# BUUG-GACMEEDKA ARDAYGA

# 26-27

DAABACAADDA DUGSIGA
SARE EE DUGSIYADA
MAGAALADA WESTERVILLE

CENTRAL
NORTH
SOUTH

# Table of Contents

WARQADDA HORUDHACA ..........................................................................

SHAQAALAHA DAGMADA...........................................................................

DUGSIYADA MAGAALADA WESTERVILLE SIYAASADAHA DAGMADA, HABABKA IYO BROGRAAMYADA....................................................................

XEERKA AADAABTA ARDAYGA .................................................................

SIYAASADDA GUDDIGA 5610 - BIXINTA, JOOJINTA, SAARIDDA, IYO REEBIDDA JOOGTADA ARDAYDA ..........................................................
SIYAASADDA GUDDIGA 5611 - XUQUUQDA SIDA SHARCIGA QABO..............
SIYAASADDA GUDDIGA 5772 - HUBKA .....................................................
SIYAASADDA GUDDIGA 5512 – ISTICMAALKA TUBAAKADA ..........................
SIYAASADDA GUDDIGA 5517.01 - GARDAREYSIGA IYO QAABABKA KALE EE DABEECADDA WEERARKA (Waxay tixraacdaa qodobka xeerka #19)................
SIYAASADDA GUDDIGA 5517 - KA SOO HORJEEDKA KADEEDKA (MAGAC LA'AANTA IX KADEEDKA JINSIGA) (Waxay tixraacdaa qodobka xeerka #19) .....
SIYAASADDA GUDDIGA 5111.01 - ARDAYDA GURI LAAWEYAASHA ..............
SIYAASADDA 5630.01 - FARAGELINTA DABEECADDA WANAAGSAN IYO TAAGEERADA IYO ISTICMAALKA KOOBAN EE LAGA SAMEEYO CELCELINTA IYO GO'DOOMINTA ..................................................................

Sharciyada Aadaabta Ardayga........................................................................
1. U Goynta Fasalka .............................................................................
2. Jebinta Sharciga Imaashada, marka laga reebo Goynta .............................
3. Dagaalka/Xoogga .............................................................................
4. Jejebinta/Khasaarada ama Burbuinta Hantida Dugsiga iyo/ama Hantida Shakhsiga...........................................................................................
5. Xattooyada/Dhaca/U Diididda Hantida Qofka Leeyaha ama Hantida Dugsiga ...................................................................................................
6. Isticmaalka, Haysashada, Iibinta ama Qeybinta Hubka...............................
7. Isticmaalka, Haysashada ama Qeybinta Hub Halis ah balse aan ahayn Qori ama waxyaabaha Qarxa, Dab, ama Sunta Gaaska .............................
8. Isticmaalka, Haysashada, Iibinta ama Qeybinta Qalabka Burburinta, kana mid ah waxyaabaha Qarxa, Dabka ama Sunta Gaaska ..............................
9. Isticmaalka, Haysashada, Iibinta ama Qeybinta Badeecada Tubaakada .....
10. Isticmaalka, Haysashada, Iibinta ama Qeybinta Cabbitaanka Qamrada Lagu Saqraamo (Intoxicating Alcoholic Beverages) ....................................
11. Isticmaalka, Haysashada, Iibinta ama Qeybinta Mukhaadaraadka Marka Laga Reebo Tubaakada ama Qamrada ......................................................
12. Muujinta Jeceelka...............................................................................
13. Ku Xad-gudubka Xiriirada Shaqsiyeed .......................................................
14. Carqaladeynta Weyn ee ka Dhacda Dugsiga, Digniinta Beenta ah, Cabsi Gelinta Bombka, Dabka/Dabka aan la Fasixin iyo/ama Haysashada

Shideyaasha ........................................................................................................
15. Labbiska Aan Habbooneyn .........................................................................................
16. Qalabka Isgaarsiinta Gaarka ah (PCD)/Madadaalada iyo Isticmaalka Tiknolojiyadda........................................................................................................
17. Daacad darro/Been abuur iyo/ama Iska Dhigid Qof Kale ............................
18. Dabeecadda aan Hoggaansamin ......................................................................
19. Gardareysiga/Kadeedka/Cabsi Gelinta/Dhibidda .........................................
20. Sida Hubka .........................................................................................................
21. Dhaqanka Jinsiga aan la Rabin/Kadeedka Jinsiga/Dagaalka Shukaansiga .
22. Dhaawaca Culus ee loo Geysto Jirka ..............................................................
23. Meelaha Ka Baxsan Xaafadaha .........................................................................
24. Qamaar ..................................................................................................................
25. Badeecada ..............................................................................................................
26. Jebinta Sharciyada Dugsiga .................................................................................
27. Jebinta Sharciyada Gawaarida Dugsiga ..............................................................
28. Isticmaalka, Haysashada, Iibinta ama Qeybinta Dabka.......................................
29. Weerarka ...............................................................................................................
30. Daacadnimada Aqoonta/Dhaqan Xumada.........................................
31. Dabeecad Carqaladdeyn .......................................................................................
32. Isticmaalka Af-Xumada..........................................................................................
33. Taabashada aan La Oggolaan ..............................................................................

Raadinta/La Wareegidda............................................................................................
Ciqaabta la Xariirta Jebinta Sharciyada Dugsiga ....................................................
Disshibiliinka Ardayda Itaalka Darran......................................................................
Ciqaabta Guddiga Sifeeyo ..........................................................................................
1. Tubaakada..............................................................................................................
2. Mukhadaraadka marka laga reebo Tubaakada ....................................................
Ciqaabta Dugsiga..........................................................................................................
1. Adeegga Bulshada .................................................................................................
2. Xabsiga Ardayda ....................................................................................................
3. Dishibiliinka Dugsiga Kaddib ...............................................................................
4. Ka Saaridda Degdegga ..........................................................................................
5. Luminta Axsaanka Hawsha Ka Baxsan Manhajka .................................................
6. Fursadda Faragelinta Waalidka..............................................................................
7. Xarunta Waxbarashada Kale...................................................................................
8. Ka Joojinta...............................................................................................................
9. Ka Saaridda.............................................................................................................
Jebinta Dugsiga/Talooyinka la xariira Saaridda ......................................................
Ka Saaridda Muddo Hal Sanno Kalendar...................................................................
Hubka ......................................................................................................................
Middiyada ................................................................................................................
Falalka waxyeelada culus gaarsiiya dadka iyo hantida.........................................
Cabsi Gelinta Bambka ..............................................................................................
Ka-saaridda Joogtada ah...........................................................................................

Daruufaha Khaaska ee loogu talogalay Ardayda Itaalka Darran ........................
Agagaarka Ammaanka Dugsiga.......................................................................
1. Hubka Halista ..............................................................................................
2. Walaaltinimada/Walaalaha Gabdhaha/Hawsha Burcadda ...........................
Gaadiidka Dugsiga ...........................................................................................
Dhaqanka Ardayga inta uu saaran yahay Gawaarida Dugsiga ..............................
Mas'uuliyadda Saaran Ardayda ......................................................................
Mas'uuliyadda Waalidiinta/Ilaaliyeyaasha ........................................................
Sharciyada Ammaanka Gaariga Dugsiga .........................................................
Sharciyada Lagu Soo Dhajiyay Dhamaan Gawaarida .....................................
Ka Joojinta/Ka Saaridda Gawaarida Dugsiga ...................................................
Baddalaadda Gaadiidka ama Meesha loo Socdo .............................................

CAAFIMAADKA ARDAYDENA ..............................................................................
Dawooyinka - Dawooyinka la Siiyo Ardayda.....................................................
Soo Koobidda Foomamka La Xariira Daweynta ..............................................
Xanuunka iyo Hababka Degdegga ...................................................................
Talaalka ...........................................................................................................
Baaritaanka Tiibishada (TB, tuberculosis) ...................................................
Arrimaha Caafimaadka Ardayga.....................................................................
Xaaladaha Leysku Daarto.................................................................................
Injirta Madaxa .................................................................................................
Tababarka Guriga ............................................................................................
Ceymiska Shilka Ardayga iyo Ceymiska (Student Accident Insurance and Liability Insurance) ........................................................................................
Maamulka Cayayaanka Mideysan (IPM, Integrated Pest Management) iyo Ogeysiisyada ..............................................................................................

IMAASHADA .......................................................................................................
Sifeynta Tagidda
Maqnaashada la Fasaxay ..............................................................................
Maqnaashada aan la Fasaxin:.........................................................................
Goynta Dugsiga:............................................................................................
Goynta fasalka:.............................................................................................
Maqnaashada la Fasaxay....................................................................................
Xisaabinta Imaashada Ardayga (Caruurta La Waayay iyo Caruurta Maqan)..........
Ka soo Daahidda Dugsiga iyo Rawaxaadda Hore ..................................................
Shaqada Gadaal Laga Sameeyo .........................................................................

DAGGANAASHADA.................................................................................................
Dugsiga uu Tago...............................................................................................
Ka Bixidda Dagmada .........................................................................................
Dagganaashada iyo Ilaalinta Sharciga.................................................................
Arrimaha Qofka Aan Dagganeen..........................................................................

HAWLAHA GUUD ..................................................................................................

Geynta iyo Fariimaha ..........
Ogeysiiska fiidiyowga lagu duubo fasalka ..........
Kor ka Eegidda fiidiyowga iyo Kormeerka Elattaroonigga ..........
Hababka Degdegga ..........
Helitaanka Adeegga Raashinka iyo Dabeecadda Qaxwada ..........
Diiwaanada Waxqabadka Ardayga, Kaararka Darajada ..........
Khidmadaha aan la bixinin ..........
Lumay lana Helay ..........
Waxyaabaha Qofka Leeyahay ..........
Xoolaha Guri Joogga iyo Xoolaha Dugsiga ..........
Soo Gelinta Calaamadaha/Qeybinta Warqadaha (Leaflets) ..........
Diiwaanada Ardayga ..........
Ogeysiiska Sannadka Diiwaanada Ardayga ..........
Ogeysiiska Xuquuqda Hoos Timaada Badbaadinta Baddalaadda Xuquuqda Cunugga (PPRA, Protection of Pupil Rights Amendment) ..........
Takoor La'aanta ..........
Qorshooyinka 504 ..........
Sharciga Horumarinta Waxbarashada Dadka Itaalka Darran (Individuals with Disabilities Education Improvement Act) ee 2004 ..........
Ardayda Gurilaaweyaasha ..........
Buugaagta/Buugaagta Maktabka/Qalabka ..........
Buugaagta ..........
Dhismaha Dugsiga/Dadka Soo Booqda Fasalka - La Socodka/Kormeerka Dugsiga - Hababka ..........
Brograamyada Iskaa Wax u Qabso ..........
Ka Qeybgalka Waalidka ..........
Faragelinta Dabeecadda Wanaagsan iyo Taageerada ..........

ADEEGYADA KHAASKA ..........
Ardayda Barata Ingiriisiga (EL, English Learners) ..........
Adeegga Hibada Waxbarashada ..........
Adeegga Caafimaadka Dugsiga-Baaritaanada ..........
La-tallinta iyo Taakuleynta Caafimaadka Madaxa ..........
Kaalmada Faragelinta ..........
Waxbarashada Ardayda Itaalka Darran ..........

HESHIISKA IN ARDAYGA U ADEEGSADO TIKNOOLOJIYADDA SI BADBAADO LEH OO LA OGGOL YAHAY

DUGSIYADA MAGAALADA WESTERVILLE SIYAASADAHA DUGSIGA SARE IYO HABABKA IYO BROGRAAMYADA ..........
Imaashada ..........
Magnaashada - Waxa la sameeyo ..........
Ballamada ..........
Ka noqoshada xariirka ..........
Ardayda Qaangaartay - Toban iyo Sideed Jir balse ka Yar Labaatan-iyo-Labo

Sanno ........................................................................................................
Hababka Diiwaan Gelinta Ardayda Qaangaartay ..............................................
Heerka Fasalka ..........................................................................................
Sii Jeedinta ..............................................................................................
Qaaraanka-Maaliyadda ................................................................................
Siistemka Darajo Bixinta ..........................................................................
Qalin Jebinta, Habeenka Waayeelka Fakarka/Shahaada Baccalaureate ..........
La Talliyeyaasha Dugsiga ..........................................................................
Ruqsadda Lagu Marro Hallka (Hall Passes) ....................................................
Aqoonsiga/Aqoonsiga Ardayga .......................................................................
Ogeysiisyada Wararka loo Jeediyo Dadweynaha ..............................................
Isbaddalada Caqiidada ................................................................................
Imtixanaadka Samastarka ..........................................................................
Khidmadaha Ardayga ................................................................................
Hallasha Waxbarashada ..............................................................................
Dugsiga Kuleylaha ......................................................................................
Kormeerka Saacadaha uusan Tababarka Jirin ................................................
Qaadidda Imtixaanka ..................................................................................
Ka Dhaafidda Imtixaanka Ugu Dambeeyo Ardayda Sannadka ugu Dambeeyo

SIYAASADDA DUGSIYADA MAGAALADA WESTERVILLE KOODKA ASLUUBTA ARDAYDA KA QEYBGASHA HAWLAHA KA BAXSAN MANHAJKA ..............................................................................
Falsafo ..................................................................................................
Ogolaashada Munaasabadaha Dugsiga ..........................................................
A. Xaq u Yeelashada Ka Baxsan Manhajka ................................................
B. Khidmadaha/Sharciyada ...........................................................................
Abaal Marinta Warqadaha ..........................................................................
Kadeedka ..................................................................................................
Luminta Axsaanka Hawsha Ka Baxsan Manhajka ............................................
Qaaraanka-Maaliyadda ................................................................................
Mukhadaraadka, Qamrada, iyo Isticmaalka Tubaakada ...................................
Qeybta I – Sifeynta ..................................................................................
Qeybta II - Hababka Dishibiliinka ................................................................
Qeybta III - Sharciyada iyo Ciqaabta la Socoto ..........................................
Qeybta IV – Ciqaabta ................................................................................
Xeerka Asluubta ee ka Baxsan Manhajka Sharciyada iyo Jadwalka Ciqaabta ..

# WARQADDA HORUDHACA

Gacaliyeyaal Qoysaska Westerville,

Ku soo dhawoow Westerville Central/North/South High School sanad dugsiyeedka 2026-27. Waxaan rajeyneynaa in aan kula shaqeyno adiga iyo caruurtaada sida iskaashato xagga waxbarashadooda. Waan ku faraxsanahay in aad qeyb ka tahay qoyska dugsiyada Westerville. Waxaan ku kalsoonahay in tani ahaan doonto sannad lagu guuleysto oo xiiso leh.

Buuggaan waxaa laguu siiyay sida ilo kuu roon adiga, wuxuu ka jawaabi doonaa su'aalo badan oo caadi ah oo ku saabsan qeybtena iyo dagmadena. Waxaan kaa codsaneynaa in aad waqti qaadatid si aad ula fiirisid cunugaada si isaga/iyada u fahamto sharciyadena iyo hababkena. Fadlan, waxaad buugga dhigtaa meel sugan, meel laga heli karo si loo tixraaco si fudud sannadka oo idil ama calaameyso meesha aad ku keydisid kombuyutarkaada.

Waxaan ku dhiirigelineynaa ardayda in ay u shaqeyaan si adag gudaha fasalka, in ay asxaabta fasalka iyo macalimiinta ula dhaqmaan si xushmad leh, iyo in ay lug ku yeeshaan hawlaha dheeraadka ku ah manhajka. Iminka waxaa la joogaa waqtiga loo baahan yahay in la bilaabo nolosha ka dambeyso dugsiga sare, iyo in si qoto dheer oo balaaran lug loogu yeesho brograamyadena waa sida ugu fiican oo loo sameeyo taas.

Qodobo badan ayaa ugu wacan guusha dugsiyada Westerville, balse taageerada laga helo qoysaska ayaa si gaar ah loo qiimeeyaa. Waxaan kugu dhiiri gelineynaa in aad si firfircoon uga qeybgashid waxbarashada cunugaada, ha ahaato in aad iskaa wax u qabso uga shaqeysid dugsiga, guriga, tagidda shirarka PTO/PTA, la kullanka macalimiinta, kormeerka shaqada guriga, iwm. Waxaa aad isugu xeran guusha ardayga ka gaaro dugsiga iyo taageerada waalidka siiyo ardayga.

**English**
Parents/Guardians: For language assistance, please contact the building secretary or building administrator at your child’s school and let them know the language you speak.

**Spanish**
Padres / Tutores: A veces el Distrito puede proporcionar asistencia gratis en otros idiomas. Si necesita esta ayuda, comuníquese con la secretaria del edificio o con el administrador del edificio en la escuela de su hijo y hágales saber el idioma que usted habla.

**Somali**
Waalidiinta/Mas'uuliyiinta: Degmada Waxbarashadu waxay mararka qaarkood idinka caawin kartaa luqooyinka kale. Haddii aad u baahan tahay caawintaas, fadlan la xariir xoghaynta ama qofka maamula iskuulka ilmahaagu dhigto una sheeg luqadda aad ku hadashid.

Waxaan rajeyneynaa in aan kula shaqeyno. Fadlan la xariir xafiiskena haddii aad qabtid su'aalo, arrimo, ama talooyin.

Mahadsanid,

Agaasimeyaasha Dugsiga Sare Westerville

# SHAQAALAHA DAGMADA

DUGSIYADA MAGAALADA WESTERVILLE
Guddiga Waxbarashada
936 Eastwind Drive
614-797-5700

**Guddiga Waxbarashada**

| | |
|---|---|
| Madaxa | Marwo Kristina R. Meyer |
| Ku Xigeenka Madaxa | Marwo Jennifer Aultman |
| Xubin | Marwo Tatjana Brown |
| Xubin | Marwo Anisa Liban |
| Xubin | Marwo Louise Valentine |

**Maamulka**

| | |
|---|---|
| Kormeeraha Guud | Angela Hamberg |
| Madaxa Shaqaalaha iyo Sarkaalka Siyaasadda | Scott Reeves |
| Madaxa Maamulka Barista iyo Barashada | Mark Cooper |
| Madaxa Hawlaha | Kari Dennis |
| Agaasimaha Fulinta ee Isgaarsiinta iyo La Hawlgalka Qoyska | Melanie Amato |

**Xafiiska Khasnajiga**

| | |
|---|---|
| Khasnajiga | Nicole Marshall |
| Kaaliyaha Khasnajiga | Laura Hendricks |

# DUGSIYADA MAGAALADA WESTERVILLE
# SIYAASADAHA DAGMADA, HABABKA IYO BARNAAMIJYADA
# Ogolaashada Guddiga

## XEERKA AADAABTA ARDAYGA

Qeybtaan buugga waxaa ku jiro Xeerka Dabeecadda Ardayga ee Dagmada (District Code of Student Conduct) iyo siyaasado kale iyo habab ay Dagmada ku shaqeyso. Waalidiinta/Ilaaliyeyaasha iyo ardayda labadaba waxay u baahan yahiin in ay la socdaan siyaasadahaan ka jira dagmada bacdamaa waalidiinta/ilaaliyeyasha iyo ardayda, iyadoo aan la fiirinin xaaladda waxbarashada, waxaa laga filaa in ay raacaan.

Siyaadaha iyo hababka kaddib, qeybtaan waxaa ku jira sharaxaad ku saabsan adeegyada ardayga iyo brograamyada kala duwan ee la heli karo. Haddii ay jiraan su'aalo ku saabsan waxa ku jira buuggaan, fadlan la xariir agaasimaha dhismaha ama qofka isaga/iyada mattala.

Koodkaan waxaa ka mid ah (1) aadaab darrada uu geysto ardayga ee ka dhacda dibadda hantida dugsiga dagmada balse la xariirta hawlaha ama dhacdooyinka ka dhacay hantida dugsiga dagmada; iyo (2) aadaab darrada uu geysto ardayga ee, iyadoo aan la fiirinin meesha ay ka dhacday, loo jeediyo sarkaalka dagmada ama shaqaalaha ama hantida sarkaalka ama shaqaalaha. Sidaas awgeed, xeerkaan asluubta wuxuu socon doonaa inta (1) ardayda ay hoos yimaadaan awoodda shaqaalaha dugsiga iyo/ama (2) inta ay socdaan dhamaan hawlaha iyo munaasabadaha la xariira dugsiga, xattaa marka hawlaha noocaas ka dhacaan meel ka baxsan xerada dugsiga.

Xeerkaan Dhaqanka (Code of Conduct) waxaa lagu dabaqaa basaska dugsiga, munaasabadaha ka baxsan manhajka iyo brograamyada waxbarashada kale.

Guddiga wuxuu ogolaaday Xeerka Dhaqanka Ardayga (Code of Student Conduct) ee hoos lagu soo bandhigay. Ujeedada weyn ee koodka waa dajinta heerka dabeecadda la ogolaan karo. Jebinta sharciyada Xeerka Aadaabta Ardayga (Code of Student Conduct) waxay dhallin kartaa in laga qaado talaabo dishibiliin kana mid ah, balse kuma eka, ka joojinta iyo/ama ka saaridda dugsiga iyo/ama tixraaca madaxda sharciga ku habboon. (Koodka La Baddalay Ohio 3313.20, 3313.66, 3313.661).

**SIYAASADDA GUDDIGA 5610 - BIXINTA, JOOJINTA, SAARIDDA, IYO REEBIDDA JOOGTADA AH EE ARDAYDA**

Guddiga Waxbarashada (Board of Educatifon) waxay aqoonsan tahay in ka reebidda brograamka waxbarashada dugsiyada, ha ahaato ka-saarid degdeg ah, ka-joojinta dibadda dugsiga, ka-saarid, ama ka-reebid joogto ah, waa ciqaabta ugu darran ee la saaro ardayga ku sugan Dagmadaan, taasina ma aha wax la saari karo haddii aan la raacin nidaamka dagsan (due process). Hase ahatee, Guddiga uma dulqaadan doono dagaalka, carqaladeynta ama dabeecadda aan habbooneyn ay ku kacaan ardaydeeda.

Ma jiro arday loo oggol yahay in laga saaro, laga joojiyo loona diro dibadda dugsiga, laga saaro iyo/ama si joogto ah looga saaro, illaa ay dabeecaddooda tahay aadaab darro ma'ogiye sida ku sifeysan Xeerka Aadaabta Ardayga (Student Code of Conduct)/Xeerka Dishibiliinka Ardayga (Student Discipline Code) sida Guddiga oggolaaday oo/ama ficilada ardayga ay ku keenayaan halis dhow oo daran oo ku aaddan caafimaadka iyo bad-qabka ardayda ama shaqaalaha kale. Xeerka wuxuu kaloo tilmaami doonaa hababka loo baahan yahay in ay raacaan saraakiisha dugsiga marka ay ku hawlan yahiin fullinta dishibiliinka noocaas. Marka la go'aaminayo in ardayga la laali doono ama la eryi doono, maamulka degmadu waa inay adeegsadaan heerka caddaynta oo biyo kama dhibcaan ah. Badbaadada nidaamka iyo sifeynta ku qoran siyaasadaan iyo buugga ardayga/waalidka, waxaa kaloo dheeraad ah habab iyo tixgelin lagu dabaqi doono

ardayda lagu tilmaamay in ay yahiin kuwo itaal darran sida hoos timaado IDEA, ADA, iyo/ama Qeybta 504 ee Sharciga Dayactirka (Rehabilitarion Act) ee 1973. (Fiiri Siyaasadda 5605 "Ka Joojinta/Ka Saaridda Ardayda Itaalka Darran.")
Waxaa dhici karto in ardayda la saaro dishibiliin marka ay jebiyaan Xeerka Asluubta/Xeerka Dishibiliinka Ardayga xattaa haddii dhaqankaas ka dhaco hanti uusan Guddiga lahayn ama kantaroolin hase ahatee dabeecadda noocaas ku xeran tahay hawlaha ama dhacdooyinka ka dhacay hantida uu leeyahay ama uu kantaroolo Guddiga, ama dhaqan, xattaa iyadoo aan la fiirinin meesha ay ka dhacday, ku aaddan sarkaal ama shaqaale ka tirsan Dagmada, ama hantida sarkaal ama shaqaale noocaas.

Xatta siyaasaddaan iyo Xeerka Asluubta/Xeerka Dishibiliinka Ardayga, waxaa lagu dabaqi doonaa inta soo socota:

A. "Saarid Degdegga" waa marka dugsiga laga reebo ardayga halis joogto ah ku haayo hantida Dagmada ama dadka ku sugan Dagmada ama dabeecadiisa cabsi gelin joogto ah ku tahay carqaladyenta hawsha waxbarashada ay Dagmada bixiso. (Fiiri Siyaasadda 5610.03 "Ka Saaridda Degdegga")

B. "Ka-Joojnta" ("Suspension") waa muddada ku meel gaarka ah uu Maamulaha, Agaasimaha, kaaliyaha Agaasimaha, ama maamule kale oo ka socda brograamka waxbarashada Dagmada muddo aan ka badneyn toban (10) maalin dugsiyeeda. Ka-joojinta ma gaari doonto in ka badan sannad dugsiyeedka iminka socdo, haddii marka la siiyo ka-joojinta in ka yar toban (10) maalin ka harsan tahay sannad dugsiyeedka. Maamulaha wuxuu badal ahaan ka codsan karaa ardayga in uu ka qeybgalo brograamka adeegga bulshada ama ciqaab kale muddo saacado la'eg qeybta ka hartay muddada ka-joojinta. Ardayga waxaa laga rabaa in uu bilaabo brograamka adeegga bulshada noocaas ama ciqaabta kale inta lagu dhex jiro todobaadka buuxa nasashada kuleylaha. Maamulaha waxa laga yaabaa inuu sameeyo liis cawaaqib beddel ah oo ku habboon, oo uu liiskaas soo raaciyo tilmaamaha lagu dabaqi karo Haddii ardayga ku guul dareysto in uu dhamaysto adeegga bulshada laga rabo ama ciqaabta kale ee la siiyay, Maamulaha wuxuu gaari karaa talaabada la qaado ee ku xigta. Hase ahatee, talaabada noocaas kuma jirto in ardayga laga dalbado in uu qaato waqtiga ka haray ka-joojinta marka la gaaro bilowga sannadka xiga. Hababka ka-joojinta waxay ku qoran yahiin Xeerka Asluubta Ardayga (Student Code of Conduct)/Xeerka Dishibiliinka Ardayga (Student Discipine Code) iyo Siyaasadda Guddiga (Board Policy) 5611 - "Xuquuqda Sharciga" (Due Process Rights)".

   Ardayga laga joojiyo waxaa loo ogolaan doonaa in uu dhamaystiro hawlaha fasalka uu gaffay taasoo ugu wacan ka-joojinta oo uu helo ugu yaraan qayb ka mid ah buundooyinka hawlihii la dhammeeyey. Hoos-u-dhigista darajada oo ay sabab u tahay cayrinta ardayga waa la oggol yahay; si kastaba ha ahaatee, ardayna kama heli karo buundo dhicid ah hawsha la dhammeeyey iyadoo ay kaliya sabab u tahay cayrinta ardayga.

C. "Ka-Saaridda" waxaa loola jeedaa marka ardayga laga reebo dugsiyada Dagmadaan muddo aan ka badneyn sideetan (80) maalin dugsiyeed ama tirada maalmaha dugsiga ka haray muddo hal samester ama teerm oo lala kulmo dhacdada ka dambeyso ka-saaridda ama muddo hal (1) sanno sida ku qoran siyaasaddaan iyo Xeerka Asluubta Ardayga/Xeerka Dishibiliinka Ardayga (Student Code of Conduct/Student Discipline Code). Maamulaha wuxuu awood u leeyahay in uu ardayga ka saaro. Hababka ka-saaridda waxay ku qoran yahiin Xeerka Asluubta Ardayga (Student Code of Conduct)/ Xeerka Dishibiliinka Ardayga (Student Discipine Code) iyo Siyaasadda Guddiga (Board Policy) 5611 - "Xuquuqda Sharciga" (Due Process Rights)".

   Marka go'aan laga gaarayo in ardayga la eryo ama aan si joogto ah loo saaro, Maamulaha waa inuu hayaa dhammaan dukumeentiyada, macluumaadka elektarooniga ah lagu

kaydiyay ("ESI"), iyo warbaahinta elektaroonigga ah (sida lagu qeexay Xeerka 8315 - Maareynta Macluumaadka (tusaale. "Hakinta Xeereed")) ee loo sameeyay iyo/ama loo helay iyadoo qayb ka ah baaritaanka.

Dukumeentiyada, ESI, iyo warbaahinta elektiroonigga ah (sida lagu qeexay Siyaasadda 8315) ee la hayo waxaa ku jiri kara diiwaannada dadweynaha iyo diiwaannada ka reeban siidaynta hoos timaada Federaalka (tusaale, FERPA, ADA) iyo/ama sharciga Gobolka (tusaale, R.C. 3319.321) - e. g., diiwaanka ardayda iyo diiwaanada caafimaadka qarsoodida ah.
Dukumeentiyada, ESI, iyo warbaahinta elektaroonigga ah (sida lagu qeexay Siyaasadda 8315) waa in loogu hayaa si waafaqsan Siyaasadda 8310, Siyaasadda 8315, Siyaasadda 8320, iyo Siyaasadda 8330 wax aan ka yarayn saddex (3) sano, balse ka badan haddii ay u baahato diiwaanka jadwalka haynta Degmada.

Haddii waqtiga ka-saaridda, ay maalmo yar ka haraan sannad dugsiyeedka marka loo firiyo tirada maalmaha ka-saaridda, Maamulaha wuxuu qeyb ama dhamaan muddada hartay ku xisaabi karaa sannad dugsiyeedka xiga.

**1. Hub ama Middi**

Marka ardayga aan si joogto ah looga reebin dugsiga, Maamulaha wuxuu ardayga ka saari karaa dugsiga muddo hal (1) sanno marka uu hub xabbad ka dhacdo ama middi awood u leh in ay dhaawac culus gaarsiiso jirka, uu keeno dhismaha dugsiga ama hanti kasta oo kale (sida baabuurka dugsiga) uu leeyahay, kantaroolo ama ku shaqeeyo Guddiga, meel uu ka socdo tartan ka dhexeeyo dugsiyada, munaasabo dheeraad ku ah manhajka, ama brograam kale uu dugsiga wado ama hawl aan ku sugneen dugsi ama hanti uu leeyahay ama kantarool Guddiga, marka laga reebo in Maamulaha uu yareyn karo muddadaan hadba sida kiiska yahay sida waafaqsan siyaasaddaan. Sidoo kale, Maamulaha wuxuu ardayga dugsiga ka saari doonaa muddo hal (1) sanno marka lagu helo in uu haysto hub xabbad ka dhacdo ama middi oo awood u leh in ay dhaawc culus gaarsiiso jirka, kana dhacdo dugsiga ama hanti kale (sida baabuurka dugsiga), taasoo uu leeyahay, kantaroolo, ama ku shaqeeyo Guddiga, tartanka ka dhexeeyo dugsiyada, munaasabo dheeraad ku ah manhajka, ama brograam kale uu dugsiga wado ama hawl aan ku sugneen gudaha dugsiga ama hantida uu leeyahay ama kantaroolo Guddiga, marka laga reebo Maamulaha oo yareyn kara muddadaan hadba sida kiiska yahay sida waafaqsan siyaasadaan. Ka-saaridda waxay gaari kartaa, hadba sida loo baahdo, sannad dugsiyeedka ku xiga sannad dugsiyeedka lala kulmay dhacdada dhallisay ka-saaridda. Maamulaha wuxuu arday kasta oo laga saaro dugsiga bacdamaa uu qori ama hub u soo qaato dugsiga (sida ku sifeysan 18 U.S.C. 921(a)(3)) ku wareejin donaa caddaaladda dambiyada ama siistemka gafafka dhallinta ee u adeega Dagmada.

Hubka xabadda ka dhacdo waxaa lagu sifeyaa hub kasta, kana mid ah qoriga bilaabaha, kaasoo loo handasay ama dhakhso loo baddali karo in uu tuuro xabbad marka la qarxiyo, frameka ama qaataha hubka noocaas, hub kasta oo xabad ka dhacdo, qarxo ama aamusiyaha, ama qalab kasta oo wax burburiyo. Qalabka burburinta, waxaa ka mid ah, balse kuma eka waxyaabaha qarxa, waxyaabaha dabka kiciya, ama gaaska sunta, bamka, bamka gacanta, saaruuqa wax tuura ee ka culeys badan afar (4) ounce, saaruuqa waxyaabaha qarxa ama wax guba oo ka culeys badan rubac ounce (1/4); miino, ama, qalab kale oo la mid ah.

Middi dhaawac culus gaarsiin karta jirka waxaa lagu sifeyaa hub kasta ama qalab wax gooya oo ka kooban middida lagu dhajiyay daabka la qabsado; middida wax lagu gooyo; ama qalab kale oo la mid ah (sida hub fiiqan, birta loo

adeegsado xiiladaha dagaalka "martial arts" sida ninjaha tuura xiddigaha) ee loo adeegsado, ama diyaar u ah in loo adeegsado, keeni kara dhimasho ama dhaawac culus soo gaarsiin kara jirka.

Maamulaha, hadba sida uu u go'aamiyo ama u garto, wuxuu baddali karaa ama yareyn karaa ka-saaridda noocaas oo qoran muddo ka yar hal (1) sanno, hadba sida kiiska yahay, kaddib marka uu tixgeliyo waxa soo socda:

a. sharciyada Gobolka ama Federaalka iyo xeerarka ee la xariira ardayda qabta itaal darrida (tusaale ahaan, marka dhacdada quseyso arday itaalka darran iyo dabeecad xumada ay soo gaaraan koox ka kooban dad xogogaal u ah in cunugga muujiyo itaal darrida ardayga);

b. heerka eedeynta marka la fiiriyo da'da ardayga iyo sida ay munaasab ugu habboon tahay aadaab darrada iyo/ama ciqaabta iyo/ama caddeynta la xariirta halista suurtogalka ah ay ku leeyahiin caafimaadka iyo ammaanka dadka kale, kana mid ah caddeynta ku saabsan rabitaanka ardayga iyo la socoshada la xariirta haysashada hubka xabbada ka dhacdo ama middida; ee sabab u noqon kara dhaawac culus oo soo gaar jirka iyo/ama

c. taariikhda aqoonta iyo dishibiliinka ardayga, sida jawaabta ardayga ka bixiyo dishibiliin hore oo loo saaray dhibaatooyin la xariira dabeecadda.

Dib-u-qaabilidda ardayga loo eryay sabab ah in uu hub keenay dugsiga waxa ay ku xiran tahay nidaamka dib-u-qaabilidda ee lagu soo koobay Qaybta (C)(4) ee siyaasaddan.

2. **Dhaqanka Dagaalka**

Haddii ardayga uu fal ka geysto dugsiga, hantida dugsiga, tartanka ka dhexeeyo dugsiyada, munaasabad dheeraad ku ah manhajka, ama brograam kasta oo la xariira dugsiga ama hawl kaddibna falka:

a. yahay gaf lagu tilmaami karo in uu yahay dambi haddii uu geysto qof qaan gaaray;

iyo

b. waxyeelo culus u geysto jirka qof (dad) sida ku sifeysan R.C. 2901.01(A)(5), ama u geysto hanti sida ku sifeysan R.C. 2901.01(A)(6)

Maamulaha wuxuu saari karaa ardayga muddo gaarta ilaa hal (1) sanno. Maamulaha wuxuu ka-saaridda u fidin karaa sannad dugsiyeedka xiga ama wuxuu yareyn karaa ka-saaridda hadba sida lagama maarmaanka ah kiiska sida ku sifeysan hoos. Looma baahna in ardayga la dacweeyo ama lagu xakumo dambi taasoo keeni karta in laga saaro sida hoos timaado qodobkaan.

Maamulaha, hadba sida uu u go'aamiyo ama u garto, wuxuu yareyn karaa ka-saaridda noocaas ilaa muddo ka yar hal (1) sanno, hadba sida kiiska yahay, kaddib marka uu tixgeliyo waxa soo socda:

a. Sharciyada Gobolka ama Federaalka iyo xeerarka lagu dabaqi karo lana xariira ardayda qabta itaal darrida (tusaale ahaan, marka dhacdada quseyso ardayga itaalka darran iyo dabeecad xumada ay soo gaaraan koox ka kooban dad xogogaal

u ah in cunugga muujiyo itaal darrida ardayga);

ama

b. daruufo kale oo culus, sida, balse ku ekeen, taariikhda waxbarashada iyo taariikhda dishibiliinka ardayga, sida jawaabta ardayga ka bixiyo dishibiliin hore oo la saaray ana xariira dhibatooyinka dabeecadda.

Haddii waqtiga ka-saaridda, ay maalmo yar ka haraan sannad dugsiyeedka marka loo firiyo tiracda maalmaha ka-saaridda, Maamulaha wuxuu qeyb ama dhamaan muddada hartay ku xisaabi karaa sannad dugsiyeedka xiga.

3. **Cabsi Gelinta Bambka**

Haddii ardayga uu cabsi gelinta bambka u geysto dhismaha dugsiga ama xerada ay ka socoto hawsha dugsiga waqtiga cabsi gelinta, Maamulaha wuxuu saari karaa ardayga muddo gaarta ilaa hal (1) sanno. Maamulaha wuxuu ka-saaridda u fidin karaa sannad dugsiyeedka xiga ama wuxuu yareyn karaa ka-saaridda hadba sida lagama maarmaanka ah kiiska sida ku sifeysan hoos. Looma baahna in adayga la dacweeyo ama lagu xakumo dambi taasoo keeni karta in laga saaro sida hoos timaado qodobkaan.

Maamulaha, hadba sida uu u go'aamiyo ama u garto, wuxuu yareyn karaa ka-saaridda noocaas muddo ka yar hal (1) sanno, hadba sida kiiska yahay, asbaabta soo socoto awgeed.

a. ardayda lagu tilmaamay in ay itaal darran yahiin sida hoos timaado IDEA, ADA, iyo Qeybta 504 Sharciga Dayactirka (Rehabilitarion Act) 1973, kaddib marka ay ku talliyaan koox dad aqoon u leh baahida waxbarashada ardayga;

ama

b. daruufo kale oo culus, sida, balse ku ekeen, taariikhda waxbarashada iyo dishibiliinka ardayga, sida jawaabta ardayga ka bixiyo dishibiliin hore oo la saaray ana xariira dhibatooyinka dabeecadda.

Haddii wakhtiga eryidda, maalmaha la eryay ay ka badan yihiin maalmaha ka dhiman sanad dugsiyeedka hadda socdo, maamulaha wuxuu u wareejin karaa qaar ama dhammaan maalamaha haray sannad dugsiyeedka soo socda.

4. **Halis dhow oo Daran oo ku aaddan Caafimaadka iyo Bad-qabka Ardayda ama Shaqaalaha**

Oraahda “halis dhow oo daran” macnaheedu waa ficil kasta oo uu ardayga ku kaco sida hoos ku xusan:

a. La imaanshaha hub ama mindi awood u leh inay gaysato waxyeelo jireed dugsiga ay maamulaan Guddigu ama hanti kale oo ay leeyihiin ama ay maamulaan Guddigu, ama tartan kasta oo dugsiyada dhexdooda ah, munaasabad manhajka ka baxsan, ama barnaamij kasta ama hawl kasta oo ay kafaalo qaaddo Degmo Dugsiyeedka ama ay Degmadu ka qayb qaadanayso;

b. Ku kicidda ficil fal dambiyeed ah marka uu sameeyo qof weyn oo dadka u gaysta dhaawac jireed oo halis ah sida lagu qeexay R.C. 2901.01(A)(5) ama u gaysta hantida sida lagu qeexay R.C.2901.01(A)(6) iyadoo ardaygu uu ku jiro dugsi ay maamulaan Guddigu, ama hanti ay leeyihiin ama ay maamulaan Guddigu, ama

barnaamij kasta ama waxqabad kasta oo ay kafaalo qaaddo Degmadu ama ay Degmadu ka qayb qaadanayso;

c. Ku cabsi gelinta bam dhismaha dugsiga ama dhisme kasta oo hawl dugsiyeed ay ka dhacayso wakhtiga cabsi gelinta; ama

d. Samaynta hanjabaad hadal ama qaab kale oo cad, oo ay ku jiraan liis qaarajin, bayaan cabsi gelin, ama qoraal la soo dhigay baraha bulshada, taas oo sababi karta qof macquul ah inuu u fahma in ardaygu uu ku dhaqaaqi akro khatar weyn.

Kormeeraha guud waxa laga yaabaa inuu ardayga eryo ilaa 180 maalmo-dugsiyeed ah oo uu u eryo ficilada uu kormeeruhu go'aamiyo inay halis dhow oo daran ku yihiin caafimaadka iyo bad-qabka ardayda kale ama shaqaalaha dugsiga iyada oo aan loo eegin haddii ficiladu u qalmaan ka saarid joogto ah.

Kadib marka ardayga loo eryo falal halis dhow oo daran gelinaya dadka kale, Kormeeraha guud wuxuu dajin doonaa shuruudo in uu ardaygu buuxiyo ah kahor inta aan ardayga dib loo qaabilin. Nuqul ah shuruudaha ayaa la siin doonaa Guddiga, ardayga, iyo waalidka/masuulka ardayga bilowga muddada eryidda. Mid ka mid ah shuruudaha ayaa ah in uu qiimayn sameeyo dhakhtarka dhimirka, cilmi-nafsiga, ama cilmi-nafsiga dugsiga joogo ee ay shaqaalaysiisay ama qandaraas kula jiro Degmadu si loo go'aamiyo haddii ardaygu halis ku yahay naftiisa, ardayda kale, iyo/ama shaqaalaha dugsiga. Degmada iyo waalidka/masuulka ardaygu waxay si wadajir ah ugu heshiin doonaan shakhsiga samayn doona qiimaynta. Haddii shakhsigu aanu shaqaalaysiin degmada, kharashka qiimaynta waa in loo gudbiyaa caymiska caafimaadka ardayga si loo bixiyo. Wixii kharash ah ee soo hara ee aan caymiska ardaygu daboolin waxa bixinaya Degmada. Haddii shakhsigu ay shaqaaleysiiso ama uu qandaraas kula jiro Degmada, Degmadu ayaa bixinaysaa kharashka buuxa ee qiimaynta. Ka sokow go'aaminta in ardaygu uu halis ku yahay naftiisa ama kuwa kaleba, dhakhtarka dhimirka, cilmi-nafsiga, ama cilmi-nafsiga dugsiga ayaa sidoo kale laga yaabaa inay soo jeediyaan talooyin ku saabsan xaaladaha lagu xirayo in ardayga dib loo qaabilo.

Dhammaadka muddada eryidda hore ama muddo kasta ee xigta, Kormeeraha guud ayaa go'aamin doona haddii ardaygu muujiyay is-baddel muuqda oo dib loogu qaabili karo dugsiga. Haddii Kormeeraha guud uu go'aamiyo in ardaygu aanu muujin is-baddelkaas, markaas kormeeraha guud waxa uu u sii kordhin karaa eryidda tiro aan xadidnayn oo dheeraad ah oo gaaraysa sagaashan (90) maalmo-dugsiyeed ah mid kasta. Kormeeraha guud ayaa go'aan ka gaari karo haddii ardaygu muujiyay is-baddel isagoo la tashanaya koox kala-xirfadleyaal ah oo uu soo xushay Kormeeraha guud. Kormeeraha guud wuxuu tixgelin doonaa qiimaynta dhakhtarka dhimirka, cilmi-nafsiga, ama cilmi-nafsiga joogo dugsiga iyo in uu ardaygu buuxiyay shuruudaha uu dajiyya Kormeeraha guud bilawga muddada eryidda iyo in kale. Haddii uu Kormeeraha guud kordhiyo muddada eryidda, Kormeeraha guud waa inuu u dajiyaa shuruudo ardaygu inuu buuxiyo ay tahay kahor inta aan dib loo qaabilin. Shuruudaha waxaa laga yaabaa inay la mid noqdaan kuwa loo dajiyay muddadii hore ee eryidda. Nuqul ah shuruudaha waa in la siiyaa Guddiga, ardayga, iyo waalidka/masuulka ardayga.

Kormeeraha guud ayaa u sii kordhin kara muddada eryidda bilowga ah ama xigta ilaa sanad dugsiyeedka soo socda. Kormeeraha guud ayaa sidoo kale yareyn kara eryida sida loogu baahdo iyadoo kiisba-kiis loo eegayo sida lagu qeexay hoos. Qasab ma aha in ardayga lagu soo dacweeyay ama lagu xukumay ficil dambi si looga eryo marka loo eego qodobkan.

Kormeeraha guud ayaa laga yaabaa in, ayagoo go'aankooda iyo garsoorid u gaar ah cuskanayo, uu ka dhimo eryidda muddo ka yar 180 maalmo-dugsiyeed ee muddada

bilowga ah, ama in ka yar sagaashan (90) maalmo-dugsiyeed muddo kasta oo dheeraad ah, iyadoo kiisba-kiis loogu eegayo, sababaha soo socda awgood:

a. ardayda loo aqoonsaday inay qabaan baahiyaha gaarka ah sida hoos timaada IDEA, ADA, iyo Qaybta 504 ee Sharciga Baxnaaninta ee 1973, markay soo jeediyaan kooxda dadka aqoonta u leh baahiyaha waxbarasho ee ardayga; ama

b. duruufaha kale ee ka baxsan awoodda ardayga oo ay ku jiraan, laakiin aan ku xaddidnayn, taariikhda akademiyeed iyo edbineed ee ardayga, oo ay ku jirto fal-celinta ardayga ee ku soo rogida edbin kasta oo hore oo loogu soo rogay hab-dhaqan xumadiisa awgeed.

Kahor dhammaadka muddada eryidda hore ama kordhin kasta, waalidka/masuulka ardaygu wuxuu codsan karaa in Kormeeraha guud uu dhamaystiro qiimaynta hore ee ardayga. Kormeeraha guud ayaa qiimayn doona ardayga oo gaari doona go'aan ah in ardaygu buuxiyay shuruudaha dib-u-qaabildda sida ku qeexan qaybtan. Kormeeraha guud wuxuu cuskan doonaa sababaha loo oggolaaday dhimista muddada eryidda ee lagu sheegay qaybtan si uu u go'aamiyo haddii ardayga dib loo qaabili karo kahor dhammaadka muddada eryidda ee hadda socoto. Waalidka/masuulka ayaa codsan kara qiimayn hore hal (1) mar wakhtiga bilowga ah, iyo hal (1) mar muddo kasta oo eryid ah oo xigta.

Kormeeraha guud waxa loo idmaday inuu dejiyo shuruudaha ku xirayo dib u qaabilidda ardayga. Shuruudaha waxaa ku jiri kara shuruudaha loo dejiyay xilliga eryidda asalka ah iyo sidoo kale talo kasta oo uu bixiyo dhakhtarka dhimirka, cilmi-nafsiga, ama cilmi-nafsiga dugsiga ee ku qiimeeya ardayga qaybtan. Kormeeraha guud ayaa dejin doona muddada ay tahay in ardaygu buuxiyo shuruudaha dib loogu qaablayo, taas oo fogayn karta taariikhda qalin-jabinta ardayga. Kormeeraha guud ayaa siin doono koobiga shuruudahan Guddiga, ardayga, iyo waalidka/masuulka ardayga marka Kormeeraha guud uu gaaro go'aanka dib loogu qaabilayo ardayga. Haddii ardaygu ku guuldareysto inuu u hoggaansamo shuruudaha dib loogu qaabilayo, Kormeeraha guud ayaa laga yaabaa inuu ka noqdo dib u qaabilidda ardayga oo uu dejiyo eryid muddada loo kordhiyay iyadoo la raacayo isla habraaca lagu qeexay qaybtan.

Ardayda aan lahayn qorshaha waxbarashada shaqsiyadeed (IEP), Kormeeraha guud waa inuu, isaga oo la tashanaya ardayga iyo waalidka/masuulka, qorshe u dejiyaa sii wadida waxbarashada ardayga. Tan waxa ku jiri kara waxbarasho ay ku bixiso Degmadu meel kale oo ay ka mid yihiin wax ku baridda guriga, ka diiwaangelinta degmo kale, ka diiwaangelinta nooc kale oo dugsi dadweyne ah ama mid aan dugsi dadweyne ahayn, ama nooc kasta oo waxbarasho oo u hoggaansamaya sharciga gobolka. Qorshaha waxa la samayn doonaa muddo aan dib uga dhicin shan iyo toban (15) maalmo-dugsiyeed kadib bilowga xilliga eryida asalka ah ama kordhin kasta. Ardayda ku jira IEP, Kormeeraha guud wuxuu sidoo kale kala tashan doonaa kooxda IEP ardayga dejinta qorshaha, waxaana qorshaha la dejin doonaa toban (10) maalmo-dugsiyeed gudahooda kadib bilowga xilliga eryida asalka ah ama kordhin kasta.

Guddiga ayaa Waaxda Waxbarashada iyo Shaqaalaha ("DEW") u gudbin doono diiwaanada eryid kasta oo lagu soo saaro iyadoo la cuskanayo qaybtan, iyo sidoo kale isbeddel kasta oo lagu sameeyo heerka eryida ardayga. Diiwaanada laguma qori doono magaca ardayga, laakiin waxa lagu qori doonaa waxyaabaha soo socdo:

a. magaca dugsiga ardayga;

b. sababta(sababaha) loo eryay ardayga;

c. muddada eryidda ardayga iyo muddo kordhin kasta oo lagu sameeyo eryidda;

d. tirada guud ee ardayda ay Degmadu eriday sanad dugsiyeedka kahor taariikhda warbixinta; iyo

e. da'da, jinsiga, isirka, iyo macluumaadka kale ee tirakoobka ee ardayga ee ay codsatay DEW.

Degmadu waxay siin doontaa diiwaanada eryidda ee lagu soo saaray qaybtan haddii ay codsato degmo ama dugsi kale oo uu ardaygu u wareegay. Diiwaanadaan lagama yaabo in gudbintooda la diido iyadoo sabab looga dhigayo deyn lagu leeyahay ardayga.

Guddigu waxa ay dejin doonaan hagitaanada xaaladaha ku habboon ee uu Kormeeruhu samayn karo si waafaqsan qaybtan.

Kormeeraha guud ayaa soo saari doona liis xulashooyin ah qaab kale oo wax lagu baro ardayda la eyay sida hoos timaado qaybtan.

D. "Ka-saaridda joogtada ah" waxaa loola jeedaa ardayga laga mamnuucay abid in uu tago dugsiga dadweynaha ee ku yaal Gobolka Ohio. (Fiiri Siyaasadda 5610.01- Ka Saaridda Joogtada ah ee Ardayga aan Naafada ahayn)

Haddii ardayga laga saaro in ka badan labaatan (20) maalin dugsiyeed, waqti kasta ha ahaato oo gaarsiisan sannad dugsiyeedka xiga, Maamulaha wuxuu ardayga iyo waalidiintda ardayga siin doonaa magacyada, cinwaanada, nambarada telefoonada wakaaladahah dadweynaha iyo kuwa gaarka loo leeyahay ee ku sugan bulshada kuwaasoo bixiya brograamyo ama adeegyo kaalmo ka geysta toosinta dabeecadaha ardayga iyo dhaqanka ku biiriyay dhacdada (dhacdooyinka) ka dambeyay.

**Ka Joojinta ama Saaridda Ardayda Fasallada Kahor-Fasalka Barbaarinta ilaa Fasalka Saddex (3).**

Marka laga reebo sida sharciga ogol yahay, ka-joojinta ama ka saaridda ka horesyo laguma bilaabi karo ardayga ku jiro darajooyinka ka horeeyo xanaanada illaa laga gaaro darajadaf saddex (3) haddii arday uusan geysanin ugu yaraan mid ka mid ah falalka soo socdo:

A. Marka ardayga la yimaado qori xabbad ka dhacdo ama middi awood u leh in ay dhaawac culus gaarsiiso jirka gudaha dhismaha dugsiga ama hanti kasta (kana mid ah baabuur dugsiga) leeyahay, uu kantaroolo, ama ku shaqeeyo Guddiga, tartan ka dhexeeyo dugsiyada, munaasabo dheeraad ku ah manhajka, ama brograam ama hawl dugsiga leeyahay oo aan ku aalin gudaha dugsiga ama hantida uu leeyahay ama kantaroolo Guddiga, ama leeyahay hub ama middi awood u leh in ay dhaawac culus gaarsiiso jirka inta lagu sugan yahay dugsiga ama hanti kale (kana mid ah baabuurka dugsiga) leeyahay, kantaroolo, ama Guddiga ku shaqeeyo, tartanka ka dhexeeyo dugsiyada, munaasabo dheeraad ku ah manhajka, ama brograam kasta ama hawl uu dugsiga leeyahay kuna aalin gudaha dugsiga ama hanti uu leeyahay ama kantaroolo Guddiga

B. Ardayga fal ka geysto dugsiga, xero kale uu dugsiga leeyahay, meel ay ka jirto tartan ka dhexeeyo dugsiyada, munaasabo dheeraad ku ah manhajka, ama brograamka kale ama hawl dugsiyada leeyahay kaddibna falka: 1) ahaan doono gaf lagu tilmaami karo dambi haddii uu geysto qof qaan gaary; kaddibna 2) waxyeelo culus u geysto jirka qof (dad)

sida ku sifeysan R.C. 2901.01(A)(5), ama hanti sida ku sifeysan R.C. 2901.01(A) (6).

C. Ardayga uu cabsi gelinta bamb u geysto dhimaha dugsiga ama xero kasta oo laga fulliyo hawsha dugsiga marka la geysanaayo cabsi gelinta.

D. Ardayga ku kaco dabeecad noocaas ah oo markaas lagama maarmaan ka dhigta in ardayga laga joojiyo ama laga saaro dugsiga si loo badbaadiyo caafimaadka iyo ammaanka ardayga, asxaabta ardayga, shaqaalaha iyo macalimiinta fasalka, iyo/ama shaqaalaha kale ee ka tirsan dugsiga.

Ka hor inta aan laga joojinin ama laga saarin ardayga darajooyinka Pre-K ilaa darajada saddex (3), mar kasta ay suurtogal tahay, Agaasimaha wuxuu la tashan doonaa aqoonyaanka caafimaadka madaxa kaddib marka lala galo heshiis. Haddii dhacdooyinka u horseeda ka-joojinta ama ka-saaridda ardayga laga saaro dugsiga tilmaanto in ardayga u baahan yahay adeegyo dheeraad ah xagga caafimaadka madaxa, Agaasimaha ardayga ama aqoonyaanka caafimaadka madaxa Dagmada wuxuu waalidka ardayga ama ilaaliyaha ku kaalmeyn doonaa in uu helo bixiyeyaal ama helitaanka adeegyada noocaas, sida tixraacinta aqoonyaan madax banaan oo ka shaqeeya caafimaadka madaxa, hase ahatee kaalmada noocaas waa in aysan culeys ku noqonin Dagmada ama dugsiga ardayga xagga maaliyadda.

Haddii arday ku jira darajooyinka Pre-K ilaa darajada saddex (3) laga joojiyo ama laga saaro, ardayga waxaa la siin doonaa isla ogeysiiska iyo dhageysiga, hababka, iyo fursadaha waxbarashada sida ku qoran siyaasadda Guddiga iyo sharciga. Ka-joojinta ama ka-saaridda ardayga ku jira darajooyinka Pre-K ilaa darajada 3aad ma soo koobi doonto mas'uuliyadda Guddiga ka saaran bixinta waxbarashada khaaska iyo adeegyada la xariira ee la siiyo ardayga noocaas sida waafaqsan siyaasadda Guddiga iyo sharciga. Intaas kaddib, lama soo koobi doono awoodda Guddiga u leedahay in ay dugsiga ka-joojiso arday ku jira darajooyinka Pre-K ilaa darajada 3aad, hase ahatee waa in loo adeego ka-joojinta gudaha dugsiga, jawigana waa in uu ahaado mid ku habboon waxbarasho oo lagu karmeero.

Haddii Maamulaha go'aan ku gaaro in dabeecadda ardayga saaran baabuurka dugsiga jebiso sharciyada u dagsan dugsiga, Maamulaha ayaa ardayga ka joojin kartaa axsaanka raacidda baska muddo ku habboon lana xariirta jebinta iyo wax ka qabashada dabeecadda. Ka joojin kasta oo noocaas ah waa in ay u hoggaansanto nidaamka iyo Xeerka Asluubta Ardayga/Xeerka Dishibiliinka Ardayga.

Guddiga wuxuu Maamulaha u fasaxay in uu soo jeediyo talooyin la xariira ka-joojinta/ka-saaridda ardayga laga siiyo dugsiga lagana yaabo in ay ka mid yahiin talooyinka waxbarashada kale.

Maamulaha wuxuu bilaabi doonaa dacwadaha ka-saaridda ee ka soo horjeedo ardayga ku dhaqaaqay ficil mutteystay ka-saarid sida hoos timaado siyaasadda Guddiga haddii ardayga ka noqdo dugsiga ka hor inta aan la gaarin dhageysiga ama go'aanka ka-saaridda. Waa in la mariyo ka-saaridda isla muddada la marrin lahaa haddii ardayga uu ku sii qornaan lahaa.

Guddiga wuxuu ogolaan karaa in dugsiga loo ogolaado arday la soo saaray dugsiyada dagmo kale oo ku taalo Ohio ama dibadda ka ah gobolka haddii muddada ka saaridda ardayga ay dagmada u qabatay aysan dhamaanin. Ardayga laga saaray waxaa marka hore la siin doonaa fursad oo lagu dhageysto. Qodobkaan waxaa kaloo lagu dabaqaa ardayga ay quseeyso awoodda mattalaadda (power of attorny) oo awoowaha/ayeeyada cunugga ku tilmaanto in ay yahiin qareenka dhabta ah ama warqadda uu ku dhaarto una fasaxda daryeelaha (affidavit) uu fulliyo awoowaha/ayeeyada cunugga, oo raadiya in loo ogolaado gelitaanka dugsiyada Dagmadaan sida waafaqsan Siyaasadda 5111.

Guddiga wuxuu ogolaan karaa in dugsiga loo ogolaado arday la soo saaray dugsiyada dagmo kale oo ku taalo Ohio ama dibadda ka ah gobolka haddii muddada ka saaridda ardayga ay

dagmada u qabatay aysan dhamaanin. Ardayga laga saaray waxaa marka hore la siin doonaa fursad oo lagu dhageysto.

Marka ardayga laga saaro Dagmadaan, Maamulaha wuxuu ogeysiis qoran u diri doonaa kulliyad kasta uu ardayga la eryay ku qoran yahay sida hoos timaado Barnaamijka U Diyaargarowga Kuleejka (College Credit Plus) waqtiga lagu fulliyo ka-saaridda. Ogeysiiska qoran wuxuu muujin doonaa in taariikhda ka-saaridda ku beegan tahay in ay dhacdo iyo in Guddiga qaatay qodob ku jira Siyaasadda (Policy) 2271 ee hoos timaada R.C. 3313.613 in loo diido buundada dugsiga sare lana xariira koorsooyinka Barnaamijka U Diyaargarowga Kuleejka (College Credit Plus Program) ka dambeeyo dugsiga sare oo la qaatay mudda ka-saaridda socotay.

Haddii muddada ka-saaridda la dheereeyo, Maamulaha wuxuu kuliyadda ogeysiin doonaa dheereynta.

Nuqul ka mid ah siyaasaddan waa in lagu dhejiyaa meel la wada arkayo dugsi kasta oo loo diyaariyo ardayda iyo waalidiinta marka la codsado.

La baddalay 12/10/18, 6/10/19, 6/26/23, 4/7/2025

**© Neola 2023**

Sharciga
R.C. 2919.222, 3313.534, 3313.649, 3313.66, 3313.661, 3313.662, 3313.663
R.C. 3313.664, 3313.668, 3321.13 (B)(3) iyo (C),3327.014
18 U.S.C. Qaybta 921
20 U.S.C. 3351, 20 U.S.C. 7151, 20 U.S.C. 8921

**SIYAASADDA GUDDIGA 5611 - XUQUUQDA SIDA SHARCIGA QABO**

Guddiga Waxbarashada (Board of Edcuation) wuxuu aqoonsan yahay in ardayda leeyahiin xuquuq kooban sida hoos timaado dastuurka marka laga hadlaayo waxbarashadooda.

Sidaas darteed, Guddiga wuxuu aasaasay hababka soo socda ee Maamulayaasha Dagmadu ay isticmaali doonaan marka ay la shaqaynayaan ardayda:

A. **Ardayga laga joojiyay:**

   Marka Maamulaha uu ku fakaro in ardayga dibadda looga saaro dugsiga ilaa muddo, agaasimaha, ama maamulaha kale:

   1. Ardayga waxaa loo adeegsan doonaa qoraal si loo ogeysiiyo in ay suurtogal tahay in laga joojiyo lana siiyo sababta loo qaado talaabada la soo jeediyay.

   2. Ardayga waxaa la siin doonaa fursad si aan rasmi ahayn loogu dhageysto si uu uga doodo sababta loo siiyay ka-joojinta iyo si uu u sharaxo falalka uu ku kacay isaga/iyada.

   3. Waxaa leysku dayi doonaa in waalidiinta ama ilaaliyeyaasha lagu ogeysiiyo telefoon haddii la soo saaro ka-joojin.

   4. Muddo hal (1) maalin dugsiyeed ka-joojinta kaddib, maamulaha, agaasimaha, ama cidda loo xil saaray waxay ogeysiin doonaan waalidiinta, ama haayeyaasha ardayga iyo Hanti Dhowrka Guddiga. Ogeysiiska waxaa ku jira asbaabta ka dambeyso ka-joojinta iyo xaqa ardayga, waalidka, ilaaliyaha, ama haayaha u

leeyahayiin in ay racfaan u gudbiyaan Guddiga ama cidda loo xil saaro; xaqa in la mattalo racfaanka; iyo xaqa in la codsado in dhageysiga lagu qabto kullanka fullinta haddii la hor keeno Guddgia. Ogeysiiska wuxuu kaloo tilmaami doonaa in haddii ardayga, waalidka, ilaaliyaha, ama haayaha ku talo jiro in uu racfaan u gudbiyo Guddiga ama cidda loo xil saaray, ogeysiiska noocaas ee la xariira racfaanka waxaa loo gudbin doonaa, iyadoo qoran, Xafiiska Qiimaynta iyo Waxbarashada Kale (Office of Assessment and Alternative Education) muddo toban iyo afar (14) maalmo isku xiga kaddib taariikhda la soo saaro ogeysiiska ka-joojinta. Haddii gafka yahay mid ay Dagmada ku raadsato ka-reebid joogto ah, markaas ogeysiiska waxaa ku jiri doono macluumaadkaas.

5. Ogeysiiska ka-joojintaan waxaa kaloo loo diri doonaa:

    a. Maamulaha;

    b. Diiwaanka dugsiga ardayga (waa in aan lagu darin diiwaanka joogtada).

**6.** Haddii ardayga uu ka tago xerada dugsiga, fasax la'aan, isla marka uu jebiyo (ama lagu tuhmo in uu jebiyay) qodob ka tirsan Xeerka Asluubta Ardayga/Xeerka Dishibiliinka Ardayga ama ka hor inta maamulaha uusan fullinin dhageysi aan rasmi ahayn sida ku qoran kor, kaddibna ardayga ku guuldareysto in uu ku soo noqdo dugsiga maalin dugsiyeedka ku xiga, agaasimaha, kaaliyaha agaasimaha, Maamulaha, ama maamule kasta oo kale, wuxuu ardayga iyo/ama waalidiinta/ ilaaliyeyaasha ogeyssis ku saabsan ka-joojinta, kaddibna wuxuu ardayga iyo/ama waalidiinta siin doonaa dhageysi aan rasmi ahayn kaddib marka la codsado si looga hadlo asbaabta dhallisay ka-joojinta iyo in ardayga loo ogolaado in uu ka hor yimaado asbaabta iyo in uu sharaxo ficilkiisa/ ficilkeedawaqti kasta ka hor inta aan la gaarin muddada ka-joojinta.

**Racfaanka Laga Qaato Ka-Joojinta ee loo Gudbiyo Guddiga ama Qofka Loo Xil Saaro**

Ardayga jira toban iyo sideed (18) ama ka badan ama marka waalidka (waalidiinta) ardayga ama ilaaliyaha (ilaaliyeyaasha) ardayga waxay racfaan ka qaadan karaan ka-joojinta iyaga oo u gudbiya Guddiga ama cidda loo xil saaray. Waxaa dhici karto in cid kale mattasho inta ay socdaan dhamaan dacwadaha racfaanka noocaas

Diiwaanka waxyaabaha afka laga sheegay ee ku saabsan dhageysiga waxaa lagu hayn doonaa kullanka fullinta marka ardayga, waalidka, ama waalidka codsadaan haddii lagu haayo Guddiga hortiisa.

Habka loo dabagalo racfaanka noocaas waxaa lagu soo qori doonaa sharciyada uu soo ogolaado Maamulaha. Ogeysiiska racfaanka waa in loo gudbiyo, iyadoo qoran, Hanti Dhowrka (Treasurer) ama Maamulaha muddo toban iyo afar (14) maalin kalendarka gudahooda kaddib marka la soo saaro ogeysiiska ka-joojinta.

Inkastoo ay dhici karto in dhageysi lagu qabto Guddiga hortiisa, kullanka fullinta, Guddiga waa in uu soo bandhigo dadweynaha.

**Racfaanka Laga Qaato Maxkamadda**

Sida hoos timaado sharciga Ohio, racfaanka laga qaato go'aanka Guddiga ama cidda loo xil saaray waxaa loo gudbiyaa Maxkamadda Dacwadaha Caadiga (Court of Common Pleas).

B. **Ardayga hoos yimaada ka-saarid:**

Marka maamulaha uu ku fakaro in uu ardayga saaro:

1. Maamulaha wuxuu ardayga, waalidka, ama haayaha siin doonaa ogeysiis qoran oo ku saabsan ka-saaridda lagu talo jiro, kana mid ah asbaabta loo rabo ka-saaridda lagu talo jiro.

2. Ardayga iyo waalidka ama wakiilka waxay fursad u haystaan in ay iska xaadiriyaan Maamulaha hortiisa ama cidda loo xil saaray si ay uga doodaan talaabada la soo jeediyay ama si ay u sharaxaan talaabadaha uu ardayga qaaday. Ogeysiiska qoran wuxuu sheegi doonaa waqtiga iyo goobta loo baahan yahay in la tago, taasoo aysan waajib ahayn in ay ka yaraato saddax (3) maalin dugsiyeed kana dambaynin shan (5) maalin dugsiyeed kaddib marka la siiyo ogeysiiska haddii Maamulaha uusan bixinin dheereyn kaddib marka ardayga ama waalidka codsanin.

3. Hal (1) maalin dugsiyeed gudaheeda, Maamulaha wuxuu ogeysiin doonaa waalidiinta, ilaaliyeyaasha, ama haayeyaasha ardayga iyo Haayaha Hantida Guddiga (Treasurer of the Board). Ogeysiiska waxaa ku jira asbaabta ka dambeyso ka-saaridda iyo xaqa ardayga, waalidka, ilaaliyaha, ama haayaha u leeyahayiin in ay racfaan u gudbiyaan Guddiga ama cidda loo xil saaro; xaqa in la mattalo racfaanka; iyo xaqa in la codsado in dhageysiga lagu qabto kullanka fullinta haddii la hor keeno Guddgia. Ogeysiiska wuxuu kaloo tilmaami doonaa in haddii ardayga, waalidka, ilaaliyaha, ama haayaha ku talo jiro in uu racfaan u gudbiyo Guddiga ama cidda loo xil saaray, ogeysiiska noocaas ee la xariira racfaanka waxaa loo gudbin doonaa, iyadoo qoran, Xafiiska Qiimaynta iyo Waxbarashada Kale (Office of Assessment and Alternative Education) muddo toban iyo afar (14) maalmo isku xiga kaddib taariikhda la soo saaro ogeysiiska ka-joojinta. Haddii gafka yahay mid ay Dagmada ku raadsato ka-reebid joogto ah, markaas ogeysiiska waxaa ku jiri doono macluumaadkaas.

   **Racfaanka Saaridda ee loo Gudbiyo Guddiga**

   Ardayga jira toban iyo sideed (18) ama ka weyn ama waalidka (waalidiinta) ardayga ama ilaaliyaha (ilaaliyeyaasha) waxay racfaan ka qaadan karaan ka-saaridda uu soo jeediyay Maamulaha una gudbin karaan Guddiga ama cidda loo xil saaray.

   Diiwaanka waxyaabaha afka laga sheegay ee ku saabsan dhageysiga waxaa lagu hayn doonaa kullanka fullinta marka ardayga, waalidka, ama waalidka codsadaan haddii lagu haayo Guddiga hortiisa.

   Habka loo dabagalo racfaanka noocaas waxay ahaan doontaa sida waafaqsan sharciyada uu soo ogolaado Maamulaha. Ogeysiiska racfaanka waa in la gudbiyo, iyadoo qoran, muddo toban iyo afar (14) maalin gudahooda, kaddib marka Maamulaha gaaro go'aanka ka-saaridda, loona gudbiyo Xafiiska Qiimaynta iyo Waxbarashada Kale (Office of Assessment and Alternative Education).

   Inkastoo ay dhici karto in dhageysi lagu qabto Guddiga hortiisa, kullanka fullinta, Guddiga waa in uu soo bandhigo dadweynaha.

   **Racfaanka Laga Qaato Maxkamadda**

   Sida hoos timaado sharciga Gobolka, go'aanka Guddiga ama cidda loo xil saaray

waxaa laga qaadan karaa racfaan loo jeediyo Maxkamadda Dacwadaha Caadiga (Court of Common Pleas).

C. **Ardayda waxaa degdeg looga saari karaa dugsiga:**

Ardayda dabeecadooda dhallisa in si degdeg ah looga saaro waxaa loola dhaqmi doonaa sida waafaqsan xuquuqda iyo hababka ku qoran Siyaasadda (Policy) 5610.03 - Ka-Saaridda Degdegga (Emergency Removal).

D. **Ardayda sida joogtada ah looga reebay:**

Ardayda dabeecadooda tahay mid u baahan in si joogto ah looga saaro waxaa loola dhaqmi doonaa sida waafaqsan xuquuqda iyo hababka ku qoran Siyaasadda 5610.01 – Siyaasadda Joogtada ah ee Ardayda Aan Itaalka Darneyn (Permanent Exclusion of Non-disabled Students).

E. **Ardayga laga joojiyo raacidda baska/axsaanka gaadiidka:**

Ardayda asluubtooda awgeed u baahan in laga joojiyo raacidda baska iyo/ama adeegyada gaadiidka waxaa loola dhaqmi doonaa sida waafaqsan xuquuqda iyo hababka ku qoran Siyaasadda 5610.04 - Ka Joojinta Raacidda Baska/Axsaanka Gaadiidka.

Marka la go'aaminayo in tillaabada edbinta lagu sheegay siyaasaddan la fulinayo iyo in kale, Maamulayaasha Degmadu waa inay adeegsadaan heerka caddaynta. Intaa waxaa dheer, shaqsi kasta oo lagu soo oogay go'aan dishibiliin sida hoos timaada siyaasaddan waa inuu hayaa dhammaan dukumeentiyada, macluumaadka elektarooniga ah ee lagu kaydiyo ("ESI"), iyo warbaahinta elektaroonigga ah (sida lagu qeexay Siyaasadda 8315 - Maareynta Macluumaadka (ie. "Dacwadda Haynta")) la abuuray iyo/ ama lagu helay qayb ka mid ah baaritaanka.

Dukumeentiyada, ESI, iyo warbaahinta elektaroonigga ah (sida lagu qeexay Siyaasadda 8315) ee la hayo waxaa ku jiri kara diiwaannada dadweynaha iyo diiwaannada laga dhaafo siidaynta ee hoos timaada Federaalka (tusaale, FERPA, ADA) iyo/ama sharciga Gobolka (tusaale, R.C. 3319.321) - tusaale, diiwaanka ardayda iyo diiwaanada caafimaadka qarsoodiga ah

Dukumeentiyada, ESI, iyo warbaahinta elektaroonigga ah (sida lagu qeexay Siyaasadda 8315) waa in loo hayaa si waafaqsan Siyaasadda 8310, Siyaasadda 8315, Siyaasadda 8320, iyo Siyaasadda 8330 wax aan ka yarayn saddex (3) sano, laakiin ka badan haddii uu u baahdo jadwalka haynta diiwaanka degmadu.

Intaas kaddib, oraahda ku saabsan xuquuqda nidaamka dagsan waxaa la soo gelin doonaa dhamaan buugaagta ardayga taasoo u fududeyn doonto ardayda iyo waalidiintooda.

Hababkaan laguma dabaqo talooyinka dishibiliinka kale ee gudaha-dugsiga sida ka-joojinta gudaha-dugsiga. Ka-joojinta gudaha dugsiga waa mid dhamaan laga bixiyo jawi waxbarsho oo la kormeero kuna yaal gudaha dugsiga. Mana aha in hababkaan kale ee la xariira dishibiliinka in ay quseyaan ardayda ay shaqaalaha dugsiga ee loo fasaxay ka mamnuuceen dhamaan ama qeybo ka tirsan ka-qeybgalkooda hawlaha la xariiro manhajka, hawlaha ka dhexeeyo dugsiga, iyo/ama hawlaha dheeraadka ku ah manhajka kana dhexeynin dugsiga.

**© Neola 2021**

Sharciga
R.C. 3313.20, 3313.66, 3313.661

**Sharciyada Aadaabta Ardayga**
Ujeedada qorista sharciyada la xariira asluubta ardayga iyo falka dishibiliinka ee laga yaabo in laga qaado jebinta waxay tahay in la ogeysiiyo ardayda waxa loo arko in ay yahiin dabeecad aan la ogolaan karin; iyo waxyaabaha suurtogalka ah ee ka dhasha dabeecadda aan la ogolaan karin.

1. **U goynta Fasalka**
   U goynta fasalka waa marka arday jooga dugsiga uu si badheedh ah u doorto inaanu dhigan hal ama in ka badan oo xiisado ah. Imaanshaha fasalka ayaa muhiim u ah waxbarashada; sidaas darteed, waxaa la filayaa in ardaydu ay xaadiraan dhammaan fasallada inta lagu jiro maalinta dugsiga. Marka ardaydu fasalada soo xaadiraan, waxay awoodaan inay helaan casharada fasalka, la falgalaan macalimiinta iyo ardayda kale, helaan jawaab celin degdeg ah oo ku saabsan xirfadaha lagu tababaray, ka qaybqaataan hawlaha fasalka, oo ay wax ku biiriyaan bulshada fasalka. U goyntu fasalka waa xad gudub xaga Xeerka Anshaxa Ardayga.

2. **Jebinta Sharciga Imaashada, marka laga reebo Goynta**
   Ardayga kama baaqan karo in uu u hoggaansamo sharciyada dugsiga ee ku saabsan imaashada. Sida waafaqsan XEERKA LA BADDALAY EE OHIO 3321.01, cunugga jira inta u dhexeyso lex (6) sanno iyo toban iyo sideed (18) sanno waa cunug ay waajib ku tahay in uu tago dugsi.

3. **Dagaalka/Xoogga**
   Dagaalka/Weerarka waa marka dhinacyada ka qeybgalaan dhacdo ku lug leh isku dhaca jira. Lama ogola in ardayga uu u dhaqmo si cabsi gelin karta ama sabab u noqon karta dhaawaca jirka qof kale. Ardayga ma imaan karo si uu u daawado ama u dhiiri geliyo dagaal mana ka reebi karo shaqaalaha dugsiga in ay dhexgalaan marka dagaal dhaco Ka reebidaan waxaa ka mid ah ardayda kaalmeysa, oo joogta, ama si kastaba uga qeybgasha jebinta sharcigaan. Gafkaan waa ka soocan yahay Xeerka Asluubta (Code of Conduct), Qeybta #29/Weerarka marka gacan qaad ay ku lug leeyahiin in ka badan hal arday.

4. **Jejebinta/Khasaarada ama Burbuinta Hantida Dugsiga iyo/ama Hantida Shakhsiga**
   Maamulaha wuxuu muddo hal sanno dibadda u saari karaa ardayga geystay fal waxyeelo culus gaarsiiya hantida.

   Ardayga waxay mas'uul ka yahiin daryeelka ku habboon hantida dugsiga, saadka dugsiga iyo qalabka. Looma dulqaadan doono waxyaabaha lagu qoro darbiyada, albaabada ama meelaha kale. Ma aha in stikarada lagu dhajiyo meel kasta, gaar ahaan miisaska ardayga iyo lokarada. Ardayda burbur u geysata hantida dugsiga waxaa laga qaadi doonaa talaabo dishibiliin.

   Jejebinta waa marka si ula kac ah loo burburiyo ama jejebiyo hantida dugsiga ama qofka. Ardayga sabab uma noqon karo mana iskudayi karo in uu sabab u noqdo burburka loo geysto hantida dugsiga. Ka reebidaan waxaa ka mid ah ardayda kaalmeysa, oo joogta, ama si kastaba uga qeybgasha jebinta sharcigaan.

   Ardayda iyo waalidiintooda ama ilaaliyeyaashooda waxay mas'uul ka yahiin jejbinta, burburinta, wasakhda darbiyaha ama burburinta uu ardayga u geysto dugsiga, hantida uu leeyahay ama kantaroolo dugsiga dagmada, ama tartanka ka dhexeeyo dugsiyada, munaasabadda ka baxsan manhajka, ama brograam kasta oo ka jira dugsiga ama hawsha iyadoo aan la fiirinin goobta. Waxaa loo baahan yahay kharashka ku baxa dib u hagaajinta dhamaystiran ee la xariirta khasaarada.

5. **Xattooyada/Dhaca/U Diididda Hantida Qofka Leeyaha ama Hantida Dugsiga**
   Xattooyada waa sharci darrada lagu qaato hanti uu leeyahay qof kale.

   Ardayga wax ma xadi karo, ma iskudayi karo in uu wax xado ama ma ka reebi karo milkiilaha hantida gaarka ama hantida dugsiga, ama ma haysan karo ama ma gudbin karo hantida la soo

xaday. In aan hantida lagu soo celinin milkiilaheeda ama loo gudbinin saraakiisha dugsiga waa jebin loo geystay xeerkaan.  Ka reebidaan waxaa ka mid ah ardayda kaalmeysa, oo joogta, ama si kastaba uga qeybgasha jebinta sharcigaan.

6. **Isticmaalka, Haysashada, Iibinta ama Qeybinta Hubka**
Qoriga waxaa loo haystaa in uu yahay hub halis ah. " Hubka xabadda ka dhacdo" waxaa lagu sifeyaa hub kasta, (kana mid ah qoriga bilaabaha), kaasoo loo handasay ama dhakhso loo baddali karo in uu tuuro xabbad marka la qarxiyo, ama shay kale oo tuura, frameka ama qabtaha hubka noocaas, hub kasta oo xabad ka dhacdo, yareeyaha qeylada hubka ama aamusiyaha hubka, ama qalab kasta oo wax burburiyo. (Fadlan tixraac #8 hoos si aad u heshid sifeynta "qalabka burburinta). Ka reebidaan waxaa ka mid ah ardayda kaalmeysa, joogta, ama si kastaba uga qeybgasha jebinta sharcigaan.

**SIYAASADDA GUDDIGA 5772 - HUBKA**
Guddiga Waxbarashada wuxuu ardayda ka mamnuucay in ay haystaan, keydsadaan, samaystaan, ama isticmalaan hub, kana mid ah hubka la qarsado, meel ammaan u ah dugsiga iyo xaalad kasta oo hoos timaada kantaroolka iyo kormeerka Guddiga si loo fulliyo hawlaha dugsiga soo ogolaaday iyo ruqseyaykana mid ah, balse ku ekeen, hantida la kireystay, la leeyahay, ama qandaraas ku qaadatay Guddiga, munaasabo uu dugsiga mas'uul ka yahay, ama gudaha baabuur uu leeyahay Guddiga.

Erayga "hub" waxaa ka mid ah shay kasta, hadba sida loo isticmaalo, loogu talogalo in loo isticmaalo, ama loo soo bandhigo, awood u leeyahay in uu waxyeelo culus gaarsiiyo jirka, iyo sidoo kale in uu halis geliyo caafimaadka iyo ammaanka dadka. Hubka waxaa ka mid ah balse kuma eka hubka xabbadda ka dhacdo, qoryaha nooc kasta, kana mid ah qoryaha ku shaqeeyo hawada iyo gaaska (haddii la cabbeeyo ama haddii aan la cabbeynin), middiyada, sakiinta, garuunka, hubka korantada, biraha la gashto faraha, hubka "martial arts", rasaasta, aaladaha dabka dhaliyo, walxaha qarxa, iyo walxo kale oo loo aqoonsaday khatar marka loo eego sharciga Gobolka.

Ka dhaafidda siyaasadda waxaa ka mid ah:

A. Waxyaabaha uu horay u ogolaaday agaasimaha dhismahataasoo qeyb ka ah bandhig uu sameeyo fasalka ama qofka sida hoos timaado kormeerka qofka weyn, haddii loo isticmaalo iyo habka la ogolaaday (hub shaqeeya iyo rasaasta marna lama ogolaan doono in ay qeyb ka noqdaan bandhigga);

B. Xushmadda masraxiyadda loo isticmaalo xaaladaha ku habboon.

Ardayda waxay soo sheegi doonaan macluumaadka ku saabsan hubka iyo/ama cabsi gelinta dagaalka ay geystaan ardayda, xubnaha shaqaalaha, ama dadka soo booqda agaasimaha. In aana la soo sheegin macluumaadka noocaas waxay dhallin doontaa in ardayga laga qaado talaabo dishibiliin.

Fullinta siyaasaddaan waxaa loo mari doonaa Sharciga Asluubta/Sharciga Dishibiliinka Ardayga (Code of Conduct/Student Discipline Code), Siyaasadda 5610, iyo Siyaasadda 5610.01, iyo tilmaamaha maamulka.

Maamulaha waxaa la siiyay awood uu ku dajiyo brograamyada tababarka ee ku saabsan hubka iyo shardiga in ardayda isla markiiba soo sheegaan aqoonta ay u leeyahiin hubka iyo cabsi gelinta dagaalka ay ardayda iyo/ama shaqaalaha u geystaan agaasimaha dhismaha. In uusan soo gudbinin aqoonta noocaas waxay ardayga dhallin kartaa in ardayga lagu qaado dishibiliin.

Maamulaha wuxuu ardayga jebiya siyaasaddaan ku wareejin doonaa waalidiinta ardayga ama ilaaliyeyaasha iyo caddaaladda dambiga ama siistemka gafafka dhallinta. U hoggaansami la'aanta siyaasaddaan waxaa lagu qaadi doonaa talaabada dishibiliinka ku habboon ilaa kana mid ah ruqsadda laga siiyo shaqada.

Siyaasaddaan waxaa sannad kasta lagu soo daabici doonaa dhamaan buugaagta Dagmada ee ardayga iyo shaqaalaha. Daabacaadda ma aha shardi horta lagu xujeeyo hirgelinta siyaasaddaan.

**© Neola 2022**

Sharciga
R.C. 2923.11, 2923.122, 3313.20, 3313.66, 3313.661
18 U.S.C. 921, 20 U.S.C. 8922, 20 U.S.C. 7151

7. **Isticmaalka, Haysashada ama Qeybinta Hub Halis ah balse aan ahayn Qori ama waxyaabaha Qarxa, Dab, ama Sunta Gaaska**

Hub halis ah, marka laga reebo qoriga ama qalabka burburinta, kana mid ah waxyaabaha qarxa, dabka ama sunta gaaska, waxaa lagu sifeyaa shayga, qalabka, maadada, ama waxyaabaha, dhaqaaqa ama aan dhaqaaqin, ee loo isticmaalo, ama lagu talojiro in loo isticmaalo, ama loo mattalo in ay diyaar u yahiin in ay geystaan dhimasho, dhaawac culus oo soo gaara jirka ama burbur soo gaara hantida ama halis geliya caafimaadka iyo ammaanka dadka. Tusaalooyinka waxaa ka mid ah, balse kuma eka, taserada ama garuunka.

Middi dhaawac culus gaarsiin karta jirka waxaa lagu sifeyaa hub kasta ama qalab wax gooya oo ka kooban middida lagu dhajiyay daabka la qabsado; middida wax lagu gooyo; ama qalab kale oo la mid ah (sida hub fiiqan, birta loo adeegsado xiiladaha dagaalka "martial arts" sida ninjaha tuura xiddigaha) ee loo adeegsado, ama diyaar u ah in loo adeegsado, keeni kara dhimasho ama dhaawac culus soo gaarsiin kara jirka. Mamnuucaan waxaa ku jira ardayda kaalmo ka geysata, jooga, ama si kastaba ha ahaato ka qeybgala jebinta sharcigaan.

8. **Isticmaalka, Haysashada, Iibinta ama Qeybinta Qalabka Burburinta, kana mid ah waxyaabaha Qarxa, Dabka ama Sunta Gaaska**

Waxyaabaha qarxa, dabka ama sunta gaaska waxaa lagu sifeyaa qalabka burburinta, kana mid ah bambka, bambka gacanta laga tuuro, saaruuqa tuura in ka badan shay afar once, saaruuq watta waxyaabaha qarxa ama dab ka badan rubac once, miino, ama qalab la mid ah. Sifeyntaan waxaa kaloo ka mid ah hub kasta oo halis ah oo, si fudud loo baddali karo, soo tuuri karo xabad marka qaraxa dhaco ama wax kale lagu tuuro, oo afka ku leh duleel dhexroorahiisa yahay nus-inji. Ka reebidaan waxaa ka mid ah ardayda kaalmeysa, oo joogta, ama si kastaba uga qeybgasha jebinta sharcigaan.

9. **Isticmaalka, Haysashada, Iibinta ama Qeybinta Badeecada Tubaakada**

Waxaa toos loo mamnuucay isticmaalka, haysashada ama qof kale lala haysto tubaako, qaak kasta ha ahaato ay ardaydka ku sameyaan meel u dhaw hantida dugsiga, gaadiidka dugsiga korkiisa iama hawlaha dugsiga mas'uulka ka yahay. "Isticmaalka tubaakada" waxaa loola jeedaa calaajiska ama in afka lagu haysto maado kasta oo laga helo tubaako, sida tubaakada aan qiiqa lahayn, si looga helo dhadhanka tubaakada, iyo sidoo kale dhamaan isticmaalka tubaakada ama waxyaabaha lagu baddalo tubaakada, sida sigaarka, siigaraha, tubaakada tubada, tubaakada la calaajiyo, urka, ama maado kasta oo kale ama maadooyinka laga helo tubaako, marka lagu darro warqadaha loo adeegsado in lagu duubo sigaarka, sigaarka "clove" ama qalabka kale ee la shido si loo gubo tubaakada. Sidoo kale waa la mamnuucay cabidda sigaarka iyo/ama haysashada sigaarka elataroonigga, "qalabka uumiga," iyo noocyo kale oo lagu baddalo sigaarka, ha ku jirto ama yeysan ku jirin nikotiin. Ka reebidaan waxaa ka mid ah ardayda kaalmeysa, oo joogta, ama si kastaba uga qeybgasha jebinta sharcigaan.

**SIYAASADDA GUDDIGA 5512 – KAHORTAGGA ISTICMAALKA TUBAAKADA**

Guddiga Waxbarashada waxay ballan qaaday in ay ardayda, shaqaalaha, iyo dadka soo booqdo siiso jawi aan lagu cabbi karin sigaarka niikotiinka, tubaakada elektorooniga ah oo ka madax

banaan qiiqa. Waxyeelada darran ay tubaakada ku leedahay caafimaadka xagga isticmaalaha iyo kuwa aan isticmaalin oo ay ku jiraan saamaynta u baylah noqoshada sigaarka gacanta-labaad iyo tubaakada elektorooniga ah, wax si cad loo xaqiijiyay. Kaddib, in aan la heli meel lagu cabbo sigaar iyo jawi ka madax banaan tubaakada waxay waafaqsan tahay mas'uuliyadda saaran macalimiinta iyo shaqaalaha in ay hoggaan fiican u noqdaan ardaydena.

Tan ku saabsan siyaasaddaan, "isticmaalka tubaakada" waxaa loola jeedaa calaajiska ama afka oo lagu haysto maado sida tubaakada, kana mid ah tubaakada aan qiiqin, si looga helo waxyeelada tubaakada, iyo sidoo kale isticmaalka tubaakada ama waxyaabaha lagu baddalo tubaakada, sida sigaarka, tubaakada tubada, tubaakada la calaajiyo, tubaakada la jiido, ama shay kasta ama maadooyinka laga helo tubaako ama oo ay ku jiraan saamaynta u baylah noqoshada sigaarka gacanta-labaad iyo tubaakada elektorooniga ah, iyo warqadaha oo adeegsado in lagu duubo sigaarka iyo/ama qiiqa elataroonigga, "uumiga" ama waxyaabo kale oo lagu baddalo sigaarka, sigaarka la duubo ama qalabka kale ee loo adeegsado sigaar ku cabidda ama maado kasta oo kale.

Erayga "tubaako" waxa ku jira shay kasta oo ka kooban, ka samaysan, ama laga helay tubaakada ama nikotiinka (oo ay ku jirto niikotiin macmal ah) kaas oo loogu talagalay isticmaalka dadka ama ay u badan tahay in la isticmaalo, haddii la neefsado, la nuugo, ama loo liqo si kasta oo kale, oo ay ku jiraan, laakiin aan ku xaddidnayn, sigaarka, sigaarka qadiidka leh, tubaakada tuubada, tubaakada la calaliyo, la ursado, ama la san-saarsado; Qalab kasta oo sigaar-cabbid elektarooniga ah iyo walxo kasta oo hawada lagu shido ama lagu qiiq ahaan qalabkaa loogu qaato, haddii ay walaxdu ku jirto nikotiin iyo haddii kale; sigaarka elektaroonigga ah (oo ay ku jiraan, laakiin aan ku xaddidnayn, "JUUL," "NJOY," "BREEZE," "Puff Bar," iwm.), sigaarka elektaroonigga ah, e-pipe, qalin vape (qiiqa), ama e-hookah; balse kuma eka shayga lagu joojiyo ee ay ansixisay Maamulka Mukhadaraadka iyo Raashinka Mareykanka (United States Food and Drug Administration) loona isticmaalo sida daweynta caafimaadka si loo yareeyo ama loo tirtiro nikotiinka ama ku tiirsanaanta tubaakada.

Guddiga wuxuu mamnuucay haysashada, isticmaalka, iibssashada ama iskudayida in la iibsado iyo/ama la istcimaalo tubaakada ama waxyaabaha ay ardayda ku baddalaan tubaakada mar kasta, labaatan iyo afar (24) saac maalintii, todobo (7) maalin todobaadkii, xerada Guddiga, gudaha baabuurta Guddiga, gudaha hay'ad uu Guddiga leeyahay soo kiresytay ama qandaraas siiyay, iyo/ama loo adeegso si caruurta loo siiyo waxbarasho ama adeegyada maktabka, iyo dhamaan munaasabadaha Guddiga mas'uulka ka yahay.

Mamnuucaan wuxuu gaaraa baabuurta Guddiga leedahay iyo/ama baabuurta ay ku shaqeyso oo loo isticmaalo qaadidda ardayda iyo/ama dhamaan baaburta kale uu ku shaqeeyo Guddiga. Barxadda dugsiga, dhismooyinka jimicsiga, iyo munaasabo kasta oo la xariirto dugsiga, ha ahaato gudaha ama dibadda xerada.

**Xayaysiinta/Horumarinta**

Sida waafaqsan Siyaasadda 9700.01, xayaysiinta tubaakada waa mamnuuc in tubaakada lagu xayaysiiyo dugsiga, daabacaadyada dugsiga mas'uulka ka yahay, iyo dhamaan munaasabadaha uu dugsiga mas'uulka ka yahay.

Waxyaabaha xayaysiiya tubaakada ee horumariyo isticmaalka maadooyinka tubaakada, kana mid ah daboolidda, boorsooyinka, shiddeyaasha, iyo waxyabaha kale oo qofk isticmaalo lama ogola in lagu haysto xerada dugsiga, gudaha baabuurta dugsiga, ama munaasabadaha dugsiga mas'uulka ka yahay.

**Ogeysiiska**

Calaamado ayaa lagu dhajin doonaa Dagmada oo dhan sida ku saleys an sharciga R.C. 3794.06 iyo sida ay sheegtay Waaxda Caafimaadka Ohio (Ohio Department of Health) Ardayda waxaa

ogeysiiskaan lagu siin doonaa buugaagta ardayga. Baabuurta dagmada waxay soo bandhigi doonaan sumadda caalamiga "Laguma Cabbi Karo Sigaar" ("No Smoking"). Ku dhawaaqidda waxaa la samayn doonaa inta ay socdaan munaasabadaha jimicsiga guriga, munaasabada ka hor iyo marka la joojiyo, iyo sidoo kale dhamaan xafladaha dugsiga hadba meesha loo arko in ay ku habboon tahay. Brograamka dugsiga waxaa ka mid noqon doono xasuusin qoran oo ku saabsan siyaasadda ka madax-banaan tubaakada.

**Brograamka loo Sameeyo Waxbarashada**

Waxbarashada ka-hortagga isticmaalka tubaakada waxaa lala habeyn doonaa qeybaha kale brograamka caafimaadka dugsiga waana inuu noqdaa mid caddayn ku salaysan, da'da ku habboon, oo dhaqanka waafaqsan. Shaqaalaha mas'uulka ka ah tababarka ka hortagga isticmaalka tubaakada waxaa la siin doonaa tababarka ka horeeyo adeegga iyo waxay ka qeybgeli doonaan hawlaha horumarinta aqoonyaanka si ay gudbiyaan brograamka loo dajiyo waxbarashada. Diyaarinta iyo hawlaha horumarinta aqoonta waxay aqoon aasaasi ah ka bixin doontaa waxyaalada isticmaalka tubaakada iyo waxyeelaha cadaadiska asxaabta ka geystaan isticmaalka tubaakada lagu darray farsamooyinka tababarka iyo xiiladaha iyo hawlaha u gaarka ah brograamka. Waxbarashada waxaa ku jiri doona tilmaamo ku saabsan waxyeellada iyo xannibaadaha sharciga ah ee ka dhanka ah tubaakada, nikotiinka, iyo aaladaha sigaarka elektaroonigga ah, taas oo qayb ka ah manhajka waxbarashada caafimaadka, oo ay ku jiraan Barnaamijka Joojinta Sigaar Cabidda Dhallinyarada ee My Life My Quit Youth Cessation Program. Hirgelinta waxa laga yaabaa inay la jaanqaado Taageerada Dhiirigelinta Dhaqanka Wanaagsan (PBIS) oo lagu daray xoojinta waxbarashada socota oo qayb ka ah Heerka 1 (iyo heerarka xiga) ee xeeladaha PBIS, sida habboon.

**Dhaqan-gelinta**

Ardayda jebisa siyaasaddaan waxaa laga qaadi doonaa talaabo dishibiliin sida waafaqsan Xeerka Asluubta Ardayga (Student Code of Conduct)/Xeerka Dishibiliinka Ardayga (Student Discipline Code) iyo sida waafaqsan siyaasadaha Guddiga.

La baddalay 7/25/11, 2/10/20, 4/24/2023

**© Neola 2023**

Sharciga
R.C. 3313.20, 3313.47, 3313.66, 3313.751, 2151.87
20 U.S.C. 6081 et seq., 20 U.S.C. 7182

10. **<u>Isticmaalka, Haysashada, Iibinta ama Qeybinta Cabbitaanka Qamrada Lagu Saqraamo (Intoxicating Alcoholic Beverages)</u>**
    Ardayga ma haysan karo, ma istcmaali karo, ma qarsan karo, ma gudbin karo, ama ma ahaan karo qof soo isticmaalay cabbitaanka qamrad, (kana mid ah maadooyinka laga helo qiyaas la cabbiri karo oo qamro ah, sida "near-beer" ama kuwa laga iibiyo miiska dawooyinka). Sida hoos timaada cabidda qamrada waxaa lagu sifeyaa muujina, sarkaal ka tirsan dugsiga hortiisa, calaamadaha si qaldan ee loo isticmaalo qamrada, sida, balse kuma eka, gabgabta, urka qamrada, qalqal, dagganaasho la'aan, luminta xasuusta, aflagaada, hurdo gudaha fasalka ama dabeecad kale aan caadi u ahayn ardayga. Ka reebidaan waxaa ka mid ah ardayda kaalmeysa, oo joogta, ama si kastaba uga qeybgasha jebinta sharcigaan.

11. **<u>Isticmaalka, Haysashada, Iibinta ama Qeybinta Mukhaadaraadka Marka Laga Reebo Tubaakada ama Qamrada</u>**
    Waa la mamnuucay isticmaalka, haysashada, iibinta, qarinta ama qeybinta mukhadaraad kasta oo aan ahayn daawada la qoro ee la siiyay sida waafaqsan siyaasadaha dagmada. Ardayga ma haysan

karo, ma isticmaali karo, ma gudbin karo, ma iskudayi karo in uu gudbiyo, qariyo, ama hoos yimaado isticmaalka mukhadaraad sharci darro ah/waxyeelo gaarsiisa, kuwa la jiido, kiimikada baddasha niyadda, ama maado lagu mattalo sida sakhradda ama maado baddasha niyadda. Ardayga ma yeelan karo ama ma gudbin karo qalabka mukhadaraadka (drug paraphernalia iyo/ama qalab, kana mid ah warqadaha lagu duubo. Sakhradda waxaa lagu sifeyaa marka sarkaalka dugsiga hortiisa lagu muujiyo calaamadaha marka sida qaldan loo isticmaalo mukhadaraadka sida, balse kuma eka, gabgableynta, indhaha cas, urka mukhadaraadka, carrada, dagganaasho la'aanta, luminta xasuusta, luqadda af xumada, hurdada gudaha fasalka ama dabeecad kale aan lagu arkin ardayga caadiga. Ka reebidaan waxaa ka mid ah ardayda kaalmeysa, oo joogta, ama si kastaba uga qeybgasha jebinta sharcigaan.

12. **Muujinta Jeceelka**
   Waa la mamnuucay bandhigga jeceelka sida balse kuma eka shumiska, salaaxidda, qanjaruufada, dharbaaxyada, ama isku cariirinta ardayda dhexdooda. Ka reebidaan waxaa ka mid ah ardayda kaalmeysa, oo joogta, ama si kastaba uga qeybgasha jebinta sharcigaan.

13. **Ku Xad-gudubka Xiriirada Shaqsiyeed**
   Lama ogola in ardayga uu kadeedo, cabsi geliyo, muujiyo cadaawad, xumaan, liido, kiciyo, dulmiyo, dabagalo, ama handado qof ku sugan xerada dugsiga, hanti uu leeyahay ama kantaroolo dugsiga dagamada, ama, brograamka uu dugsiga leeyahay ama hawl ama in uu carqaladeeyo jawiga dugsiga. Ujeedadaan, ku xad-gudubka xiriirada shaqsiyeed waxaa ka mid ah: isgaarsiinta, waxyaabaha lagu dirro elataroonigga: hoos geliska; afxumada; macluumaadka qoran; wararka ama falalka yasniinta; ceebta; qaadashada ama muujinta sumadaha, calaamadaha, battanada, labbiska, ama dharka; ama aadaabta afka ama jirka, kana mid ah, balse ku ekeen, kuwa ku saleysan isirka, midabka, asal qaran, abtirsiino, rabitaanka jinsiga, dhallashada, diinta, itaal darrida, da'ada, iyo/ama aqooonsiga "transgender", ujeedadooda tahay ama dhalliya (1) in la sababo ama la rabo in la sababo in arday kale ama shaqaale kale lagu dhalliyo in uu u cabsado naftiisa; (2) la sababo ama la rabo in la sababo cadaawad dhallisa, cabsi, ama jawi waxbarashada oo ku dhisan xumaan loo geysto arday kale ama shaqaale kale oo ka tirsan dugsiga; (3) la sababo ama la rabo in la sababo in la carqaladeeyo hawsha waxbarashada; (4) si aan macquul ahayn loo farageliyo shaqada manhajka ardayga, shaqada lala sameeyo ee ku saabsan manhajka ama shaqada dheeraadka ku ah manhajka; ama (5) si aan macquul ahayn saameyn lagu yeesho fursadaha waxbarashada ardayga. Waa mamnuuc isticmaalka isgaarsiinta qof ahaanta, afka, qoraalka, ama elataroonigga si cabsi loogu dhalliyo iyo/ama loo abuuro waxbarasho cabsi ku jirto ama cadaawad ama jawiga lagu shaqeeyo, iyadoo aan la muujinin hub iyo iyadoo aan dhibanaha lagu qaadin weerarka jirka oo dhab ah.

14. **Carqaladeynta Weyn ee ka Dhacda Dugsiga, Digniinta Beenta ah, Cabsi Gelinta Bombka, Dabka/Dabka aan la Fasixin iyo/ama Haysashada Shideyaasha**
   Waa la mamnuucay cabsi gelin kasta (afka, qoran ama elataroonig) uu geysto qof in uu bomb ku tuuro ama isticmaalo maadooyin ama qalab kale si uu u qarxiyo, u gubo, sababo in uu burbur ka geysto dhismaha dugsiga ama hantida dugsiga, ama in uu waxyeelo gaarsiiyo ardayda ama shaqaalaha. Lama ogola in ardayga bilaabo ama ka-qeybgalo dab been abuur ah ama digniinta bamka ama cabsi gelin kasta oo been ah balse ku jeedo ammanka dugsiga. Sida waafaqsan XEERKA LA BADDALAY OHIO 2917.31 (OHIO REVISED CODE 2917.31), in qalqal laga abuuro gudaha dugsiga waxaa loo qaadan karaa dambi culus.

   Lama ogola in ardayga uu isticmaalka dagaalka, xoogga, qeylada, jujuubka, handadaadda, cabsi gelinta, cabsida, ka hortagga, khayaanada, reebashada macluumaadka ama dhaqan kale, sababin carqaladeyn maadiyan muuqata ama hor istaagidda shaqo kasta oo sharciga u hoggaansan, hawl ama xaflad uu qabo dugsiga. Ardayga ma bilaabi karo ama ma qeybin karo warbixin ama digniin ku saabsan dab la soo sheegay ama soo socda, qarax, dambi ama musiibo kale isaga/iyada oo ogsoon in warbixinta ama digniinta noocaas tahay been.

   Lama ogola in ardayga uu shido ama iskudayo in uu shido dab aan loo fasixin ama in uu kiciyo ama iskudayo in uu kiciyo dab. Ardayga ma haysan karo shide, tarakh ama shay kale oo loo isticmaalo in

lagu shido dab. Ka reebidaan waxaa ka mid ah ardayda kaalmeysa, oo joogta, ama si kastaba uga qeybgasha jebinta sharcigaan.

15. **Labbiska Aan Habbooneyn**

Ardayda waxaa laga filaa in ay u hoggaansamaan heshiisyada ay iyaga la gaareen qeybaha ka mid ah brograamkena waxbarashada ee u haysta in heerarka labbiska yahiin qeybo loo baahan yahay oo ka mid ah brograamyadooda (tusaale: safarada dibadda, kooxaha jimicsiga, brograamyada shaqada, shaybaarada, iwm.).

Labbiska iyo alaabaha ama hantida shakhsiyadeed ee lagu sawiray sawiro ama luqad gaf ah, kana mid ah aflagaado, hadalka naceebka, qaawanaan, qamro, tubaako, mukhadaraad, qoriga xabbadda ka dhacdo, ama maado la xariirto, waa la mamnuucay. Waa mamnuuc labbiska iyo alaabaha ama hantida shakhsiyadeed ee la xariirta hawlaha sharci darrada ah.

Xaaladaha laga yaabo in loo arko in ay halis/carqaladeyn ku yahiin ardayga soo qaatay labbis gaar ah ama si kale u samaystay tinta, waxaa dhici karto in ardaygaas laga dalbado in uu qaato labbis gaar ah waqtigaas iyo/ama wax kale oo celiya tinta.

Ardayda ma qaadan karaan shay qariya aqoonsigooda ama mukdi geliya wijigooda, marka laga reebo asbaabta la xariirta diinta iyo/ama caafimaadka u baahan. Haddii ay ogol yahay madaxda dhismaha, koofiyadaha iyo daboolka madaxa waa la arki karo wijiga, iyo dhagaha.

Ardayda looma ogola in ay qaataan labbis soo saara meelaha u gaarka ah jirkooda ama hoosta laga qaato.  Ardayda waa in la qasbo in ay qaataan kabo. Ardayda looma ogola in ay haystaan ama isticmaalaan busto maalinimada dugsiga.

Ardayda waxaa lagu soo dhaweynaa in ay soo jeediyaan iyaga oo adeegsada habka u gaarka ah, isla markaasna u hoggaansama heerarka iminka jira oo ku saabsan qaadashada labbiska ku habboon meelaha dadweynaha.

**16. Qalabka Isgaarsiinta Gaarka ah (PCD)/Madadaalada iyo Isticmaalka Tiknolojiyadda**

Ardaygu ma isticmaali karo qalabka isgaarsiinta gaarka ah (ereygan waxa kale oo ku jira “qalabka isgaarsiinta elektaroonigga ah” sida lagu xusay R.C. 3313.753) ama qalabka madadaalada inta lagu jiro waqtiga waxbarashada, haddii aanu oggolaansho ka haysan macallinka ama maamulaha dugsiga, ama haddii isticmaalka qalabkaas aanu qayb ka ahayn qorshaha waxbarasho ee gaarka ah ee ardayga (IEP) ama qorshaha Qaybta 504.

Qalabka Isgaarsiinta gaarka ah (PCD) waa qalab isgaarsiineed oo elektaroonig ah, kaas oo ku shaqeeya baytari ama koronto, isla markaana awood u leh helidda, gudbinta, ama helidda iyo gudbinta labadaba ee isgaarsiinta ka dhaxaysa shaqsiyaadka ama kooxaha, kaas oo aynan Degmadu u soo saarin ujeeddo waxbarasho. Tusaalayaasha PCD-yada waxaa ka mid ah kombuyuutarada, laabtoobyada, taableetka, qalabka wax akhriska ee elektaroonigga ah (e-readers), taleefannada gacanta, taleefannada casriga ah (smartphones), aaladaha ciyaaraha (gaming devices), saacadaha casriga ah (smartwatches) iyo tiknoolojiyada kale ee la xirto, iyo aaladaha kale ee intarneetka ku xirma ee loo isticmaalo isgaarsiinta. Ardaydu uma isticmaali karaan PCD-yada inay galaan oo/ama daawadaan mareegaha intarneetka ee ardayda laga xiray inta ay ku jiraan dugsiga, dhismaha dugsiga, ama hawl uu dugsigu maalgeliyo.

Marka laga reebo xaaladaha uu oggolaado macallin, maamule, kooxda IEP, ama qorshaha Qaybta 504, ardayda waxaa ka mamnuuc ah inay isticmaalaan qalabka isgaarsiinta gaarka ah (PCDs) si ay u duubaan, u qabtaan, ama u gudbiyaan codadka (maqal) iyo/ama sawirrada ama muuqaallada (fiidiyowga) arday kasta, xubin shaqaale, ama qof kale inta lagu jiro saacadaha dugsiga. Isticmaalka qalabkan si loo duubo, loo qabto, ama loo gudbiyo cod, sawir, ama muuqaal qof kale iyada oo aan laga haysan oggolaansho sax ah inta lagu jiro maalinta waxbarashada, gaar ahaan meel ama xaalad uu qofku si macquul ah uga filan karo asturnaantiisa in la ilaaliyo, ama sida kor lagu

sheegay, waxaa loo tixgeliyaa ku xadgudub asturnaanta qofka, sidaas darteedna lama oggola. Ardaydu uguma isticmaali karaan qalabka isgaarsiinta gaarka ah (PCD) si kasta oo loo arki karo cagajugleyn (bullying), dhibaatayn (harassment), ama jebinta kale ee Xeerka Anshaxa Ardayda (Student Code of Conduct).

Ardayda sidoo kale waa ka mamnuuc inay u isticmaalaan qalabka isgaarsiinta gaarka ah (PCD) si ay u qabtaan, u duubaan, ama u gudbiyaan macluumaadka imtixaanka ama macluumaad kale si ka dhigan khiyaano, xatooyo, qish, ama anshax-xumo tacliimeed. Sidoo kale, ardayda waa ka mamnuuc inay isticmaalaan qalabkaas si ay u helaan macluumaad noocaas ah.

Ardayda waa ka mamnuuc inay isticmaalaan qalabka isgaarsiinta gaarka ah (PCDs) si kasta oo ku xadgudbaya xuquuqda qofka ee gaarka ah iyo asturnaanta la filan karo. Tani waxaa ka mid ah ku isticmaalka qalabkan meelaha iyo xaaladaha uu ardaygu dhar beddelanayo ama uu ku jiro xaalad uu jirkiisu qayb ahaan ama gebi ahaanba qaawan yahay, sida goobaha jimicsiga, qolalka dharka lagu beddelo, meelaha qubayska, musqulaha, iyo barkadaha dabaasha. Kormeeraha Guud ee Dugsiyada (Superintendent) iyo maamulayaasha dugsiyada (building principals) ayaa loo oggol yahay inay go'aamiyaan goobo iyo xaalado kale oo gaar ah oo isticmaalka qalabka isgaarsiinta gaarka ah (PCD) si buuxda looga mamnuucayo. Marka isticmaalka qalabka isgaarsiinta gaarka ah (PCDs) la mamnuuco, dhammaan PCD-yadu waa in si buuxda loo damiyaa (taas oo macnaheedu yahay inaan lagu koobin oo keliya habka gariirka ama aamusnaanta) lana dhigaa meel aan muuqan. Marka isticmaalka ama haysashada PCD-yada la oggolaado, dhammaan PCD-yada waa in lagu hayaa habka aamusnaanta (silent mode), haddii aysan si kale u farayn qorshaha IEP ama Qaybta 504 si loo kormeero ama wax looga qabto xaalad caafimaad, ama haddii maamule ama macallin u oggolaado ujeeddooyin waxbarasho. Ardayda loo oggolaaday inay PCD-yadu u isticmaalaan sababahan xaddidan waxaa laga filayaa inay qalabka la ansixiyey u isticmaalaan oo keliya sida loo oggolaaday. PCD-yada waa in lagu hayaa meel aan muuqan marka uu sidaas faro maamulaha, macallinka, darawalka baska, qof weyn oo kormeeraya hawl ka baxsan manhajka ama munaasabad dugsiyeed, ama kafaal-qaadaha hawsha.

Ardaydu waa inaysan filan sir ahaansho marka ay isticmaalayaan qalabka isgaarsiinta gaarka ah (PCDs) inta ay joogaan dugsiga ama dhismaha dugsiga, oo ay ku jiraan dhismayaasha dugsiga, xarumaha kale ee dugsiga, iyo gaadiidka dugsiga. Haysashada PCD uu ardaygu sito inta lagu jiro maalinta waxbarashada iyo inta lagu jiro munaasabadaha iyo hawlaha la xiriira dugsiga waa mudnaan la siiyey ardayga, mudnaantaas oo lagala noqon karo arday kasta oo ku guuldaraysta inuu u hoggaansamo qodobbada Siyaasadda Guddiga 5136 ama si kale ugu takri-fala mudnaantan.

Ku xadgudubka siyaasaddan waxay keeni kartaa tallaabooyinka edbinta ee soo socda:
A. In ardayga la siiyo digniin afka ah laguna amro inuu ku kaydiyo qalabka isgaarsiinta gaarka ah (PCD) si waafaqsan siyaasaddan.

B. In lala wareego qalabka isgaarsiinta gaarka ah (PCD) laguna kaydiyo si ammaan ah sanduuq, armaajo ama khaanad ay maamulaan shaqaalaha dugsigu inta ka harsan casharka ama muddadaas.

C. In lala wareego qalabka isgaarsiinta gaarka ah (PCD) ee ardayga, laguna kaydiyo xafiiska dhexe ee dugsiga inta ka dhiman munaasabadda dugsiga ama maalinta waxbarashada.

D. In lala wareego qalabka isgaarsiinta gaarka ah (PCD)ee ardayga, laguna hayo xafiiska dhexe ee dugsiga si uu u soo doonto waalidka ama mas'uulka ardayga.

E. In loo ballamiyo kulan waalidka ama mas'uulka ardayga si looga wadahadlo isticmaalka aaladda PCD ee ardayga.

F. In ardayga laga qaado mudnaanta uu aaladda PCD ugu soo qaadan karo dugsiga muddo cayiman ama si joogto ah (haddii aanay jirin sababo caafimaad ama si waafaqsan qorshaha IEP ama Qaybta 504).

G. In ardayga laga joojiyo darsiga laakiin lagu hayo dugsiga dhexdiisa.

H. In ardayga laga joojiyo dugsiga muddo cayiman iyadoo guriga loo dirayo.

I. Eryid.

Haddii xadgudubku ku lug yeesho fal sharci-darro ah (tusaale ahaan sawirro ama muuqaallo galmo oo carruur ah, ama dirista fariimo/sawirro galmo ah), masuulka dugsigu sidoo kale arrintaas ayuu u gudbin doonaa booliiska ama adeegyada ilaalinta carruurta. PCD-ga waa lala wareegi doonaa, waxaana suurtogal ah in loo wareejiyo hay'adaha fulinta sharciga haddii xadgudubku la xiriiro falal laga yaabo inay sharci-darro yihiin.

Saraakiisha dugsigu ma baari doonaan ama si kale uma faragelin doonaan qalabka isgaarsiinta gaarka ah (PCDs) ee uu dugsigu haysto, ilaa ay si macquul ah uga shakiyaan in baaritaanka loo baahan yahay si loo helo caddeyn muujinaysa ku xadgudub sharciga ama xeerarka kale ee dugsiga. Baaritaan kasta waxa lagu fulin doonaa si waafaqsan Siyaasadda Guddiga 5771 – Baaritaan iyo Qabasho (Search and Seizure).

Ardaydu waxay u isticmaali karaan qalabka isgaarsiinta gaarka ah (PCD) si waafaqsan Qorshahooda Waxbarasho ee Shakhsiyeed (IEP) ama qorshaha Qaybta 504. Guddigu sidoo kale wuxuu oggolaan doonaa in arday uu isticmaalo PCD si loo kormeero ama wax looga qabto xaalad caafimaad, haddii Guddigu helo warqad qoraal ah oo ka timid dhakhtarka ardayga oo faraysa isticmaalkaas. Intaa waxaa dheer, ardaydu waxay isticmaali karaan teleefannada dugsiga si ay ula xiriiraan waalidiintooda/ilaaliyayaashooda inta lagu jiro maalinta dugsiga, iyadoo ku xiran tahay degdegga xaaladda, goobta ardayga, iyo halka uu yaallo PCD-ga inta lagu jiro khatar firfircoon ama xaalad degdeg ah, si waafaqsan hab-raaca ku xusan qorshaha maaraynta xaaladaha degdegga ah ee uu ansixiyay Guddigu.

Ardayda waxaa loo oggol yahay inay haystaan qalabka isgaarsiinta gaarka ah (PCD) iyaga oo sita, ilaa iyo inta uu qalabku yahay mid meel aan muuqan lagu kaydiyey, isla markaana aan la isticmaalin marka laga reebo xaaladaha uu oggol yahay Siyaasadda Guddiga 5136 ama qorshaha maaraynta xaaladaha degdegga ah.

Ardayda waxaa loo oggol yahay inay haystaan qalabka isgaarsiinta gaarka ah (PCD) inta ay ku jiraan xarunta dugsiga, laakiin waa inay ku hayaan qalabka meel lagu kaydiyo sida sanduuqa, boorsada dhabarka, ama boorsada gacanta. Looma oggola inay isticmaalaan qalabka, marka laga reebo xaaladaha uu oggol yahay siyaasaddan ama qorshaha maaraynta xaaladaha degdegga ah.

Waalidiinta/ilaaliyeyaasha waxaa lagu wargelinayaa in habka ugu habboon ee ay ula xiriiri karaan ilmahooda inta lagu jiro maalinta dugsiga ay tahay inay wacaan xafiiska dugsiga ama ay adeegsadaan qalab ama barnaamij kale oo isgaarsiineed oo loo qoondeeyay.

Ardaydu si shaqsi ah iyo si buuxda ayay mas'uul uga yihiin ilaalinta iyo badbaada qalabka isgaarsiinta gaarka ah (PCDs). Guddigu mas'uul kama aha xatooyo, lumis, ama waxyeellayn soo gaarta, ama si xun u isticmaalka ama isticmaal aan la oggolayn ee PCD-ga la keeno hantida dugsiga. Ardaydu waxay u adeegsan doonaan tiknoolojiyadda dugsiga si waafaqsan Siyaasadda Guddiga iyo Tilmaamaha Maamulka. (Siyaasadda Guddiga Waxbarashada: 5136, 5136.01).

17. **<u>Daacad darro/Been abuur iyo/ama Iska Dhigid Qof Kale</u>**
Ardayda kama qeybgeli karaan dabeecad khayaano ama ma aha in ay bixiyaan macluumaad been ah. Ardayda waa in aysan been ka sheegin saxiixyada waalidka, ilaaliyaha, ama macalin, iyo waa in aysan iska dhigin waalidiinta, ilaaliyeyaasha, ama macalimiinta si ay qaldaan saraakiisha dugsiga Mamnuucaan waxaa ku jira ardayda kaalmo ka geystata ama waxay ahaabtaba ka qeybgala jebinta sharcigaan.

18. **Dabeecadda aan Hoggaansamin**

Hoggaansami la'aangta waxaa lagu sifeyaa diidmada in laga jawaabo iyo/ama in loo hoggaansamo codsiyada macquulka, sharciyada, ama sharuudaha macalinka, agaasimaha, tababaraha, la talliyaha hawsha ka baxsan manhahja, shaqaalaha dugsiga ama dadka qaangaaray ee ku shaqeeo iskaa wax u qabso.

19. **Gardareysiga/Kadeedka/Cabsi Gelinta/Dhibidda**

Dugsiyada Magaalada Westerville waxay u hoggaansan yahiin siyaasadda ka soo horjeedo gardareysiga, sida waafaqsan ORC 3313.666. Waa la mamnuucay kadeedka, cabsi gelinta, ama dabeecadda gardareysiga uu arday ka geysto Dugsiga Dagmada Westerville, dabeecadda noocaas waxay dhallin kartaa in ardayga laga qaado talaabo dishibiliin, oo ay ku jirto ka-joojin iyo/ama in laga saaro dugsiga.

Kadeedka, cabsi gelinta, gardareysiga waxaa lagu sifeyaa:

ficil kasta oo lagu talogalay oo qoran, laga sheegay afka, elataroonig ah, la sawiray ama jir ahaan la geysto uu arday ama koox arday u muujiyaan arday kale in ka badan hal jeer iyo dabeecadda waxyeelo gaarsiiso madaxa ama jirka ardayga (ardayda) kale oo, in ku filan culus, lagu celceliyo ama soo noqnoqota iyo abuurta jawi cabsi gelisa, handadaada ama jawi waxbarasha oo xumaan ku dhisan iyo/ama munaasabo uu dugsiga u kafaalo qaaday arday (ardayda) kale.

Gardareysiga, cabsi gelinta ama kadeedka waxaa kaloo ka mid ah dagaalka ka dhaca xariirka shukaansiga. Gardareysiga waa laga mamnuucay hantida dugsiga ama meelaha ku dhinac yaal dugsiga iyo munsaasabadaha dugsiga kafaalo qaado, marka la saaran yahay gaadiidka dugsiga keeno, ama meelaha baska dugsiga rasmi ahaan u joogsado.

Waalidiinta/ilaaliyeyaasha iyo ardayda waa in ay la xariiraan agaasimaha dhismahooda ama qofka loo xil saaray in ay soo sheegaan asluubta lagu guul dareysto sida hoos timaado ka-reebidaan. Shaqaalaha dugsiga waa in ay maamuleyaasha dugsiga u soo sheegaan dhacdooyinka gardareysiga. Ka reebidaan waxaa ka mid ah ardayda kaalmeysa, oo joogta, ama si kastaba uga qeybgasha jebinta sharcigaan.

Madaxa guddiga waxbarashada waxaa sannadkii labo jeer la siiyaa soo koobid qoran oo ku saabsan dhamaan dhacdoyinka la soo sheegay kaddibna soo-koobidaan waxaa la soo geliyaa boggena intarneetka. Liiska wuxuu ku ekaan doonaa tirada falalka la xaqiijiyay ee la xariira kadeedka, cabsi gelinta, iyo/ama gardareysiga, haddii ay ka dhacday gudaha fasalka, hantida dugsiga, tagidda iyo ka soo noqoshada dugsiga, ama munaasabadaha dugsiga kafaalo qaaday.

Mar kasta, waa mamnuuc nooc kasta hawlaha kadeedka. Ma jiro arday loo ogol yahay in uu qorsheeyo, dhiiri geliyo, ama ka-qeybgalo kadeed. Kadeedka waxaa lagu sifeyaa fullinta fal ama jujuubka loo geysto qof kale, sida dhibanaha, si loo fulliyo ficil kasta oo laga bilaabo fasalka, kooxda ama urur oo sabab u ah ama abuura halis la taaban karo in ay waxyeelo gaarsiiso madaxa ama jirka qof kale. Ruqsadda, ogolaashada, ama qaadashada halista uu qaato qofka loo geysto kadeedka ma yareyn doonto waxyaabaha laga reebay. Ka reebidaan waxaa ka mid ah ardayda kaalmeysa, oo joogta, ama si kastaba uga qeybgasha jebinta sharcigaan.

Taageero la siiyo Siyaasadda Ka Soo Horjeedo Kadeedka W.C.S. (W.C.S. Anit-Harassment Policy) 5517, Guddiga wuxuu horumariyaa hababka ka-hortagga aqoonta (preventative educational measures) si loo ogaado dhaqamada takoorka ee sharci darrada ah. Maamulaha ama cidda loo xil saaray waxay tababar ku habboon siin doonaan dhamaan xubnaha ka tirsan bulshada dugsiga dagmada oo ku saabsan sida loo fulliyo siyaasaddaan iyo tilmaamaha la socdo. Dhamaan tababarka ku saasban siyaasadda Guddiga waxay ahaan doontaa mid ku habboon da'da iyo nuxurka.

**SIYAASADDA GUDDIGA 5517.01 - GARDAREYSIGA IYO QAABABKA KALE EE DABEECADDA WEERARKA - Waxay tixraacdaa qodobka xeerka #19**

Guddiga wuxuu ballan qaaday in uu dhamaan ardayda siiyo jawi ammaan ah, wanaagsan, soo saar leh, oo nafaqeeya. Guddiga wuxuu dhiirigeliyaa horumarinta xariirka wanaagsan ee dhexmara xubnaha bulshada dugsiga.

Si adag ayaa loo mamnuucay, mana loo dulqaadan doono kadeedka, cabsi gelinta, ama gardareysiga loo geysto ardayga, haddii ay u geystaan arday kale, shaqaale, ama dhinacyada saddaxaad. Mamnuucaan waxaa ka mid ah dabeecadda weerarka, jirka, afka, iyo xumaanta madaxa, iyo dagaalka ka dhaca gudaha xariirka shukaansiga. Guddiga Waxbarashada ma u dul qaadan doonto baaqa, faalada, cabsi gelinta, ama falalka sabab u ah ama cabsi geliya in ay sabab u noqdaan waxyeelada soo gaara jirka ama hoos u dhiga qofka. Siyaasaddaan waxay quseysaa dhamaan hawlaha ka socdo Dagmada, kana mid ah hawlaha ka socda hantida dugsiga, ama marka la saaran yahay baska dugsiga, ama marka loo sii socdo ama laga soo noqodo dugsiga, iyo kuwa ka dhaca dibadda hantida dugsiga haddii ardayga ama shaqaalaha ku sugan yahay hawsha u dugsiga mas'uul ka yahay, dugsiga ogolaaday ama dugsiga la xariira ama munaasabo dugsiga qabto, sida safarada dibadda ama munaasabadaha isbortiga halkaas ay ardayda ka hooseyaan kantaroolka dugsiga, gudaha baabuurka dugsiga, ama marka shaqaalaha ku hawlan yahay ganacsiga dugsiga.

Siyaasaddaan waxaa la soo saaray kaddib marka lala tashaday waalidiinta, shaqaalaha Dagmada, kuwa ku shaqeeyo iskaa wax u qabso, ardayda iyo xubnaha bulshada sida ku qoran R.C. 3313.666 iyo Siyaasadda Modelka Gudiga Waxbarashada Gobolka (State Board of Education's Model Policy).

Kadeedka, cabsi gelinta, gardareysiga waxaa lagu sifeyaa:

A. Ficil kasta oo lagu talogalay oo qoran, laga sheegay afka, elataroonig, la sawiray ama jir ahaan la geysto uu arday ama koox arday u muujiyo arday kale in ka badan hal jeer iyo dabeecadda waxyeelo gaarsiiso madaxa ama jirka ardayga (ardayda) kale oo, in ku filan culus, lagu celceliyo ama soo noqnoqota iyo abuurta jawi cabsi gelisa, handadaad ama jawi waxbarasha oo xumaan ku dhisan iyo/ama munaasabo uu dugsiga u kafaalo qaaday arday (ardayda) kale; ama

B. Dagaalka ka jira shukaansiga.

"Sharciga elataroonigga" waxaa loola jeedaa la geysto marka la isticmaalo telefoonka gacanta, kombuyutar, bajar, qalabka isgaarsiinta qofka leeyahay, ama qalab kale oo loo adeegsado isgaarsiinta.

Dabeecadda dagaalka waxaa lagu sifeyaa dabeecadda aan habbooneyn ee lagu celceliyo in ku filan, ama culus in ku filan, taasoo si xun u saameyso fiyoobida waxbarashada, jirka, ama caatifadda ardayga. Dabeecadda noocaan waa qaab cabsi gelin iyo kadeed, inkastoo qasab aysan ahayn in lagu saleeyo sifooyinka sharci ahaan la badbaadiyo, sida jinsiga, isirka, midabka, asal qaran, xaaladda guurka, itaal darrida, ama rabitaanka jinsiga. Waxaa ka mid ah, balse kuma eka, dabeecadaha dabagalka, gardareysiga/gardareysiga internetka, cabsi gelinta, dhibidda, jujuubka, aflagaadada, dulmiga, handadaadda, iyo yasniinta.

Kadeedka, cabsi gelinta, gardareysiga waxaa kaloo loola jeedaa gardareysiga internetka oo loo adeegsado falalka elataroonig ahaan la gudbiyo (sida internetka, email, telefoonka gacanta, kaalmada dijitalka qofka (PDA, personal digital assistant), ama qalabka gacanta lagu qaato) uu ardayga (ardayda) ama koox arday u muujiyaan arday (ardayda) kale in ka badan hal mar iyo dabeecadda sabab u tahay waxyeelo la xariira madaxa iyo jirka ardayga kale oo in ku filan darran, lagu celceliyo, ama ku adkeysata ilaa heer ay ardayga (ardayda) kale ku abuurto jawi waxbarasho oo ku dhisan cabsi gelin, handadaad, ama xumaan.

Arday kasta ama waalidka/ilaaliyaha aamisnan in isaga/iyada ay ahayd ama tahay dhibane loo geystay dabeecadda dagaalka waa in ay isla markiiba xaaladda u soo sheegto agaasimaha dhismaha ama qofka loo magacaabo, ama kaaliyaha agaasimaha, ama Maamulaha. Ardayga wuxuu kaloo soo sheegi karaa arrimaha loo gudbiyo macalimiinta iyo shaqaalaha kale dugsiga ee mas'uulka ka noqon doono in ay ogeysiiyaan maamulaha ku habboon ama sarkaalka Guddiga. Ashakooyinka ka soo horjeedo agaasimaha dhismaha waa in loo gudhiyo Maamulaha. Ashtakooyinka ka soo horjeedo Maamulaha waa in loo gudbiyo Madaxa Guddiga.

Arday kasta waxaa lagu dhiirigelinaa, iyo xattaa xubinta shaqaalaha waxaa laga rabaa, in uu soo sheego xaalad kasta ay aaminan yahiin in ay tahay dabeecad dagaal oo loo geysto ardayga. Warbixinta waa la siin karaa kuwa kor lagu sheegay.

Isla markiiba waa la baari doonaa dhamaan ashtakooyinka ku saabsan dabeecadda weerarka ee laga yaabo in ay jebiyaan siyaasadda. Agaasimaha dhismaha ama maamulaha ku habboon wuxuu diyaarin doonaa warbixin qoran oo ku saabsan baaritaanka kaddib marka la dhamaystiro. Warbixinta noocaas waxaa ka mid ah xaqiiqada la helay, go'aanka laga gaaray haddii ficilka kadeedka, cabsi gelinta, iyo/ama gardareysiga la xaqiijiyay, iyo, marka falalka la mamnuucay la xaqiijiyay, talada faragelinta, kana mid ah falka dishibiliinka waxaa la gelin doonaa warbixinta. Meesha ay ku habboon tahay, warbixinta waxaa lagu dhajin doonaa wararka qoran ee marqaatiga.

Haddii baaritaanka soo saarto in ay jirto kadeed, cabsi gelin, iyo/ama gardareysi/gardareysiga internetka oo loo adeegsaday elataroonig ama wax kale, taasi waxay dhallin doontaa in laga qaato tallabo degdeg ah oo lagu saxo kuna habboon iyo/ama talaabo dishibiliin. Tani waxaa ka mid ah ka-joojinta ama gaarta ilaa ka-saarid la siiyo ardayda, ilaa laga ruqseeyo shaqaalaha, reebidda waalidiinta, martida, kuwa ku shaqeeyo iskaa wax u qabso, iyo qandaraasleyaasha, iyo ka qaadidda booska rasmiga iyo/ama codsiga in uu iska dhiibo xubinimada Guddiga. Waxaa kaloo dhici karta in shakhsiyaadka lagu wareejiyo saraakiisha hirgelinta sharciga.

Inta uu socdo baaritaanka kaddeed la soo sheegay, cabsi gelin iyo/ama gardareysi/gardareysiga internetka, Agaasimaha ama maamulaha ku habboon aaminsan yahay in laga yaaba in aadaab darrada dhallisay jawi waxbarasho oo cadaawad ku dhisan lagana yaabo in ay tahay kadeed ku dhisan takoor sharci darro ah oo ku saleysan Dad la Badbaadiyo (Protected Class), Agaasimaha wuxuu falka gardareysiga iyo/ama kadeedka ogeysiin doonaa mid ka mid ah Saraakiisha u Hoggaansamida ee ka soo Horjeeda Kadeedka (Anti-Harassment Compliance Officers) si loo baaro sida waafaqsan hababka ku qoran Siyaasadda 5517 - Ka Soo Horjeedka Kadeedka (Anti-Harassment).

Waa la mamnuucay mana loo dulqaadan doono aar gudashada ka soo horjeedo qof kasta, oo soo sheega, loo maleeyo in uu soo sheegay, soo gudbiya ashtako, ama si kale uga qeybgalo baaritaan ama dhaawac ku saabsan eedeynta dabeecadda weerarka. Aar gudashada noocaan waxaa loo qaadan doonaa in si culus loo jebiyay siyaasadda Guddiga, waxayna ka madax banaan tahay haddii ashtakada loo yeelay aasaas. Aar gudashada la tuhunsan yahay waa loo soo sheego si la mid ah sida dabeecadda dagaalka. Aar gudashada waxay dhallin kartaa talaabo dishibiliin sida lagu muujiyay kor.

In si ula kac ah loo bixiyo warbixin been ah oo ku saabsan kadeed, cabsi gelin, gardareysi iyo/ama dabeecad kale oo ku dhisan weerar, sidoo kale waa la mamnuucay mana loo dulqaadan doono. In si ula kac ah loo soo jeediyo warbixin been abuur ah waxay dhallin kartaa talaabo dishibiliin sida lagu muujiyay kor.

Haddii ardayga ama qofka kale aaminsan yahay in ay jirtay dabeecad dagaal, iyadoo aan la fiirin haddii ay soo gasho sifeynta gaarka, isaga/iyada waa in ay soo sheegto iyo waa in ay u ogolaato maamulka in uu gaaro jidka ku habboon oo la qaado.

Dagmada waxay fullin doontaa xiiladaha faragelinta (AG 5517.01) si dhibanaha ama qofka kale looga badbaadiyo kadeed cusub oo dheeraad ah, cabsi gelin, ama gardareysi iyo aar gudasho oo ka dambeyso warbixinta noocaas.

Siyaasaddaan looma tarjumi karo in lagu farageliyo xuquuqda Baddalaadda Kowaad (First amendment) ee ardayda (sida in la mamnuuco isdhaafsiga fikradaha madaniga ee macquulka ah, ama dood, la qabto waqtiyada iyo meelaha ku habboon inta ay socoto maalin dugsiyeedka taasoo badbaadisa sharciga Gobolka ama Federaalka).

Ashtakoodaha waxaa la ogeysiin doonaa wixii ka soo baxay baaritaanka, iyo hadba sida ku habboon, in la qaaday talaabo lagu saxo. Haddii, baaritaanka kaddib, la xaqiijiyo gardareysiga ka soo horjeedo ardayga, agaasimaha dhismaha ama maalulaha ku habboon wuxuu ogeysiin doonaa waalidka/ilaaliyaha ilmaha haaya ee dhibanaha waxa la ogaaday. Maka la bixiyo ogeysiiska noocaas, waa in laga taxadiro in la xushmeeyo xuquuqda asturnaata sharicga ee gaffaha kaddeedka noocaas, cabsi gelinta, iyo/ama gardareysiga.

Kaddib marka la baaro, haddii la xaqiijiyo falalka kadeedka, cabsi gelinta, iyo/ama gardareysiga uu geysto arday cayiman, agaasimaha dhismaha ama maamulaha ku habboon, qoraal ahaan wuxuu ogeysiin doonaa waalidka/ilaaliyaha qofka geystay waxa la ogaaday. Haddii ciqaabta dishibiliibiliinka ciqaabta la saaro ardayga noocaa, waxaa ogeysiiska lagu soo darri doonaa sharaxaad ku saabsan dishibiliinka noocaas.

**Ashtakada**

Ardayda iyo/ama waalidiintooda/ilaaliyeyaashooda waxay soo gudbin karaan warbixin ku saabsan kadeedka la tuhunsan yahay, cabsi gelin, ama gardareysi. Warbixinta noocaas waxay ahaan doonaan kuwo khaas sida macquulka ah kana mid ah dadka ku lugta leh, tirada inta jeer iyo goobaha ay ka dhacday asluubta la soo sheegay, bartilmaameedka kadeedka la tuhunsan yahay, cabsi gelinta, iyo/ama gardareysiga, iyo magacyada ardayga ama marqaatiga shaqaalaha ee suurtogalka ah. Warbixinta noocaas waxaa loo gudbin karaa xubin kasta oo ka tirsan shaqaalaha dugsiga ama maamulaha, kaddibna isla markiiba loo gudbin doonaa agaasimaha dhismaha ama qofka loo magacaabay in uu fiiriyo, baaro, kaddibna wax ka qabto.

Ardayda, waalidiinta/ilaaliyeyaasha, iyo shaqaalaha dugsiga waxay soo gudbin karaan ashtakooyinka aan rasmi ahayn ama la aqoonin dhaqanka ay iyaga la tahay in uu yahay kadeed, cabsi gelin, iyo/ama gardareysi oo afka looga geysto macalin, maamulaha dugsiga, ama shaqaale kale oo ka tirsan dugsiga. Ashtakooyinka aan rasmiga ahayn ee noocaas waxay gaar u ahaan doonaan qofka (dadka) ku lugta leh, tirada inta jeer iyo goobaha uu ka dhacay dhaqanka la soo sheegay, bartilmaameedka kadeedka la tuhunsan yahay, cabsi gelinta, iyo/ama gardareysiga, iyo magacyada arday kasta oo suurtogal aha ama marqaatiyada shaqaalaha. Xubinta shaqaalaha dugsiga ama maamulaha hela ashtako aan rasmi ahayn ama aan la aqoonin qofka soo gudbiyay waa in uu isla markiiba qoro ashtakada, kuna soo darro macluumaadka la soo gudbiyay. Warbixintaan qoran waxaa isla markiiba loo gudbin doonaa xubinta shaqaalaha dugsiga iyo/ama maamulaha agaasimaha dhismaha ama qofka loo magacaabay si loo fiiriyo, baaro, kaddibna laga qaado talaabada ku habboon.

Dadka soo jeediya ashtakooyinka aan rasmiga ahayn, sida kor lagu sheegay, waxay codsan karaan in xubnaha shaqaalaha dugsiga iyo maamulaha ay soo gaarto ashtakada qariyaan magacooda. Waa la fiidin doonaa ashtakooyinka aan la aqoonin, waxaana laga qaadi doonaa talaabo macquul ah si wax looga qabto xaaladda, ilaa heer talaabada noocaas (1) aysan kashifin ilaha laga helay ashtakada, iyo (2) waafaqsan tahay xuquuqda sida sharciga qabo ee ardayga (ardayda) la soo sheegay in ay geysteen falalka kadeedka, cabsi gelinta, iyo/ama gardareysiga.

Marka qofka soo jeediyo ashtako aan rasmi ahayn uu codsado in aan la aqoonsanin, baarista ashtakada noocaas waxaa lagu soo koobi doonaa hadba sida habboon lana fiiriyo aqoonsi la'aanta ashtakada. Yareynta noocaas oo lagu sameeyo baaritaanka waxaa ka mid ah falka

yareynta oo lagu soo koobo fiirinta ashtakada kaddib marka la helo macluumaad dheeraad ah iyo/ama ka noqoshada ardayga ashtakooda shardiga in warbixinta aan la aqoonin cidda soo dirtay.

**Asturnaanta/Qarsoodiga**

Dugsiga Dagmada wuxuu sharfi doonaa asturnaanta ashtakoodaha, qofka (dadka) laga soo ashtakooday, iyo marqaatiyada ilaa inta suurtogalka ah, sida waafaqsan waajibaadka sharciga ee saaran Guddiga in uu baaro, qaado talaabada ku habboon, iyo in uu u hoggaansamo waajibaadka raadinta iyo kashifaadda. Dhamaan diiwaanada la soo saaro sida hoos timaado siyaasaddaan iyo tilmaamaha maamulka la xariira waxay ahaan doonaan kuwo loo xajiyo sida qarsoodi ilaa inta uu ogol yahay sharciga.

**Qodobka Warbixinta**

Ugu yaraan bar ka bar sannadka, maamulaha wuxuu Madaxa Guddiga siin doonaa soo koobid qoran oo ku saabsan dhamaan dhacdooyinka la soo sheegay kaddibna wuxuu soo koobidda soo gelin doonaa bogga internetka Dagmada (haddii uu jiro mid). Liiska wuxuu ku ekaan doonaa tirada falalka la xaqiijiyay ee la xariira kadeedka, cabsi gelinta, iyo/ama gardareysiga, haddii ay ka dhacday gudaha fasalka, hantida dugsiga, tagidda iyo ka soo noqoshada dugsiga, ama munaasabadaha dugsiga kafaalo qaaday.

Eedeynta asluub xumada dambiga iyo ku xadgudubka la tuhunsan yahay ee loo geysto cunugga waxaa la gaarsiin doonaa wakaaladda hirgelinta sharciga ee ku habboon iyo/ama Adeegyada Badbaadinta Cunugga (Child Protective Services) sida waafaqsan sharciga. Shaqaalaha dagmada waxay la shaqeyn doonaan baaristaanka ay wadaan wakaaladaha noocaas.

**Difaaca Jirka**

Shaqaalaha Dugsiga Dagmada, ardayga, ama qofka ku shaqeeyo iskaa wax u qabso wuxuu qof ahaan ka tallaalan yahay dacwaddaha madaniga oo la xariira khasaarada ka dhallata marka la soo sheego dhacdo sida waafaqsan siyaasaddaan iyo R.C. 3313.666 haddii qofkaas soo sheego shil kadeed, cabsi gelin, cago jugleyn, iyo/ama gardareysi, daacad laga yahay, iyo sida waafaqsan hababka ku qoran siyaasaddaan. Difaaca noocaas ee laga qaato qaanta looma qabsan karo shaqaalaha, arday, ama qof ku shaqeeyo iskaa wax u qabso oo loo garto in uu warbixin been iyo ula kac ka soo jeediyay kadeedka, cabsi gelinta, iyo ama gardareysiga.

**Ogeysiiska**

Ogeysiiska siyaasaddaan waxaa la wareejin doonaa sannad kasta iyo waxaa lagu soo dhajin doonaa meelo laga arki karo ee dhamaan dhismooyinka dugsiga iyo waaxyada ku yaal gudaha Damgada, waxaa lagala hadli doonaa ardayda, iyo sidoo kale waxaa la gelin doonaa buugaagta macalinka, ardayga, iyo walidka/ilaaliyaha. Ugu yaraan hal mar sannad dugsiyeed kasta, waalidka/ilaaliyaha arday kasta waxaa loo dirri doonaa oraah sharaxeyso siyaasadda iyo ciqaabta la xariirta jebinta siyaasadda.

Oraahda waxaa lala diri karaa kaararka warbixinta ardayga ee caadiga ah ama waxaa lagu diri karaa habka elataroonigga.

Siyaasadda iyo sharaxaadda cuslaanta gardareysiga loo adeegsado habka elataroonigga waa in la siiyo ardayda ku sugan Dagmada iyo waalidiintooda ama ilaaliyeyaashooda haaya.

Waxaa kaloo dhismo kasta lagu soo dhajin doonaa boostarada xuquuqda gobolka iyo Federaalka ee ku saabsan takoorka iyo kadeedka.  Dhamaan shaqaalaha cusub waxaa laga rabaa in ay fiiriyaan iyo in ay saxiixaan siyaasaddaan iyo hababka ashtakada la xariirto.

**Waxbarashada iyo tababarka**

La taageero siyaasaddan, Guddiga wuxuu horumariyaa hababka waxbarashada ka-hortagga si loo abuuro dareen xooggan oo ku saabsan dabceeadda weerarka, kana mid ah gardareysiga iyo dagaalka ka jiro xariirka shukaansiga. Maamulaha ama cidda loo xil saaray waxay tababar ku habboon siin doonaan dhamaan xubnaha ka tirsan bulshada dugsiga dagmada oo ku saabsan sida loo fulliyo siyaasaddaan iyo tilmaamaha la socdo. Dhamaan tababarka ku saasban siyaasadda Guddiga waxay ahaan doontaa mid ku habboon da'da iyo nuxurka.

Sannad kasta, Dagmada waxay dhamaan ardayda ku qoran Dagmada siin doontaa tababar ku habbon da'da kuna saabsan siyaasadda Guddiga, kana mid ah wada hadalka qoran ama afka laga sheegay ee ku saabsan ciqaabta jebinta siyaasadda ilaa maaliyadda Gobolka ama Federaalka loo qorsheyo ujeedadaan.

Ardayda ku jirta darajooyinka todobo (7) ilaa toban iyo labo (12) waxaa la siin doonaa tababar ku habboon da'da xagga aqoonta ka hortagga dagaalaka shukaanisga, kana mid ah tababarka aqoonsiga calaamadaha digniinta dagaalka shukaansiga iyo sifooyinka xariirka caafimaadka qaba. Waalidiinta/Ilaaliyeyaasha, oo codsi qoran u soo jeediya agaasimaha dhismaha ama qofka uu magacaabo in uu baaro qoraalka ka hortagga tababarka dagaalka shukaansiga ee laga isticmaalo dugsiga, waxaa la siin doonaa fursad ay ku fiiriyaan qoraalada muddo macquul ah.

Dagmada waxay siin doontaa tababar, shirar, iyo/ama koorsooyin ku saabsan siyaasaddaan oo loogu talogalay shaqaalaha dugsiga iyo kuwa ku shaqeeyo iskaa wax u qabso ee xariir toosan la leh ardayda, ilaa heerka maaliyadda Gobolka ama Federaalka loo dhigo ujeedadaan.  Waqtiga ay shaqaalaha dugsiga geliyaan brograamyadaan tababarka waxaa la raacin doonaa sharuudaha waxbarashada sii socota ee waajibka ah.

Sida waafaqsan Siyaasadda Guddiga 8462, Agaasimaha wuxuu fiirinta siyaasaddaan ku darri doonaa gardareysiga iyo noocyada kale kadeedka tababarka loo baahan yahay si looga hortago ku xadgudubka cunugga, dagaalka, iyo ku xadgudubka maadada iyo horumarinta dhallinta wanaagsan.

Maamulaha wuxuu soo saari doonaa tilmaamaha maamulka si uu u fulliyo siyaasaddaan. Tilmaamaha waxaa ka mid ah soo sheegidda iyo hababka baarista, hadba sida loogu baahdo. Waxaa la raaci doonaa habka ashtakada uu dajiyay Maamulaha.

La Baddalay 12/13/10, 5/7/12, 6/9/14

**© Neola 2013**

Sharciga
R.C. 3313.666, 3313.667
Siyaasadda Modelka Guddiga Waxbarashada Gobolka (2007)

**SIYAASADDA GUDDIGA 5517 - KA SOO HORJEEDKA KADEEDKA (MAGAC LA'AANTA IX KADEEDKA JINSIGA) - Waxay tixraacdaa qodobka xeerka #19**

**Bayaanka Siyaasadda Guud**

Waa siyaasadda Guddiga Waxbarashada in ay socodsiiso waxbarasho iyo jawi lagu shaqeeyo oo ka madax banaan dhamaan nooyada kadeedka sharci darrada, kana mid ah kadeedka jinsiga. Ballankaan waxaa lagu dabaqaa dhamaan hawlaha Dugsiga Dagmada, brograamyada, iyo hawlaha. Dhamaan ardayda, maamuleyaasha, macalimiinta, shaqaalaha, iyo dhamaan shaqaalaha kale dugsiga waxay wadaagaan mas'uuliyadda iska ilaalinta, niyad jebinta, iyo soo sheegidda nooc kasta kadeed oo sharci darro ah. Siyaasaddaan waxay quseysaa dhaqanka

sharci darrada ee ka dhacay hantida dugsiga, ama goob kale haddii dhaqanka noocaas uu dhaco inta ay socoto hawsha uu kafaalo qaaday Guddiga.

Guddiga wuxuu si xooggan u hirgelin doonaa wax uu mamnuucay ee ka soo horjeedo kadeedka takoorka sida ku saleysan isirka, midabka, asal qaran, jinsiga (kana mid ah rabitaanka jinsiga iyo aqoonsiga jaadka qofka), itaal darrida, da'da, diinta, abtirsiinada, ama macluumaadka geneetikada (iskudarkooda, "Dabaqadaha la Badbaadiyo"), ay sharciyada xuquuqda madaniga Federaalka badbaasiyaan (halkaan wixii ka dambeeyo loo yaqaan "kadeedka sharci darrada"), iyo waxay dhiiri gelisaa kuwa ku jiro bulshada Dugsiga Dagmada iyo sidoo kale Dhinacyada Saddaxaad, ee dareensan in la xumeyay kaddibna raadsadaan toosinta dhibatoyinka noocaas. Guddiga waxay baari doonaan dhamaan eedeynta kadeedka iyo, kiisaska marka kadeedka sharci darrada la hubiyo, Guddiga wuxuu qaadi doonaa talaabo degdeg oo lagu soo gabogabeeyo kadeedka, laga hortago in aysan dhicin, iyo wax laga qabto saameynteeda. Shakhsiyaadka lagu helo in ay ka qeybgaleen kaddeed sharci darro ah waxaa lagu qaadi doonaa dishibiliin ku habbon.

**Jebinta Kale ee Siyaasadda Ka Soo Horjeeda Kadeedka**

Guddiga wuxuu kaloo qaadi doonaa talaabo degdeg ah si uu dishibiliin u saaro dadka ka qeybgala falalka la mamnuucay ee soo socda:

A. Ka aar gudashada qofka ee warbixin ka qoray ama soo gudbiyay ashtako ku dacwooneysa kadeed sharci darro ah, ama marqaati ahaan ka qeybgalay baarista kadeedka.

B. Ugu dambayn, warbixin xun ama sida la ogsoon yahay been ah ama ashtako ku saasban kadeed sharci darro ah.

C. In aan la tixgelinin, in aan loo baarin si ku filan, ama dib u dhigidda baarista eedeynta kadeedka sharci darrada, marka mas'uuliyadda soo sheegidda iyo/ama baarista eedeynta kadeedka ay qeyb ka tahay waajibaadka saaran kormeeraha.

**Sifeyn**

Macnaha erayada la isticmaalo siyaasaddaan waxay yahiin kuwa lagu sifeyay halkaan; macnaha erayada aan lagu sifeynin halkaan waxaa loo qaadan doonaa sida caadi ahaan loo sharaxo.

Ashtakoodaha waa qofka ku dacwooda, ama la soo sheegay in loo geystay kadeed sharci darro ah, iyadoo aan la fiirinin haddii qofka uu soo gudbiyo ashtako rasmi ah ama uu dabagalo xal aan rasmi ahayn oo la xariira kadeedka la soo sheegay.

**Eedeysanaha** waa qofka lagu soo eedeyay in uu ka qeybgalay kadeed sharci darro ah, iyadoo aan la fiirinin haddii Dhinaca Soo Sheegay soo gudbisay ashtako ama ay rabto in si aan rasmi ahayn loo xalliyo kadeedka la soo sheegay.

Bulshada Dugsiga Dagmada waxaa loola jeedaa ardayda iyo shaqaalaha Guddiga (sida maamuleyaasha, iyo shaqaalaha aqoonyaanka iyo shaqaalaha gaarka), sidoo kale xubnaha Guddiga, wakiilada, dadka ku shaqeeyo iskaa wax u qabso, qandaraasleyaasha, ama dadka kale ee hoos yimaada kantaroolka iyo kormeerka Guddiga.

Dhinacyada saddaxaad waxaa ka mid ah, balse kuma eka, martida iyo/ama dadka soo booqda hantida Dugsiga Dagmada (tusaale dadka soo booqda ee hadal u soo jeediya dugsiga, ka-qeybgaleyaasha ka soo jeeda kooxaha atleetikada iska soo horjeeda, waalidiinta), iibiyeyaasha ee la ganacsado, ama raadiya in ay la ganacsadaan, Guddiga, iyo dadka kale ee la soo xariira bulshada Dugsiga Dagmada ee ku sugan munaasabadaha la xariira dugsiga/hawlaha (haddii ay ku sugan yahiin hantida Dagmada ama haddii kale).

Maalinta (Maalmaha) : Haddii aan si toos ah loo sheegin, erayga "maalin" ama "maalmaha" sida loo isticmaalay siyaasaddaan waxaa loola jeedaa maalinta (maalmaha) la shaqeeyo uu xafiiska Guddiga uu furan yahay saacadaha la shaqeeyo, Isniin-Jimco, marka laga reebo fasaxyada Gobolka-aqoonsan yahay).

**Gardareysiga**

Gardareysiga wuxuu gaaraa heerka kadeedka sharci darrada marka hal ama ka badan dadka si nidaam iyo si isku xigxiga ay dhaawac iyo dhibaato nafsi u gaarsiiyaan (1) ama ka badan ardayda ama shaqaalaha iyo in gardareysiga ku saleysan yahay hal (1) ama ka badan Dadka la Badbaadiyo, oo ah, sifooyinka ay sharciyada xuquuqda madaniga Federaalka badbaadiyaan. Waxaa lagu sifeyaa wax aan la rabin oo lagu celceliyo, qoran, afka, ama dabeecadda jirka, kana mid ah cabsi gelinta, aflagaadada, ama baaqa yasniinta, uu qaangaar ama arday geysto, oo darran ama lagu adkeesto in ku filan si loo abuuro jawi ku dhisan cabsi gelin, cadaawad, ama gaf xagga waxbarashada ama shaqada; sababo fahmo darro ama yasniin; ama si aan macquul ahayn u farageliyo dugsiga qofka ama shaqada uu qabto ama ka qeybgal; iyo waxaa soo geli kara:

A. kaftanka;

B. hanjabaad;

C. cagajuglayn;

D. dabagalka;

E. dabagalka internetka;

F. gardareysiga internetka;

G. dagaalaka jirka;

H. xattooyada;

I. kadeedka jinsiga, diinta, ama isirka;

J. yasidda dadweynaha; ama

K. burburinta hantida.

**Kadeedka**

"Kadeed" waxaa loola jeedaa cabsi gelin, afxumo, ama yasniin, isticmaalka farsamada, ama qoran, dhaqan xumo laga soo jeediyo afka ama jirka kana soo horjeedo arday ama shaqaale ka tirsan dugsiga oo:

A. arday ama shaqaale ka tirsan dugsiga geliya cabsi macquul ah in waxyeelo soo gaari doonaan naftiisa/nafteed ama la burburin doono hantidiisa/hantideeda;

B. sababto in ay si dhab u farageliso waxqabadka waxbarashada ardayga, fursadaha, ama manaafacaadka, ama shaqada uu qabto shaqaalaha; ama

C. sababto in ay si dhab ah u carqaladyeso nidaamka fullinta hawsha dugsiga.

Ashtakooyinka takoorka ee ku dacwooda kadeedka jinsiga gudaha sifeynta iyo ujeedada Cutubka

IX (Title IX) waxaan lagu wareejin doonaa Iskuduwaha Cutubka IX si wax looga qabto u hoggaansamida Siyaasadda Guddiga 2266 iyo Tilmaanta Maamulka (Administrative Guidelines) 2266.

**Kadeedka Isirka/Midabka**

Kadeedka isirka la mamnuucay waxaa lala kulmaa marka dhaqan aan la soo dhaweynin jir ahaan, afka, ama aan afka laga sheegin uu ku saleysan yahay isirka qofka ama midabka iyo marka dhaqanka ujeedadeedu tahay faragelinta shaqada qofka ama waxqabadka waxbarashada; abuurista jawi cabsi geliya, cadaawad ku dhisan, ama gaffa, iyo/ama jawi waxbarasho; ama faragelinta awoodda qofka u leeyahay in uu ka qeybgalo ama ka fa'iideysto fasalka ama brograam waxbarasho ama hawl. Kadeedka noocaas wuxuu ka dhici karaa marka asluubta loo jeediyo sifooyinka isirka qofka ama midabka, sida aflagaadada isirka, naaneesta loola jeedo noocyada caadiga, afxumada, iyo/ama tixraacyada la xariira caadada isirka.

**Kadeedka Diinta (Caqiidada)**

Kadeedka isirka la mamnuucay waxaa lala kulmaa marka dhaqan aan la soo dhaweynin jir ahaan, afka, ama aan afka laga sheegin uu ku saleysan yahay isirka qofka ama midabka iyo marka dhaqanka ujeedadeedu tahay faragelinta shaqada qofka ama waxqabadka waxbarashada; abuurista jawi cabsi geliya, cadaawad ku dhisan, ama gaffa, iyo/ama jawi waxbarasho; ama faragelinta awoodda qofka u leeyahay in uu ka qeybgalo ama ka fa'iideysto fasalka ama brograam waxbarasho ama hawl. Kadeedka noocaas wuxuu ka dhici karaa marka asluubta loo jeediyo sifooyinka isirka qofka ama midabka, sida aflagaadada isirka, naaneesta loola jeedo noocyada caadiga, afxumada, iyo/ama tixraacyada la xariira caadada isirka.

**Asal Qaran/Kadeedka Abtirsiinada**

Mamnuuca kaddeedka asal qaran/abtirisiino wuxuu dhacaa marka dhaqanka aan la soo dhaweynin ee la xariira jirka, afka, ama aan afka ahayn uu ku saleysan yahay asalka qaran ama abtirsiinada iyo marka dhaqanka ujeedadeeda tahay ama farageliso shaqada qofka ama waxbarashadiisa; abuurto jawi shaqo iyo/ama waxbarasho oo ku dhisan cabsi gelin, cadaawad, ama xumaan; faragelisa awooda qofka u leeyahay in uu ka qeybgalo ama ka fa'iideysto fasal ama brograamka waxbarashada ama hawsha. Kadeedka noocaas wuxuu dhici karaa meesha lagu toosiyo dhaqanka sifooyinka la xariira asal qaranka qofka ama abtirsiinada, sida faalada xun oo laga bixiyo caadada, habka loo hadlo, luqadda, magacyada dambe, ama aflagaada loo geysto dhallashada.

**Itaal Darrida Kadeedka**

Kadeedka isirka la mamnuucay waxaa lala kulmaa marka dhaqan aan la soo dhaweynin jir ahaan, afka, ama aan afka laga sheegin uu ku saleysan yahay isirka qofka ama midabka iyo marka dhaqanka ujeedadeedu tahay faragelinta shaqada qofka ama waxqabadka waxbarashada; abuurista jawi cabsi geliya, cadaawad ku dhisan, ama gaffa, iyo/ama jawi waxbarasho; ama faragelinta awoodda qofka u leeyahay in uu ka qeybgalo ama ka fa'iideysto fasalka ama brograam waxbarasho ama hawl. Kadeedka noocaas wuxuu dhici karaa marka lagu sii jeediyo sifooyinka itaal darrida qofka, sida faalada xun ee ku saabsan hababka hadalka, dhaqaaqa, itaal darrida jirka ama cilladaha/muuqaalka, ama wixii la mid ah.

**Saraakiisha u Hoggaansamida Ka Soo Horjeedka Kadeedka (Anti-Harassment Compliance Officers)**

Guddiga dadka soo socdo u xil saartay in ay u shaqeyaan sida Sarkaalka (Sarakiisha) U Hoggaansamida Ka Soo Horjeedo Kadeedka" ee loogu talogalay Dagmada. Halkaan waxaa loo yaqaan "Sarkaalka (Saraakiisha) u Hoggaansamida" ["Compliance Officer (s)"].

Agaasimaha Fulinta, Ilaha Aadanaha
614-797-5700
936 Eastwind Drive
Westerville, OH 43081

Magacyada, mansabyada, iyo macluumaadka lagala xariiro dadkaan waxaa sannad kasta lagu soo daabici doonaa buugaagta waalidka iyo shaqaalaha iyo bogga internetka Dugsiga Dagmada.

Sarkaalka u Hoggaansamida wuxuu mas'uul ka yahay dadaalka Dagmada in ay u hoggaansanto sharciyada Federaalka iyo Gobolka ee lagu dabaqi karo, kana mid ah waajibka Dagmada in ay di degdeg ah iyo si siman wax uga qabato su'aalaha ama ashtakooyinka ku saabsan kadeedka.

Saraakiisha u Hoggaansamida waxaa la heli karaa saacadaha caadiga dugsiga/shqada si loogala haldo arrimaha la xariira kadeedka sharci darrada, so loo kaalmeeyo ardayda, xubnaha kale ee ka soo jeeda bulshada Dagmada, iyo dhinacyada saddaxaad ee raadsada taageero ama waano marka macluumaad ku saabsan dhaqan "aan la soo dhaweynin", ama si aan rasmi ahayn loo dhexgalo laguna mattalo qofka ku sugan xaaladahaas aysan ka jirin arrimo dhalliyay gudbinta ashtako rasmo ah iyo dhamaan dhinacyada ku heshiyeen in ay ka qeybgalaab hawsha aan rasmiga ahayn.

Saraakiisha u Hoggaansamida waxay qaban doonaan ashtakooyinka kadeedka sharci darrada ee ka yimaada xubin kasta oo ka tirsan bushada Dugsiga Dagmada ama qof soo booqda Dagmada, ama hela ashtakooyin oo horaantii loo gudbiyay maamulaha dhismaha dugsiga. Kaddib marka uu helo ashtakada, toos ama ha loo soo mariyo maamulaha dhismaha dugsiga, Sarkaalka u Hoggaansamida wuxuu bilaabi doonaa hab aan rasmi ahayn ama hab rasmi ah (taasoo ku xeran codsiga qofka soo sheegay kadeedka nooca kadeedka la soo sheegay), ama Sarkaalka u Hoggaansamida wuxuu u magacaabi doonaa qof fulliya hawsha noocaas. Marka lala kulmo kiiska ashtada rasmiga, Sarkaalka u Hoggaansamida wuxuu diyaarin doonaa tallooyin loo gudbiyo Maamulaha ama wuxuu kor ka fiirin doonaa diyaarinta talooyinka noocaas uu soo jeediyo qofka loo magacaabay. Dhamaan xubnaha bulshada Dugsiga Dagmada waa in ay dhacdooyinka kadeedka ee loo soo sheego iyaga u sheegaan Sarkaalka u Hoggaansamida muddo labo (2) maalin dugsiyeed laga bilaabo marka ay ogaadaan dhacdada.

Shaqaalaha Guddiga oo toos u arka kadeed sharci darro ah oo loo geysto arday waxaa waajib ku ah, sida waafaqsan siyaasaddaan, in uu kor ka eegiddaas u soo sheego mid ka mid ah Saraakiishena u Hoggaansamida muddo labo (2) maalin dugsiyeed. Intaas kaddib, shaqaale kasta oo ka tirsan Guddiga oo arka fal la xariira kadeed sharci darro ah waxaa laga filaa in uu farageliyo si uu u joojiyo kadeedka, haddii daruufaha aysan faragelinta ka dhigin halis, markaas xubinta shaqaalaha waa in ay dhakhso ogeysiiyaan shaqaalaha kale Guddiga iyo/ama saraakiisha hirgelinta sharciga deegaanka, sida lagama maarmaanka ah, in uu joojiyo kadeedka. Intaas kaddib, Xafiiska u Hoggaansamida ama qofka loo magacaabo waa in uu la xariiro ardayga, haddii uu jiro toban iyo sideed (18) sanno ama ka weyn yahay, ama waalidiinta ardayga haddii uu ka yar yahay toban iyo sideed (18) sanno, muddo labo (2) maalin dugsiyeed gudahooda in iyada/isaga/iyaga la ogeysiiyo rabitaanka Guddiga in uu baaro aadaab darrada la soo sheegay, kana mid ah waajibka saaran Sarkaalka u Hoggaansamida ama qofka loo magaacabo in uu fulliyo baaritaan, raaco dhamaan hababka ku qoran ashtakada rasmiga.

**Warbixinta iyo Ashtakooyinka la xariira Dabeecada Kadeedka**

Ardayda iyo dhamaan xubnaha kale ee bulshada Dugsiga Dagmada iyo Dhinacyada Saddaxaad waxaa lagu dhiirigelinaa in ay isla markiiba dhacdooyinka dhaqanka kadeedka u soo sheegaan macalinka, maamulaha, kormeeraha, ama sarkaalka Dagmada si Guddiga wax uga qabto dhaqanka ka hor inta aysan ka sii darrin, joogto noqonin, ama aysan ku sii adkaanin. Macalin kasta, maamule, kormeere, ama shaqaale ka tirsan Dagmada ama sarkaal oo hela warbixinta noocaas wuxuu u soo gudbin doonaa Sarkaalka u Hoggaansamida muddo labo (2) maalin kaddib marka uu helo warbixinta kadeedka.

Xubnaha bulshada Dugsiga Dagmada iyo Dhinacyada Saddaxaad, kana mid ah ardayda, ama dhinacyada saddaxaad ee aaminsan in si sharci darro ah loo kadeeday waxay xaq u leeyahiin in ay isticmaalaan habka ashtakada Guddiga ee ku qoran hoos. Bilaabidda ashtakada, haddii ay tahay rashmi ama haddii aysan ahayn, si qaldan ma u saamayn karto shaqada Ashtakoodaha ama ka-qeybgalka brograamyada waxbarashada ama ka baxsan manhajka. Inkastoo aysan jirin waqti la soo koobo oo la bilaabo ashtakooyinka kadeedka sida hoos timaado siyaasaddaan, dadka waa in ay ku dadaalaan in ay soo gudbiyaan ashtako sida ugu dhakhsiyaha badan ee suurtogalka ah kaddib marka lala kulmo dabeecadda inta xaqiiqada la ogsoon yahay lana heli karo marqaatiyo suurtogal ah.

Haddii, inta uu socdo baaritaanka ku saabsan gardareysiga la soo sheegay, dabeecad dagaal iyo/ama kadeed sida waafqasan Siyaasadda 5517.01 - Gardareysiga iyo Noocyada Kale Dabeecadda Dagaalka (Bullying and Other Forms of Aggressive Behavior), Agaasimaha aamnisan yahay in laga yaaba in aadaab darrada la soo sheegay abuurtay jawi shaqo oo cadaawad ku dhisan lagana yaabo in ay ahayd kadeedka takoorka sharci darrada sida ku saleysan Dadka la Badbaadiyo (Protected Class), Agaasimaha wuxuu ficilka gardareysiga, dabeecadda daggalka iyo/ama kadeedka loo geysto Sarkaalka (Saraakiisha) u Hoggaansamida [Compliance Officer(s)] kuwasoo baari doono eedeynta sida waafaqsan siyaasaddaan. Haddii kadeedka laga soo dacwooday ku lug leedahay Kadeedka Jinsiga sida ku sifeysan Siyaasadda 2266, xaajada waxaa loo qaban doonaa sida waafaaqsan habka cabashada iyo hababka ku qoran Siyaasadda 2266. Inta Sarkaalka u Hoggaansamida uu baaraayo eedeynta, ama xaajada wax laga qabanaayo sida waafaqsan Siyaasadda 2266, Agaasimaha wuxuu ilaa muddo joojin doonaa Siyaasadda 5517.01 baarista si uu u sugo warbixinta qoran ee Sarkaalka u Hoggaansamida ama laga ogaanaayo mas'uuliyadda sida waaaqsan Siyaasadda 2266. Sarkaalka u Hoggaansamida wuxuu Agaasimaha ogeysiin doonaa xaaladda ay ku sugan tahay baarista Siyaasadda 5517 iyo wuxuu Agaasimaha siin doonaa koobiga warbixinta ka dhallatay ee qoran. Sidoo kale, Iskuduwaha Cutubka IX wuxuu Agaasimaha siin doonaa rabitaanka mas'uuliyadda ka dhallata habka ashtakada Siyaasadda 2266.

Ashtakooyinka takoorka ee ku dacwooda kadeedka jinsiga gudaha sifeynta iyo ujeedada Cutubka IX (Title IX) waxaan lagu wareejin doonaa Iskuduwaha Cutubka IX si wax looga qabto u hoggaansamida Siyaasadda Guddiga 2266 iyo Tilmaanta Maamulka (Administrative Guidelines) 2266.

**Baaritaanka iyo Habka Ashtakada**

Marka laga reebo Kadeedka Jinsiga ee ku qoran Siyaasadda 2266 - Takoor la'aanta ku saleysan Jinsiga xagga Brograamyada Waxbarashada ama Hawlaha, arday kasta oo aaminsan in loo geystay kadeedka sharci darrada ama aar gudashada hoos timaada Siyaasaddaan wuxuu raadsan karaa xalka ashtakada marka la adeegsado hababka hoos ku sharaxan. Hawsha ashtakada rasmiga waxaa la socda baaritaanka sheegashada Ashtakoodaha ee la xiriirta kadeedka ama aar gudashada iyo habka go'aan looga gaaro tan ku saabsan haddii eedeynta yahiin kuwa sax ah.

Bacdamaa xasaasiyadda ku wareegsan tahay ashtakooyinka kadeedka sharci darrada, ama jadwalka aar gudashada yahay mid dabacsan si loo bilaabo hawsha ashtakada; hase ahatee, dadka waa in ay ku dadaalaan in ay soo gudbiyaan ashtako muddo soddon (30) maalin gudahooda kaddib marka dhacdada lala kulmo inta xaqiiqada laga ogsoon yahay lana heli marqaatiyo suurtogal ah. Kaddib marka habka ashtakada rasmiga la bilaabo, baarista waxaa lagu dhamaystiri doonaa waqtiga loo qabtay (caadi ahaan, toban iyo shan (15) maalin la shaqeeyo laga bilaabo ashtakada la helo).

Hababka hoos ku qoran looguma talogelin in ay farageliyaan xuquuqda ardayga in uu raaco ashtakada kadeedka sharci darrada ama aar gudashada Xafiiska Xuquuqda Madaniga ee

Waaxda Waxbarashada Mareykanka (United State Department of Education Office for Civil Rights).

**Hababka Ashtakada Aan Rasmiga Ahayn**

Ujeedada habka ashtakada aan rasmiga ahayn waxay tahay in dhakhso loo joojiyo dabeecadda aan habbooneyn iyo fududaynta xallinta iyaga oo la adeegsanayo hab aan rasmiga ahayn, haddii ay suurtogal tahay. Habka ashtakada aan rasmiga ahayn waxaa loo bixiyaa sida fursadda aan xoogaa rasmiga ahayn oo la siiyo ardayga aaminsan in isaga/iyada ay sharci darro u kadeeday ama aar gudatay. Looma baahna habkaan aan caadiga ahayn in uu horsocod u noqdo gudbinta ashtakada rasmiga. Hawsha aan rasmiga ahayn waxaa la heli karaa oo keliya daruufaha marka Ashtakoodaha iyo Eedeyssanaha labadaba ku heshiyaan in ay ka qeybgalaan.

Ardayda aaminsan in si sharci darro ah loo kadeeday sida hoos timaado Siyaasaddaan waxay ashtakadooda ku bilaabi doonaan habkaan ashtakada aan rasmiga ahayn, balse qasab kuma ah. Habka aan rasmiga ahayn waxaa la heli karaa oo keliya marka lagu sugan yahay daruufaha ay dhinacyada (bartilmaameedka lala beegsaday kadeedka) waafaqaan in ay kala qeybgalaan hawsha aan rasmiga ahayn.

Ashtakoodaha wuxuu isla markiiba ku dhaqaaqi karaa habka ashtakada rasmiga kaddibna dadka raadiya in xal laga gaaro lana adeegsado habka aan rasmiga ahayn waxay codsan karaan in habka aan rasmiga ahayn la soo afjaro waqti kasta si loogu gudbo habka ashtakada rasmiga.

Dhammaan cabashooyinka uu ku lug leyahay shaqaale degmo, qof kasta oo weyn oo kale kana tirsan bulshada Dugsiga Degmada, ama qolo saddexaad iyo arday ayaa si rasmi ah loo baari doonaa.

Sida talaabada lagu bilaabo, haddii Ashtakoodaha dareemo in uu raali ka yahay iyo ammaan in uu sidaas sameeyo, qofka waa in uu u sheego ama ogeysiiyo Eedeysanaha in dhaqanka kadeedka ee la soo sheegay aan la soo dhaweynin iyo waa in la joojiyo.  Ashtakoodaha waa in uu ka hadlo eedeynta dhaqanka kadeedka sida ugu dhakhsiyaha badan ee suurtogalka ah kaddib marka lala kulmo kadeedka. Sarkaalka (Saraakiisha) u Hoggaansamida waa la heli karaa is ay u taageeraan iyo si ay ula talliyaan dadka marka ay qaadaan tallaabadaan ama farageliyaan iyagoo mattalaaya Ashtakoodaha haddii sidaas laga codsado. Astakoodaha aan raali ka ahayn aan rabin in uu toos Eedeysanaha kala hadlo dhaqanka aan habbooneyn ee lagu soo eedeyay wuxuu soo gudbin karaa ashtako aan rasmi ahayn ama mid rasmi ah. Intaas kaddib, tan ku saabsan noocyada qaar kadeedka sharci darrada, sida kadeedka jinsiga, Sarkaalka u Hoggaansamida wuxuu soo jeedin karaa waan ka soo horjeedo isticmaalka habka ashtakada aan rasmiga ahayn.

Waxaa dhici karto in Ashtakoodaha uu ashtako aan rasmi ahayn, afka ama qoraal, u soo jeediyo: 1) macalin, shaqaale kale, ama maamulaha dhismaha ee ku jira dugsiga uu ardayga tago; 2) Maamulaha ama shaqaale kale oo ka tirsan heerka-Dagmada; iyo/ama 3) toos u jeediyo Sarkaalka (Sarakiisha) u Hoggaansamida.

Dhamaan ashtakooyinka aan rasmiga ahayn waa in loo sheego mid ka mid ah Saraakiisha u Hoggaansamida kaasoo ama fududeyn doono xal aan rasmi ahayn sida ku sharaxan hoos, ama magacaabi doono qof kale in uu fududeeyo xal aan rasmi ahayn.

Habka ashtakada Guddiga waxaa loo samayay in la siiyo ardayda aaminsan in si sharci darro ah la kadeedo lana siiyo fursado loo samayay in xal laga gaaro arrimahooda. Sida ku xeran nooca ashtakada iyo rabitaanka Ashtakoodaha, xallinta aan rasmiga ahayn waxaa ku jira, balse kuma eka, mid ama ka badan kuwa soo socdo:

A. Ogeysiinta Ashtakoodaha arrinta ku saabsan si Eedeysanaha loo gaarsiiyo dabeecadda aan la rabin.

B. Qeybinta koobiga siyaasaddan ka soo horjeedo kadeedka taasoo ah xasuusinta dadka ku sugan dhismaha dugsiga ama xafiiska meesha uu ka shaqeeyo ama uu tago Eedeysanaha.

C. Haddii labada dhinac ku heshiyaan, Sarkaalka u Hoggaansamida wuxuu qabanqaabi doonaa iyo wuxuu fududeyn doonaa shir ama dhexdhexaadin dhexmara Ashtakoodaha iyo Eedeysanaha si ay uga wada shaeyaan xalka labda dhinca.

Bacdamaa aysan jirin waqtiyo la qabtay oo loo baahan yahay oo lagu xalliyo ashtakada aan rasmiga ahayn, Sarkaalka u Hoggaansamida waxaa la faraa in uu xalliyo dhamaan ashtakooyinka muddo toban iyo shan (15) maalin gudahooda laga bilaabo marka uu helo ashtakada aan rasmiga ahayn. Haddii Ashtakoodaha uusan raali ka ahayn habka ashtakada aan rasmiga ahayn, Ashtakoodaha wuxuu ku dhaqaaqi karaa in uu soo gudbiyo ashtako rasmi ah. Iyo, sida lagu sheegay kore, dhinac kasta wuxuu codsan karaa in hawsha aan rasmiga ahayn la joojiyo waqti kasta si loo gaarsiiyo hawsha ashtakada rasmiga ah.

**Habka Ashtakada Rasmiga**

Haddii ashtakada aan lagu xallinin habka ashtakada aan rasmiga ahayn, haddii mid ka mid ah dhinacyada soo codsaday in la joojiyo habka ashtakada aan rasmiga ahayn si loogu wareego habka ashtadka rasmiga, ama Ashtakoodaha, horaantiiba, doorto in uu soo gudbiyo ashtako rasmi ah, ama CO (Compliance Officer) go'aan ka gaaro in eedeynta aysan ahayn kuwo ku habboon xallinta habka aan rasmiga ahayn, waxaa la fullin doonaa habka ashtakada rasmiga.

Ashtakoodaha wuxuu soo gudbin karaa ashtako rasmi ah, ama afka ama qoraal ahaan, uu la kaashado macalin, ama shaqaale kale oo ka tirsan Dagmada oo ku sugan dugsiga ardayga, Sarkaalka u Hoggaansamida, Maamulaha, sarkaal kale oo ka tirsan Dagmada oo ka shaqeeyo dugsi kale ama heerka Dagmada. Bacdamaa xasaasiyadda ku wareegsan tahay ashtakooyinka kadeedka sharci darrada iyo aar gudashada, jadwalka lagu bilaabo hawsha ashtakada waa dabacsan yahay; hase ahatee, dadka waa in ay ku dadaalaan in ay soo gudbiyaan ashtako rasmi ah muddo soddon (30) maalin kaddib marka la fulliyo dhacdada inta la ogsoon yahay xaqiiqada lana heli karo marqaatiyada suurtogalka ah. Haddii Ashtakoodaha ogeysiiyo macalinka, agaasimaha, Maamulaha, ama Sarkaal Kale oo ka tirsan Dagmada, ama ha ka sheego afka ama qoraal ahaan, kuna saabsan ashtakada ama kadeedka ama aar gudashada, shaqaalahaas waa in uu macluumaadkaas ogeysiiyo Sarkaalka u Hoggaansamida muddo labo (2) maalin la shaqeeyo.

Inta ay socoto hawsha, Sarkaalka Ashtakada waa in ay dhinacyada sida macquulka ah ula socodsiiyaan xaaladda ay ku sugan tahay baarista iyo hawsha go'aan gaarista.

Dhamaan ashtakooyinka rasmiga waa in lagu darro macluumaadka soo socdo ilaa inta la ogsoon yahay: aqoonsiga Eedeysanaha; sharaxaad tafatiran oo ku saabsan xaqiiqada ay asktakada ku saleysan tahay (sida goorta, goobta, iyo waxa dhacay); liiska marqaatiyada suurtogalka ah; iyo xalka uu raadiyo Ashtakoodaha.

Haddii ashtakoodaha uusan rabin ama uusan awoodin in uu soo gudbiyo oraah qoran kuna soo darro macluumaadka kor ku qoran, Sarkaalka u Hoggaansamida (Compliance Officer) wuxuu weydiisan doonaa tafaasiisha noocaas marka la wareysto. Taasi kaddib, Sarkaalka u Hoggaansamida wuxuu diyaarin doonaa soo koobid qoran oo ku saabsan wareysiga afka, iyo Ashtakoodaha waxaa la weydiin doonaa in uu xaqiijiyo sax ahaanta eedeynta la soo jeediyay marka uu saxiixo warqadda.

Kaddib marka uu helo ashtakada rasmiga, Sarkaalka u Hoggaansamida wuxuu ka fakari doonaa haddii loo baahan yahay in talaabo laga qaado marxaladda baaritaanka si Ashtakoodaha looga badbaadiyo kadeed dheeraad ah ama aar gudasho, kana mid ah, balse ku ekeen, in laga

baddalo shaqada loo diray ama jadwalka Ashtakoodaha iyo/ama Eedeysanaha. Si uu u gaaro go'aankaas, Sarkaalka u Hoggaansamida waa in uu la tashto Ashtakooda si uu u qiimeeyo haddii qofka waafaasan yahay falka la soo jeediyay. Haddii Ashtakoodaha uusan rabin in uu ogolaado isbaddalka la soo jeediyay, Sarkaalka u Hoggaansamida wuxuu weli qaadi karaa talaabo wixii loo arko in ay ku habboon tahay lana tashto Maamulaha.

Muddada labada (2) maalin la shaqeeyo laga bilaabo marka la helo ashtakada, qofka uu Sarikaalka u Hoggaansamida (Compliance Officer) u magacaabay wuxuu bilaabi doonaa baaritaan rasmi ah si uu u ogaado haddii Ashtakoodaha loo geystay gaf/kadeed/aar gudasho. Agaasimaha ma fullin doono baaritaan haddii uusan sidaas farin Sarkaalka Hoggaansamida.

Islamarkaas, Sarkaalka u Hoggaansamida wuxuu ogeysiin doonaa Eedeysanaha in la soo gaarsiiyay ashtako rasmi ah. Eedeysanaha waxaa la ogeysiin doonaa nooca eedeynta iyo waxaa la siin doonaa koobiga siyaasadaha la xariira iyo/ama tilmaamaha maamulka, kana mid ah siyaasadda Ka Soo Horjeeda Kadeedka. Eedeysanaha waa in sidoo kale la ogeysiiyo fursadda in uu jawaab qoran u gudbiyo ashtakada muddo shan (5) maalin la shaqeeyo gudahooda.

Inkastoo kiisaska qaar u baahan yihiin waqti dheeraad ah, Sarkaalka u Hoggaansamida qofka uu u magacaabay wuxuu iskudayi doonaa in uu dhamaystiro baaritaan la xariira eedeynta ama kadeedka/aar gudashada muddo toban iyo shan (15) maalin oo ah maalmaha la shaqeeyo kaddib marka la soo gudbiyo ashtakada rasmiga. Baaritaanka waxaa ka mid noqon doono:

A. wareysiyada lala yeesho Ashtakoodaha;

B. wareysiyda lala yeesho Eedeysanaha;

C. wareysiyada lala yeesho marqaatiyada kale oo sida macquulka ah laga filaayo in ay hayaan macluumaad la xariira eedeynta;

D. tixgelinta warqadaha ama macluumaadka kale ay soo bandhigaan Ashtakoodaha, Eedeysanaha, ama marqaati kale oo sida macquulka ah la aaminsan yahay in ay la xariiraan eedeynta.

Marka la soo gabogabeeyo baaritaanka, Sarkaalka u Hoggaansamida wuxuu diyaarin doonaa iyo wuxuu Maamulaha u soo gudbin doonaa warbixin qoran oo soo koobta caddeynta la soo aruuriyay inta ay socotay baaritaanka iyo wuxuu bixin doonaa talooyin ku saleysan caddeynta iyo sifeynta kadeedka sharci darrada sida ku qoran siyaasadda Guddiga iyo sharciga Gobolka iyo Federaalka tan ku saabsan haddii Ashtakoodaha loo geystay kadeedka sharci darrada. Tallooyinka uu soo jeediyo Sarkaalka u Hoggaansamida waa in ay ku saleysnaato iskudarka daruufaha, sida da'da iyo heerarka bislaanta kuwa u lugta leh. Si loo ogaado haddii ay meesha ka dhacday kadeedka takoorka ama aar gudasho, waxaa la isticmaali doonaa heerka badnida caddeynta. Sarkaalka u Hoggaansamida wuxuu la tashan karaa qareenka sharciga Guddiga ka hor inta aan la soo gabogabeynin warbixinta loo diro Maamulaha.

Haddii aysan jirin wax yareeya daruufaha, muddo toban (10) maalin oo ah maalmaha la shaqeeyo kaddib marka la helo warbixinta qofka loo magacaabay Sarkaalka u Hoggaansamida (Comliance Officer), Maamulaha waa in uu soo saaro go'aan qoran oo ku saabsan haddii ashtakada kadeedka tahay mid jirta ama wuxuu codsan karaa baaritaan dheeraad ah. Koobiga go'aanka kama dambaysta Maamulaha ayaa loo geyn doonaa Ashtakoodaha iyo Eedeysanaha labadaba.

Haddii Maamulaha codsado baaritaan dheeraad ah, Maamulaha waa in uu sheego macluumaadka dheeraadka ah ee loo baahan yahay in la soo aruuriyo, iyo baarista dheeraadka noocaas waa in lagu dhameeyo muddo toban (10) maalin la shaqeeyo. Marka la gaaro

gabogabada baarista dheeraadka, Maamulaha waa in uu soo saaro go'aan qoran sida lagu sharaxay kor.

Go'aanka Maamulaha wuxuu ahaan doonaa kama dambeys.

Guddiga wuxuu reebtay xaqa uu u leeyahay in uu baaro iyo xalliyo ashtakada ama warbixinta kadeedka sharci darrada/aar gudashada iyadoo aan la fiirinin haddii xubinta bulshada Dugsiga Dagmada ama dhinac saddaxaad oo ku dacwoota kadeedka sharci darrada/aar gudashada dabagasho ashtakada. Guddiga wuxuu kaloo reebtay xaq uu u leeyahay in baaritaanka ashtakada rasimiga uu fuuliyo qof dibadda ka ah sida waafaqsan siyaasaddaan ama si kale hadba sida uu u garto in ay ku habboon tahay Guddiga ama qofka loo magacaabo.

Waa la mattali karaa dhinacyada ka qeybgala shirarka/dhageysiyada kor lagu sharaxay, hase ahatee waa in ay iska bixiyaan kharashka.

Xaqa qofka u leeyahay in isla markiiba iyo si siman loo xalliyo ashtakada may aha in ay cuuryaamiso waxyaabaha kale uu qofka raadiyo sida ashtakada loo gudbiyo Xafiiska Xuquuqda Aadanaha (Office of Civil Rights), eedeynta loo gudbiyo hirgelinta sharciga deegaanka, ama dacwadda madaniga ee loo gudbiyo maxkamadda. Isticmaalka habkaan ashtakada gudaha ma aha qodob lagu xero raadinta habab kale oo lagu saxo.

**Asturnaanta/Qarsoodiga**

Dagmada waxay adeegsan doontaa dhamaan dadaalka macquulka ah si ay u badbaadiso xuquuqda ashtakoodaha, Eedeysanaha, iyo marqaatiyada ilaa inta suurtogalka ah, sida waafaqsan waajibaadka sharciga ee saaran Guddiga in ay baarto, qaado talaabada ku habboon, iyo in ay u hoggaansanto waajibaadka kashifaadka raadinta iyo kashifaadda. Dhamaan diiwaanada la soo saaro sida hoos timaado qodobada siyaasaddaan iyo tilmaamaha maamulka la xariira waa in la haayo lagana dhigo kuwao qarsoodi ah ilaa inta sharciga ogol yahay. Qarsoodiga, hase ahatee, lama ballan qaadi karo. Dheeraad, Eedeysanaha waa in la siiyo aqoonsiga Ashtakoodaha.

Inta uu socdo baaritaanka rasmiga, qofka loo magacaabay Sarkaalka u Hoggaansamida wuxuu fari doonaa dhamaan xubnaha bulshada Dugsiga Dagmada iyo dhinacyada saddaxaad ee la laga wareysto muhiimadda ay leedahay socodsiinta qarsoodiga. Qof kasta oo wareysto taasoo qeyb ka ah baarista kadeedka waxaa laga filaa in uusan kashifin macluumaad la barto ama la bixiyo inta uu socdo baaritaanka.

**Cunoqabadeynta iyo Kormeerka**

Guddiga wuxuu si xooggan u hirgelin doonaa waxyaabaha la mamnuucay ee ka soo horjeedo kadeedka sharci darrada (aar gudashada marka uu qaado talaabo ku habboon oo sida macquulka ah la xisaabo in lagu joojiyo kadeedka iyo laga hor istaago kadeedka noocaas. Inta la dhowraayo mabaadiida nidaamka, jebinta siyaasadaan waxay dhallin kartaa dishibiliin, oo gaara kana mid ah in la ruqseeyo shaqaalaha ama in laga fadhiisyo ilaa muddo/dibadda loo saaro. Waxaa la qaadi doonaa dhamaan falka dishibiliinka sida waafaqsan sharciga Gobolka ee lagu dabaqi karo iyo qodobada heshiiska (heshiisyada) xaajoodka wadajirka ee munaasabka ah. Marka la rabo in la saaro dishibiliin, Maamulaha wuxuu tixgelin doonaa iskudarka daruufaha jira, kana mid ah da'ada iyo heerarka garashada kuwa ku lugta leh. Kiisaska noocaas marka kadeedka sharci darrada aan la xaqiijin karin, Guddiga wuxuu ka fakari karaa haddii dhaqanka la soo sheegay u baahan tahay in la saaro dishibiliin sida waafaqsan siyaasadaha kale ee Guddiga, sida waafaqsan qodobada heshiiska (heshiisyada) wada xaajoodka munaasabka ah.

Marka Guddiga ogaato in la qaaday talaabl hore laga qaaday xubin ka tirsan bulshada Dugsiga Dagmada, dhamaan xiqaabta ku xigta uu saaro Guddiga iyo/ama Maamulaha waxaa loo xisaabi

doonaa si loo soo gabogaeeyo dabeecadda noocaas, laga hor istaago in aysan soo noqonin, iyo wax laga qabto waxyeeladeeda.

**Aar gudashada**

Waa la mamnuucay aar gudashada ka soo horjeedo qofka soo gudbiya warbixinta ama soo gudbiya fayl ashtako oo ku dacwooda kadeed/aar gudasho sharci darro ah ama marqaati ahaan ka qeybgala baaritaan. Lama ogola in Guddiga ama qof kale cabsi geliyo, handado, jujuubo, ama farageliyo qof maxaa yeelay qofka wuxuu diiday fal kasta ama dhaqan kasta uu sharciga xuquuqda madaniga Federaalka ama Gobolka ka dhigeen sharci darro, ama maxaa yeelay qofkaas wuxuu qoray warbixin, ashtako rasmi uu ka marqaati furay, kaalmo ka geystay ama ka qeybgalay ama diiday in uu ka qeybgalo sinna baaritaan, dacwad, ama dhageysi sida hoos timaada sharciyadaas iyo/ama siyaasaddaan, ama maxaa yeelay qofkaas wuxuu adeegsaday, ka helay, kaalmeyay ama dhiirigeliyay qof kasta oo ku hawlan ka helidda xaq kasta oo la siiyay ama ay badbaadyeen sharciyadaas iyo/ama siyaasaddaan.

Aar gudashada ka soo horjeedo qofka soo qor warbixin ku saabsan takoor, gudbinta ashtako rasmi aha ama ka qeybgalka baaritaan ama la kullanka waa jebin culus oo loo geystay siyaasaddaan ee dhallin karta in lagu qaado xiyiraada/ciqaab iyo/ama waxyaabo kale oo ku habbon toosinta.

Waa la soo gudbin karaa ashtakooyinka rasmiga ee ka dacwooda aar gudasho waxaa loo gudbin karaa sida waafaqsan habka ashtakada gudaha sida ku qoran kor.

Ku shaqeynta xuquuqda hoos yimaada Baddalaadda Kowaad ee Dastuurka Mareykanka ma noqoto aar gudasho la mamnuucay sida hoos timaado siyaasaddaan.

**Eedeynta Dhaqanka Dambiga: Ku Xadgudubka Cunugga/Aadaab Darrada Jinsiga**

Sharciga gobolka wuxuu rabaa in macalinka dugsiga ama shaqaalaha dugsiga oo ogsoon ama tuhunsan in cunugga qaba itaal darri ee ka yar labaatan iyo koiw (21) sanno ama cunugga ka yar toban iyo sideed (18) sanno la kulmay dhibaato ama ay soo food saartay handadaad in loo geysto dhaawac jirka ama madaxa, itaal darri ama xaalad sida macquulka ah muujineyso ku xadgudub ama dayac loo geysto cunug, in uu isla markiiba aqoontaas ama tuhunkaas u soo sheego wakaaladda adeegyada caruurta dagmada. Haddii, inta ay socoto baaritaanka kadeedka, Sarkaalka u Hoggaansamida (Compliance Officer) ama qofka loo magacaabay uu qabo sabab uu ku aaminsan yahay ama tuhunsan yahay in dabeecadda la soo sheegay, si macquul ah, u muujiso ku xadgudubka ama dayaca Ashtakoodaha, waa in ogaantaas laga sameeyo warbixin sida waafaqsan sharciga Gobolka iyo Siyaasadda Guddiga.

Sharciga gobolka wuxuu xariirka qaar ee dhexmaro macalinka iyo ardayga ku sifeyaa "jinsiga galmada" ("sexual battery"). Haddii Sarkaalka u Hoggaansamida ama qofka loo magacaabo uu qabo sabab uu ku aamino in Ashtakoodaha uu ahaa dhibane laga galay dambi sida ku sifeysan Xeerka Dambiga Ohio (Ohio's Criminal Code), aqoonta noocaas waa in isla markiiba loo gudbiyo hirgelinta sharciga deegaanka.

Warbixinta loo gudbiyo wakaaladda adeegyada caruurta dagmada ama hirgelinta sharciga deegaanka, meesha ma ka saari karto waajibka saaran Sarkaalka u Hoggaansamida ama qofka uu magacaabo iyo mas'uuliyadda saaran in uu sii wado in uu baaro ashtakada kadeedka. Inta Sarkaalka u Hoggaansamida ama qofka loo magacaabo ay wadajir ah ula shaqeyn doonaan wakaaladaha dibadda si ay u fulliyaan baaritaan wada socda, lama ogola sinna in ku lug yeelashada wakaaladaha dibadda joojiyaan baaritaanka kadeedka haddii aysan jirin sabab kaddib marka lala tashto Maamulaha.

**Eedeynta ku Lugta leh Anshax Xumada Shaqada Macalinimada/Ka Joojinta**

Maamulaha wuxuu Waaxda Waxbarashada Ohio siin doonaa warbixin, ku qoran foomam loo sameyay ujeedadaas, oo ku saabsan aadaab darrada ay geystaan xubnaha shaqaalaha soocan ee shattiga haysta ee lagu helay xadgudubka jinsiga, iyo wuxuu, sida waafaqsan Siyaasadda 8141, ka joojinta doonaa shaqaalaha noocaas dhaamaan waajibaadka ee la xariira ama ku lugta leh daryeelka, haynta, ama kantaroolka cunugga inta laga sal gaaraayo dambiga oo qofka loo soo xeray, loogu yeeray iyo/ama lagu soo dacweyay.

**Waxbarashada iyo tababarka**

La taageero Siyaasaddaan ka soo Horjeedo Kadeedka, Guddiga wuxuu horumariyay hababka waxbarashada ka-hortagga si loo abuuro dareenka takoorka sharci darrada ah. Maamulaha ama cidda loo xil saaray waxay tababar ku habboon siin doonaan dhamaan xubnaha ka tirsan bulshada dugsiga dagmada oo ku saabsan sida loo fulliyo siyaasaddaan iyo tilmaamaha la socdo. Dhamaan tababarka, iyo sidoo kale dhamaan macluumaadka, la bixiyay, kuna saasban siyaasadda Guddiga iyo kadeedka guud ahaan, waxay ahaan doonaan kuwo ku habboon da'da iyo waxa ku qoran.

**Haysashada Diiwaanada Baaritaanka iyo Qoraalada**

Sarkaalka (Saraakiisha) u Hoggaansamida waxay mas'uul ka yahiin kor ka eegidda haysashada diiwaanada loo baahan yahay in la haayo sida waafaqsan siyaasaddaan. Dhamaan dadka lagu eedeeyo in ay fulliyeen baaritaan sida hoos timaado siyaasaddaan waxay haysan doonaan warqado, macluumaad elataroonig ahaan la keydiyo (electronically stored information) ("ESI"), iyo meediyada elataroonigga (sida ku sifeysan Siyaasadda 8315) oo la abuuray iyo/ama la helay sida qeyb ka tirsan baaritaan, oo laga yaabo in ay ku jiraan balse aan lagu soo koobin:

A. dhamaan warbixinta qoran / eedeynta / ashtakooyinka / cabbashada / oraahda / jawaabta la xariirta jebinta la soo sheegay siyaasaddaan;

B. sheekooyinka xasuusinta hadalka warbixinta / eedeynta / ashtakooyinka / cabbashada / bayaanada / jawaabaha la xariira jebinta siyaasadda ee la soo sheegay;

C. warqad kasta oo xasuusisa talaabadaha ay qaadeen shaqaalaha Dagmada ama dadka lala galay heshiiska ama Guddiga u magacaabay in ay fulliyaan mas'uuliyadeeda la xariirta baaritaanka iyo/ama jawaabta Dagmada ka bixisay jebinta la soo sheegay ee siyaasaddaan;

D. oraahda qoran marqaatiga;

E. sheekooyinka, xasusta laga soo qaatay ama maqalka fiidiyowga, ama duubitaanka dijitalka ee wareysiyada laga qaaday marqaatiyada/bayaanada;

F. e-mailada, buugaagta, ama soo gelinta meediyaha bulshada ee sida tooska ula xariiro ama dhigan sida caddeyn la xariirta jebin la soo sheegay siyaasaddaan (taasoo aha faalada aan ahayn xaqiiqada kaddib ee ku saabsan waxa meediyaha ka qoreen dhacdada);

G. xasuusin ama soo koobid baaraha soo diyaariyay isla mar qaab kasta oo loo samayay (tusaale, gacanta lagu qoray, lagu qoray kombuyutar ama tablet, iwm.), balse ku jirin xasuusinta ku meel gaarka oo waxa ku qoran lagu qoray warqado kale;

H. xayiraada dishibiliin qoran oo loo soo saaray ardayda ama shaqaalaha iyo warqad kale oo lagu xasuusto xayiraadda dishibiliinka la siiyo ardayda ama shaqaalaha marka la jebiyo siyaasaddaan;

I. taariikhda lagu qoray go'aanada/warbixinta (kana mid ah soo koobidda caddeynta ka saarta iyo adkeysa eedeynta) ama warqado kale oo xasuus ka reebta ogeysiisyada afka ee la siiyo dhinacyada ku saabsan natiijada baaritaanka, kana mid ah ciqaabta la saaray sida waafaqsan jebinta siyaasaddaan;

J. warqadaha taageersan hababka la soo jeediyay iyo/ama la siiyay Ashtakoodaha iyo/ama Eedeysanaha, kana mid ah ammarada la siiyay labada dhinac in aan lala xariirin, taariikhda la soo saaray ammarada in aan lala xariirin, iyo taariikhda ay dhinacyada aqoonsadeen in ay heleen ammarada in aan lala xariirin;

K. warqado ku saabsan dhamaan talaabadaha lagu dhaqaaqay, qof ahaan iyo siistemka labadaba, in la joojiyo takoorka ama kadeedka, laga hortago in aysan soo noqonin, la tirtiro cadaawadda jawiga, iyo la toosiyo waxyeeladeeda takoorka;

L. koobiyada siyaasadda Guddiga iyo/ama hababka/tilmaamaha ay Dagmada adeegsato si ay u fulliso baaritaanka, iyo warqado kasta ay Dagmada adeegsato waqtiga jebinta la soo sheegay in waxa Guddiga filaayo loo gudbiyo ardayda iyo shaqaalaha xagga mowduuca siyaasaddaan (tusaale Xeerka Asluubta Ardayda iyo/ama Buugaagta Shaqaalaha);

M. koobiyada warqadaha xasuusinta go'aanada rasmiga ama kuwa aan rasmiga ahayn ee la xariira takoorka ama kadeedka la soo sheegay.

La Baddalay 5/24/10, 6/9/14, 12/10/18, 9/28/20, 4/12/21

**© Neola 2021**

Sharciga
R.C. 4112.02
20 U.S.C. 1400 et seq., Shakhsiyaadka Naafada ah Sharciga Horumarinta Waxbarashada ee 2004 (IDEIA)
20 U.S.C. 1681 et seq.
29 U.S.C. 621 et seq. , Sharciga Ku takoorida Da'da Shaqa siinta ee 1967
29 U.S.C. 794, Sharciga Baxnaaninta ee 1973, oo wax laga beddelay
29 U.S.C 6101, Sharciga Ku takoorida Da'da ee 1975
42 U.S.C. 2000d et seq.
42 U.S.C. 2000e et seq.
42 U.S.C. 12101 et seq. , Sharciga Dadka Maraykanka Naafada ah ee 1990, sida wax laga beddelay
42 U.S.C. 1983
Weydiinta iyo Falanqaynta Ururka Guddiyada Dugsiyada Qaranka – May, 2008

20. **<u>Sida Hubka</u>**

Waxyaabaha hubka u ek waa shay u shabaha hub balse aan lahayn waxyaabaha qarxa ee la socda hubka hase ahatee isticmaali kara qalab ku raran moolo ama cadaadiska hawada oo loo adeegsado tuurista shay ama maado (sida qoriga ilmaha ku cayaraan, qoriga bb, qoriga "pellet", qoriga hawada iyo qoryaha "paint ball.") Ardayga ma yeelan karo, kama shaqeyn karo, ama ma gudbin karo waxyaabaha u ek hub, kuwa isticmaalkooda aysan shaqo ku lahayn habka waxbarashada. Ka reebidaan waxaa ka mid ah ardayda kaalmeysa, oo joogta, ama si kastaba uga qeybgasha jebinta sharcigaan.

21. **<u>Dhaqanka Jinsiga aan la Rabin/Kadeedka Jinsiga/Dagaalka Shukaansiga</u>**

Shukaansiga aan la soo dhaweynin iyo/ama kadeedka jinsiga, waxaa ka mid noqon kara codsiyada axsaanka jinsiga, dhaqanka kale jirka ama dhaqanka afka ama nooca isgaarsiinta jinsiga, kana mid

ah kadeedka ku saleysan jaadka qofka ee abuura waxbarasho ku saleysan cabsi gelin, cadaawad, ama gaf ama jawiga shaqada, tusaale ahaan, balse kuma eka qanjaruufada, qabashada, dharbaaxada, salsalaaxa, cadaadis aan dhamaaneynin, taabasho, ku rugasho, iyo/ama faalo hoos gelis ah, baaq ama kaftan, dhawaaqyada hoos geliska ama af xumada ama foorida, telefoonada fadeexada ama qoraalka fariimaha elataroonigga, ama cadaadiska in qofka ogolaado jinsiga. Kadeedka jinisga waxaa ka mid noqon kara dabeecadda qofka labka ama dhedigga oo ka soo horjeeda jaadka qofka yahay ama jaad kale. Lama ogola shukaansiga jinsiga aan la rabin iyo/ama kadeedka jinsiga, waana la mamnuuci doonaa. Ka reebidaan waxaa ka mid ah ardayda kaalmeysa, joogta, ama si kastaba ka qeybgasha jebinta sharcigaan.

Gafka shukaansiga waxaa lagu sifeyaa sassaanka dabeecadda marka qofka isticmaalo ama ku hanjabo xumaanta jirka, jinsiga, afka, ama caatifadda si uu u kantaroolo qofka ay ka dhexeyso shukaansiga. Qofka shukaansada waa qof, iyadoo aan la fiirinin jaadka uu yahay, xariir sokke la leh qof kale, aasaasiya ku sifoobay waxa laga filaayo jeceel, ha jirto sabab, ha ahaado dhab, ama mid muddo dheer qaata. Lama aqbali doono ballaminta dagaalaka waana la mamnuuci doonaa. Ka reebidaan waxaa ka mid ah ardayda kaalmeysa, oo joogta, ama si kastaba uga qeybgasha jebinta sharcigaan.

22. **<u>Dhaawaca Culus ee loo Geysto Jirka</u>**

Maamulaha wuxuu muddo hal sanno saari karaa ardayga ballan qaaday in uu waxyeelo culus gaarsiiyo jirka dadka. Xanuun kasta oo ku dhacda madaxa ama xaalad culus oo caadi ahaan u baahan jiifinta isbitaalka ama daweynta madax muddada dheer; wayeelada jirka ay la socoto halista dhimashada; waxyaalada jirka oo ku dhallisa itaal darri joogto ah, haddii ay tahay qeyb ama iskudar, ama ku lug leh itaal darri ku meel gaar ah, la taaban karo; waxyeelo soo gaarta jirka oo dhallisa burbur joogto ah ama ku lug leh burbur culus oo ku meel gaar ah; ama waxyeelo soo gaarta jirka oo ku lug leh xanuun darran oo qaata muddo oo dhalliya dhibaato badan ama ku lug leh xanuun qaata muddo dheer ama aan la joojin karin. Ka reebidaan waxaa ka mid ah ardayda kaalmeysa, oo joogta, ama si kastaba uga qeybgasha jebinta sharcigaan.

23. **<u>Meelaha Ka Baxsan Xaafadaha</u>**

Ardayda waxaa laga mamnuucay in ay galaan meelaha aan loo ogoleyn. Meelaha ka baxsan waxaa lagu sifeyaa sida meelaha ah, gudaha iyo dibadda dhismaha dugsiga labadaba, ee ay qoondeeyaan saraakiisha dugsiga marka la sifeeyo ama waqtiga maalinta, kana mid ah ka tagidda dhismaha dugsiga fasax la'aan inta ay socoto maalin dugsiyeedka. Tan waxaa ku jira qolalka alaabta la dhigto iyo musqulaha sida hoos timaada Siyaasadda Guddiga 7421.

24. **<u>Qamaar</u>**

Ardayda waxaa laga mamnuucay qamaarka. Qamaarka waxaa lagu sifeyaa sida cayaaraha lagu helo lacag ama wax kale oo laga macaasho, sida balse kuma eka, cayaaraha tuurista, turubka ama jibyada bokerka. Ka reebidaan waxaa ka mid ah ardayda kaalmeysa, oo joogta, ama si kastaba uga qeybgasha jebinta sharcigaan.

25. **<u>Badeecada</u>**

Lama ogola in ardayda ay waxyaabo ka iibiyaan ardayda kale haddii uusan soo ogolaanin agaasimaha dhismaha ama qofka uu isaga/iyada magacaawday. Ka reebidaan waxaa ka mid ah ardayda kaalmeysa, oo joogta, ama si kastaba uga qeybgasha jebinta sharcigaan.

26. **<u>Jebinta Sharciyada Dugsiga</u>**

Ardayga waa in uusan ku guul dareysanin in uu u hoggaansamo sharciyada dugsiga iyo nidaamka sida habboon loogu dajiyay ammaanka iyo hawlaha dugsiga.

Ardayda waxaa la siin doonaa kaararka aqoonsiga (I.D.) waxaana ka mid noqon doono magacooda, nambarka aqoonsiga (ID) ardayga iyo sawir. Kaararkaan waa in la qaato mar kasta inta ardayga uu ku sugan yahay dhismaha dugsiga, saacadaha dugsiga, hantida dugsiga, ama marka uu tago munaasabo uu dugsiga mas'uul ka yahay. Aqoonsiga I.D. waa la dhiibo haddii uu codsado shaqaalaha ka tirsan dugsiga ama sarkaal ka tirsan hirgelinta sharciga.

27. **Jebinta Sharciyada Gawaarida Dugsiga**
Ardayga waa in uusan ku guul dareysanin in uu u hoggaansamo sharciyada gawaarida dugsiga iyo nidaamka sida habboon loogu dajiyay ammaanka iyo hawlaha dugsiga.

28. **Isticmaalka, Haysashada, Iibinta ama Qeybinta Dabka**
Isticmaalka, haysashada, iibinta ama qeybinta waxyaabaha qarxa, sida balse kuma eka "bambooyinka cherry bombs" waa la mamnuucay. Ka reebidaan waxaa ka mid ah ardayda kaalmeysa, oo joogta, ama si kastaba uga qeybgasha jebinta sharcigaan.

29. **Weerarka**
Lama ogola in ardayga uu cabsi geliyo si uu qofka kale gaarsiiyo dhaawaca jirka ama u dhaqmo si oo sabab u noqoto dhaawac jirka.  Ardayga ma imaan karo si uu u arko ama u dhiiri geliyo iyo/ama si uu u kiciyo weerar, ama ma ka hor istaagi karo shaqaalaha in ay soo farageliyaan, marka weerar dhaco. Ka reebidaan waxaa ka mid ah ardayda kaalmeysa, oo joogta, ama si kastaba uga qeybgasha jebinta sharcigaan.

30. **Daacadnimada Aqoonta/Dhaqan Xumada**
Sharafta aqoonta waa mabda' muhiim u ah Dugsiyada Magaalada Westerville.  Waxaa muhiim ah in ardayda la siiyo xirfadaha ay u baahan yahiin si loo ilaaliyo sharaftooda una soo bandhigaan waxa ay bartaan, isla sida ay muhiim u tahay ardayda in ay soo saaraan sharafta qofka si ay u noqdaan muwaadiniin bulsho ahaan mas'uul ah. Waxaa la filaa in ardayda soo saaraan shaqadooda iyagoo aan ka qeybqaadanin dabeecad xumada waxbarashada. Aadaab darrada waxbarashada waxaa lagu sifeyaa hawl kasta oo haleysa sharafta waxbarashada dugsiga dagmada, ama carqaladeysa habka waxbarashada. Tusaalooyinika hab-dhaqan xumada aqoonta waxaa ka mid ah, balse aan ku xadidnayn qaadashada shaqada qolo kale, is-kaashi (wada shaqeyn aan la fasixin), in la koobiyeeyo shaqada arday kale, u soo bandhigida shaqo lagu soo sameeyay aqli macmaleed (“AI”) sida inay tahay shaqo aad naftaada soo diyaarisay iyadoo adeegsiga AI aanu si gaar ah u oggolaan macalinku inay qayb ka tahay hawsha, haysashada qoraalada aan la fasixin, iyo/ama dhaqan kale oo ardayga siiso horumar aan xaq ahayn. Aadaab darrada aqoonta waxay ahaan kartaa ula kac iyo/ama mid aan ula kac ahayn. Aadaab darrada aan lagu talogelin waxay dhici kartaa marka aan la aqoonin sharciyada la cuskada, marka qalad laga fahmo sharuudaha koorsada ama tilmaamaha shaqada loo diro, ama leysu diyaarinin. Waxaa muhiim ah in la xasuusto in aadaab darro kasta ee waxbarasho, ha ahaato ula kac ama aysan ahaanin ula kac, ay tahay jebinta Xeerka Asluubta Ardayga (Student Code of Conduct) iyo Xeerka Guddiga 5500. Dhammaan shaqada dugsiga loo soo gudbiyay ee ujeedadu tahay buuxinta shuruudaha koorsada waa inay ahaadaan shaqada asalka ah ee uu ardayga iskii u qabtay ama shaqada asalka ah ee koox arday ah si mashrruc kooxeed ahaan ah u qabteen. Waa ka mamnuuc arday kasta in uu si cadaalad darro ah u horumariyo waxqabadkiisa tacliimeed ama midka arday kale.

**31. Dabeecadda carqaladaynta**
Dabeecadda Carqaladaynta leh waxaa lagu qeexaa fal kasta oo carqaladeeya habsami u socodka hawlaha dugsiga waxaana ku jiri kara dhaqan ka baxsan kaamka dugsiga. Ardaygu waa inaanu ku dhaqaaqin akhlaaq khalkhal galinaysa jawiga waxbarasho ee habsamida leh ama dhacdo uu dugsigu maalgeliyo. Mamnuucidan waxaa ku jira ardayda caawiya, jooga, ama si kasta uga qaybqaata ku xadgudubka sharcigan.

**32. Isticmaalka Af-Xumada**
Istimaalka af-xumada, cayda ama luuqad kale oo aan habboonayn oo lagu hadlo, qoraal ama qaab elegrooniga ah, ama adeegsiga af-xumada, cayda ama ficillo/ishaaro kale oo aan habboonayn waa mamnuuc.

**33. Taabashada Aan La Oggolaan**
Ardaygu waa inaanu u taaban arday kale qaab ciyaar ama dagaal ah oo sababi karta dhaawac jireed ama maskaxeed. Ujeedadan awgeed, taabashada aan la ogolayn waxa ka mid noqon kara (laakin kuma koobna): riixida, tuurista, dharbaaxada ama garaacista, is qabsiga, ciyaar qaylo leh ama

qallafsan, ficilo aan macno lahayn, anshax xumo. Mamnuucidan waxaa ku jira ardayda caawiya, ag jooga, ama si kasta uga qaybqaata ku xadgudubka sharcigan.

**Raadinta/La Wareegidda**

Saraakiisha Dugsiga waxay tixgelin doonaa da'da ardayga, ujeedada iyo darnaashada jebinta la tuhunsan yahay marka laga fakaraayo ballaca iyo/ama gudo galka baaritaanka. Dhamaan raadinta waxaa loo fullin doonaa oo keliya ilaa ay sida macquulka ah ka yahiin lagama maarmaan si loo baaro jebinta la tuhunsan yahay ee loo geysto sharciyada ama nidaamka u dagsan dugsiga.

Saraakiisha dugsiga waxay baari karaan qofka, kana mid ah, balse kuma eka, in ardyaga uu dibadda u soo saaro jeebkisa ama jeebkeeda ama iska saaro kabaha, waxyaabaha qofka qaato, kana mid ah balse ku ekeen isgaarsiinta gaarka ah iyo qalabka lagu keydiyo meediyaha, lokarka, miiska iyo/ama baabuurka (inta baabuurka uu yaal hantida dugsiga) iyadoo aan la haysanin ruqsadda ardayga. Waa dhici kartaa in la qaado talaabada noocaas mar kasta saraakiisha dugsiga ay qabaa tuhun macquul ah in raadinta dhallin doonto jebinta sharciyada dugsiga, alaab la xadday ama shay ama maado ahaan karo sharci darro, halis ku ah ardayga ama dadka kale, ama carqalaheeyo jawiga ammaanka iyo nidaamka jawiga ka jiro dugsiga. In aan loola shaqeynin si macquul ah waxaa loo qaadan doonaa ammar diidid, waana jebinta Xeerka Dhaqanka Ardayga (Code of Student Conduct).

**Ciqaabta la Xariirta Jebinta Sharciyada Dugsiga**

Jebinta uu ardayga u geysto mid ama ka badan Xeerka Asluubta Ardayga (Code of Student Conduct) waxay dhallin doontaa talaabo dishibiliin. Diiwaanka talaabada dishibiliinka waxaa lagu hayn doonaa dugsiga la tago. Afka iyo/ama canaan qoran; luminta ruqsadda meesha baabuurka la dhigto; luminta shattiga wadaha; xabsi; dishibiliinka dugsiga kaddib; tafashiisha shaqada; adeegga bulshada; la wareegidda waxyaabaha aan ku habbooneen dugsiga; luminta manhajka iyo/ama axsaanka hawsha ka baxsan manhajka; luminta boosaska hoggaaminta; luminta axsaanka in la tago ama laga qeybgalo shirarka, feestada/xafladaha; xafladaha qalin jebinta; luminta buundada waxbarashada (darajooyinka); luminta abaal marrinta, warqadaha, ama aqoonsiga; brograamka leexinta; xarunta waxbarashada kale; ka joojinta dibadda dugsiga; ka saaridda degdegga; la xariirinta faragelinta; saaridda, ka reebidda joogtada iyo/ama la xariirinta madaxda sharciga ku habboon.

Ardayda jebisa sharciyada dugsiga waxaa la siin doonaa ciqaab kala duwan sida ku sifeysan Xeerka Asluubta iyo saraakiisha dugsigana u arkaan in uu habboon yahay. Rabitaanka ciqaabta waa in la hagaajiyo dabeecadda ardayda.

**Disshibiliinka Ardayda Itaalka Darran**

Hababka loo joojiyo iyo loo saaro ardayda itaalka darran in aysan tagin iyo ka-qeybgelin hawlaha manhajka iyo kuwa ka baxsan manhajka waa la raaci doonaa sida waafaqsan Sharciga Horumarinta Waxbarashada Dadka Itaalka Darran (Individuals with Disabilities Education Improvement Act) ee 2004 Qeybta 504 ee Sharciga Dayac Tirka (Rehabilitation Act ee 1973, Xeerka la Baddalay Ohio (Ohio Revised Code), iyo Heerarka ay ku Shaqeyaan Wakaaladaha Waxbarashada Ohio (Operating Standards for Ohio Educational Agencies 2008) ee u adeega Caruurta Itaalka Darran (Children with Disabilities), la baddaly 2014, Sharciyada (3301-51-01 ilaa 3301-51-09 iyo 3301-51-11 ee Xeerka Maamulka (Administrative Code (Ohio Administrative Code)).

**Ciqaabta Guddiga Sifeeyo**

**Walxaha Tubaakada**

Talaabadaha dishibiliinka ee la xariira hirgelinta siyaasaddaan waa lagama maarmaan si loo horumariyo loona socodsiiyo jawi caafimaad qaba, ammaan ah iyo dugsi ka madax banaan tubaako. Hirgelinta siyaasaddaan ay shaqaalaha fulliyaan waa in ay waafaqsan tahay iyo xaq tahay lana fahmo kala duwanaanta horumarka ka dhexeeyo ardayda dugsiga hoose, dhexe iyo sare. Sidaas darteed, sida waafaqsan ORC 3313.751 (D) hoow waxaa ku qoran jebinta talaabadaha dishibiliinka soo socdo ee la xariira jebinta siyaasaddaan xagga cabidda sigaarka ama isticmaalka ama haysashada walxaha tubaakada, K-12.

| | |
|---|---|
| GAFKA KOWAAD | Ilaa 2 Maalin OSS, Sii ardayga macluumaadka ku saabsan barnaamijyada wax ka ogaanshaha tubaakada ee caddaynta ku salaysan ee la heli karo (tusaale waxaa ka mid ah INDEPTH ama Healthy Futures), sii ardayga macluumaadka ku saabsan barnaamijyada tubaako joojinta qiimaha jaban ama bilaashka ah iyo agabka, oo ay ku jiraan barnaamijyada laga bixiyo Waaxda Caafimaadka ee Ohio (My Life, My Quit, ama Khadka Joojinta Tubaakada ee Ohio (Ohio Tobacco Quit Line)), ama barnaamijyo kale oo qaran ahaan loo aqoonsan yahay ee joojinta tubaakada. |
| GAFKA LABAAD | Ilaa 5 Maalin OSS, ka qaybgalka ardayga ee barnaamijka wax ka ogaanshaha tubaakada ee caddaynta ku salaysan (tusaale waxaa ka mid ah INDEPTH, Futures Healthy, ama Vape Education), heshiis u dhexeeya ardayga iyo qofka shaqaalaha ah ee loo xilsaaray ee ku saabsan sida dhamaystirka wax ka ogaanshaha tubaakada loo xaqiijin doono ama loo diiwaan galin doono, in la siiyo ardayga macluumaadka ku saabsan barnaamijyada joojinta tubaakada ee qiimaha jaban iyo bilaashaka ah iyo agabyo, oo ay ku jiraan barnaamijyada laga bixiyo Waaxda Caafimaadka Ohio (Noloshayda, Joojinta, ama Khadka Joojinta Tubaakada Ohio), ama barnaamijyada kale ee qaran ahaan loo aqoonsan yahay joojinta tubaakada. |
| GAFKA SADDAXAAD | Ilaa 10 Maalin OSS, kulan anshaxeed taageero ah oo u dhexeeya ardayga, waalidkood ama daryeelaha, iyo kuwan soo socda: maamulaha ama xubin ka mid ah shaqaalaha anshax-marinta ardayda, ama xubin shaqaale ah (sida kalkaalisada dugsiga, la-taliyaha dugsiga ama xubin ka tirsan shaqaalaha xarunta caafimaadka ee dugsiga ku salaysan), ka qaybgalka ardayga ee barnaamijka wax ka ogaanshaha tubaakada ee caddaynta ku salaysan (tusaale waxa ka mid ah INDEPTH, Futures Healthy, ama Vape Education), sii ardayda macluumaadka ku saabsan barnaamijyada joojinta tubaakada ee bilaashka ah ama |

| | |
|---|---|
| | qiimaah jaban ee la heli karo iyo agabyada, oo ay ku jiraan barnaamijyada laga bixiyo Waaxda Caafimaadka Ohio (My Life, My Quit, or the Ohio Tobacco Quit Line (Khadka Joojinta Tubaakada Ohio)), ama barnaamijyo kale oo qaran ahaan loo aqoonsan yahay ee joojinta tubaakada. |

OSS = Xanibaadda Dibadda-ka-ah Dugsiga (OSS, Out of School Suspension)

**Mukhadaraadka marka laga reebo Tubaakada**

Haddii ardayga uu hasysto, qarsado, ama iibiyo, ama dabeecadda loo aqoonsado in ay la xariirto, isticmaalka sharci darrada ama sida xun ee loo isticmaalo mukhadaraadka, qamrada (kana mid ah cabbitaanka laga helo qiyaas la cabbiri karo qamro sida, balse kuma eka, "near beer" ama dawooyinka laga iibsado miiska) ama maado la aaminsan yahay in ay tahay ama loo mattalo sida kiimiko baddasha niyadda, ama maado lagu sakhraamo ama baddasha niyadda, qalabka loo adeegsado mukhadaraadka ama qalabka sida tuboyinka, biraha loo dhigo baranbarada, cirbadaha, cirbadaha leysku duro, warqadaha lagu duubo, qaadooyinka cocaine, qalabka, ama shay kasta oo caadi ahaan ama dhab ahaan loo adeegsado baako gelinta, bixinta ama isticmaalka mukhadaraadka sharci darrada, ardayga waa laga joojin doonaa dugsiga ilaa muddo iyo/ama waxaa lagu tallin doonaa in laga saaro dugsiga sida u hoggaansan hababka sida waafaqsan sharciga iyo Xeerka Asluubta Ardayga #10 iyo #11. Falalka dishibiliinka waxay u socon doonaan sida soo socoto:

**Gafka 1aad** – 10 maalin oo dibadda laga joogo dugsiga (loo yareyay shan (5) haddii ardayga ka qeybgalo qiimeyn iyo qorshaha faragelinta la socdo sida u qoro aqoonyaan ku hawlan caafimaadka/daweynta madaxa.)

**Gafka 2aad** – 10 maalin uu dibadda ka yahay dugsiga (laguna talliyo in laga saaro dugsiga)
Marka la haysto si loo iibiyo ama si loo gudbiyo mukhadaraadka sharci darrada ama qalabka mukhadaraadka ama maado la aaminsan yahay in uu yahay ama loo mattalo sida mukhadaraadka, agaasimaha ama qofka mattalo wuxuu kula tallin doonaa ardayga soo gudbiyay ama ku talo jiray in uu gudbiyo qoraalada noocaas in laga saaro dugsiga marka kowaad uu geysto gaf.

Haddii la ogaad in ardayga uu haaysto ama kantaroolo mukhadaraad sharci darro ah ama maado la aaminsan yahay in ay tahay ama loo soo bandhigo sida kiimiko baddasha niyadda, maado lagu sakhraamo ama baddasha niyadda, iyo/ama isla waxyaabahaas u gudbiyay dadka kale, waxaa dhici karto in la ogeysiiyo saraakiisha hirgelinta sharciga lagana codsado in ay ka qaadaan talaabo ku habboon. Waxaa lagu dadaali doonaa in la ogeysiiyo waalidiinta/ilaaliyeyaasha ujeedada dugsiga ka leeyahay in uu ogeysiiyo saraakiisha iyo in uu waalidka (waalidiinta)/ilaaliyaha (ilaaliyeyaasha) siiyo fursad ay ku yimaadaan marka saraakiisha hirgelinta sharciga wareystaan ardaygooda.

**Ciqaabta Dugsiga**

**Adeegga Bulshada**

Si loo ogaado haddii loo baahan yahay ama in la saaro adeegga bulshada sida fursad la siiyo ardayga lagu helo in uu jebiyay Xeerka Asluubta Ardayga (Code of Student Conduct), iyo hadii ay sidaas tahay, nooca iyo mudada uu socon doono adeegga bulshada in la bixiyo ama la saaro, Maamulaha ama qofka Maamulaha u magacaabo wuxuu tixgelin doonaa daruufaha uu ku sugan yahay ardayga, nooca iyo sida ay u darran tahay jebinta Xeerka Asluubta (Code of Conduct) uu geystay ardayga, iyo haddii ay jiraan qodobo ka sii darra ama yareeya. Maamulaha ama qofka Maamulaha magacaabo wuxuu qasbi karaa, hadba sida uu u garto, shardiga adeegga bulshada baddalkii uu dalban lahaa ka-joojin ilaa muddo ama ka-saarid. Maamulahaama qofka mattala Maamulaha wuxuu la shaqeyn doonaa waalidiinta/ ilaaliyeyaasha/ardayda si loo aqoonsado goobta adeegga bulshada. Adeegga bulshada ma aha in la

fulliyo maalinimada dugsiga.

**Xabsiga Ardayda**
Lama ogola in ardayga loo diido qado, ciqaab ahaan. Xabsiga macquulka, dhamaadka maalin dugsiyeedka ma aha mamnuuc, hase ahatee xabsiga noocaas kama badan karo soddon (30) daqiiqo xagga ardayda dugsiga hoose, afartan iyo shan (45) daqiiqo xagga ardayda dugsiyada dhexe iyo hal (1) saac xagga ardayda dugsiyada sare. Haddii la xero arday ku sugan dugsiga hoose dhamaadka maalinta, waalidiinta/ilaaliyeyaasha horay ayaa loo ogeysiin doonaa. Arday kasta ee lagu qaado baska dugsiga waa in uusan gaffin baska, xabsiga noocaas awgeed, marka laga reebo ogeysiis hore oo la siiyo waalidiinta/ilaaliyeyaasha.

**Dishibiliinka Dugsiga Kaddib**
Ardayda hoos yimaada talaabo dishibiliin wax lagu qori doonaa dishibiliinka dugsiga kaddib. Ardayda waxaa laga rabaa in ay la yimaadaan buugaagta loo baahan yahay iyo waxyaabaha loo adeegsado waxbarashada. Waalidiinta/Ilaaliyeyaasha waa in ay qaataan mas'uuliyadda la xariirta dhamaan gaadiidka. Agaasimaha dhismaha/qofka loo magacaabay wuxuu isticmaali doonaa garashadiisa/garashadeeda marka la rabo in go'aan laga gaaro maalmaha iyo waqtiyada dishibiliinka dugsiga kaddib.

**Ka Saaridda Degdegga**
"Saaridda Degdegga" ("Emergency Removal") waxaa loola jeedaa marka ardayga laga saaro hawlaha ku manhajka ama kuwa ka baxsan manhajka haddii la ogaado in ardayga uu halis joogta ah ku naftiisa, dadka kale ama hantida ama cabsi geliyo carqaladeynta hawsha waxbarashada iyo/ama munaasabadaha laga yahay mas'uul.

**Luminta Axsaanka Hawsha Ka Baxsan Manhajka**
"Luminta Axsaanka Hawsha Ka Baxsan Manhajka" waxaa loola jeedaa ka reebidda qaar ama dhamaan hawlaha ka baxsan manhajka uu ardayga ka qeybgalo ama xaq u leeyahay in uu ka qeybgalo haddii wax kale la sheegin. Ka saaridda hawl gaar ah waa guud waxana lagu dabaqaa dhaqanka, ku celcelinta, safarada dibadda, tartanka, iyo dhamaan hawlaha kale ee la xariira hawsha ka baxsan manhajka taasoo hoos timaada Qeybta IV Xeerka Asluubta Ardayda ka Qeybgasha Hawlaha Ka Baxsan Manhajka (Code of Conduct for Students Participating in Extracurricular Activities).

**Fursadda Faragelinta Waalidka**
Xaaladaha noocaas marka ardayga ku celceliyo jebinta Xeerka Asluubta Ardayga (Code of Student Conduct) Maamulaha ama qofka Maamulaha magacaabo wuxuu baddali karaa ka joojinta /ka saaridda haddii waalidka/ilaaliyaha ka qeybgalaan brograamka faragelinta sida, balse kuma eka, fasalada waalidnimada, la tallinta qoyska iyo/ama dishibiliinka dugsiga kaddib.

**Xarunta Waxbarashada Kale**
Xarunta Barashada Kale (ALC, Alternative Learning Center) waa fursad meeleyn waxbarasho, marka ay habboon tahay, bixiso talo kale oo baddasha ka joojinta dugsiga ilaa muddo. Meeleyntaan waxay ardayga siin doontaa fursad uu ku tago dugsiga iyo in uu qaato buundada 100% shaaqada uu qabtay, inta uu ardayga wax ku baraayo jawi waxbarasho la kantarool, oo ka baxsan jawiga waxbarashada caadiga. ALC waa xarun waxbarasho ay macalimiinta iyo maamuleyaasha u isticmaali karaan sida qalabka baddala dabeecadda oo loogu talogalay ardaydena.

**Joojinta**
Dhamaan ka-joojinta waxay hoos yimaadaan awoodda Xeerka la Baddalay Ohio (Ohio Revised Code) Qeybta 3313.66 taasoo ilaalisa habka ka-joojinta ilaa muddo iyo saaridda loo geysto ardayda dugsiyada dadweynaha. "Ka joojinta" waxaa lagu sifeyaa sida dugsiga oo si ku meel gaar ah looga reebo ardayga kana mid ah hawlaha manhajka iyo hawlaha ka baxsan manhajka muddo aan ka badneen toban (10) maalin dugsiyeed. Haddii in ka yar toban (10) maalin ka harto sannad dugsiyeedka, cunugga, todobaadka kowaad ee buuxa nasashada kuleylaha, waxaa dhici karto in laga dalbado in uu ka qeybgalo brograamka adeegga bulshada ama ciqaab kale muudo saacado la'eg qeybta ka hartay muddada ka joojinta. Ardayda waxay shaqeysan doonaan 100% dhibcaha la shaqeystay shaqada la siiyo shaqada

darajada inta ay ku sugan yahiin ka-joojinta oo ay ku jiraan samastarka/imtixanaadka ugu dambeeyo ama mashariicda, la siin doono buund buuxdo.

**Saaridda**

Dhamaan ka-joojinta waxaa la samayay sida hoos timaada Xeerka La Baddalay Ohio (Ohio Revised Code) Qeybta 3313.66 ee laga helo ammaanka hababka loogu talogalay laga saaro dugsiyada dadweynaha. "Saaridda" ("Expulsion") waxaa lagu sifeyaa ardayga oo laga saaro dugsiga kana mid ah hawlaha manhajka ama kuwa ka baxsan manhajka muudo ka badan toban (10) maalin dugsiyeed iyo gudaha inta ugu badan uu dajiyay Xeerka La Baddalay Ohio (Ohio Revised Code). Ardayga lama siin doono buundo xagga shaqada uu gaffo inta uu ku maqan yahay xaaladda ka-saaridda.

Maamulaha wuxuu joojin ku soo rogi karaa ama ka saari karaa ardayga:

a. Marka aadaab darrada ka dhacdo dibadda hantida ay leedahay ama kantaroosho dagmada balse la xariirto hawlaha ama dhacdooyinka ka dhacay hantida ay leedahay ama kantaroosho dagmada; iyo

b. Aadaab darrada, iyadoo aan la fiirinin meesha ay ka dhacday, waxay ku beegan tahay sarkaalka dagmada ama shaqaalaha ama hantida sarkaalka noocaas ama shaqaalaha.

**Jebinta Dugsiga/Talooyinka la xariira Saaridda**

Hoos waxaa ku qoran jebinta laga yaabo in loo arko in ay yahiin kuwo culus oo u qalma in talo ahaan la soo jeediyo in laga saaro dugsiga. Liiskaan ma mattalo liis gaar ah oo soo taxa dhamaan aadaab darrada laga yaabo in loo baahdo tallada ka-saaridda. Jebinta soo soocda tusaalooyin ku saabsan aadaab darrada laga yaabo in tallo loo soo jeediyo Maamulaha in uu ardayga dibadda u saaro. Ka reebidaan waxaa ka mid ah ardayda kaalmeysa, oo jooga, ama si kastaba ha ahaato ka qeybgala jebinta sharcigaan.

1. Jebinta yaryar ee lagu celceliyo oo ardayga horay looga reebay muddo toban iyo shan (15) oo leysku darray ama ka badan.
2. Ula kaca burburinta ama jejebinta hantida dugsiga ama hantida dadka kale oo ku sugan xerada dugsiga ama ka baxsan.
3. Gudbinta, iibinta, ama iskudayidda gudbinta mukhadaraad sharci darro ah/waxyeelo leh, cabbitaan, kiimiko ama maado oo baddasho niyadda oo loo soo bandhigo sida kiimiko baddasha niyadda.
4. Ula kaca weerarka jirka uu geysto macalinka, maamulaha ama shaqaalae kale ee ka tirsan shaqaalaha dugsiga.
5. Ku celcelinta jebinta sharciyada mukhadaraadka waxyeelada leh iyo cabbitaanka qamrada
6. Cabsi gelinta la xariirta hubka ama qalabka qarxa.
7. Bilaabid ula kac ah ama ka qeybgalka nooc kasta oo ah digniin ama cabsi gelin been ah lana xariirta caafimaadka iyo/ama ammaanka ardayda ama shaqaalaha.
8. Fal kasta oo lagu talogalay in dab ama dab aan la fasixin la shido.
9. Haysashada iyo/ama gudbinta shay kasta loo qaadan karo hub halis ah.
10. Jebinta sharci kasta hab cabsi gelin la taaban karo gaarsiin karta caafimaadka ama ammaanka ardayga, shaqaalaha ama qofka ku shaqeeyo iskaa wax u qabso.
11. Xoog ahaan kara dambi haddii uu geysto qof qaangaar ah; wuxuuna dhalliyaa waxyeelo soo gaara jirka qofka (dadka) ama hantida.

**Ka Saaridda Muddo Hal Sanno Kalendar**

**Hubka**

Ardayga dugsiga ku haysta hub xabad ka dhacdo; hanti kale uu leeyahay ama kantaroolo Guddiga Waxbarashada; ama iyadoo aan la fiirinin goobta, tartanka ka dhexeeyo dugsiyada, munaasabad ka baxsan dugsiga, ama brograam kasta oo ka jira dugsiga ama hawl, hubkaasna horay loo keenay dugsiga, hantida, ama tartanka, munaasabadda, brograamka ama hawsha uu wado qof kale, waxaa dhici karto in Maamulaha uu ka saaro dugsiga muddo hal sanno kalendar.

**Middiyada**
Ardayga dugsiga ku haysto middi; ama hanti kale uu leeyahay ama kantaroolo Guddiga Waxbarashada; ama iyadoo aan la fiirinin goobta, tartan ka dhexeeyo dugsiga, munaasabad ka baxsan manhajka, ama brograam kale oo ka jira dugsiga ama hawl, middi horay loo keenay dugsiga, hantida, ama tartanka, munaasabadda, brograamka ama hawsha uu haayo qof kale, waxaa dhici karto in Maamulaha uu ka saaro dugsiga muddo hal sanno kalendar.

**Falalka waxyeelada culus gaarsiiya dadka iyo hantida**
Ardayga geysta fal dambi ah marka uu geysto qof qaangaaray oo waxyeelo culus gaarsiiyo dadka ama hantida, sida ku sifeysan XEERKA LA BADDALY EE OHIO (OHIO REVISED CODE) 2901.01, inta ardayga uu ku sugan yahay dugsiga; ku sugan yahay hantid kale uu leeyahay ama kantaroolo Guddiga Waxbarashada, ama ku sugan yahay tartan ka dhexeeyo dugsiyada, munaasabo ka baxsan manhajka, ama brograam kasta oo ka jira dugsiga, waxaa dhici karto in Maamulaha uu ka saaro dugsiga muudo hal sanno kalendar.

**Cabsi Gelinta Bambka**
Ardayga cabsi gelinta bambka u geysto dhismaha dugsiga ama xero kasta oo laga fulliyo hawsha dugsiga, waxaa dhici karto in uu Maamulaha ka saaro dugsiga muddo hal sanno kalendar.

**Ka-saaridda Joogtada ah**
"Ka-saaridda joogtada ah" waxaa loola jeedaa ardayga laga mamnuucay abid in uu tago dugsiga dadweynaha ee ku yaal Gobolka Ohio. Waxaa dhici karto in Guddiga Waxbarashada (Board of Education) raadsado in xayiraad joogto ah lagu sameeyo ardayga jira toban iyo lex (16) sanno ama ka weyn, ee lagu xakumo in uu geystay ama lagu xakumo in uu yahay cunug geystay mid ama ka badan falalka soo socdo:

1. Gudbinta ama iskudayidda in la gudbiyo hub dillaa ah ama halis ah ama waxyaabaha qarxa in la keeno hantida dugsiga ama xafladda dugsiga taasoo jebisa Xeerka La Baddalay Ohio (Ohio Revised Code) Qeybta 2923.122:
2. Haysashada hubka dillaaga ama halista hubka waweyn oo lagu haysto hantida dugsiga ama munaasabada dugsiga taasoo jebisa Xeerka la Baddalay Ohio Qeybta 2923.122;
3. Qaadashada hub gudaha hantida dugsiga ama munaasabo dugsiga soo diyaariya, taasoo jebineyso Qeybta Xeerka la Baddalay ee Ohio 2923.122;
4. Si la ogsoon yahay shay lagu haysto hantida dugsiga ama xafladda uu dugsiga abaabulay aan laga aqoonsan karin hub (iyadoo aan la fiirinin haddii shayga uu awood u leeyahay in xabad lag rido) taasoo muujisa in ardayga leeyahay shayga iyo in shayga yahay hub, ama ogsooni lagu muuji ama la lulo shayga taasoo muujisa in shayga yahay hub, taasoo jebisa Xeerka la Baddalay Ohio Qeybta 2923.122
5. Beec mushtarka ama ka beec mushtarka darran ee la xariira mukhadaraadka ama iibinta maadada la yo ama kantaroolo inta lagu sugan yahay hantida dugsiga ama xaflad uu soo abaabuay dugsiga taasoo jebisa Xeerka La Baddalay ee Ohio Qeybta 2925.03;
6. Dilka, dilka xun, dilka lagu talogalay, ama dilka aan lagu talogelin marka lagu sugan yahay hantida dugsiga ama la joogo xafladda dugsiga taasoo jebisa Xeerka La Baddalay Ohio Qeybaha 2903.01, 2903.02, 2903.03, ama 2903.04;
7. Weerarka culus ama weerarka darran ee ka dhaca xerada dugsiga ama munaasabo uu dugsiga diyaariyay, taasoo jebisa Sharciga La Baddalay ee Ohio, Qeybta 2903.11 ama 2903.12;
8. Kufsiga, qasabka jinisga, ama dambiga galmada culus ee laga fulliyo hantida dugsiga, munaasaadda dugsiga, ama marka dhibanaha ka tirsan yahay shaqaalaha dugsiga taasoo jebisa Xeerka La Baddallay Ohio Qeybaha 2907.02, 2907.05, 2907.12;
9. Haysashada mukhaadaraadka inta lagu sugan yahay hantida dugsiga ama munaasabo uu mas'uul ka yahay dugsiga taasoo jebisa Xeerka La Baddalay Ohio Qeybta 2925.11, haddii jebinta noocaas ay tahay gaf yar mooye sida hoos timaado qodobkaas.

**<u>Daruufaha Khaaska ee loogu talogalay Ardayda Itaalka Darran</u>**
Ardayda itaalka darran ee geysta fal ku lug leh hub, mukhadaraad, ama dhaawac culus oo ku yimaada

jirka (sida ku sifeysan hoos) waxaa dhici karto in la geeyo meel kale oo ku meel gaar ah oo wax lagu barto. Xattaa haddii dabeecadda ardayga loo arko in ay tahay mid muujiso itaal darridiisa ama itaal darrideed, saaridda waxay ahaan kartaa ilaa afartan iyo shan (45) maalin dugsiyeed. Haddii dabeecadda la ogaado in aysan ahayn muujin la xariirto itaal darrida ardayga, waxaa dhici karto in ardayga la mariyo dishibiliin isla sida arday caadi ah xagga waxbarashada.

Erayga "dhaawaca culus ee soo gaara jirka" waxaa loola jeedaa dhaawaca jirka sida:

1. Halis la taaban karo oo ku saabsan dhimashada;
2. Xanuun aad u badan oo ku dhaca jirka;
3. Jejebin muddo dheer socda oo la arki karo; ama
4. Muddo dheer ee la lumiyo ama naafonimada hawsha ay qabato xubin ka tirsan jirka, xubin, ama awoodda madaxa.

18 U.S.C. 1365(h)(3)

**<u>Agagaarka Ammaanka Dugsiga</u>**

Xeerka Asluubta Ardayga (Code of Student Conduct) wuxuu xakumaa dabeecadda ardayga mar kasta, ha ka dhacdo ama ku dhawaato xerada dugsiga, inta uu la socdo gaadiidka dugsiga, inta ay socdaan hawlaha ka baxsan manhajka goob kasta iyo mar kasta inta lagu jiro safarada la xariira dugsiga. Xeerka Dambiga (Criminal Code) 2901.01(C) wuxuu “agagaarka ammaanka dugsiga" sida dhismaha dugsiga, xerada dugsiga, hawsha dugsiga, baska dugsiga iyo meelaha u dhaw dugsiga. Ka reebidaan waxaa ka mid ah ardayda kaalmeysa, oo jooga, ama si kastaba ha ahaato ka qeybgala jebinta sharcigaan.

Guddiga ma u dul qaadan doonto dabeecadda dagaalka, carqaladeynta ama aan habbooneyn ay ardayda ku kacaan iyo in dabeecadda noocaas la mamnuucay sida ku qoran Xeerka Asluubta Ardayga.

**Hubka Halista**

Lama ogola in ardayga uu haysto, keydsado, samaysto, qaado, gudbiyo, qariyo ama iskudayo in uu haysto, qaado, gudbiyo ama qariyo hub halis ah, xabad, middi, waxyaabaha qarxo ama qalab halis ah, ama u "muuqd sida hub been abuur ah", xabad, middi, waxyaabaha qarxa ama qalab halis ah. Hubka "la midka ah", hubka xabadda ka dhacdo, middiyada, waxyaabaha qarxa, ama qalabka waxaa ka mid ah, balse kuma eka, shay kasta uu qofka macquulka ah ka fakaro sida hoos timaado xaaladaha hubka halista, hubka xabadda ka dhacdo, middida, waxyaabaha qarxa ama qalabka halista.

Ma aha in waxa ku qoran qodobkaa loo qaato, mana ka saari karto meesha Maamulaha in uu joojiyo, dibadda u saaro ama ka saaro ardaysida waafaqsan sharciga Ohio maxaa yeelay wuxuu haystaa, sameyaa, gudbiyaa, ama qariyaa hub, waxyaabaha qarxo, ama qalab kale oo halis ah gudaha ammaanka dugsiga aan halkaan weli lagu sifeynin.

**Walaaltinimada/Walaalaha Gabdhaha/Hawsha Burcadda**

Waa maamnuuc ka tirsanaanta ama ka qeybgalka urur ama hawlaha walaaltinimada, gabdhaha walaalaha, ama koox kale oo qarsoodi ah sida sharciga sharaxay Dugsiga Dagmada oo idil. Gaar ahaan, Guddiga ma u dul qaadan doonto nooc kasta oo burcadnimo ah ama hawl la xariirto burcadnimo in ay ka dhacdo hantida Dagmada ama inta ardayda ay hoos yimaadaan Guddiga.

Ardayga ma geysan karo fal kasta/dabeecad, afka ama aan afka laga soo jeedinin (tusaale, balse kuma eka, baaq, gacan salaan, labbis) uu arday kasta ama shaqaale ka tirsan dugsiga u arki karo sida caddeyn ka tirsanaan ama raacid koox burcad ah. Lama ogola in ardayga uu fulliyo fal, ha ahaato mid laga sheego ama mid aan laga sheegin, si uu u taageero maslaxadda burcad ama mid burcad la xariirta, balse ku ekeen: (1) dadka kale oo laga dalbado in ay xubin ka noqdaan burcadda ama hawlaha burcadda la xariira; (2) in qof kasta laga codsado in uu bixiyo kharash si uu u helo badbaadin ama in qofka la cabsi geliyo ama la handado. Erayga "burcad", sida loo isticmaalo siyaasadda, waxaa loola jeedaa koox ka kooban labo (2) qof ama ka badan oo ujeedooyinkooda ama hawlahooda ka mid yahiin fullinta falal sharci darro ah ama jebinta sharciyada u dagsan dugsiga dagmada ama siyaasadaha.

**Gaadiidka Dugsiga**
Joogitaanka dad ama baabuur aan loo fasixin dhulka ama xerada Dugsiga Dagmada Westerville LAMA ogola. Gelitaanka aan la ogoleyn waxay ahaan kartaa ku-xadgudubka dambiga, dambi hoose (misdemeanor) sida hoos timaada Qeybta 2911.21, Xeerka la Baddalay Ohio (Ohio Revised Code), iyo Qeybta 509.05, Ammarada la Sharciyeyay ee ka soo baxa Magaalada Westerville. (O.R.C 3313.20; O.R.C.2911.21; Magaalada Westerville, Ammarada La Habbeyay 509.05)

**Dhaqanka Ardayga inta uu saaran yahay Gawaarida Dugsiga**
Gaadiidka waa adeeg uu bixiyo Guddiga Waxbarashada Westerville, waa in loo tixgeliyo sida axsaan ay qaataan ardayda iyo waalidiintooda/ilaaliyeyaashooda. Kuwa raaca gawaarida dugsiga waxay u dhaqmi doonaansida waafaqsan sharciyada la soo dhajiyay iyo Xeerka Asluubta Ardayga mar kasta.

Ardayda dugsiga sare iyo dugsiga dhexe waa in ay tusaaan teesaraha aqoonsiga dugsiga marka la weydiiyo. In aan la bixinin teesaraha aqoonsiga la codsaday waxay dhallin kartaa in la lumiyo axsaanka gaadiidka.

**Mas'uuliyadda Saaran Ardayda**
Ardayda waxaa laga filayaa in ay:

a. U dhaqmaan hab wanaagsan mar kasta inta ay saaran yihiin gaariga dugsiga
b. Raacaan soo jeedinta ama tilmaamaha wadaha.
c. Ka raacaan oo kaga dagaan meesha joogsiga loogu talogalay. Joogsi kasta oo loo qabto, ardayda waxaa dhinaca guriga looga qaban doonaa meel ammaan ah. Ardayda ma aha in ay sii aadaan gurigooda ilaa baska dugsiga ka dhaqaaqo.
d. Isticmaalaan joogsiga loo baahan yahay ee loo qoondeeyay. Haddii la baddelo goobta joogsiga ama loo baahdo in la baddalo meesha loo socdo, waa in la soo bandhigo warqad saxiixan oo ka socoto waalidka/ilaaliyaha iyo maamulaha kaddibna uu soo ogolaado wakiil ka tirsan gaadiidka.
e. Joogteeyaan aamusnaan buuxdo meelaha laga gudbo waddada tareenka iyo meelaha kale ay khatarta ka jirto sida uu faro waddaha.
f. Isla markiiba aadaan gaariga dugsiga marka lagaa fasaxo dugsiga.
g. Warqad ka soo qaataan waalidka ama ilaaliyaha kaddibna laga saxiixo agaasimaha ama qofka uu magacaabay haddii loo baahdo in ardayda ka daggaan gaariga dugsiga meel ka duwan joogsigooda caadiga ah.
h. Sharciyada Ammaanka iyo Hawlaha Gaadiidka Cunugga ODE (ODE Pupil Transportation Operation and Safety Rules) OAC 3301-83-08(C) (12) wuxuu leeyahay in “ardayga la kori karaan gaariga dugsiga keliya waxyaabaha ay saaran karaan dhabtooda”.
i. Lama oggola looxa lagu taraaraxo, xoolaha iyo/ama xoolaha guri joogga, nooc kasta; dadka baahiyaha gaarka ah qaba waxaa loo oggol yahay in ay la socdaan xoolahooda la adeegsado.

**Mas'uuliyadda Waalidiinta/Ilaaliyeyaasha**
Waalidiinta waxaa laga filaa in ay:

1. Ahaw qof mas'uul ah si loo ilaaliyo ammaanka iyo disbibiliinka ardayda inta aad u socotid iyo meelaha laga soo qaado iyo meelaha gaariga dugsiga istaago.
2. Iska ilaali in aad gashid gaariga dugsiga ka hor inta aan lagu siinin ogolaasho.
3. In caruurta tagaan meesha gaariga dugsiga joogsado shan (5) daqiiqo ka hor waqtiga la soo qaado sida u qoran waaxdagaadiidka.
4. In ay lacag ahaan mas'uul ka yahiin burburka uu cunugga u geysto gaariga dugsiga.
5. Xushmee in shaqaalaha aan la weydiisanin in ay galaan muran u dhexeeyo waalidiinta/ilaaliyeyaasha iyo/ama ardayda ka hor inta aan la soo qaadin ama kaddib marka ay u soo noqdaan in ay qaataan dhibco.
6. Xushmee baahida uu wadaha u qabo in uu ahamiyadda siiyo wadidda iyo in uu ilaaliyo jadwalka. Fadlan ka joogso in aad dhibatooyinka gaariga dugsiga kala hadashid wadaha inta isaga/iyada ku socoto jidkeeda/jidkiisa. Tani waxay gadaal u dhigtaa jadwalka gaariga dusgsiga. Wac Waaxda Gaadiidka (Transportation Department), telefoonka 614-797-5950.

**Sharciyada Ammaanka Gaariga Dugsiga**

1. Ardayda waa in ay fadhiyaan mar kasta.
2. Lama ogola dagaalka/turunturada/riixidda ama falal kale oo dagaal ah waqti kasta (tani waxay kaloo tixraacdaa gardareysiga sida ku sharaxan qeybta 5517.01 - "GARDAREYSIGA IYO NOOYADA KALE DABEECADDA WEERARKA").
3. Lama ogolaan doono luqadda/fara taagga ceybta.
4. Marna looma dulqaadan doono dabeecadda aan habbooneyn.
5. Lama ogola in wax lagu tuuro gudaha ama dibadda gaariga dugsiga.
6. Lama ogola in wax lagu cunno gaariga dugsiga haddii aysan jirin sabab caafimaad.
7. Lama ogol qeylo ama qeylada xad dhaafka.
8. Sharaf darrada loo geysto dadka kale iyo/ama in aan la raacin tilmaamaha wadaha waxay dhallin doontaa dishibiliin.
9. Falalka kale ee qalqal geliya ammaanka ama dadka ama hantida waxay dhallin doonaan in la qaado dishibiliin.
10. Ardayda waa in ay mar kasta u hoggaansamaan Xeerka Asluubta Ardayda (Code of Student Conduct).

**Sharciyada Lagu Soo Dhajiyay Dhamaan Gawaarida Dugsiga**

**"HA LUMININ AXSAANKA RAACIDDA"**

- Ilaali aadaabtaas sida marka aad ku sugan tahay gudaha fasalka.
- Ilaali sharafta, ha isticmaalin af xumo.
- Waxba ha ku cunin hana ku cabbin baska.
- Fadlan nadiifi gaariga dugsiga.
- La shaqeey wadaha.
- Ha cabbin sigaar/uumi.
- Ha noqonin qof wax burburiya.
- Ha iska qaadin sawiro/fiidiyowyo ama ha ka qaadin dad kale.
- Ha shiddin codka ku baxa samaacadaha dibadda.
- Joog kursigaada.
- Waxaad madaxa, gacmaha iyo cagaha ku haaysaa gudaha baska.
- Wadaha baska waxaa loo ogol yahay in uu ardayda u magacaabo kuraasta.

***Haddii dhacdo lagala kulmo gaariga dugsiga oo u baahan in ilaa muddo laga joojiyo dugsiga loona adeegsado Xeerka Asluubta Ardayga (Code of Student Conduct), Xeerka Asluubta Ardayga ayaa soo hormari doono, kaddibna ardayga waxaa laga joojin doonaa dugsiga.***

**Ka Joojinta/Ka Saaridda Gawaarida Dugsiga**

Aadaabta habboon gaariga dugsiga korkiisa waa muhiim maxaa yeelay waxaa jirta arrinta ammaanka ardayda kale iyo wadaha. Marka ardayga uusan soo bandhigin dabeecad ku habbon marka uu saaran yahay gaariga dugsiga, waxaa dhici karta in laga joojyo iyo/ama laga saaro gaariga taasoo ka dhallata dabeecad xumada. Ardayda doorata in ay jebiyaan sharciyada gaariga waxaa la siin doonaa Ogeysiiska Digniinta Dishibiliinka (Disciplinary Warning Notice). Koobiyada warbixinta waxaa loo qeybin doonaa dhamaan dhinacyada ku lugta leh iyo waxaa dhici karto in la joojiyo axsaanka raacidda gaariga dugsiga ardayga. Jebinta sii socoto sharciyada gaariga dugsiga waxay dhallin kartaa ka-saaridda gaariga. Shaqaalaha dugsiga waxay ku dadaali doonaan in ay badbaadiyaan xuquuqda ardayga iyaga oo adeegsada hababka sida sharciga qabo marka joojinta ama saaridda la adeegsado.

Ardayda wiyo waalidiinta ama ilaaliyeyaashooda waxay mas'uul ka noqon doonaan jejebinta, khasaarada, ama burburinta uu ardayga u geysto gaariga dugsiga. Waxaa loo baahan yahay kharashka ku baxa dib u hagaajinta dhamaystiran ee khasaarada.

**Baddalaadda Gaadiidka ama Meesha loo Socdo**

Haddii ay dhacdo in la baddalo gaadiidka ardayga ama meedha uu u socdo ardayga, waa in la soo diro

warqad ka socoto waalidiinta/ilaaliyeyaasha arday kasta oo ku lug leh oo ka hadasho isbaddalkaan iyo waa in uu soo ogolaado maamulaha dhismaha iyo wakiilka gaadiidka. Ruqsadda laga qaato isbaddaladaas waa in uu soo ogolaado gaadiidka, waa hadba sida loo helo boos.

Si aad u heshid wararkii ugu dambeyay ee ku saabsan dib u dhaca gaadiidka, wac 614-797-5950 ama booqo https://www.westerville.k12.oh.us/operations/departments/my-bus

# CAAFIMAADKA ARDAYDENA

**Dawooyinka - Dawooyinka la Siiyo Ardayda**
Waalidiinta waa in ay go'aan ka gaaraan la-tallinta uu u soo jeediyo qoraha ardayga haddii jadwalka daawada la habeyn karo si looga maarmo in daawada la siiyo saacadaha dugsiga.

Dugsiyada Magaalada Westerville ma iibsadaan ama ma bixiyaan acetaminophen, ibuprofen, ama dawooyinka kale aan la qorin ama dawooyinka la qoro lana siiyo ardayda. Qeybta Xeerka La Baddalay ee Ohio (Ohio Revised Code Section) 3313.713 wuxuu shaqaalaha ka rabaa in ay:

A. Waxaad ardayda siisaa dhamaan dawooyinka la soo qoray ama kuwa aan la soo qorin marka waalidiinta/ilaaliyeyaasha codsadaan in shaqaalaha dugsiga siiyaan dawooyinka noocaas. Si aad u codsatid in lagaa kaalmeeyo daawada, waalidka/ilaaliyaha waa in uu:

   1. Buuxiyaa foomka daweynta la xariiro ee ku habboon. Eegaa soo koobidda foomamka hoose. Dhamaan foomamka daawada waa in ay saxiixaan waalidka iyo bixiyaha daryeelka caafimaadka ee awoodda u leh in uu qoro.
   2. Waalidka/ilaaliyaha uu daawada toos u geeyo dugsiga ama adeegsado qof qaan-gaar ah oo mas'uul uu waalidka ka codsado. Tani waa in horay loo soo habeeyo.
   3. Dawooyinka waa in aad ku dhaaftid dhallo calaamad leh, oo lagu qoray taariikhda, magaca ardayga; iyo qiyaasta saxsan. (Waxaa dhici karto in farmashiyaha laga helo dhallo dheeraad ah loona isticmaalo sida daawada la qaato muddada dheer.) Haddii ay tahay daawo aan la soo qorin, waa in ay ku jirto weelka asalka.
   4. Ha geynin in ka badan labo ilaa afar (2-4) saadka dawooyinka todobaadka halkii mar;
   5. Keen oraah ay soo baddaleen waalidka/ilaaliyaha iyo bixiyaha daryeelka caafimaadka ee awoodda u leh in uu qoro daawada xagga isbaddalada la xariira qiyaasta loo baahan yahay in la siiyo; qoraal la baddalay oo ku qoran dhallada daawada ku jirto ayaa loo baahan yahay xagga dawooyinka la qoro.

B. Haddii aad dooneysid in cunugaada qaato qalabka lagu neefsado inta uu joog dugsiga, waxaa loo baahan yahay in bixiyaha daryeelka caafimaadka ee awoodda u leh in uu qoro daawo uu buuxiyo kaddibna adiga saxiixdid Foomka Ogolaashada Qalabka Neefta ee Qofka Isdaweeya" (“Self-Medication for Asthma Inhalers Authorization Form”) (Form 5330 F3).

C. Haddii aad dooneysid in cunugaada uu qaato Qalabka Daawo bixinta tooska ah ee Epinephrine (xagga xasaasiyadda ee nafta khatarta gelin karto) saacadaha dugsiga, Qorshaha Xasaasiyadda (Allergy Action Plan) uu Ardayga Haysto oo Isticmaalo Qalabka Daawo bixinta tooska ah ee Epinephrine (Foomka 5330F4 iyo Foomka 5335F1) waa in uu buuxiyo bixiyaha daryeelka caafimaadka ee awoodda u leh in uu qoro daawada kaddibna laga saxiixo waalidka/ilaaliyaha sida waafaqsan Xeerka la Baddalay ee Ohio (Ohio Revised Code) Qeybta 3313.718. Dugsiga waa in uu haysto qiyaas dheeraad ah Cirbadda Leysku Muddo ee loo Qaato Xasaasiyadda (Epinephrine Auto Injector). Haddii la isticmaalo qiyaas inta uu socdo dugsiga ama inta ay socoto hawsha dugsiga, waxaa la wici doonaa 911.

D. Haddii aad dooneysid in cunugaada uu naftiisa siiyo dawooyinka aan la soo qorin (laga iibsado miiska) dugsiga, waalidka ama ilaaliyaha waa in uu saxiixo Form 5330 F1a kaddibna la geliyo laguna haayo faylka caafimaadka ee yaal dugsiga. Ardaygu waa inuu si madax-bannaan u haystaa oo iskiis u cunaa daawada. Daawooyinka laguma kaydin karo rugta caafimaadka.

E. Haddii cunugaada u baahan doono Daryeelka Sokorowga (Diabetic Care), Foomka 5336 F1 ama foomamka bixiyaha kale iyo foomamka ogolaanshaha waalidka/masuulka ee WCS ee Foomka 5336 F2 ee laga yaabo in la beddelo, waa in uu buuxiyaa bixiye daryeel caafimaad oo leh awoodda daawo qoridda, oo uu saxiixo waalidka/masuulka. Kalkaaliyeyaasha dugsigu waxay qoysaska kala shaqayn doonaan inay hubiyaan in dhammaan foomamka lagama maarmaanka ah, oggolaanshaha, iyo amarada maaraynta sonkorowga la helo oo la dhammaystiro bilowga sannad-dugsiyeedka kasta iyo wixii isbeddello ah.  Guddiga Waxbarashada wuxuu ballan qaaday in uu hubiyo in arday kasta oo ku qoran Dagmada oo qaba sokorow helo daryeel sokorow ku habboon oo loo baahan yahay sida waafaqsan ammarka uu saxiixo takhasuslaha daweeya ardayga. Muddo toban iyo afar (14) maalin gudahooda, kaddib marka Dagmada qaadato ammar uu saxiixo takhasuslaha daweeyo ardayga, Guddiga wuxuu ogeysiin doonaa waalidka, mas'uulka, ama qof kale oo daryeelo ama masuul ka ardayga in laga yaabo in ardayga uu xaq u leeyahay Qorsha Qeybta (Section 504 Plan) ee ku saabsan sokorowga ardayga. Guddigu wuxuu isticmaali doonaa xaashida macluumaadka qorshaha 504 ee ay soo saartay Waaxda Waxbarashada Ohio si uu u bixiyo ogeysiin noocaas ah.

<u>**Soo Koobidda Foomamka La Xariira Daaweynta**</u> **-** Daawadu waxa kaliya oo laga heli karaa rugta caafimaadka, saacadaha waxbarashada. Foomamka iyo xirmooyinka daawaynta ee Neefta, Xasaasiyadda, Suuxdinta, iyo Sonkorowga waxa laga heli karaa kalkaalisada dugsigaaga, ama bogga intarneetka ee Dugsiyada Magaalada Westerville:
https://www.westerville.k12.oh.us/teaching-learning/programs-services/health-services

A. Codso in aad Siisid Wax la Isticmaalay sida Daawo la Qoray (5330 F1):
   1. Foomkaan wuxuu ogolaadaa in dawooyinka lagu keydiyo kliinikada dhismaha iyo in ay biyaan shaqaalaha dhismaha.
B. Oggolaashada in Ardayga uu Haysto iyo Isticmaalo Qalabka Neefta (Asthma Inhalers) (5330 F3):
   1. Foomkaan wuxuu u ogolaan doonaa ardayda in ay iyaga naftooda maamulaan qalabka lagu neefsado iyaga aan kaalmo ka helin shaqaalaha dugsiga.
C. Oggolaashada Haysashda iyo Isticmaalka Ardayga Qalabka Daawo bixinta tooska ah ee Epinephrine (5330 F4):
   1. Foomkaan wuxuu ardayda u ogol yahay in ay naftooda isa siiyaan daawada epinephrine ee loo qaato degdegga iyadoo aan kaalmo laga helin shaqaalaha dugsiga, balse sidoo kale u baahan qiyaas "keyd-ah" ("back-up") daawada epinephrine oo loo baahan yahay in lagu haayo kliinikada dugsiga.
   2. Foomka 5335 F41 waa in la soo raaciyo Foomka 5330 F4
D. Qorshaha Talaabada Laga Qaado Xasaasiyadda (Allergy Action Plan) (5335 F41):
   1. Foomkaan wuxuu u ogolaadaa oo siiyaa tilmaamo gaar ah Ku: Maamulidda Qalabka Daawo bixinta tooska ah ee Epinephrine oo uu siinayo shaqaalo ka tirsan dugsiga oo u tababaran siinta. Waxa laga yaabaa in lagu beddelo bixiye ku habboon Foomka Qorshaha Falka Xasaasiyadda.
E. Ruqsadda WCS xagga Daryeelka Sokorowga (5336 F1)
   1. Foomkaan wuxuu u ogolaadaa iyo wuxuu siiyaa tilmaamo gaar ah. Foomamka bixiyaha iyo foomka ogolaanshaha waalidka/masuulka ee WCS (5336 F2) waa la bedeli karaa.
F. Fadlan tixraac Siyaasadda 5330 kaddibna buuxi foomka 5330 F1a si loo helo hababka ku habboon Ardayga Naftiisa Isa Siiya daawada Miiska (Student Self Administration of Over-the-Counter).
   1. Foomka 5330 F1a waa foomka ka-dhaafidda, oo u oggolaanaya ardayda in ay 100% mas'uul iyo xor ka noqdaan maamulka daawada Laga Iibsado Miiska.
G. Oggolaanshaha Haysashada iyo Isticmaalka Dawooyinka Suuxdinta (5330 F5):
   1. Foomkaani waa inuu la socdaa Foomka Qorshe Hawleedka Suuxdinta ee la dhammaystiray ee ka socda bixiyaha. Foomka Qorshe Hawleedka Suuxdinta Degdegga ah ee guud ayaa laga heli karaa mareegta degmada WCS, haddii loo baahdo. Foomka 5330 F5 ayaa u baahan saxiixa bixiyaha daawada qoraya iyo saxiixa waalidka/masuulka si loogu oggolaado shaqaalaha dugsiga ee la qoondeeyay ay ardayga siiyaan daawada suuxdinta ayna ugu hayaan daawada suuxdinta dugsiga dhexdiisa, iyo/ama ardayga iskood isgu duraan/qaataan daawada suuxdinnta sida uu sharcigu u oggolyahay.

H. Tilmaamaha Maamulka 5335 Carruurta leh Xasaasiyadda Nafta Halis Gelin Karta (5335)

1. Warqaddaan waxay soo faafaahinaysaa habka dugsiga uu ku taageero ardayda qabta xasaasiyadda halis gelisa nafta.
2. Ka ilaalinta ardayga inay soo gaarto waxyaabaha ku kiciyo xasaasiyadda ayaa ah habka ugu muhiimsan ee looga hortago xasaasiyadda daran ee nafta halis gelisa. Inta badan falcelinta xasaasiyadda daran waxay dhacdaa marka ilmuhu si aan ku talogal ahayn uu ula kulmo walax uu xasaasiyad ka qaado, sida cuntooyinka, daawooyinka, cayayaanka, iyo waxyaabaha cinjirka ka samaysan. Ka fogaanshuhu waa furaha ka hortagga falcelinta xasaasiyadeed.
3. Habraacyo degmeed ayaa la dajiyay si wax looga qabto arrimaha xasaasiyadda ee meelaha khatarta sare leh inay ka dhalato. Habraacyadan waxaa lagu qeexay AG 5335.
4. Hadafka mustaqbalka fog waa in ardayga qaba xasaasiyad nafta halis gelisa inuu u madax bannaanaado ka hortagga, daryeelka, iyo maareynta xasaasiyaddooda iyo falcelintooda iyadoo lagu saleynayo heerka korriimadooda. Si taas loo gaaro ardayda leh xasaasiyad nafta halis gelisa waxaa laga codsanayaa inay raacaan tilmaamahan (AG 5335):
    a. Waa muhiim IN AAN la kala baddelan ama la wadaagin cuntooyinka. HA KA guran cunto weelka cuntada la wadaago ee laga yaabo inay yaallaan dhismayaasha dugsiyada qaarkood.
    b. Ku dhaq gacmaha saabuun iyo biyo ka hor iyo kadib markaad wax cunaysid. Jeermis-dileyeaasha gacmaha la mariyo beddel uma aha inaad si sax ah gacmaha saabuun iyo biyo loogu dhaqdo.
    c. Baro inaad garato calaamadaha falcelinta xasaasiyadda oo isla markiiba ogeysii qof weyn haddii aad falcelin xasaasiyadeed aad ka shakiso.
    d. Si degdeg ah ugu wargeli qof weyn isla markaa ay si ku talogal aan ahayn aykuu soo gaaraan waxyaabaha kiciyo xasaasiyadda ama calaamado aad yeelato.
    e. La samee xiriir kalkaalisada dhismaha iyo ugu yaraan qof kale oo weyn oo lagu kalsoon yahay oo dugsiga jooga si uu uga caawiyo aqoonsiga arrimaha la xiriira maaraynta xasaasiyadda marka dugsiga la joogo.
    f. Ha cunin wax ay ku jiraan maaddooyin aadan garanayn ama ay ku jiraan maaddooyin la ogyahay inay kiciyaan xasaasiyad.
    g. Yeelo caado ah inaad had iyo jeer akhrido maaddooyinka ku jiro cuntada kahor intaadan cunin.
    h. Marna ha fuulin baska haddii aad isku aragto calaamado fal-celin xasaasiyadeed ah.
    i. Isku doodidda xaaladaha uu ardaygu u arko inay wax u dhimayaan caafimaadkooda.

Fadlan la soco, kaddib marka la fiiriyo tilmaamaha, Kalkaalinta Dugsiga iyo/ama qofka Agaaismaha u magacaabo in ay u baahan karaan caddeenta tilmaamaha in ay ka helaan bixiyaha daryeelka caafimaadka soo qora ka hor inta aan la siinin daawo.

**<u>Xanuunka iyo Hababka Degdegga</u>**

Waxaa aad loo dhiiri gelinaa in la soo gudbiyo foomamka Macluumaadka Xariirka Degdegga (Emergency Contact Information) iyo foomamka Macluumaadka Caafimaadka (Medical Information) horaanta sannad dugsiyeed kasta. Kuwaan waa foomamka elataroonigga ee laga helo Xariirinta Waalidka PowerSchool (PowerSchool Parent Portal) ee hoos yimaada “Ecollect Forms”. Dadka ku qoran foomka degdegga keliya ayaa soo qaadi kara ardayda haddii aan ogolaasho hore laga soo qaadanin maamulaha dhismaha. Inta uu socdo sannad dugsiyeedka, waxaa dhici karto in wax iska baddalo cinwaanada iyo nambarada telefoonka ku yaal foomamka degdegga. Haddii uu jiro isbaddal, fadlan ogaysii xafiiska albaabka hore ee dhismaha ardaygaaga si aad u cusboonaysiiso macluumaadka xiriirka ee PowerSchool.

Ardayda xanuunsata maalinimada dugsiga waa in ay tagaan kliinikada. Ardayda waxaa lagala tallinaa in ay toos u wacaan ama fariin qoran u diraan waalidka/ilaaliyaha, bacdamaa qiimeynta calaamadaha iyo ogeysiiska xariirinta habboon waxaa sida ugu fiican u fududeeyo xafiiska/kliinikada. Shaqaalaha dugsiga waxay iskudayi doonaan in ay ogeysiyaan waalidiinta/ilaaliyeyaasha ama ku qoran foomka degdegga ardayga in ay ardayga u sameyaan qorshe uu ku tago dugsiga. Mas'uul kama nihi daweynta xanuunka wixii ka badan degdegga kaalmada kowaad.

Dhamaan kiisaska xanuunka ama dhaawaca, waxaa la filaa in waalidka/ilaaliyaha ama qofka xariirka degdegga in uu soo qaadi doono ardayga sida ugu dhakhsiyaha badan ee suurtogalka ah kaddib marka

loo yeero. Haddii ardayga u baahan yahay in la gu qaado baabuurka degdegga, sarkaalka kooxda degdegga wuxuu go'aan ka gaari doonaa isbitaalka la geyn doono ardayga.

Waalidiinta waxaa laga rabaa in ay ardayga siiyaan ruqsad in uu caafimaad qabo si uu ugu noqdo in uu cayaaro kaddib marka uu ku dhaawacmo jugta ka soo gaarta barxadda dugsiga, sida waafaqsan R.C. 2305.23 (Good Samaritan), 3313.20, 3313.539 and Siyaasadda 5340, Shilalka Ardayga (Student Accidents).

**Talaalka**
Sharciga gobolka wuxuu rabaa in waalidiinta/ilaaliyeyaasha soo gudbiyaan caddeyn qoran, muddo toban iyo afar (14) maalin gudahooda laga bilaabo dugsiga, in cunugooda la siiyay dhamaan tallaalada loo baahan yahay ama uu ku gudo jiro habka tallaalka, ama foomka la buuxiyay ee saxeexan/ka-dhaafitaanka ah si ay isaga/iyada ugu sii jiraan dugsiga. Haddii, dhamaadka toban iyo afarta (14) maalin, waalidka/ilaaliyaha uusan soo gudbinin caddeyn qoran oo ku saabsan u hoggaansamida, ardayga waxaa laga reebi doonaa dugsiga ilaa laga gudbiyo caddeynta noocaas. Waqtiga ka reebidda, maqnaashada ardayga waxaa loo qori doonaa sida in aan la fasaxin. Talaalka uu rabo Xeerka La Baddalay Ohio (Ohio Revised Code) 3701.13 iyo 3313.671 waxaa laga heli karaa bogga internetka dagmada, ama wuxuu ku yaal xarunta diiwaan gelinta dagmada ama kliinikada dawladda.

**Baaritaanka Tiibishada (TB, tuberculosis)**
Ardayda ku qoran Dugsiyada Magaalada Westerville (ku dhashay ama safar kaga socdo) ee ka yimaada waddan shisheeyo oo uu ku badan yahay TB waa in ay muujiyaan warqado oo ku saabsan baaritaanka maqaarka PPD ee taban ah iyo/ama raajada xabadka oo taban, laguna sameyay Mareykanka. Haddii waalidka/ilaaliyaha uusan awoodin in uu bixiyo warqadaha qoran ee loo baahan yahay, ardayga waxaa laga rabaa in uu qaato PPD kale ama loo dhamaystiro raajada lana fiiriyo. Waxaa loo baahan yahay warqaddaan ka hor inta aan horay loo sii wadin diiwaan gelinta. Dugsiyada Westerville waxay raacaan sharuudaha warbixinta ee ku qoran O.R.C. 3313.71.

**Arrimaha Caafimaadka Ardayga**
Haddii cunugga uu qabo arrin la xariirto caafimaadka, waalidiinta/ilaaliyeyaasha waa in ay keenaan sharaxaad qoran oo ku saabsan arrinta, oo la geliyo diiwaanada caafimaadka dugsiga, lana casriyeeyo macluumaadka bilawga sanad dugsiyeedka iyo hadba sida loo baahdo haddii uu isbedel dhaco. Waxaa dhici karto in loo baahdo warqadaha laga soo qaado bixiyaha daryeelka caafimaadka cunugga.

Ardayda u baahan jimicsiga jirka ama waxyaabaha ka reeban ee la xariira cimilada kaba badan muddo labo maalin waxay u baahan yahiin ogolaasho qoran oo laga soo qaato takhtarka.

**Xaaladaha Leysku Daarto**
Haddii cunugga xanuunsado, fadlan xasuuso in isaga/iyada aysan-qabin qandho, iyadoo aan la siinin, daawada yareysa qandhada, muddo 24 saac ka hor inta uusan ku soo noqonin dugsiga.

Cunugga waxaa loo dirri doonaa guriga haddii ardayga lagu arko heerkul gaara 100 digrii ama ka badan. Canugga ayaa loo diri karaa guriga haddii ardaygu mattago, qabo shuban, qabo nabro aan la baarin, ama lagu tuhunsan yahay in uu qabo xaalad leysku daarto ayna kamid tahay injirta madaxa, sida ay go'aansato kalkaalisada dugsiga. Ardayda isku daarta waa in uu soo qaado waalidka/ilaaliyaha, mana la ogola in ay soo raacaan gaadiidka dugsiga. Laguma talliyo in caruurta qabta xaaladaha leysku daarto in ay raacaan baska dugsiga ama gaadiidka kale uu dugsiga bixiyo. Waalidka/Ilaaliyaha ama qofka qaabilsan xariirka degdegga waxaa laga rabaa in uu ardayga geeyo guriga.

**Injirta Madaxa**
Injirta madaxa (Pediculosis) waxay u muuqataa in ay tahay dhibaato sannadka oo idil haysata bulshado badan. Bacdamaa waalidiinta ay muhiim u yahiin kantaroolka injirta madaxa, waxaan rabnaa in aan kaa kaalmeyno si aad u noqotid xogogaal.

Sidee ayaad ku heli doontaa?
Injrta madaxa waa caadi, xaalad si fudud loo daweeyo oo guud ahaan aan la xariirin xaalad kasta oo

caafimaad ahaan culus. Badanaa injirta madaxa waxay ka gudubtaa hal waxayna u gudubtaa qof kale marka ay toos u xariiraan labada qof iyo marka ay wada siticmaalaan waxyaabaha qofka u gaarka ah sida shanlada, buraashka ama fasaleetiga. Caruurta waa in looga digo in aysan caruurta kale la qeybsanin koofiyadaha, labbiska ama waxyaabaha loo adeegsado qurxinta. Dad badan ayaa u fakara in injirta madaxa ku dagto dadka aan nadiifka ahayn. Marka laga hadlo injirta madaxa, tani ma AHA RUN. Qabeyska badan ma kaa hor istaagi karo injirta madaxa mana kaa tirtiri karo haddii ay jiraan.

Waxa La Raadiyo:
Mid ka mid ah calaamadaha badanaa la arko waa cuncun badan iyo xoqidda maqaarka madaxa. Injirta madaxa waa cayayaan dhudhuuban oo ah ku dhawaad intaan la'eg (--) iyo midabkooda ud dhexeeyo midabka dambasta iyo maroon qafiif ah. Injirta ma qabaan baalal, sidaas darteed, ma buubi karaan. Ma boodaan, balse dhakhso ayay u dhaqaaqaan; tani waxay aad adkeysaa in laga helo tinta cunugga. Bacdamaa foomamka garguurta ay aad u adag yahiin in la arko, baaritaanka injirta madaxa waxaa badanaa lagu saleyaa helitaanka ukunta injirta (ukunta injirta). Ukunta injirta waa sida dhibicda shaaha, qiyaas ahaan waxay la'eg tahay ('), midabka wuxuu u dhexeyaa maroonka-jaalaha ilaa caddaan. Injirta madaxa waxay ukunta ku dhajisaa hal tin isku duubaan kaddibna waxay ku malaastaa maaddo la mid ah shimentada, aysan biyaha soo dhaafin. Sidaas darteed, ukunta injirta lama dhaqi karo ama lagama buraashi karo tinta sida dandruffta ama wasakhda kale ee marmar u muuqda sida ukunta injirta. Ukunta injirta waxaa badanaa laga helaa tinta ku taal dusha qoorta ama dusha dhagaha. Waa kaalmo in la adeegsado muraayadda weyneynta iyo nuurka iftiinka (ka sii fiican iftiinka maalinimada) marka aad raadineysid injirta.

Maxay samayn karaan waalidiinta?
Injirta waa aad leysugu daarto oo dhib badan in laga hortago, balse haddii waalid kasta uu mas'uuliyadda iska saaro in uu in badan hubiyo tinta qoyska oo idil iyo maqaarka madaxa, faafidooda waa la kantarooli karaa. Haddii aad tuhunsan tahay in cunugaada uu qabo injirta madaxa, balse aadan hubin, la xariir kalkaalisada dugsiga ee cunugaada. Haddii aad oggsoon tahay in cunugaada uu qabo injir, la tasho dhakhtarkaada, kalkaalinta dugsiga ama farmashistaha si looga daweeyo. Ha ka qajilin in aad ogeysiisid kalkaalisada dugsiga cunugaada si looga qaado talaaabo oo loo kantaroolo injirta. Sidoo kale, oggeysii waalidiinta asxaabta cunugaada. Iskaashiga waalidka/ilaaliyaha waxay kaalmo u tahay ka hortagga in injirta ku faafto caruur kale sida kuwaada.

Ardayda waa in ay ku soo noqdaan dugsiga isla marka la dhamaystiro daweynta lana ogaado in aysan jirin faafidda cayayaanka. Faafidda firfircoom waxaa lagu sifeyn doonaa jiritaanka injir nool, ama horumarka aan laga gaarin saaridda ukunta injirta. Daweynta waxaa wax laga qaban karaa habeen kaddib, taasoo u ogolaata in dib loo soo gudbiyo maalinta xigta. Qofka weyn waa in uu ardayga u raaco dugsiga si uu ula kulmo kalkaalinta ama xubin kale oo ka tirsan shaqaalaha marka ay ku soo nqodaan dugsiga. Ardayga waxaa baari doono xubin ka tirsan shaqaalaha dugsiga oo tababar ku qaatay habka baarista hore. Haddii ardayga la ogaado in ay ku faaftay injirta madaxa, waalidka/ilaaliyaha wuxuu ardayga geyn doonaa guriga si looga sii daweeyo. Ku faafidda badan waxaa loola jeedaa in ay jiraan cayayaan nool ama aan horumar laga gaarin saaridda ukunta injirta. Hawsha saaridda nit waxay qaadan doonta dhowr maalin Sii wad shanlada maalin kasta kana saar ukunta injirta aad ku aragtid.

**Tababarka Guriga**
Haddii uu ogaado takhtarka in cunugga uusan jir ahaan awoodin in uu yimaado dugsiga kaddibna uu maqnaan doono muddo toban iyo kow (11) maalmo dugsiyeed ama ka badan oo isku xiga, isaga/iyada waxaa dhici karto in uu xaq u yeesho tababarka guriga. Waxaa la qaaban doonaa shirka Kooxda Faragelinta si loo ogaado xaq u yeelashada tababarka guriga. Si aad u heshid macluumaad badan, la xariir xafiiska dugsiga.

**Ceymiska Shilka Ardayga iyo Ceymiska (Student Accident Insurance and Liability Insurance)**
Ceymiska Dugsiga Dagmada Westerville ma ceymiso dhaawacyada soo gaara ardagga. Inta dagmada ka qaadeyso talaabo ku habboon si loo hubiyo ammaanka ardayda, waxaa dhaca shilal. Dugsiga dagmada ma bixiyo kharashka la xariira caafimaadka marka ardayda dhaawacaan naftooda inta ay joogaan xerada dugsiga, marka ay dibadda ka yahiin dhulka dugsiga inta ay socdaan munaasabadaha uu dugsiga mas'uul ka yahay, inta uu saaran yahay gaadiidka dugsiga-mas'uulka ka yahay, ama inta uu

ku sugan yahay hantida dugsiga ama aan dugsiga ahayn saacadaha dugsiga ka horeeyo ama kaddib. Tan macnaheeda waxay tahay in waalidka (waalidiinta)/ilaaliyaha (ilaaliyeyaasha) ay mas'uul ka yahiin biilasha la xariiro dhaawac cunugga ka soo gaaray dugsiga.

Dagmada ma laha ceymiska shilka ardayga. Hase ahatee, qoysaska u baahan ceymis, waa la heli karaa macluumaadka ceymiska shilka ardayga. Sida adeegga la siiyo waalidiinta/ilaaliyeyaasha, ceymiska waxaa laga helaa dugsiga, waalidiina/ilaaliyeyaasha waxaa lagu dhiirigelinaa in ay cunugaada u helaan ceymis. Fadlan xasuuso in kani uusan ahayn brograam uu mas'uul ka yahay dugsiga dagmada. Dugsiga dagmada waxay ogolaan doontaa qeybinta macluumaadkaan si loogu fa'iideeyo ardayda iyo waalidiinta/ilaaliyeyaasha. Qeybinta macluumaadkaan ma aha aqoonsi la siiyo tani ama qorshahaan gaarka ah ee la xariira ceymiska ardayga. Dagmada sinna looma celiyo kharashka uga baxa qeybinta macluumaadka. Go'aan kasta hadii loo baahan yahay in la iibsado ceymis waa in uu ku saleysan yahay qiimeynta u gaark ah waalidka/ilaaliyaha halista ku jirto dhaawaca ama xanuunka iyo ku filnaanta qorshaha si loola kulmo baahidooda haddii loola kulmo xanuun ama dhaawac oo ceymiska ku jiro.

Dagmada ma laha ceymiska hantida dadka kale. Haddii ardayda lumiso shay (tusaale, balse kuma eka, qalabka muusikada) ama haddii la xado hantidooda, iyaga ayaa weli mas'uul ka ah in ay baddalaan hantida. Waalidiinta/Ilaaliyeyaasha waxaa la xasuusinaa in ardayda-atleetikada u baahan yahiin ceymis iyo waa in caddeynta ceymiska la keeeno si loogu ogolaado.

**Maamulka Cayayaanka Mideysan (IPM, Integrated Pest Management) iyo Ogeysiisyada**

Dugsiga Dagmada Magaalada Westerville wuxuu isticmaalaa habka Maamulka Cayayaanka Mideysan (IPM, Integrated Pest Management). IPM waxay adeegsataa qasanka kiimikada iyo wax kale, aan dillin cayayaanka, habab kale oo lagu kantaroolo cayayaanka. Waalidiinta/Ilaaliyeyaasha ama xubnaha bulshada, ee raba in la ogeysiiyo daawada cayayaan dishada waxay horay u ogeysiinta iyo daawada cayayaan dishada degdegga ka heli karaan boggena internetka dagmada.

# IMAASHADA

Ardayda ku qoran Dugsiyada Magaalada Westerville wuxuu sharciga gobolka ka rabaa in ay tagaan maalin kasta uu dugsiga socdo. Ardayda waa in ay maalin kasta ku jiraan dhamaan fasalada lagu qoray iyo qolalka wax lagu baro. Wixii macluumaad ah ee ku saabsan wakhtiga loo sii daayay waxbarashada diinta inta lagu jiro maalinta dugsiga, fadlan tixraac Siyaasadda Guddiga 5223 iyo Hagidda Maamulka 5223. Dugsiyada Magaalada Westerville waxay oo ay ku jiraan farsamada mideysa Siistemkena Macluumaadka Ardayga (Student Information System) si warbixinta iyo ballaminta maqnaashada ardayga mid u roon qoysaska. Qoysaska waxaa lagu dhiirigelinayaa in ay adeegsadaan farsamadan si ay u soo sheegaan maqnaansho kasta ee ardayga.

**Sifeynta Imaanshaha**

Maqnaashada Cudur-daarka leh: Maqnaashaha ka dhasho xanuunka qofka, fasaxa caafimaad ahaan lagama maarmaanka ah (si waafaqsan Siyaasadda 5751), xanuunka ka jiro qoyska, karantiilka guriga, dhimashada qaraabada, shaqada guriga oo ugu wacan maqnaashada waalidiinta ama ilaaliyeyaasha, xusidda maalmaha diinta, fasaxa qoyska horay loo ogolaaday ama xaaladaha degdegga ama sabab gaar ahuu maamulaha siiyo oggolaasho ama ka qaybgalka koorso waxbarasho oo darawalnimo (Siyaasadda 5200).

Maqnaashada aan Cudur-Daarka lahayn: Maqnaashada uusan xaqiijinin waalida/ilaaliyaha/, ama maqnaashada la ogsoon yahay, oo ogolaasho laga haysto waalidka/ilaaliyaha, sababtana tahay mid uusan dugsiga ogoleyn. Ardayda dugsiga sare waxaa la siin doonaa 100% dhibcaha la shaqeysto hawsha la siiyo buundada lana fasixin. Ardayda Dugsiga Hoose iyo Dhexe waxay qaadan doonaan 100% dhibcaha ay shaqeystaan inta ay ku maqan yahiin fasax la'aan.

Goynta Dugsiga: Ardayga waxaa loo tixgelin doonaa mid caadaysaday u goynta dugsiga (habitually truant) haddii ardaygu uu ku jiro da'da waxbarashada waajibka ah, uuna ka maqnaado dugsiga isagoon haysan cudurdaar sharci ah muddo dhan soddon (30) saacadood ama ka badan oo isku xiga, afartan iyo labo (42) saacadood ama ka badan oo hal (1) bisha dugsiga ah, ama toddobaatan iyo labo (72) saacadood ama ka badan sannad-dugsiyeedkiiba. Sarkaalka ka-qaybgalka dugsiga ee Degmada ama qofka uu u idmado ayaa dacwad ka furi doona maxkamadda carruurta (juvenile court) oo ka dhanka ah arday kasta oo caadaysaday u goynta dugsiga, ilaa ay Degmadu ama dugsiga ardaygu go'aamiyaan in ardayga iyo qoyskiisu ay horumar lagu qanco ka samaynayaan hagaajinta imaanshaha dugsiga ee ardayga. Haddii aan wax horumar ah la xaqiijin, ama haddii dugsigu go'aamiyo in ardayga iyo qoyskiisu ay joojiyeen dadaalkii ay ku horumarinayeen imaanshaha dugsiga ee ardayga, sarkaalka ka-qaybgalka dugsiga wuxuu sii wadi doonaa inuu dacwad ka furo maxkamadda caruurta oo ka dhanka ah ardayga. Dacwadaas ayaa lagu sheegi doonaa in ilmuhu yahay mid madax-adag maadaama uu caadaysaday ka-maqnaanshaha dugsiga, iyo in waalidka, mas'uulka, ama qofka kale ee xannaaneeya ilmaha uu jabiyay Xeerka Dib-u-eegista ee 3321.38 (Revised Code 3321.38).

Maqnaanshaha Xad-dhaaf ah iyo Ogeysiinta Waalidka: Marka ardayga ku jira da'da waxbarashada waajibka ah uu dugsiga ka maqnaado in ka badan laba iyo labaatan (22) saacadood fasalka barbaarinta (Kindergarten) ee nus-maalinka ah, afartan iyo shan (45) saacadood fasallada barbaarinta maalinka buuxa ah ilaa fasalka 6-aad, iyo konton (50) saacadood fasallada 7-aad ilaa 12-aad, Degmada ama dugsigu waa inay qoraal ku ogeysiiyaan waalidka ama mas'uulka ilmaha maqnaanshahaas. Ogeysiiska qoraalka ah waxaa la soo diri doonaa toddobo (7) maalmood oo dugsi gudahood laga bilaabo maalinta uu dhacay maqnaanshaha keentay in ogeysiis la diro. Isla marka ogeysiiska qoraalka ah la bixiyo, kooxda faragelinta maqnaanshaha ee dhismaha (AIT) waxay la shaqayn doonaan ardayga halista ugu jira inuu caadaysto maqnaanshaha iyo qoysaskooda si loo hagaajiyo imaanshaha ardayga. Qorshayaasha faragelinta maqnaanshaha waxay lahaan doonaan yoolal gaar ah, waxayna ku kala duwanaan doonaan baahida gaarka ah ee ardayga iyo waxa ay kooxda A.I.T. aaminsan tahay inay sida ugu wanaagsan u dhimayso ama u baabi'inayso maqnaanshaha dambe, isla markaana ay u hagaajinayso guusha waxbarasho ee ardayga.

Maqnaashada la Fasaxay:
Shaqada gadaal laga sameeyo waa in lagu dhamaystiro tirada maalmaha la'eg maqnaashadiisa/ maqnaashadeeda marka ay suurtogal tahay. Haddii aan la samaynin shaqada, ardayga waxaa la siin doonaa darajo uu ku dhaco bacdamaa uusan dhamaystirin shaqada. Marka laga hado shaqada la gaffay taasoo ugu wacan fasaxa qoyska, fadlan tixraac qeybta imaashada "Shaqada Gadaal Laga Sameeyo" ("Make-up Work").

Waxaa dhici karto in la bixiyo maqnaashada la fasaxay taasoo ku saleysan mid ama ka badan xaaladaha soo socdo:

Xanuunka Qofka: Waa la caffin doonaa cunugga daryeel caafimaad habboon ka qaata bixiyaha daryeelka caafimaadka shattiga haysta. Madaxda qaabislan waxay u baahan kartaa shahaadada takhtarka haddii isaga/iyada u garato in ay danta kujirto.

Xanuunka Qoyska: Maqnaashada hoos timaada xaaladdaan laguma dabaqo caruurta ka yar 14 sanno.

Karantiilka Guriga: Cunugga ka maqan dugsiga sida hoos timaado xaaladdaan waxay ku kooban tahay muddada karantiilka, sida ay u xisaabaan saraakiisha caafimaadka ku habboon.

Dhimashada Qaraabada: Maqnaashada ka dhallata xaaladdaan waxay ku kooban tahay muddo saddax (3) maalin haddii arjiilaha cunugga uusan muujin sabab macquul ah uu ku dalbado maqnaasho dheer.

Shaqada Guriga Taasoo Ugu Wacan Maqnaashada Waalidiinta iyo Ilaaliyeyaasha: Maqnaasho kasta oo ka dhallata sababtaan awgeed kama dheeraan karto muddada ay waalidiinta/Ilaaliyeyaasha maqan yahiin. (Tani waxaa lagu dabaqaa oo keliya ardaydajirta 14 sanno iyo ka badan.)

Xusidda Maalmaha Diinta:

Maamuluhu waxa uu ansixin doonaa ilaa saddex (3) maalmood oo xusid diineed ah sannad dugsiyeedkiiba kadib marka uu helo codsi qoraal ah ama loo soo gudbiyo foomka maqnaanshaha horay loogu cudurdaartay ee uu waalidka ama masuulka ardayga soo gudbiyo. Maalmaha xusidda diineed waxaa laga yaabaa in loo isticmaalo fasaxyada ah sababaha caqiidada ama diinta ama nidaamka caqiidada ruuxiga ah ama ka qayb qaadashada hawlo abaabulan oo hoos yimaada caqiido diimeed, kaniisad, ama urur diineed ama ruuxiyeed kale (siyaasadda 5200).

Si aad u hesho fududayn khusaysa xusidda diineed, waalidiinta ama dadka ardayda masuulka ka ah waa in ay soo gudbiyaan codsiyo qoraal ah ama u soo gudbiyaan maamulaha foomka maqnaanshaha horay loogu cudurdaartay. Codsiga waa in lagu qeexaa maalmaha xusidda diineed ee in la ansixiyo la rabo. Maamuluhu waxa uu ansixin doonaa maalmaha isaga oo aan waydiin daacadnimada nidaamka diineed ama ruuxa ardayga. Si kastaba, maamulaha dugsigu waxa uu xaqiijin karaa sax ahaanshaha codsiga isaga oo la xiriirayo waalidka ama masuulka si uu u xaqiijiyo in ay iyaga saxiixeen ama ay soo gudbiyeen foomamka maqnaanshaha cudurdaarka hore leh. Maamuluhu waxa laga yaabaa inuu diido codsiga maalmaha xusidda diineed haddii waalidka ama masuulku ay muujiyaan in saxiixa aanu sax ahayn ama aanay iyaga soo gudbin foomka maqnaanshaha cudurdaarka hore leh.

<u>Waqtiga Fasaxa ee Loo Qaadanayo Waxbarashada Diinta Inta Lagu Jiro Maalinta Dugsiga:</u> Ardayda waxaa la siin doonaa 'waqti fasax ah' inta lagu jiro maalinta dugsiga si ay uga qaybqaataan casharada waxbarashada diinta oo ay bixinayso hay'ad gaar ah oo maalgelisa, kuwaas oo lagu dhigayo dibadda dhismaha Degmada. Ardayda waa loo cudurdaari doonaa, loomana tixgelin doono inay ka maqnaayeen dugsiga inta lagu jiro waqtigaas fasaxa ah, arintaas oo ay shardi tahay in la buuxiyo shuruudaha soo socda:

A. In waalidka ama mas'uulka ardaygu uu bixiyo oggolaansho qoraal ah;
B. In hay'adda maalgelisa (casharrada) ay hayso diiwaanka imaanshaha iyo ka-maqnaanshaha, ayna siiso Degmada;
C. In hay'adda maalgelisa (casharrada) ay bixisaa oo ayna qaadato mas'uuliyadda sharciga ah ee ardayga; oo
D. In ardaygu uu qaato mas'uuliyadda cashar kasta ama shaqo dugsi oo dhaaftay.

Gadiidka ardayda lagu geeyo loogana soo celiyo casharrada waqtiga fasaxa ah waxaa si buuxda uga mas'uul ah hay'adda maalgelisa (casharrada), waalidka, mas'uulka, iyo/ama ardayga laftiisa.

Degmadu waa inay la kaashataa hay'adda maalgelisa (casharrada) si loo cayimo waqti ku habboon oo waxbarashada diinta la bixin karo inta lagu jiro maalinta dugsiga. Waqtiyada ay Degmadu u cayimto maalinta dugsiga dhexdeeda, waxaa loogu oggolaan doonaa waqtiga fasaxa ee waxbarashada diinta sida soo socota:

A. Ardayda dugsiyada hoose iyo dhexe, hal (1) xiisad toddobaadkii.
B. Ardayda dugsiga sare, waqtiga u dhigma kan ay uga qaybqaataan hal (1) dhibic (credit) oo dugsiga sare ah toddobaadkii.

Ardayda looma oggolaan doono inay ka baaqdaan maaddooyinka asaasiga ah (core subjects) si ay uga qaybgalaan waxbarashada waqtiga fasaxa ah. Kormeeraha Guud (Superintendent) ama qofka uu u idmado ayaa dejin doona tilmaamaha maamulka (AG5223) ee ku saabsan fasaxidda ardayda inta lagu jiro maalinta dugsiga ee waxbarashada diinta. Guddiga dugsigu wuxuu u tixgeliyaa dhammaan koorsooyinka dhibcaha laga bixiyo (graded courses) inay yihiin kuwo ka mid ah manhajka asaasiga ah, oo ay ku jiraan, laakiin aan ku koobnayn, koorsooyinka leh heerarka barashada ee ay ansixisay Dawlad-goboleedku.

<u>Koorsada Darawalnimada:</u> Degmadu waxay u cudurdaari doontaa ardayga dugsiga sare si uu uga qaybqaato koorsada barashada darawalnimada ee uu ansixiyay Agaasimaha Badbaadada Guud (Director of Public Safety) si waafaqsan Cutubka 4508 ee Xeerka Dib-u-eegista. Ardaygu wuxuu ka maqnaan karaa dugsiga ilaa laba (2) saacadood maalintii, iyadoo aanay ka badnaan karin afar (4) maalmood inta lagu jiro sannad-dugsiyeedka (iyadoo ku xaddidan wadar ahaan siddeed (8) saacadood), arintaas oo ay shardi tahay in maqnaanshuhu aanu ku soo aadin inta lagu jiro xiisadaha maaddooyinka asaasiga ah (core subjects). Ardayda ka maqnaata dugsiga si ay uga qaybgalaan koorsada

darawalnimada waxaa laga rabaa inay dhammaystiraan dhammaan shaqooyinkii fasalka ee ku dhaafay maqnaanshahaas.

Booqashada Kuleejka: Degmadu waxay u baahan tahay xaqiijinta taariikhda iyo wakhtiga booqashada kuleejka, jaamacadda, ama kulliyadda farsamada. (siyaasadda 5200)

Meelaynta Daryeelka Korinta ama Beddelida Meelaynta Daryeelka Korinta: Maqnaanshaha ay sababtay meelaynta daryeelka korinta ardayga ama beddelka lagu sameeyay meelaynta daryeelka korinta ama dacwad kasta oo maxkamadeed oo la xidhiidha xaaladdooda daryeelka korinta. (siyaasadda 5200)

Guri la'aan: Maqnaanshaha ardayga sabab la xiriirto hoy la'aan darteed. (siyaasadda 5200)

Adeegga sida Sarkaalka Xaafadda: Ardayga wuxuu u adeegi karaa sida sarkaalka xaafadda u qaabilsan doorashada musharixiinta, doorashada kursiga banaan, ama doorashada guud sida waafaqsan brograamka ku qoran Siyaasadda 5725.

Fasaxa (Vacation): Maqnaashada ka dhallata ardayga ka soo safra masaafo, in ku filan in uu ka maqnaado dugsiga. Maqnaashada safarka la fasaxay waxaa la ogolaan doonaa keliya mararka ardayga uu safar kula jiro waalidkiisa ama waalidkeeda ama ilaaliyaha sharciga marka ujeedada safarka tahay nasasho, madadaalo iyo/ama fasax.

- Waalidka ama ilaaliyaha ardayga waa in ay dhamaystiraan "Foomka Maqnaashada La Fasaxay" ("Pre-excused Absence Form") lana siiyo ogolaashada mid ka mid ah agaasimeyaasha ugu yaraan saddax maalin ka hor inta aan la gaarin maalinta kowaad maqnaashada la filaayo. Kaddib marka agaasimaha fiiriyo foomka, waa in ay saxiixaan dhamaan macalimiinta ardayga kaddibna lagu celiyo Xafiiska Imaaashada (Attendance Office).
- Ogolaashada codsiga maqnaashada ee ku jira qeybtaan waxay ardayga u oggolaanaysaa in uu helo fursad uu ku qaato hawlaha sare ee la qaato muddada la filaayo in la maqnaado. Ardayga waa in uu diyaar u yahay in uu soo celiyo hawlaha lagu sameeyo guriga iyo hawsha la siiyo darajo kaddib marka ls soo celiyo iyo waa in uu diyaar u ahaado in uu qaato imtixanaadka gadaal laga sameeyo muddo shan (5) maalin gudahooda kaddib marka uu soo noqdo sida macquulka ah. Lama filaayo in macalimiinta sy bixiyaan kaalmada tababarka maadooyinka laga hadlay inta uu ardayga maqnaa.

  Degdegga ama Xaaladda Gaarka: Degdegga ama daruufaha, oo sida ay la tahay agaasimaha dhismaha, kaaliyaha agaasimaha loo magacaabay, ama Maamulaha dugsiyada, waxay tahay sabab wanaagsan oo ku filan in laga maqnaado dugsiga, waana looogolaan doonaa ardayga.

  Dhamaan ka maqnaashada dugsiga uusan maamulaha dugsiga soo ogolaanin waxaa loo gelin doonaa diiwaanka sida "lama fasixin" ama "goysmo."

**Qeybta 517.12 Ammarada Koodka Westerville (Westerville Codified Ordinances) Wuxuu Leeyahay:** Ma jiro qof, oo ah waalidka ama ilaaliyahaama qofhaysta haynta sharciga iyo kantaroolka cunug yar oo si dayacan u golaanaayo cunugga yar, in uu gooyo dugsiga marka sharciyada Gobolka u baahan yahiin in cunugga uu tago dugsiga.

**Xisaabinta Imaashada Ardayga (Caruurta La Waayay iyo Caruurta Maqan)**

Guddiga Waxbarashada Westerville wuxuu taageeraa dadaalka gobolka iyo qaranka si loo yareeyo tirada caruurta maqan. Sidaas darteed, shaqaalaha dugsiga waxay iskudayi doonaan in ay aqoonsadaan caruurta maqan iyo in ay ogeysiiyaan dadka qaangaaray ama wakaaladaha.

Marka hore uu soo galo dugsiga, ardayga ama waalidka/ilaaliyaha ardayga waxay soo bandhigi doonaan asalka shahaadada dhallashada oo la soo xaqiijiyay, shahaadada kaniisadda meesha uu ku dhashay (babtism) oo muujisa taariikhda uu dhashay, ama warqadda affidafitka dhallashada iyo koobiyada diiwaanadaas uu dugsiga haayo uu dhawaanahaan tagay oo loo baahan yahay in la geeyo xafiiska mas'uulka ka ah gelitaanka. Waxaa la samayn doonaa koobiyo oo la soo celin doono. Dhallinta

gurilaaweyaasha, fiiriya Siyaasadda Guddiga (Board Policy) 5111.01 si aad u heshiin macluumaad ku saabsan warqadaha diiwaan gelinta.

**Ka Daahidda Dugsiga iyo Rawaxaadda Waqti Hore**
Waalidiinta/Ilaaliyeyaasha waxay ogolaasho ka codsan karaan agaasimaha dhismaha ama qofka loo magacaabo marka ardayga soo daaho ama horay u baxo. Inkastoo ogolaashada dadka gadaal ka soo galo ama horay uga tago aan la dhiirigelinin, Guddiga wuxuu aqoonsan yahay in ay soo bixi karaan daruufo gaar ah in ay habboon tahay in la aqoonsado imaashada la soo daaho ama marka horay loo baxo.

Asbaabta noocaas waxaa ka mid ah degdegyadca qoyska ama daryeelka takhtarka/ilkaha. Hase ahatee, ballamada takhtarka iyo ilkaha waa in la qabto dugsiga kaddib ama dhamaadka todobaadyada, haddii ay suurtogal tahay.

Haddii sii deynta hore ama imaashada laga soo daaho ay lagama maarmaan yahiin, qoraal u soo dir xafiiska adiga macneeyo sababta dhallisan sii deynta hore ama imaashada laga soo daaho iyo waqtiga uu cunugga tagi doono ama imaan doono. Agaasimaha ama qofka uu u qoondeeyay ayaa go'aamin doono in codsiga daahidda ama xilli hire diridda la oggolaan doono. Waalidiinta/Ilaaliyeyaasha waa in ay yimaadaan xafiiska marka ay goor dambe dajiyaan cunug ama marka ay rabaan in ay waqti hore qaadaan. Saraakiisha dugsiga waxay codsan karaan in dadka noocaas ah ay la yimaadaan aqoonsi habboon.

Ma jiro arday qaba itaal darri caafimaadka oo ku abuurta naafonimo oo la sii deyn doono haddii uusan jirin qof raaca isaga/iyada. Ma jiro arday lagu wareejiyo qof kale oo aan ahayn waalidka/ilaaliyaha ardayga haddii aan la haysanin ruqsadda waalidka/ilaaliyaha. Saraakiisha dugsiga waxay codsan karaan waalidka ama ilaaliyaha in uu muujiyo aqoonsiga ku habboon.

Lama aqoonsan doono imaashada la soo daaho iyo marka loo baahdo in horay loo baxo marka ogolaashada noocaas faragelin doonto hawlaha brograamka dugsi kasta ama hawl, furitaanka dug, rawaxaadda dugsiga ama gaadiidka, ama marka ogolaashada noocaas ahaan doonto wax aad u dhima waxbarashada ardayga ama abuuri doonto halista ammaanka.

Ardayda aan imaanin fasalka dugsiga loo magacaabay waqtiga bilaabidda la cayimay waxaa loo qaadan doonaa in ay soo "daaheen" sidaas ayaana loogu qori doonaa diiwaanka imaashada.

**Shaqada Gadaal Laga Sameeyo**
Ardayda waxay xaq u leeyahiin in ay gadaal ka sameyaan shaqada ay gaffaan inta ay ku maqan yihiin dugsiga, ha loo fasaxo ama yaan loo fasaxin. Kaddib marka dugsiga lagu soo noqdo, shaqada gadaal laga sameeyo waxaa la dhamaystiri doonaa muddada tirada maalmaha la'eg maqnaashada la fasaxay ama aan la fasixin ama muddo aan ka dambayn dhamaadka rubuc-sanadka buundooyinka (hadba taariikhda soo hormarta). Wax shaqo/layli ah oo maqan looma aqbali doono buundooyinka kadib marka buundooyinka u dambeeya ee sanad dugsiyeedka la soo gudbiyo ilaa maamulaha dugsiga uu bixiyo ogolaansho ma ogiye. Mas'uuliyadda lagu helo macluumaadka ku saabsan shaqada la gaffay waxay ku hartay oo keliya ardayga ama waalidiinta/ilaaliyeyaasha ardayga.

Haddii ardaygu filayo inuu maqnaanayo muddo dheer oo maalmaha dugsiga jiro ah, isaga/iyada ama waalidkood/mas'uulka waa inuu ka codsadaa shaqooyinka ardayga macalimiinta iyo/ama la-taliyaha dugsiga. Qabanqaabada waxaa lala samayn karaa xafiiska dugsiga ama macalinka wixii ku saabsan doonashada ama inaad ku hesho qaab elektaroonig ah shaqooyinka ardayga ee la codsaday.

# GURIGA

Ardayga si loogu diwaan galiyo Dugsiga Magaalada Westerville, waalidkiis/eeda masuulka ka ah waa

inay ku noolaadaan gudaha Dugsiga Dagmada Westerville ama ay ku qancaan mid ka mid ah qodobbada Xeerka Dib loo eegay ee Ohio 3313.64 sida inuu ku jiro hayn sharciya ama si joogta ah u hayo qof aan waalidkiis ahayn, u qalma waxbarashada gaarka ah, degana guriga carruurta ama xarumaha kale ee la dego, la nool shaqsiga ilmaha loo dhiibay si uu u koriyo, ama ay yihiin ilmo leh xubnaha adeegyada isku midka ah siiya kuwaas oo ku xiran beddelka ama amarka dib u dejinta oo loo guurayo balse aan wali degin degmada waa in loo ogolaadaa inay codsadaan isdiiwaan galinta si la mid ah iyo isla wakhtiga ardayda degan sida uu dhigayo heshiiska is-afgaradka gobolka ee fursadaha waxbarasho ee caruurta milatariga (eeg siyaasadda 5111.02). Diiwaangelinta iyo Xarunta Ilaha Qoyska (Family Resource Center), diiwaan gelinta ka hor.

**Dugsiga uu Tago**

Ardayda waxaa lagu qoraa in ay tagaan dugsi taasoo ku saleysan guriga waalidka haaya (ilaaliyaha sharciga) haddii waalidka ama ilaaliyaha uusan dalbanin wareejinta ka dhexeyso dagmada kaddibna uusan soo ogolaanin Maamulaha ama qofka Maamulaha u magacaabo. Xuduudda dugsiga dagmada gudaha dugsiga dagmada Westerville waxaa samayn doono Maamulaha, lana ogeysiiyo Guddiga Waxbarashada. Marka laga hadlaayo xuduudda noocaas, waa in la tixgeliyo awoodda dhismooyinka, cabbirka fasalada, masaafada, qaabka dhulka, gaadiidka iyo qodobo kale oo la xariira. Waalidiinta/ilaaliyeyaasha waxaa laga rabaa in ay ogeysiyaan agaasimaha dhismaha ama qofka isaga/iyada magacaawday marka la baddalo cinwaanka.

**Ka Bixidda Dagmada**

Haddii ilaaliyaha sharciga ardayga ka guuro dagmada Dugsiga Magaalada Westerville ka hor inta aan la dhamaystirin sannad dugsiyeedka, ardayda sannadka ugu dambeeyo waxaa loo oglaan doonaa in ay dhamaystaan sannad dugsiyeedka iyagoo aan bixinin kharashka ku baxa waxbarashada marka Guddiga ogolaado sida ku qoran XEERKA LA BADDALAY OHIO (OHIO REVISED CODE) 3313.64.

**Dagganaashada iyo Ilaalinta Sharciga**

Haddii waalidiinta ay kala tageen ama is fureen ama guurkooda milmay ama eber noqday, "waalidka" waxaa loola jeedaa waalidka la siiyay haynta guriga cunugga xagga dugsiga.

Marka ardayga uu ku sugan yahay haynta sharciga ama joogtada qof "haaya" sida wakaaladda dawladda ama qof aan ahayn waalidka laxmiga ama waalidka soo korsaday, "waalid" waxaa loola jeedaa waalidka ka tanaasulay haynta iyo laga yaabaa xuquuqda waalidnimo ee hartay, axsaanka iyo mas'uuliyadda. Dagganaashada iyo Ilaalinta waxaa lagu sifeyay Xeerka La Baddalay ee Ohio (Ohio Revised Code) 3313.64(A) (1)).

Kiisaska wadajirka haynta, waxaa dhici karto in cunugga uu tago dugsiga ku yaal dagmada ay u magacaawday maxkamadda. Haddii maxkamadda aysan cid kale ku wareejinin, cunugga wuxuu tagi karaan dagmada uu daggan yahay waalidka uu isaga/iyada la joogto. Si loo ilaaliyo maslaxadda ugu fiican cunugga, isaga/iyada waa in ay sii wadaan tagidda hal dugsi oo ku yaal dagmada.

Isbaddal kasta oo la xariira haynta inta ay socoto sannad dugsiyeedka waa in loo sheego agaasimaha dhismaha kaddibna koobiga warqadaha haynta la geliyo faylka yaal dhismaha uu tago ardayga.

**Arrimaha Qofka Aan Dagganeen**

Hababka Xakuma Diiwaan Gelinta Ardayga aan Dagganeyn uu ka Dambeeyo "Waalidka" Aan Haynin ama Qof Aan Ahayn Waalidka

1. Xarunta Ilaha Diiwaan Gelinta iyo Qoyska (Enrollment and Family Resource Center) lana soo raaciyo warqadaha u gudbinta maxkamadda taasoo muujisa in waalidka, qaraabada ama qofka aan ahayn waalidka, bilaabay dacwadaha si uu u helo haynta cunugga.
2. Oraahda lagu dhaartay waxaa ka mid ah magaca waalidka aan ilmaha haynin, cinwaanka, magaca cunugga, magaca iyo cinwaanka waalidka haayo, magaca iyo cinwaanka dugsigii ugu dambeyay uu tahay cunugga, iyo magaca iyo cinwaanka qareenkooda.
3. Kaddib marka la helo waqadaha loo gudbiyay maxkamadda, cunugga wuxuu tagi karaa Dugsiyada Magaalada Westerville isaga oo bixinin kharashka muddo aan ka badneen lexda (60)

maalin ama tirada ugu yar maalmaha sharciga rabo.

4. Haddii haynta lagu wareejiyo waalidka dabiiciga ama ilmaha korsada ee daggan Dugsiga Dagmada Westerville, gudaha lexdanka (60) maalin, ma lagu dallici doono kharashka waxbarashada.
5. Diiwaan Gelinta iyo Xarunta Ilaha Qoyska (Enrollment and Family Resource Center) ee haysta warqado sharciyeysan in maxkamadda ay isaga/iyada siisay haynta sharciga.
6. Haddii aan la siinin haynta sharciga muddada lexdanka (60) maalin gudahooda, bixinta kharashka waxbarashada waxay waajib ku noqon doontaa waalidka mudda diiwaan gelinta. Cunugga waxaa dhici karto in laga joojiyo dugsiga haddii aan la bixinin kharashka waxbarashada.

Baddalaadda haynta inta uu socdo sannad dugsiyeedka waa in ay soo sheegaan waalidiinta/ ilaaliyeyaasha iyo koobiyada warqadaha haynta waa in la geliyo faylka, dhismaha uu tago ardayga.

# HAWLAHA GUUD

**Geynta iyo Fariimaha**
Waxyaabaha laga keeno adeegyada cunta gaynta sida GrubHub, DoorDash, Uber Eats, iwm. ama shay kale sida ubaxa, buufinnada, iwm, lama aqbali doono si loogu geeyo ardayda.

**Ogeysiiska fiidiyowga lagu duubo fasalka**
Macalimiinta dagmada, sida qeyb ka tirsan imtixaankooda, qiimeynta iyo horumarka aqoonta, iyo sidoo macalimiinta ardayga ee ka shaqeeyo shahaadadooda waxbarashada ee laga qaato kulliyadaha deegaanka iyo jaamacadaha, waxaa dhici karto in ay marmar fiidiyow ka duubaan naftooda iyaga oo wax ku baraaya gudaha fasalka.  Haddii waalidka ama ilaaliyaha sharciga doono in uu iska ilaaliyo suurtogalka in cunugaada laga duubo fiidiyow inta uu socdo tababarka, waxaa la habeyn karaa fududeyn. Fadlan ogeysii agaasimahaada, qoraal ahaan, ugu dambayn Sateembar 30 ee sannad dugsiyeedka socda haddii aad dooneysid in aad fududeyntaan u codsatid cunugaada.

**Kor ka Eegidda fiidiyowga iyo Kormeerka Elattaroonigga**
Kor ka eegidda fiidiyowga waxaa caadi ahaan loo adeegsada in lagu kaalmeeyo socodsiinta jawi ammaan ah oo ku wanaagsan nidaamka waxbarashada ardayga xagga shaqaalaha, ardayda iyo dadka soo booqda hay'adahena iyo inta uu socdo gaadiidka baska.

**Hababka Degdegga**
Haddii lala kulmo degdeg, waa in lagu dadaalo in lagu xariiro siyaabo badan oo lagu yeesho isgaarsiin. Waxaa dhici karto in qoysaska ay macluumaad ka helaan dhowr siyaabo ku helaan isgaarsiinta dagmada, kana mid ah, balse ku ekeen: bogga internetka dagmada ((www.wcsoh.org), email, ku dhawaaqidda, fariimaha qoran, ogeysiiska telefoonka degdegga, iyo ogeysiiska telefishanka dagmada iyo saldhigyada raadiyaha. Fadlan xasuuso in si loo helo qoraalka degdegga iyo fariimaha emailka, qoysaska waa in ay soo booqdaan bogga internetka dagmada kaddibna isku qoraan si ay dagmada uga helaan isgaarsiinta elataroonigga.

Xeritaanka Degdegga Dugsiga - Haddii loo baahdo in Dugsiyada Magaalada Westerville xeraan maalin, xeraa goor hore ama gadaal u dhigaan waqtiga la bilaabo dugsiga, waxaa la soo gudbin doonaa ogeysiisyo sida, balse kuma eka bogga internetka dagmada, isgaarsiinta email, fariimaha qoran, ogeysiiska degdegga telefoonka iyo shaacinta laga soo daayo raadiyaha deegaanka iyo telefishanka u adeego Dagmada Franklin/Delaware. Waalidiinta/Ilaaliyeyaasha waxaa lagu dhiiri gelinaa in ay dhageystaan dhawaaqa xeritaanka ama dib u dhaca dhamaan Dugsiyada Westerville.

Leyliga Dabka - Leyliga dabka ee loo fulliyo sida habeysan waa qeyb loo baahan yahay oo ka tirsan brogaamka dugsiga.  Ardayda waxay ka bixi doonaan dhismaha iyaga oo raaca tilmaamaha "ka bixidda dabka" ee ku dhaggan fasalka.  Dhamaan waalidiinta/dadka soo booqda waxaa laga rabaa in ay a qaxaan dhismaha.

Raadinta K-9 - Waxaa dhici karto in baaritaanada K-9 la fulliyo iyadoo aan ogeysiis laga haysanin iyo sida ay la tahay Maamulaha ama maamulaha dhismaha.

Leyliga Xayiraadda - Leyliga xeritaanka waxaa la fullin doonaa muddo ka muddo, taasoo qeyb ka ah brograamka ammaanka dugsiga. Waalidiinta/ilaaliyeyaasha/dadka soo booqda waxaa laga rabaa in ay la shaqeyaan dadaalka dugsiga ugu jiro hawlaha leyliyada noocaas.

Xayiraad - Haddii hawsha boliiska ka dhacdo meel u dhaw dugsiga, waa la xeri doonaa dugsiga.

Inta uu socdo xeritaanka, ardayda waa in ay ku sugan yahiin gudaha dhismaha. Qofna looma ogola in uu galo ama ka baxo dhismaha, waxbarashada waxay u socon doontaa sida caadiga ay ahaan jirtay. Xeritaanka wuxuu socon doonaa ilaa boliiska muujiyaan in halis aysan jirin. Waalidiinta/ ilaaliyeyaasha/dadka soo booqda waxaa laga rabaa in ay la shaqeyaan dadaalka dugsiga ugu jiro in uu kantaroolo gelitaanka dhismaha dugsiga inta ay socoto xeritaanka dhismaha.

Hababka Daluuliyaha - Ardayda waxaa geeyaa meel ammaan ah oo la badbaadiyo inta ay socoto digniinta daluuliyaha. Leyliga waxaa loo qaban doonaa si loo fududeeyo habkaan, waxaa lagu siin doonaa tilmaamo gaar oo ku saabsan ammaanka. Dhamaan waalidiinta/ilaaliyeyaasha/Dadka Soo Booqda waxaa laga rabaa in ay ka gambadaan sida waafaqsan qorshaha ammaanka dhismaha ee dhismaha.

**Helitaanka Adeegga Raashinka iyo Dabeecadda Qaxwada**

Ardayda xaqa u yeesha sida hoos timaada tilmaamaha federaalka, waxay heli karaan brograamka cuntada lacag la'aanta ama la dhimay. Ardaydena waxay heli karaan brograamka quraacda lacag la'aanta iyo la dhimay sida hoos timaada tilmaamaha federaalka. Ardayda u baahan cunto khaas ah, fadlan la xariira maamulaha adeegga raashinka dugsiga una sheeg kalkaalintaada dugsiga. Si aad u heshid macluumaad badan, la xariir dugsiga ama xafiiska adeegga raashinka.

Qadada waxaa la cuni doonaa waqtiyada la ballamyay qadada saxanka iyo, marka laga hadlo ardayda dugsiga sare iyo kuwa taga dugsiga dhexe, waa cuntada kis-kis loo dalban karo. Ardayda waxay kaloo keensan karaan qadadooda. Ardayda waxay kaloo heli karaan brograamka quraacda. Fadlan la xariir xafiiska dugsigaada si aad u heshid tafasiisha iyo kharashka brograamkaan. Ardayda waxaa la weydiiyay in ay raacaan sharciyada soo socda ee ku saabsan xushmadda:

A. Joog qolka qadada ilaa laga gaaro dhamaadka xissada ama ilaa uu kaa fasaxo qaangaarka kormeerka.
B. Ha goynin leenka qadada;.
C. Ha tuurin raashinka, warqad, ama waxyaabo kale.
D. Cun dhamaan raashinka ama cabbitaanka quraacda/qadada.
E. Ka saar dhamaan waxyaabaha ay saareen miiska ka hor inta aadan bixin. Dhamaan warqadaha iyo qashinka waa in lagu rido weelasha qashinka.
F. Ula dhaqan dhamaan shaqaalaha kafeteeriyaha, haayeyaasha iyo qaangaarka kormeerka si sharaf leh iyo si xushmad leh.

**Diiwaanada Waxqabadka Ardayga, Kaararka Darajada**

Diiwaanka Waxqabadka Ardayga (Student Achievement Record) ama kaarka darajada waxaa laga helaa soo koobidda waxqabadka ardayga iyo imaashada dugsiga. Diiwaanka Waxqabadka Ardayga (Student Achievement Records) ama kaararka darajada waxaa laga heli karaa internetka marka la galo siistemka warbixinta darajada elataroonigga Dagmada. Waalidiinta/Ilaaliyeyaasha waxay dooran karaan koobi adag balse waa in ay sidaas ku sameyaan qoraal ahaan una soo gudbiyaan agaasimaha dugsiga ama qofka loo magacaabo.

**Khidmadaha aan la bixinin**

Guddiga wuxuu dhaqan geli karaa sharciyada iyo qaanuunada bixiya jadwalka khidmadaha qoraalada loo isticmaalo maadada tababarka iyo qorista jadwalka kharashka la soo dallaco ee laga yaabo in la saaro ilmaha lumiya, khasaariya, ama burburiya alaabta dugsiga, qalabka, qalabka muusikada, alaabta

maktabka, buugaagta, ama buugaagta elataroonigga ee loo baahan yahay in la bixiyo laguna soo dallicin kharash, iyo khasaarada dhismooyinka dugsiga, ee laga yaabo in la hirgeliyo bixinta khidmadahaas iyo kharashka la soo dallaco, laga ceshto darajooyinka iyo buundooyinka caruurta ay quseyso taasoo saamayn karta ka qeybgalka hawlaha qalin jebinta. Haddii ay dhacdo in talaabado kore aysan dhallinin in la soo aruuriyo khidmadda, Guddiga wuxuu u fasaxay Qasnajiga in uu qaado talaabo sharci oo ku habboon ama talaabo kale oo looga soo aruuriyo. Fiiri Qeybta Xeerka la Badbaadiyo ee Ohio 3313.642(C).

**Lumay lana Helay**

Waxyaabaha lumay, fadlan ka hubso xafiiska weyn. Haddii ardayga uu helo shay, isaga/iyada waa in ay u soo celiyaan mid ka mid ah xogeynta ku sugan xafiiska. Si loo fududeeyo soo noqoshada haddii lala kulmo khasaaro, magacyada ardayda waa in lagu qoro dhamaan buugaagta iyo hantida kale.

**Waxyaabaha Qofka Leeyahay**

Ardayda waa in aysan dugsiga keenin waxyaabaha u gaarka ah qofka ee laga yaabo una badan tahay in ay carqalad iyo sii jeedin ku sameyaan waxbarashada sida, balse kuma eka: isgaarsiinta gaarka ah ama qalabka maaweelada. Lama ogola in xerada dugsiga lagu wato looxa lagu taraaraxo iyo baskiilada, looxa lagu istaago, kabo leh giraangiro ama giraangiro lagu dhajiyay, looxa lugaha leh, ama mootooyinka, marka laga reebo kuwa caafimaad ahaan lagama maarmaan ah. Dugsiga ma qaadan karo mas'uuliyadda khasaarada iyo burburka.

**Xoolaha Guri Joogga iyo Xoolaha Dugsiga**

Si loo badbaadiyo caafimaadka, ammaanka iyo wanaagga ardayda iyo si loo ilaaliyo tayada deegaanka waxbarashada, xoolaha guri joogga iyo xoolaha kale LOOMA OGOLA gudaha dugsiga. Xaaladaha qaar meelaha looga baahan in xoolaha guri joogga ama xoolaha kale loo adeegsado darsi agaasimaha ama qofka loo magacaabay waxay ogolaan karaan codsigaan. Shakhsiyaadka itaalka darran waxaa loo ogolaan doonaa in ay la socdaan xoolaha la adeegsado.

**Soo Gelinta Calaamadaha/Qeybinta Warqadaha (Leaflets)**

Qof kasta oo raba in uu soo geliyo calaamad ama in uu qeybiyo waxyaabaha la daabacay ku qeybiyo gudaha dugsiga ama dhulka dugsiga waa in uu ogolaasho ka helo Maamulaha ama cidda loo magacaabay.

**Diiwaanada Ardayga**

Sharciga Federaalka ama Gobolka iyo sidoo kale siyaasadda Guddiga ayaa yareyay kashifaadda macluumaadka lagu aqoonsan karo qofka ee ku jira diiwaanka ardayga. Caadi ahaan, macluumaadka noocaas lama kashifi karo haddii aan ogolaasho qoran laga haysanin waalidka/ilaaliyaha ardayga ama ardayga qaangaaray. Waxyaabaha ka reeban shardigaan ogolaashada waxaa ka mid ah kashifaadda diiwaanada loo gudbiyo saraakiisha dugsiga, kashifaad loo baahan yahay sida hoos timaado ammarka ka soo baxay maxkamadda ama ammarka ku qasba marqaatiga in uu maxkamadda ka marqaati furo, kashifaadda si loo fududeeyo wareejinta ardayga, kashifaadda macluumaadka diiwaanka iyo kashifaadda degdegga ammaanka caafimaadka. Tafasiisha dhamaystiran ee ku saabsan sii deynta diiwaanada ardayga iyo waxyaabaha ka reeban ee lagu dabaqi karo shardiga ogolaashada ee qoran waxaa laga helaa meelo kale Siyaasadda Guddiga.

**Ogeysiiska Sannadka Diiwaanada Ardayga**

Sharciga Xuquuqda Waxbarashada Qoyska iyo Asturnaanta (FERPA, Family Educational Rights and Privacy Act) waxay waalidiinta/ilaaliyeyaasha iyo ardayda ka weyn toban iyo sideed (18) sanno ("ardayda xaqa u yeesha") siisaa xuquuq xagga diiwaanada waxbarashada ardayga. Xuquuqdaan waa:

2. Xaqa loo leeyahay in la fattasho lana fiiriyo diiwaanada waxbarashada ardayga muddo afartan iyo shan (45) maalin laga bilaabo maalinta dugsiga helo codsiga gelitaanka.

> Waalidiinta/ilaaliyeyaasha ama ardayda xaqa u yeelata waa in ay agaasimaha/madaxa qeybta sare dugsiga u soo diraan codsi qoran oo aqoonsada diiwaanka (diiwaanada) ay rabaan in ay fattashaan. Sarkaalka dugsiga wuxuu sameyn doonaa qorshe lagula xariiro lana ogeysiiyo waalidka, ilaaliyaha,

bixiyaha daryeelka ama ardayga xaqa u leh waqtiga iyo goobta meesha diiwaanka lagu fattasho.

3. Xaqa loo leeyahay codsiga lagu baddalo diiwaanka waxbarashada ardayga uu waalidka/ilaaliyaha/bixiyeha daryeelka ama ardayga xaqa u yeesha aaminsan yahay in uusan sax ahayn, marin habaabiyo, ama si kale u jebiya xuquuqda asturnaanta ardayga ee hoos timaado FERPA.

   Waalidiinta/Ilaaliyeyaasha ama ardayda xaqa u yeesha waxay weydiin karaan Dagmada in ay baddasho diiwaanka ay iyaga aaminsan yahiin in uu qaldan yahay marrin habaabiyo, ama jebiyo xuquuqda asturnaanta ardayga. Waalidiinta/Ilaaliyeyaasha, ama ardayda xaqa u yeelata ee raba in ay dugsiga weydiistaan in uu baddalo diiwaan waa in ay u qoraan agaasimaha dugsiga (ama sarkaalka ku habboon), si cad u tilmaamaan qeybta diiwaanka ay rabaan in wax laga baddalo, iyo tilmaamaan sababta loogu baahan yahay in la baddalo. Agaasimaha dugsiga ama cidda loo magacaabay waxay go'aan ka gaari doonaan haddii isaga/iyada baddali doonto diiwaanka muddo macquul ah gudaheeda codsiga, aan ka badneen afartan iyo shan (45) maalin kaddib marka codsiga la soo jeediyo. Haddii agaasimaha dugsiga ama qofka uu isaga/iyada magacaawday go'aan ku gaarto in ay siiyaan codsiga, isaga/iyada waxay baddali doontaa diiwaanka sida loo baahan yahay. Haddii dugsiga go'aan ku gaaro in uusan baddalin diiwaanka sida uu soo codsado waalidka/ilaaliyaha/ bixiyaha daryeelka ama ardayga xaqa u yeesha, dugsiga wuxuu ogeysiin doonaa waalidka/ ilaaliyaha/bixiyaha daryeelka ama ardayga xaqa u yeesha go'aanka kaddibna wuxuu ogeysiin doonaa xaqa ay u leeyahiin dhageysiga ku saabsan codsiga la xariira baddalaadda. Waalidka/ilaaliyaha/bixiyaha daryeelka ama ardayga xaqa u yeesha waxaa la siin doonaa macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan hababka loo fulliyo dhageysiga marka la ogeysiiyo xaqa loo leeyahay dhageysiga. Haddii, natiijada ka soo baxda dhageysiga, la ogaado in macluumaadka uu qaldan yahay, marrin habaabiyo ama si kale u jebiyo xuquuqda asturnaanta ardayga, waa la baddali doonaa diiwaanka, kaddibna waalidka/ilaaliyaha ama ardayga xaqa u leh waxaa la ogeysiin doonaa baddalaadda oo qoran. Haddii, sida waafaqsan dhageysiga la qabto, la ogaado in macluumaadka ku jiro diiwaanka waxbarashada uusan sax ahayn, marrin habaabiyo, ama si kale u jebiyo xuquuqda asturnaanta ardayga, waalidka/ilaaliyaha ama ardayga xaq u yeesho, waxaa loo sheegi doonaa sidaas waxaana lagula tallin doonaa xaqa uu u leeyahay in uu oraah geliyo diiwaanka taasoo faalo ka bixisa macluumaadka leysku haysto iyo/ama uu sheego sababta uu isaga/iyada u qilaafsan tahay go'aanka Dagmada. Haddii Dagmada ay oraahda noocaas geliso diiwaanada waxbarashada ardayga, Dagmada waxay xajin doontaa oraahda iyo qeybta laga murmay diiwaanka ilaa inta diiwaan la haayo iyo waxay kashifi doontaa oraahda marka ay kashifto qebta diiwaanka ee la xariirta oraahda.

4. Xaqa in la bixiyo ogolaasho qoran ka hor inta dugsiga uusan kashifin macluumaadka lagu aqoonsan karo qofka oo laga soo qaato diiwaanada waxbarashada ardayga, marka laga reebo marka FERPA fasaxdo kashifaadda aysan ogolaasho la soconin.

   Hal ka reebid, taasoo ogolaata kashifaadda aan la ogoleyn, waa kashifaadda la siiyo saraakiisha dugsiga ee qaba danno waxbarasho sharciyeysan. Sarkaalka dugsiga waa qof Dugsiga ugu shaqeeyo sida Maamule, kormeere, tababare, ama xubin ka tirsan shaqaalaha taakuleynta (sida shaqaalaha caafimaadka ama daweynta iyo shaqaalaha unugga hirgelinta sharciga); ama qof ka shaqeeya Guddiga Dugsiga. Guddiga wuxuu kaloo dadka soo socdo iyo hay'adaha u magacaabay in ay ka mid yahiin "saraakiisha dugsiga xagga FERPA:

   A. Dadka iyo/ama shirkadaha uu Guddiga la galay heshiis in ay fulliyaan shaqo gaar ah (sida qareenka, xisaabiyaha, wakiilka ceymiska, ama la-talliyaha caafimaadka), iyo

   B. Qandaraasleyaasha, la-talliyeyaasha, kuwa ku shaqeeyo iskaa wax u qabso ama uu Guddiga siiyay adeegga ama shaqada ay shaqaalaha Guddiga samayn lahayeen (tusaale daweeyaha, shaqaalaha farsamada macluumaadka (IT) la fasaxay, iyo bixiyeyaasha adeegga waxbarashada internetka ee la ogolaaday)

Dhinacyada dibadda ee kor lagu tilmaamay waa in ay (a) fulliyaan adeegyada hay'adaha ama hawlaha uu Guddiga u isticmaali lahaa shaqaalaheeda, (b) toos u hoos yimaadaan kantaroolka Guddiga xasgga

isticmaalka shaqaalaheeda, (b) toos u hoos yimaadaan kantaroolka Guddiga xagga isticmaalka iyo haynta diiwaanada waxbarashada, iyo (c) hoos yimadaan sharuudaha 34 C.F.R. 99.33(a) ee xakuma isticmaalka iyo dib u kashifaadda PII ee diiwaanka waxbarashada.

Ugu dambayn, waalidka ama ardayga u adeega sida guddi rasmi ah, sida guddiga dishibiliinka ama cabbashada, ama kaalmeynta sarkaal kale oo ka tirsan dugsiga si uu u fulliyo hawshiisa/hawsheeda (kana mid ah dadka ku shaqeeyo iskaa wax u qabso) waxaa kaloo loo arkaa sida "sarkaal aka tirsan dugsiga" xagga FERPA hase ahatee isaga/iyada waa in ay la kullanto qodobka kor la tixraacay ay adeegsan karaan dhinacyada kale.

"Maslaxadda xaqa waxbarashada" ("legitimate educational interest") waxaa lagu sifeyaa sida mas'uuliyad toos ah ama loo dhiibay cid kale si ardayga loogu kaalmeeyo in uu gaaro mid ama ka badan ujeedooyinka waxbarashada Dagmada, ama haddii diiwaanka loo baahan yahay si sarkaalka Dugsiga u fulliyo hawsha maamulka, kormeerka, ama tababarka ama si uu u fulliyo adeeg ama manaafacaad ama qoyska ardayga.

Dagmada waxay kaloo kashiftaa diiwaanada waxbarashada ardayga iyadoo aan ogolaasho ka haysanin waalidiinta/ilaaliyeyaasha ama ardayga xaqa u yeesho sida hoos timaado daruufaha soo socdo:

a. Kaddib marka laga codsado, dugsiga uu ogolaasho la'aan diiwaanada waxbarashada u kashifo saraakiisha dugsi kale uu ardayga ka raadsado in lagu qoro ama doono in lagu qoro, ama horay loogu qoray haddii ujeedada kashifaadda tahay diiwaan gelinta ardayga ama wareejinta ardayga. Kaddib, waxaay dhici karto in Dugsiga uu diiwaanka waxbarashada ardayga u kashifo wakaalad kale oo ka shaqeysa waxbarashada ama hay'ad haddii ardayga uu adeegyo ka qaato wakaalad kale oo wax laga barto ama hay'ad.
b. Ku socoto saraakiisha federaalka ee loo fasaxay ama madaxda gobolka ama waxbarashada deegaanka;
c. Kashifaadda waxaa la socda macluumaadka loo baahan yahay ee la xariira kaalmada maaliyadda uu ardayga dalbaday ama uu ardayga qaatay;
d. Kashifaadda waxay ku socotaa sarakiisha gobolka iyo deegaanka ama madaxda, waxaan la ogol yahay in la soo sheego ama in la kashifo sida waafaqsan sharciga gobolka oo la adeegsaday bishii Nofembar 19, 1974 ka hor, haddii soo sheegidda la ogolaaday iyo arrimaha kashifaadda ay quseyso siistemka caddaaladda dhallinta iyo awoodda siistemka u leeyahay in uu dhab ahaan u adeego ardayga ka hor inta go'aan laga gaarin; iyo, marka la ogol yahay kashifaadda macluumaadka la adeegsado sharciga gobolka ee la dhaqan geliyay wixii ka dambeyay Nofeembar 19, 1974, sarkaalka gobolka iyo madaxda oo loo kashifay waxay qoraal ahaan u caddeyeen dugsiga in macluumaadka aan loo kashifi doonin dhinac kale, marka laga reebo sida hoos timaado sharciga gobolka, ka hor inta aan la siinin ogolaasho qoran oo ku saabsan waalidka ardayga;
e. Ku socota ururada fulliya darasaadka iyada oo mattala wakaaladaha waxbarashada ama hay'adaha si loo horumariyo, loo xaqiijiyo ama loo maamulo imtixanaadka saadaalinta, maamulo brograamyada kaalmada ee ardayga, ama loo hagaajiyo tababarka;
f. Ku socoto ururada bixiya aqoonsiga waxbarashada si ay u fulliyaan hawlahooda aqoonsiga;
g. Kashifaadda waxay ku socotaa waalidiinta ardayga ah ku tiirsanaha, sida ku sifeysan Xeerka Dakhliga Gudaha (Internal Revenue Code);
h. Si loogu hoggaansamo ammarka maxkamadda ama u yeeridda marqaatiga;
i. Marka lagu jiro xaalad caafimaad ama degdegga ammaanka, hadba meeshii looga baahdo si loo badbaadiyo caafimaadka iyo ammaanka ardayga ama dadka kale; ama
j. Kashifaadda waxaa loogu talogalay waalidka/ilaaliyaha ardayga aan ahayn arday xaq u leh ama ku socoto ardayga.

"Macluumaadka Diiwaanka" (Directory information) waa macluumaadka lagu aqoonsan karo qofka ee ku jira diiwaanka waxbarashada ardayga, aan guud ahaan loo aqoonsan karin in ay waxyeelo leeyahiin, ama farageliyaan waxyaabaha u gaarka ah qofka haddii la kashifo. Sida hoos timaado sifeyntaan, Dagmada waxay macluumaadka soo socdo ee lagu tilmaami karo qofka ee ku jira diiwaanka waxbarashada ardayga in uu yahay “macluumaadka diiwaanka” iyo waxay kashifi doontaa

macluumaadkaas iyadoo aan ruqsad qoran ka qaadanin waalidka/ilaaliyaha ama ardayga xaqa u yeesha, marka laga reebo marka codsiga yahay mid lagu raadinaayo fa'iido ama hawl: magaca ardayga, maadada ugu weyn uu barto, taariikhda uu tago, ka qeybgalo hawlaha rasmi ahaan ka baxsan manhajka iyo isbortiga, joogga iyo miisaanka haddii xubinta ka socoto kooxda jimicsiga, taariikhda qalin jebinta, ama sharafta iyo abaal marrinta uu qaatay.

Sida waafaqsan sharciga Federaalka iyo Gobolka, Guddigu waa in ay siisaa magacyada, ciwaannada, ciwaannada iimaylka ee degmadu ay siisay (haddii la heli karo), iyo liisaska taleefannada ee ardayda dugsiga sare sarkaal qoro ciidamada ee laan kasta oo ka tirsan Ciidamada Qalabka Sida ee Mareykanka, ama machad tacliin sare oo codsanaya macluumaadkaas.  Ardayga dugsiga sareama waalidka ardaygu wuxuu qoraal ku codsan karaa in magaca ardayga, ciwaanka, ciwaanka iimaylka ee degmadu ay siisay (haddii la heli karo), iyo liiska telefoonka aan la shaacinin iyada oo aanoggolaansho hore laga helin waalidka(iinta)/ardayga xaqa u leh. Sarkaalka ciidamada qoro waa inuu saxiixo foom tilmaamaya in xog kasta oo uu helo sarkaalka shaqaalaysiinta loo isticmaali karo oo keliya in ardayda lagu wargeliyo shaqada ciidan ee aan lala wadaagin cid kale oo aan ahayn shaqsiyaadka ka tirsan adeega shaqaalaysiinta ciidamada qalabka sida. Kormeeraha guud waxa loo ogol yahay inuu ka qaado kharashka boostada si uu xogtan u siiyo sarkaal ciidanka qoro.

Waalidiinta iyo ardayda xaqa u leh waxay diidi karaan inay u oggolaadaan Guddigu inay ku shaaciyaan mid ama dhammaan macluumaadka tusahaas markay ogeysiin qoran u diraan Guddida toban (10) maalmood gudahooda ka dib markay helaan ogaysiiska Kormeeraha Guud ee sanadlaha ah.

Guddigu waxa laga yaabaa inay shaaciyaan macluumaadka tusaha, ee ardaydii hore ayagoo aan haysan ogolaanshaha ardayga ama waalidka, ilaa waalidka ama ardayga xaqa u leh uu hore u soo gudbiyay codsi ah in macluumaadkan aan la shaacin iyada oo aan ogolaansho qoraal ah laga helin. (Fiiri Siyaasadda AG8330)

> Guddiga wuxuu emailada dugsiga bixiyo u habeyaa sida "diiwaanada macluumaadka" si loo fududeeyo diiwaan gelinta ardayda una helaan fursad ay ku galaab adeegyada waxbarashada internetka, kana mid ah brograamyada mobileka uu ardayga u isticmaalo waxbarashada iyo si loogu darro buugaagta emailada gudaha. Cinwaanada emailka dugsiga bixiyo looma bixin doono sida macluumaadka diiwaanka in ka baxsan ujeedooyinkaan kooban mana la siin doono qof kasta ama hay'ad marka laga reebo bixiyaha adeegga waxbaashada internetka ee gaarka ah iyo dadka isticmaala gudaha Farsamada Waxbarashada Dagmada (District's Education Technology).
>
> Waalidka/waalidiinta, ilaaliyaha (ilaaliyeyaasha) ama ardayda xaqa u yeelata waxay ogeysiis la-tallin siin doonaan agaasimaha dugsigaada ama qofka uu magacaabo ugu dambayn Sateembar 30 sannada dugsiyeedka socdo, qoraal ahaan, qaar ama dhamaan waxyaabaha kor ku qoran oo loo baahan yahay in aan la kashifin ka hor inta aan la helin ogolaashada waalidka/ilaaliyaha ama ardayga loo ogol yahay.

1. Xaqa loo leeyahay in ashtako loo gudbiyo Waaxda Waxbarashada Mareykanka (United States Department of Education) marka dugsiga lagu eedeeyo in uu ku fashalay in uu u hoggaansamo sharuudaha FERPA.  Magaca iyo cinwaanka xaffiska maamula FERPA waa:

Family Policy Compliance Office
U.S. Department of Education
400 Maryland Avenue, SW
Washington, DC 20202-4605

**Ogeysiiska Xuquuqda Hoos Timaada Badbaadinta Baddalaadda Xuquuqda Cunugga (PPRA, Protection of Pupil Rights Amendment)**

PPRA waxay waalidiinta siisaa xuquuq ku saabsan sida aan u fullin wareysiyada, aruurinta iyo isticmaalka macluumaadka loo adeegsado suuq geynta, iyo qaar ka mid ah baaritaanka jirka.  Waxaa ka

mid ah xaqa loo leeyahay in:

- Ogolaashada ka hor inta ardayda aan laga dalbanin in ay soo gudbiyaan wareysi oo quseeyo mid ama ka badan maadooyinka la badbaaiyo ee soo socda ("wareysiga macluumaadka la badbaadiyo") haddii wareysiga laga maalgeliyo brograam ay leedahay Waaxda of Waxbarashada Mareykanka (ED, U.S. Department of Education):

    1. Laamaha siyaasadda ama caqiidooyinka ardayga ama waalidka/ilaaliaha ardayga;
    2. Dhibatooyinka madaxa ama cilmu nafsiga ee ardayga ama qoyska ardayga;
    3. Dabeecadda jinsiga ama dhaqanka;
    4. Dabeecadda sharci darrada, ka soo horjeedo bulshada, naftiisa eedeeya, ama sharaf darrada;
    5. Qiimeynta muhiimk ah ee lagu sameeyo dadka ay eedeysaneyaasha ay ka dhexeeyso xariir sokke xagga qoyska;
    6. Xariirada axsaanka sharci ahaan la aqoonsan yahay, sida qareenada, takhaatiirta, ama wasiirada;
    7. Dhaqanka diiniga, laamaha, ama caqiidooyinka ardayga ama waalidiinta/ilaaliyeyaasha; ama
    8. Dakhliga, marka laga reebo sida sharciga rabo si loo ogaado xaq u yeelashada brograamka.

- Ha ku soo gaarto ogeysiis iyo fursad aad ardayga uga saartid:

    1. Wareysiga macluumaad kale oo la badbaadiyo, iyadoo aan la fiirinin maalgelinta;
    2. Baaritaan kale oo lagu sameeyo jirka, balse aan degdeg ahayn, oo loo baayan yahay sida shardi ku xeran imaashada, uu maamulo dugsiga ama wakiilkeeda, aan lagama maarmaan ahayn si loo badbaadiyo caafimaadka iyo ammaanka ardayga, marka laga reebo maqalka, aragga, ama baarista laffaha, ama baaritaan kale oo lagu sameeyo jirka ama baaritaanka la ogol yahay ama loo baahan yahay sida hoos timaada sharciga Gobolka; iyo
    3. Hawlaha ku lugta leh aruurinta, kashifaadda, ama isticmaalka macluumaadka qofka ee laga helo ardayda loona isticmaal suuq geynta ama in lagu iibiyo ama haddii kale macluumaad loogu qeybiyo dadka kale.

- Fattash, marka la codsado iyo ka hor inta aan la siinin ama la isticmaalin:

    1. Wareysiyada macluumaadka la badbaadiyo ee ardayda;
    2. Qalabka loo adeegsado in ardayda looga soo aruuriyo macluumaadka qofka xagga suuq geybta kore, ama ujeedooyinka qeybinta kale; iyo
    3. Qoraalada wax lagu barto ee loo isticmaalo sida qeyb ka tirsan manhajka waxbarashada.

Xuquuqdaan waxaa laga wareejiyaa waalidiinta/ilaaliyeyaasha/bixiyeyaasha daryeelka, waxaana lagu wareejiyaa ardayga jira 18 sanno ama cunug yar oo qaangaaray sida waafaqsan sharciga Gobolka.

Dugsiyada Magaalada Westerville ("Dagmada") soo saartay siyaasado, kaddib marka ay la tashatay waalidiinta/ilaaliyeyaasha/bixiyeyaasha daryeelka, xagga arrinta ku saabsan xuquuqdaan, iyo qorshaha lagu badbaadinaayo asturnaanta ardayga, maamulka wareysiyada macluumaadka la badbaadiyo iyo aruurinta, kashifaadda, ama isticmaalka macluumaadka shakhsiga ee loo adeegsado suuq geynta, ama iibinta, ama ujeedooyinka kale ee la xariira qeybinta.

Dagmada waxay toos u ogeysiin doontaa waalidiinta/bixiyeyaasha daryeelka siyaasadahaan ugu yaraan sannad kasta bilowga sannad dugsiyeed kasta iyo kaddib marka la fulliyo isbaddal la taaban karo. Dagmada waxay kaloo macluumaadka toos u ogeysiin doontaa waalidiinta/ilaaliyeyaasha/bixiyeyaasha daryeelka ardayda ku qoran in ay ka qeybgalaan hawlaha qaar ama wareysiyada ku qoran hoos, iyo waxay fursad siin doonaan waalidka/ilaaliyaha/bixiyaha daryeelka in ay cunugooda kala baxaan ka-qeybgalka hawsha ama wareysiga.

Waalidiinta/ilaaliyeyaasha/bixiyeyaasha daryeelka waxaa la siin doontaa ogeysiiska horaanta sannad dugsiyeedka haddii Dagmada qiyaas ahaan aqoonsato taariikhda la qabtay ama taariikhda la qaban

doono hawlaha ama wareysiyada waqtigaas. Wareysiyada iyo hawlaha la qabtay kaddib marka sannad dugsiyeedka bilowdo, waalidiinta/ilaaliyeyaasha/bixiyeyaasha daryeelka waxaa la siin doonaa ogeysiis macquul ah oo ku saabsan hawlaha la qorsheyay iyo wareysiyada ku qoran liiska hoose iyo waxaa la siin doonaa fursad ay cunugooada uga saaran hawlaha noocaas iyo wareysiyada. Waalidiinta/ ilaaliyeyaasha/bixiyeyaasha daryeelka waxaa kaloo la siin doonaa fursad ay ku fiiriyaan wareysiyada munaasabka ah.

Waxa soo socdo waa liis ku saabsan hawlaha qaar iyo wareysiyada looga hadlo ee hoos yimaado qodobkaan:

- Aruurinta, kashifaadda, ama isticmaalka macluumaadka shakhsiga ee loo adeegsado suuq geynta, ama iibinta, ama ujeedooyinka kale ee la xariira qeybinta.
- Maamulka wareysiga macluumaadka la badbaadiyo, aysan ED u maalgelinin si buuxdo ana qeyb ahaan.
- Baaritaan kasta, aan ahayn degdeg, aan gudaha u gelin jirka qofka ama baaritaan kore sida ku sharaxan kor.

Waalidiinta aaminsan in xuquuqdooda la jebiyay waxay ashtako u gudbin karaan:

Family Policy Compliance Office
U.S. Department of Education
400 Maryland Avenue, SW
Washington, D.C. 20202-8520

**Takoor La'aanta**
Waa siyaasadda u dagsan Dugsiyada Dagmada Magaalada Westerville in aysan takoorin, taasoo jebisa sharciga federaalka ama gobolka sida ku saleysan isirka, midabka, diinta, asal qaran, jaadka qofka, xaaladda militariga, abtirsiino, jinsi (kana mid ah rabitaanka jinsiga ama aqoonsiga labolabada), da'da (marka laga reebo sida sharciga rabo), macluumaadka genetikada, ama itaal darrida (wadajir ahaan, "Dadka la Badbaadiyo") loo ogolaado, helo, daweeyo, ama shaqo la xariirta adeeg, brograam, ama hawl ay mas'uul ka yahiin Dugsiyada Magaalada Westerville. Su'aalaha ama ashtakooyinka ku saabsan u hoggaansamida siyaasaddaan ama sharuudaha takoor la'aanta Sharciga Mareykanka Itaalka Darran (Americans With Disabilities Act), Qeybta 504 ee Sharciga Dayactirka (Rehabilitation Act) ee 1973, Sharciga Takoorka Da'da Shaqada (Age Discrimination in Employment Act) ee 1975, Cutubka VI Sharciga Xuquuqda Madaninga (Civil Rights Act) ee 1964, Cutubka VII Sharciga Xuquuqda Madaniga (Civl Rights Act) 1964, ama Cutubka IX Baddalaadda Waxbarashada (Education Amendments) ee 1972, waa in loo jeediyo:

Westerville School District
Elizabeth Jelkin, J.D., M.B.A.
Civil Rights/Section 504/ADA Compliance Coordinator
936 Eastwind Drive, Suite 200, Westerville, Ohio 43081

Telefoonka (614) 797-5911, ama loo diro Xafiiska Xuquuqda Madaniga, Mareykanka (Office of Civil Rights, U.S). Waaxda Waxbarashada.

**Qorshooyinka 504**
Dugsiyada Dadweynaha Cambridge waa loo shaqeeye bixiya fursadaha siman, wuxuu ballan qaaday in uu dhamaan ardayda siiyo brograamyada waxbarashada tayada leh. Qeybta 504 Sharciga Dayactirka (Rehabilitation Act) ee 1973 wuxuu mamnuucay takoorka ku saleysan itaal darrida iyo wuxuu hubiyaa in ardayda itaalka darran ay si siman u helaan fursadsaha waxbarashada sida asxaabtooda aan qabin itaal darri. Haddii ardayga lagu tuhmo in uu qabo itaal darri la aqoonsan yahay oo loo baahan yahay in la soo dhaweeyo si uu uga qeybgalo waxbarashada, waxaa dhici karto in la fulliyo qiimeynta Qeybta 504. Haddii kooxda qiimeynta ogaato in ardayga uu qabo itaal darri la aqoonsan yahay (mid si muuqata u yareysa hal ama ka badan hawlaha waaweyn nolosha) una baahan fududeyn ama taageero oo gaarsiisan kuwa caadi ahaan ku qoran xaaladda waxbarashada, waxaa la qori doonaa Qorshaha 504.

Arday kasta oo lagu tilmaamo in uu itaal darran ayahay sida hoost timaada Qeybta 504 waxaa loo hubiyaa fursada siman xagga ka-qeybgalka hawlaha waxbarashada, kuwa aan waxbarashada ku lug lahayn iyo/ama hawlaha ka baxsan manhajka. Codsiyada la xariira kaalmada ardayga iyo qiimeynta 504 waxaa loo jeediyaa agaasimaha dhismaha ama qofka loo magacaabay dagmada.

**Sharciga Horumarinta Waxbarashada Dadka Itaalka Darran (Individuals with Disabilities Education Improvement Act) ee 2004**

Dugsiga Magaalada Westerville wuxuu ku dadaalaa in uu meel ku ogaado, aqoonsado, iyo qiimeeyo dhamaan caruurta jirta 22 sanno ee daggan gudaha dagmada laguna tuhunsan yahay in ay qabaan itaal darri. Ardayda qabta itaal darri la aqoonsan yahay waxay xaq u yeelan karaan waxbarashada khaaska iyo adeegyada la xariira. Codsiyada kaalmada ardayga iyo qiimeynta loo baahan yahay waa in loo soo qoro agaasimaha dhismaha ama qofka dagmada u xil saarto.

**Ardayda Gurilaaweyaasha**

Dugsiga Dagmada Magaalada Westerville waxay ballan qaaday sugidda xuquuqda waxbarashada iyo badbaadinta caruurta iyo dhallinta la kullanta gurilaawenimada, kana mid ah kuwa qaba itaal darrida, hoos timaada Sharciga Kaalmada Gurilaawaha McKineey-Vento (McKinney-Vento Homeless Assistance Act). Guri La'aanta waa la'aanta guri joogto ah, waxaa si balaaran loogu sifeeyaa dadka aan qabin guri daggan, aan joogto ah iyo aan ku filneen habeenimadii. Si aad u heshid macluumaad badan oo ku saabsan xuquuqda ay leeyahiin ardayda guri laaweyaasha, fiiri Siyaasadda Guddiga 5111.01, ama la xariir Xafiiska Caafimaadka iyo Adeegyada Ammaana ee dugsiga dagmada.

**SIYAASADDA GUDDIGA 5111.01 - ARDAYDA GURI LAAWEYAASHA**

Caruurta la kullanta sifeynta Federaalka "gurilaawaha" waxaa la siin doonaa waxbarashada dadweynaha ku habboon oo lacag la'aan ah (FAPE, free and appropriate public education) isla sida loo siiyo ardayda kale ee daggan Dagmada. Si loo gaaro taas, ardayda guri laaweyaasha lama qaldi doono ama lama sooci karo taasoo ku saleysan xaaladooda guri laawenimda. Dagmada waxay sugi doontaa ammaanka ardayda gurilaaweyaasha taasoo ka badbaadisa takoorka ku saleysan gurilaawenimada. Dagmada waxay si joogto ah u fiirin doontaa iyo waxay baddali doontaa siyaasadaheeda, kana mid ah siyaasadaha dishibiliinka dugsiga ee saameya ardayda gurilaaweyaasha ama kuwa xubinta ka ah Dabaqadaha la Badbaadiyo (Protected Classes) (Siyaasadda 2260).

Caruurta gurilaaweyaasha iyo dhallinta waxaa lagu sifeyaa dad aan guri joogto ah lahayn, caadi ah, oo ku filan habeenka, waxaana ka mid ah caruurta iyo dhallinta la kulanta qaar ka mid ah sharuudaha soo socdo:

A. La qeybso guriyeynta dadka kale taasoo ugu wacan khasaarada guriyeynta, dhibaatada dhaqaalaha, ama sabab la mid ah

B. Ku nool "motel", hoteel, baabuurta "trailer parks", ama kambooyinka taasoo ugu wacan la'aanta hooy ku filan.

C. Nolosha degdegga ama hooyga ku meel gaarka

D. Lagu dhaafay isbitaalada

E. Haysto aasaasi ah oo habeenkii la dago oo ku yaal meel dadweyne ama gaar loo leeyahay aan loo samaynin ama caadi ahaan loo isticmaalin sida meel caadi ah uu jiifto aadane, ama

F. Ku nool gudaha baabuur, beer, meel dadweyne, dhismo laga guuray, guri liito, bas ama saldigga treenka, ama wax la mid ah

Sida waafaqsan Sharciga McKinney-Vento (McKinney-Vento Act), dhallin yarka aan lala soconin waxaa ka mid ah cunugga ama dhallin yarka gurilaawaha aan hoos imaanin haynta waalid ama ilaaliye.

Intaas kaddib, sida waafaqsan sharciga Federalka iyo Gobolka, caruurta soo guurtay ee ku nool daruufaha lagu sharaxay A-F kor waxaa loo haystaa in ay yahiin guri laaweyaal.

**Adeegyada la Siiyo Caruurta iyo Dhallinta Gurilaaweyaasha**

Dagmada waxay ardayda gurilaaweyaasha siin doontaa adeegyo la barbar dhigi karo ardayda kale ee ku sugan Dagmada sida:

A. Adeegyada gaadiidka;

B. brograamyada dadweynaha ee loogu talogalay kuwa aan weli gaarin dugsiga iyo brograamyada waxbarashada kale iyo adeegyada uu ardayga gurilaawaha la kulmo shardiga xaq u yeelashada kana mid ah:

1. brograamyada loogu talogalay caruurta itaalka darran;

2. brograamyada kuwa Barta Ingiriisiga (ELs) (taasoo ah ardayda Aqoontooda Ingiriisiga Kooban Tahay (LEP, Limited English Proficiency);

3. brograamyada shaqada iyo barashada farsamada;

4. brograamyada la siiyo ardayda hibbada iyo kartida leh;

5. brograamyada nafaqada dugsiga; iyo

6. brograamyada dugsiga-ka hor iyo kaddib.

Maamulaha wuxuu magacaabi doonaa Xariiriyaha Caruurta Gurilaaweyaasha (Liaison for Homeless Children) ee qaban doono waajibaadka uu u xil saaray Maamulaha Intaas kaddib, Xariiriyaha wuxuu iskudui doonaa iyo wuxuu la shaqeyn doonaa Iskuduwaha Gobolka xagga Waxbarashada Caruurta Gurilaawaha iyo Dhallinta (Education of Homeless Children and Youth) iyo sidoo kale bulshada iyo shaqaalaha dugsiga ee mas'uulka ka ah bixinta waxbarashada iyo adeegyada la xariira ee la siiyo caruurta gurilaaweyaasha iyo dhallinta. Si aad u heshid macluumaad badan oo ku saabsan kaalinta Xariiriyaha (Liason), tixraac AG 5111.01.

Guddigu waxa uu aqoonsadsaa buuxinta baahiyaha waxbarashada la xiriira ee ay qabaan carruurta hoylaawayaasha ah, kuwaas oo loo aqoonsaday inay yihiin hawlaha la maalgelin karo sida hoos timaaddo Xeerka Qorshaha Samatabbixinta Maraykanka, ee lagama maarmaanka u ah helitaanka waxbarasho habboon. Sidaa darteed, lacagaha loo isticmaalo baahiyaha la xiriira waxaa loo qoondeeyay inay yihiin ujeeddo dadweyne oo habboon. Guddigu waxa uu u fasaxayaa Khasnajiga inuu u dajiyo miisaaniyada lacagaha iyo inuu ujeedadan kharashaadka ka bixiyo sanduuqa guud.

**Dagganaashada Dugsiga**

Xajinta jawi daggan oo ku wanaagsan dugsiga waxay muhiim u tahay guusha ardayga gurilaawaha ka gaaro dugsiga. Si loo hubiyo dagganaasho, Dagmada waa in ay go'aan ka gaarto meeleynta dugsiga sida ku saleysan "maslaxadda ugu fiican" cunugga gurilaawaha ama dhallin yarka sida ku saleysan qodobada ku beegan dugsiga. Dagmada waa in ay:

A. sii waddo waxbarashada ardayga uga socoto dugsiga asalka inta uu ku sugan yahay gurila'aanta marka qoyska noqoto gurilaawe inta u dhexeyso sanooyinka waxbarashada

ama inta ay socoto sannad dugsiyeedka; iyo inta ka hartay sannad dugsiyeedka xattaa haddii cunugga ama dhallin yarka si joogto ah loogu meeleeyo guri inta uu socdo sannad dugsiyeedka; ama

B. ku qorto ardayga dugsiga dadweynaha ay ardayda aan gurilaaweyaal ahayn ee daggan xaafadda uu dhab ahaan daggan yahay cunugga ama dhallin yarka ay xaq u leeyahiin in ay tagaan.

Si loo ogaado maslaxadda ugu fiican cunugga ama dhallin yarka, Dagmada waa in ay u qaadato in ardayga gurilaawaha lagu sii haayo dugsiga asalka tahay maslaxadda ugu fiican ardaygaas, marka laga reebo marka taasi ka soo horjeedo codsiga waalidka ama ilaaliyaha ardayga haddii isaga ama iyada uu yahay dhallin yar aan lala soconin. Dugsiga asalka waa dugsiga uu ardayga tagay ama lagu qoray marka uu si joogto ah u dagganaa, kana mid ah dugsiga dadweynaha aan weli la gaarin (preschool). Dugsiga asalka waxaa kaloo ka mid ah dugsiga loogu talo galay in uu qaabilo heerka xiga xagga dugsiyada ku xeran, marka ardayga dhamaystiro heerka darajada kama damabayska dugsiga asalka.

Marka la rabo in la ogaado maslaxadda ugu fiican ardayga, Dagmada waa in ay tixgeliso qodobada ku beegan ardayga, sida saamaynta guuritaanka ku leedahay waxqabadka, waxbarashada, caafimaadka, iyo ammaanka ardayda gurilaaweyaasha iyo hormarinta codsiga waalidka ama ilaaliyaha ardayga, ama dhallin yarka (haddii uu yahay dhallin yar aan lala soconin). Dagmada waxay kaloo u aragtaa meeleynta caruurta dugsiga marka ay gaaraan go'aankaan.

Haddii dagmada ogaato in aysan ahayn maslaxadda ugu fiican ardayga in uu tago dugsiga asalka ama dugsiga uu codsaday waalidka ama ilaaliyaha, ama dhallin yarka aan lala soconin, Dagmada waa in ay qofka siiso sharaxaad qoran iyo sababta loo gaaray go'aanka hab iyo qaab uu fahmi karo waalidka, ilaaliyaha ama dhallin yarka aan lala soconin. Sharaxaaddaan qoran waxaa ka mid noqon doono xuquuqda racfaanka iyo waa in lagu soo gudbiyo waqti ku habboon.

**Diiwaan Gelinta Degdegga**

Dagmada waxaa waajib ka saaray in ay qaado waxyaabaha ku dadban diiwaan gelinta iyo xajinta ardayda guri laaweyaasha. Dugsiga loo doorto in uu yahay maslaxadda ugu fiican waa in uu isla markiiba diiwaan geliyo ardayga, xattaa haddii ardayga uusan haysanin warqadaha caadi ahaan loo baahan yahay si loo diiwaan geliyo, sida talaalka iyo diiwaanada kale ee la xariira caafimaadka loo baahan yahay, caddeynta dagganaashada, ama caddeynta ilaalinta, shahaadada dhallashada, ama diiwaanada waxbarashadii hore. Sidoo kale, ardayga gurilaawaha waa in lagu qoro isla markiiba iyadoo aan la fiirinin haddii ardayga uu gaffay arjiga ama taariikhda diiwaan gelinta inta ay socotay guri la'aanta ama lagu leeyahay ganaax ama khidmado.

Dugsiga diiwaangelinta waa in uu isla markiiba la xariiro dugsiga uu ardayga gurilaawaha tagay markii ugu dambeysay si uu u qaato diiwaanada waxbarashada munaasabka ah ama diiwaanada kale. Haddii ardayga u baahan yahay talaal ama diiwaan caafimaad kale, dugsiga diiwaan gelinta waa in uu isla markiiba ay waalidka, ilaaliyaha ama dhallin yarka aan lala soconin la xariiriyaan xariiriyaha deegaanka kaasoo ku kaalmeyn doono helitaanka talaalka, baaritaanka ama diiwaanka caafimaadka kale ee loo baahan yahay.  Waa in la haayo diiwaanada uu badanaa xajiyo dugsiga si loo helo waqti munaasab ah haddii cunugga uu galo dugsi cusub ama dagmo. Diiwaanadaan waxaa ka mid ah talaalka ama diiwaanada kale caafimaadka ee loo baahan yahay, shahadooyinka dhallashada, diiwaanada ilaalinta, iyo qiimeynta adeegyada khaaska ama brograamyada. Waa in la tixgeliyo hababka wareejinta diiwaanada gudaha Gobolka ee ka dhexeeyo dugsiyada si loo fududeeyo degdegga diiwaan gelinta.

Kaddib, Dagmada waxay kaloo hubsan doontaa, in marba haddii loo aqoonsado adeegyada, ardayga gurilaawaha uu tago fasalada lana kulmin waxyaabo ku dadban si uu u galo hawlaha waxbarashada iyo hawlaha ka baxsan manhajka, sida dugsiyada soo jiita ardayga (magnet

schools), dugsiga kuleylaha, waxbarashada shaqada iyo farsamada, meeleynta horumarsan, waxbarashada internetka, iyo brograamyada dugsiga bulshada ee madax banaan (charter school) (haddii la heli karo). Kharashyada waa in laga dhaafaa xaaladahan oo kale.

**Gaadiidka**

Dagmada ardayda gurilaaweyaasha siisaa adeegyada gaadiidka ee la barbar dhigi karo gaadiidka la siiyo ardayda aan ahayn gurilaaweyaal. Dagmada waxay kaloo bixisaa ama habeysaa gaadiidka lagu tago ama looga soo noqdo dugsiga asalka marka uu codsado waalidka ama ilaaliyaha, ama marka uu codsado xariiriyaha marka ay quseeyso dhallin yarka aan lala soconin. Isla markiiba waxaa diyaariyaa gaadiidka si dhakhso loogu qoro mana abuuri doonta waxyaabaha ku dadban imaashada, celinta, iyo guusha uu gaaro ardayga gurilaawaha.

A. Haddii ardayga gurilaawaha uu ku sii socdo in uu ku noolaado Dagmada, meesha uu ku yaal dugsiga asalka; waxaa la siin doonaa gaadiid ama waxaa qorsheyn doonaa gaadiidka ardayga uu ku tago kaddibna uga soo noqdo dugsiga asalka.

B. Haddii ardayga gurilaawaha u guuro meel uu u adeego dagmo kale, inkastoo uu waxbarashada ka sii wado dugsiga asalka (ee ku yaal Dagmada), Dagmada iyo dagmada uu ardayga daggan yahay waa in ay ku heshiyaan habka loo qeybiyo mas'uuliyadda iyo kharashka ku baxa gaadiidka lagu tago dugsiga asalka. Haddii dagmada aysan raali ka ahayn qaabka noocaas, mas'uuliyadda iyo kharashka waxaa loo qeybsan doonaa si siman.

C. Marka ardayga helo guri joogto ah, waxaa la siin doonaa gaadiid uu ku tago kaddibna uga soo noqdo dugsiga asalka ilaa laga gaaro dhamaadka sannad dugsiyeedka.

Dagmada waxay go'aan ka gaartaa gaadiidka iyadoo la tashato waalidka ama ilaaliyaha iyo sida ku saleysan maslaxadda ugu fiican ardayga.

Sida waafaqsan sharciga Federaalka, inta ay socoto xallinta murranka, waxaa weli shaqeyn doono sharuudaha gaadiidka kor ku qoran. Dagmada waxay la shaqeyn doontaa Gobolka si ay u xalliso murranka gaadiidka ay ku qabto dagmooyinka kale. Haddii dagmada ka dambeyso murranka ku sugan tahay Gobol kale, Dagmada waxay u jeesan doontaa Gobolka si ay u hesho kaalmo bacdamaa hoggaaminta Federaalka qabo in ay waajib tahay in labada Gobol iskudayaan in ay ka shaqeyaan heshiis dhexmara dagmooyinka.

**Go'aanka**

Qoysaska gurilaaweyaasha iyo dhallinta waxay xaq u leeyahiin in ay taxadi ku sameyaan go'aanada meeleynta iyo diiwaan gelinta. Haddii uu murran ka dhex dhasho dugsiga iyo waalidka, ilaaliyaha ama dhallin yarka aan lala soconin taasoo ku saabsan xaq u yeelashada, xullashada dugsiga, ama diiwaan gelinta ardayga gurilaawaha, Dagmada waa in ay raacdo hababka xallinta murranka, sida waafaqsan hababka Gobolka. Haddii lala kulmo murranka noocaas ah, Dagmada waxay isla markiiba ardayga gurilaawaha ku qori doontaa dugsiga laga raadsanaayo diiwaangelinta ilaa inta laga gaaraayo xallinta murranka, kana mid ah dhamaan racfaanada. Ardayga waxaa la siin doonaa dhamaan adeegyada uu xaqa u leeyahay ilaa laga xalliyo dhamaan murranka iyo racfaanada.

Sida waafaqsan siyaasadaha Gobolka, Dagmada iyo Guddiga Waxbarashada, Dagmada waxay waalidka, ilaaliyaha ama dhallin yarka aan lala soconin siin doontaa sharaxaad qoran oo ku saabsan dhamaan go'aanada ku saabsan xullashada dugsiga iyo diiwaan gelinta uu sameyay dugsiga, Dagmada, ama Gobolka, lana raaciyo sharaxaad qoran oo ku saabsan xuquuqda racfaanka.

Ogeysiiska Dagmada iyo sharaxaadda qoran ee ku saabsan sababta ay u gaartay go'aankeeda waxaa ka mid ah, ugu yaraan, sharaxaad ku saabsan sida dugsiga u gaaray go'aanka ku saabsan xaq u yeelashada, xullashada dugsiga, ama diiwaan gelinta, sida 1) sharaxaad ku saabsan talaabada la soo jeediyay ama uu diiday dugsiga, 2) sharaxaad ku saabsan sababta loo soo jeediyay ama loo diiday talaabada, 3) sharaxaad ku saabsan fursadaha kale uu dugsiga tixgeliyay iyo sababta fursadahaas loo diiday, 4) sharaxaad ku saabsan qodobada kale ee la xariira go'aanka dugsiga iyo macluumaadka la xariira xaq u yeelashada ama maslaxadda ugu fiican go'aanka sida xaqiiqada, marqaatiyada, iyo caddeynta leysku haleyay iyo ilahooda, iyo 5) waqtiga ku habboon si loo hubsado in aan la gaffin waqtiyada loo qabtay. Sidoo kale, Dagmada waa in ay ku soo darto macluumaadka xariirinta Xariiriyaha (Liason) iyo Iskuduwaha Gobolka (State Cooridnator), iyo sharaxaad kooban oo ku saabsan kaalintooda. Dagmada waxay kaloo waalidka, ilaaliyaha ama dhallin yarka aan lala soconin u diri doontaa Xariiriyaha (Liason), kaasoo fullin doono haba xallinta murranka.

Dagmada waxay hubisaa in dhamaan go'aanada iyo ogeysiisyada lagu qoro luqad iyo qaab ku habboon akhriska hoose, akhristeyaasha aragga kooban, iyo dadka itaalka darran. Caruurta iyo dhallinta iyo/ama waalidiinta ama ilaaliyeyaasha ee barta Ingiriisiga ama kuwa luqadooda hooyo aysan ahayn Ingiriisi, Dagmada waxay siin doontaa tarjamada qoraalka iyo adeegyada tarjamada afka xagga dhamaan marxaladaha habka xallinta murranka sida waafaqsan sharciyada federaalka. Dagamada waxay kaloo email ku soo diri doontaa ogeysiisyada elataroonigga haddii waalidka, ilaaliyaha ama dhallin yarka aan lala soconin uu heli karo email kaddibna soo raaciyo ogeysiis qoran uu qof ahaan keeno ama lagu soo diro boostada.

**Caruurta Gurilaaweyaasha aan Dugsiga Gaarin (Preschool)**

Caruurta guri laaweyaasha aan weli gaari dugsiga iyo qoyskooda waxaa la siin doono sinaan xagga adeegyada waxbarashada ay xaqa u leeyahiin, kana mid ah brograamyada la siiyo kuwa aan dugsiga gaarin (preschool), kana mid ah brograamyada bilowga (Head Start), ay Dagmada maamusho. Intaas kaddib, cunugga gurilaawaha waa in uu ku haro dugsiga dadweynaha asalka caruurta aan weli gaarin dugsiga, ilaa haddii laga gaaro go'aan in aysan ahayn maslaxadda ugu fiican cunugga. Marka la samaynaayo go'aanka noocaas oo ku saabsan maslaxadda ugu fiican ardayga, Dagmada waxay tixgelin doontaa qodobada la midka ah ay u samayso ardayga, iyadoo aan fiirinin da'da. Waxay kaloo tixgelisaa qodobo gaar ah oo la xariira da'ada kuwa aan gaarin dugsiga, sida 1) sida cunugga ugu dhaggan yahay macalimiinta dugsiga ka horeeyo iyo shaqaalaha; 2) saamaynta jawiga dugsiga ku leeyahay cunugga, sida ammaanka dugsiga; tayada iyo helitaanka adeegyada si loola kulmo baahida cunugga, kana mid ah caafimaadka, koriimada, iyo baahida bulshada-caatifadda; iyo 3) waqtiga lagu tago iyo looga soo noqdo dugsiga.

Dagmada waa in ay bixiso adeegyada gaadiidka uu cunugga gurilaawaha aan weli gaarin dugsiga uu ku tago dugsiga asalka. Dagmada ayaa mas'uul ka ah in ay cunugga siiso gaadiid uu ku tago dugsiga asalka xattaa haddii cunugga gurilaawaha aan weli gaarin dugsiga ee ku qoran dugsiga dadweynaha aan weli la gaarin ee Dagmada u guuro dagmo kale aan bixinin si balaaran loo heli karo ama dugsi guud aan weli la gaarin.

**Ogeysiiska Dadweynaha**

Ogeysiinta waalidka ama ilaaliyaha ardayga guri laawaha ama dhallin yarka aan lala soconin xuquuqda uu leeyahay sida lagu sharaxay kor, Dagmada waxay soo gelin doontaa ogeysiiska dadweynaha oo ku saabsan xuquuqda waxbarashada ay leeyahiin caruurta iyo dhallin yarka la kulma guri la'aanta dugsi kasta. Intaas kaddib, Dagmada waxay soo gelin doontaa ogeyssika dadweynaha ee xuquuqda McKinney-Vento meelaha ay tagaan dadka gurilaaweyaasha, sida hooyga, cuntada bilaashka, iyo maktabyada hab iyo qaab ay fahmi karaan waalidiinta iyo ilaaliyeyaasha iyo dhallinta aan lala soconin.

**Diiwaanada Ardayga**

Xariiriyaha wuxuu kaalmeyn doonaa ardayda gurilaaweyaasha iyo waalidkooda (waalidiintooda) ama ilaaliyahooda (ilaaliyeyaashooda) ama ardayda gurilaaweyaasha aan lala soconin xagga dadaalka ay wadaan si warqado loo siiyo si loola kulmo sharuudaha Gobolka iyo deegaanka si loo galo dugsiga.

Waa la hayn doonaa dhamaan diiwaanada ardayda gurilaaweyaasha si ay u hoos yimaadaan badbaadinta Xuquuqda Aqoonta Qoyska iyo Sharciga Asturnaanta (FERPA, Family Educational Rights and Privacy Act) iyo Siyaasadda 8330, iyo hab lagu heli karo markii loo baahdo oo dhakhso loogu wareejin karo dhinacyada ku habboon, sida la doono. Sida waafaqsan Sharciga McKinney-Vento, macluumaadka ku saabsan xaaladda nolosha ardayga gurilaawaha looma haysto sida macluumaadka diwaaanka, waa in la siiyo badbaadin la mid ah badbaadinta la siiyo macluumaadka kale ee la aqoonsan karo kuna jirin diiwaanka (PII, personally identifiable information) ee ku jira diiwaanka waxbarashada ardayga hoos timaado FERPA. Dagmada waxay mideyn doontaa dhaqamada si ay u badbaadiso asturnaanta sida ku sharaxan AG 5111.01, AG 8330, iyo sida waafaqsan qodobada Sharciga Dagaalka ka soo Horjeedo Dumarka (VAWA, Violence Against Women Act) iyo Sharciga Ka Hortagga Dagaalka Qoyska iyo Adeegyada (FVPSA, Family Violence Prevention and Services Act).

Ma jirto siyaasad ka soo baxday Guddiga, ma jirto hab maamul, ama dhaqqan loo tarjumi doono ama loo dabaqi doono si loo yareeyo diiwaan gelinta, imaashada, ama guusha dugsiga ee caruurta guri laaweyaasha.

[1] Sida loo eego hagitaan aan sharci ahayn oo ka timid Waaxda Waxbarashada Mareykanka (ED), heerarka guriyeynta ku filan way ku kala duwanaan karaan deegaan ahaan. Fadlan ka eeg hagidda ED arrimaha la tixgeliyo marka la go'aaminayo in ilmo ama dhallinyaradu ku nool yihiin "guri liito."

Xasuusin:

*Waxbarashada la Siiyo Caruurta Gurilaaweyaasha iyo Brograamyada Dhallinta (Education for Homeless Children and Youth Programs), Tilmaanta aan Sharciga Ahayn (Non-Regulatory Guidance), Waaxda Waxbarashada Mareykanka (ED, U.S. Department of Education), Qeybta VII-B ee Sharciga Kaalmada Gurilaawaha McKinney-Vento (McKinney-Vento Homeless Assistance Act), sida waafaqsan baddalaadda Sharciga Arday Kasta Wuu Guuleystaa (Every Student Succeeds Act), A-3 (Luulyo 27, 2016).*

La Baddalay 1/21/11, 5/8/17

**© Neola 2024**

Sharciga
42 U.S.C. 11431 et seq. Sharciga Gurilaawaha McKinney - Vento (McKinney – Vento Homeless Act)

**Buugaagta/Buugaagta Maktabka/Qalabka**

Ardayda waxay mas'uul ka yahiin buugaagta, buugaagta maktabka, qalabka iyo qoraalada kale ay soo amaahdaan. Dhamaan ilaha waa in loola dhaqmo si xushmad leh. Kharashka ku baxa buugaagta luma, qalabka, iyo/ama alaabta ku burburta in ka badan isticmaalka caadiga waxaa mas'uul ka noqon doono ardayda iyo/ama waalidiintooda ama ilaaliyeyaashooda. Waa la qiimeyn doonaa kharashka ku baxa baddalaadda iyo/ama khidmadaha sida ku habboon.

Ilaha la isticmaalo (tusaale buugga lagu shaqeeyo) waxaa la siin doonaa ardayda, kharash la'aan. Haddii la lumiyo ilaha ama aan la isticmaali karin, ardayga wuxuu mas'uul ka noqon doonaa in uu iibsado koobi ka.

**Buugaagta**
Waxaa aad loo dhiiri gelinaa isticmaalka daboolka buugga. Xasuuso in aadan isticmaalin daboolada buugga ee korka oo idil uga "dhaga" buugga. Maaliyad ahaan, ardayda waxay mas'uul ka yahiin dhamaan buugaagta la siiyay. (Iminka, qiimaha buugaagta waa ka badan yahay $50.00).

Haddii ardayga uu mas'uul ka yahay burburinta galka, waxaa lagu soo dallici doonaa khidmadda dib u gelinta galka. Jadwalka khidmadda dib u xerida waxaa laga heli karaa jadwlka khidmadda ardayga.

Buug kasta waxaa ku qoran sumad gaar ah kaasoo la mariyo skaanka elataroonigga marka la siiyo ardaygaada. Buugaagta waxaa la marrin doonaa skan mar kale marka la gaaro dhamaadka sannad dugsiyeedka si loo hubiyo in la soo celiyo isla buuggaas la siiyay ardaygaada.

**Dhismaha Dugsiga/Dadka Soo Booqda Fasalka - La Socodka/Kormeerka Dugsiga - Hababka**

1. Dadka raba in ay soo booqdaan dugsiga ama fasalka waa in ay qorshe la sameyaan ugu yaraan labaatan iyo afar (24) saac ka hor xafiiska weyn iyo waa in ay waafaqaan qodobada ku jira Tilmaanta Maamulka (Administrative Guideline) 9150 Dadka Soo Booqda Dugsiga (School Visitors).

2. Marka ay yimaadaan, dadka soo booqdo waa in ay ka xaqiijistaan xafiiska, via intercom, qorshahooda ay ku soo booqdaan iyo kaddib marka ay soo galaan toos u tagaan xafiiska weyn.

3. Lama ogola in qofka soo booqdo dugsiga kaddibna la sheekeysto arday ku sugan gudaha dugsiga haddii aan ogolaasho laga haysanin agaasimaha ama qofka uu magacaabo. Ardayga looma ogola in uu dugsiga kala tago qof aan loo aqoonsanin in uu u yahay waalid ama ilaaliye ama qof loo fasaxay in uu mattalo waalidka ama ilaaliyaha.

Qof kasta oo soo booqda dugsiga kaasoo joogitaankiisa ama dhaqankiisa dhalliyo carqalad, amadabeecaddiisa, la soo dhaafay ama iminka, soo jeediso in uu ku talo jiro ama u badan tahay in uu carqaladeeyo, waxaa dhici karto in laga codsado in uu ka baxo xarada. Haddii qofka soo booqdo ee sidaas loola hadlo uusan meesha ka tagin, agaasimaha ama qofka loo magacaabay wuxuu u yeeri karaa saraakiisha hirgelinta sharciga deegaanka.

Si dadka soo booqdo Dugsiyada Magaalada Westerville loo siiyo macluumaad gaar ah, fadlan tixraac Tilmaanta Maamulka (Administrative Guideline) 9150.

**Brograamyada Iskaa Wax u Qabso**
Dugsiyadena waxay bixiyaan fursadaha iskaa wax u qabso oo si balaaran u kala duwan, sidaas darteed, waalidiinta, ilaaliyeyaasha, xubnaha bulshada, ganacsatada iyo ardayda waxaa lagu dhiiri geliyay in ay ka soo qeybgalaan. Macluumaadka ku saabsan fursadaha dadka ku shaqeeyo iskaa wax u qabso waxaa la heli karaa marka lala xariiro agaasimaha dhismaha, macalinta fasalka, PTA, PTSA, PTO ama ururka Xoojinta (Booster organization) ama marka la booqdo bogga internetka Guddiga Waalidka Westerville (Westerville Parent Council), lagana helo bogga internetka Dugsiyada Magaalada Westerville.

**MACLUUMAADKA ISKAA WAX U QABSO** – https://www.westerville.k12.oh.us/resources/family-resources/volunteer

Sifeynta:

**Heerka 1 - Qofka Iskaa Wax u Qabso uga Shaqeeyo Dhismaha ee la Kormeero**
Waxaa toos u kormeera shaqaalaha dagmada - waxaa loo baahan yahay teesaraha Dagmada/aqoonsiga dhismahada (ID).

**Heerka 2 - Qofka Iskaa Wax u Qabso uga Shaqeeyo Dhismaha aan la Kormeerin (Unsupervised Building Volunteer) ama Wehliyaha (Chaperone)**
Dadkaan waxay xariir aan la kormeerin la yeelan karaan cunugga/caruurta. Kaalmeyaha maktabka ama

kaaliyaha safarka habeenka.  Waxaa loo baahan yahay teesaraha dagmada/aqoonsiga (ID) dhismaha.

Si aad iskaa wax u qabso uga shaqeysid Dugsiyada Magaalada Westerville, fadlan tag bogga internetka dagmada si aad u ogaatid habka iskaa wax u qabso oo dhamaystiran.

Si aad u fiirisid siyaasadda 8120:  [guji halkan]
Si aad u fiirisid tilmaamaha maamulka 3120.09: [guji halkan]

**Ka Qeybgalka Waalidka**
Guddiga Waxbarashada ee Dugsiyada Magaalada Westerville waxay aaminsan yahiin in ku lug yeelashada waalidka/ilaaliyaha ay qeyb muhiim ah ka tahay brograamka waxbarashada. Cilmi baarista iminka socoto waxay tilmaameysaa in iskaashiga guriga-dugsiga iyo ka qeybgalka balaaran dhanka waalidiinta/ilaaliyeyaasha xagga waxbarashada caruurtooda guud ahaan waxay dhallisaa buundooyin sare, dabeecadda wanaagsan ardayga iyo maqnaasho yar. Dhamaan waalidiinta/ilaaliyeyaasha ardayda ku qoran dagmada waxaa lagu dhiirigelinaa in ay kaalin firfircoon oo kala duwan ka qaataan waxbarashada caruurtooda.

Guddiga Waxbarashada Dugsiyada Magaalada Westerville wuxuu maamulka faraa in ay soo saarto sharciyada loo baahan yahay si loo hubiyo in siyaasaddaas la raaco iyo in la dhiiri geliyo ku lug yeelashada waalidka/ilaaliyaha.  Sharciyada waa in:

1. Dhiirigeli iskaashi xoog badan oo dhexmara guriga-dugsiga iyo mas'uuliyada la qeybsado xagga waxbarashada;

2. Bixi xariirin joogto ah oo shaqeysa kana dhexeyso waalidiinta/ilaaliyeyaasha iyo sarakiisha dugsiga;

3. Sii waalidiinta/ilaaliyeyaasha siyaabo ay ku kaalmeyaan kuna dhiirigeliyaan caruurtooda si ay u dadaalaant;

4. Bixiyaan fursadaha la siiyo waalidiinta/ilaaliyeyaasha in ay ku lug yeeshaan brograamka ku lug yeelashada waalidka, kana mid ah ururada waalidka/macalinka ama ururada, kooxaha xoojinta iyo taageerada, iyo fursadaha kale ee la xariira dhismaha iyo dagmada;

5. Ku dar waalidiinta/ilaaliyeyaasha, meesha ku habboon, sida hoggaamiyeyaal iyo/ama gaarista go'aanada;

6. La imow faafinta ku habboon siyaasaddaan.  Faafinta noocaas waxaa ka mid ah buugga dugsiga iyo waxyaabaha lagu soo dhajiyo dhismooyinka dugsiga.

7. Fiirinta manhajka, buugaagta, iyo qoraalada tababarka.

**Faragelinta Dabeecadda Wanaagsan iyo Taageerada**

**Dugsiyada Magaalada Westerville**
**Sharciyada Lagu Dhaqmo iyo Siyaadaha**

**SIYAASADDA 5630.01 - FARAGELINTA DABEECADDA WANAAGSAN IYO TAAGEERADA IYO ISTICMAALKA KOOBAN EE LAGA SAMEEYO CELCELINTA IYO GO'DOOMINTA**

Guddiga wuxuu Dagmada ka ballan qaaday Dagmada Faragelinta Dabeecadda Wanaagsan iyo Taageerada (PBIS, Positive Behavior Intervention and Supports) loo isticmaalo ardayda iyo dhismaha jawi xoogga saara daryeelka, ammaanka, iyo dannaha dhamaan ardayda iyo xubnaha shaqaalaha. Shaqaalaha waxaa la farayaa inay shaqeeyaan si ay uga hortagaan isticmaalka xakameynta jireed iyo/ama gooni-u-saarista. PBIS waxay u adeeg doontaa sida aasaaska

abuurista jawiga waxbarashada ee horumariya isticmaalka faragelinta dabeecadda caddeynta ku saleysan taasoo xoojisa natiijadaha dabeecadda waxbarashada iyo bulshada ee dhamaan ardayda. Waa la xoojin doonaa horumarinta faragelinta wanaagsan iyo xalalka laga gaaro qilaafaadka suurtogalka ah. Haddii hab-dhaqanka ardaygu, si kastaba ha ahaatee, uu ku noqdo khatar dhaawac jireed oo degdeg ah ardayga ama dadka kale, shaqaaluhu waxa laga yaabaa, sida dariiqa ugu dambeeya (ie, ma jirto wax ka qabasho kale oo badbaado iyo waxtar leh oo la heli karo) iyadoo la raacayo shuruudaha siyaasaddan, isticmaal xakameyn jireed oo la ansixiyay ama gooni-u-saar si loogu ilaaliyo deegaan nabdoon.

Dhamaan celcelinta jirka iyo xayiraadda waxaa la samayn doonaa oo keliya sida waafaqsan Siyaasaddaan, taasoo ku saleysan heerarka uu isticmaalo Guddiga Waxbarashada Gobolka ee ku saabsan isticmaalka celcelinta ardayga iyo xayiraadda.

Tababarka hababka PBIS iyo isticmaalka celcelinta jirka iyo xayiraadda waxaa la siin doonaa shaqaalaha aqoonyaanka iyo shaqaalaha taakuleynta uu Maamulaha ama Wakiilku u garto in ay ku habboon yahiin. Tababarka waxaa loo fullin doonaa sida waafaqsan Heerarka Gobolka (State Standards). Marka laga reebo xaaladaha degdegga ah, shaqaalaha dugsiga keliya ee loo tababaray go'dominta la ogolaan karo iyo talaabadaha celcelinta jirka ayaa isticmaali doono farsamada noocaas.

Celceli kasta iyo go'doomin kasta waa in laga reebo qoraal iyo warbixin sida waafaqsan Siyaasaddaan.

Guddiga wuxuu sannad kasta waalidiinta ogeysiin doonaa siyaasaddaan, kaddibna wuxuu ku soo daabici doonaa bogga internetka Dagmada.

**SIFEYNTA**

**Faragelinta dabeecadda xun** waxaa loola jeedaa faragelinta loogu talogalay in ay xanuun ama fahmo darro ku abuurto ardayga si loo tirtiro ama loo yareeyo dabbecadaha xun, kana mid ah faragelinta sida isticmaalka kicinta waxyeelada, xanuunka, iyo/ama gudaha u gala, sida waxyeelada, xanuunka ama buufiska gudaha u gala, neefsiga daawada, ama dhadhanka, ama kicinta dareenka kale sida xakamaynta cimilada, iftiinka, iyo dhawaaqa.

Behavioral Intervention Plan (Qorshaha Wax ka qabashada Hab-dhaqanka (“BIP”) macneheedu waa qorshe dhammaystiran oo lagu maareeyo dabeecadda dhibta leh iyadoo la beddelayo ama meesha laga saarayo arrimaha macnaha guud leh ee kicinaya ama lagu ilaalinayo, iyadoo la xoojinayo xirfadaha beddelka, baridda xirfado cusub, iyo iyadoo la siinayo wax ka qabasho hab-dhaqan oo wanaagsan iyo taageero iyo adeegyo wax looga qabanayo hab-dhaqanka.

**Celcelinta kiimikada** waxaa loola jeedaa mukhadaraadka ama daawada loo isticmaalo in lagu kantaroolo dabeecadda ardayga ama lagu xayiro xoriyadda dhaqaaqa aan ahayn:

A. Sida uu qoray takhtar shatti qoray, ama aqoonyaan kale oo caafimaad qaba kana hoos shaqeeya awoodda aqoonyaanka sida hoos timaada sharciga Ohio, xagga dhaweynta caadiga xaaladda caafimaadka ama madaxa; iyo

B. La siiyay sida uu u qoray takhtar shatti haysta ama aqoonyaan kale oo aqoon u leh caafimaadka kana hoos shaqeeya madaxada aqoonyaanka sida hoos timaado sharciga Ohio.

**Farsamooyinka hoos u dhigida** waawax ka qabasho loo isticmaalo si looga hortago rabshadaha iyo dhaqamada gardarada leh loona dhimo darnaanta hanjabaadaha, rabshadaha iyo dhacdooyinka qaska ah.

**Qiimaynta hab-dhaqaynka shaqaynaya ("FBA", Functional Behavior Assessment)** waa nidaam ku salaysan dugsi oo loogu talagalay ardayda naafada ah iyo ardayda aan naafada ahayn oo ay ku jiraan waalidka ardayga iyo, sida ku habboon, ilmaha, si loo go'aamiyo sababta ilmuhu u sameeyo hab-dhaqamo adag iyo sida hab-dhaqanku ula xidhiidho deegaanka ilmaha. Oggolaanshaha laga helo waalidka iyo, sida ku habboon, ilmaha (sideed iyo toban (18) jir ama ka weyn), waa in la helaa intaan la samaynin Qiimaynta Habdhaqanka Shaqaynaya.

**Celcelinta makaanikada** waxaa loola jeedaa hab kasta oo lagu celceliyo dhaqdhaqaaqa xoriyadda ardayga, dhaqaaqa jirka, ama isticmaalka caadiga jirka ardayga, iyadoo la isticmaalo qalab ama shay loo samayay ujeedadaas. Celcelinta makaanikada ma aha macnaheeda qalabka ay adeegsadaan shaqalaha dugsiga ee la tababaray, ama uu ardayga u adeegsado, daweynta la ogolaaday ama ujeedooyinka ammaanka ee qalabka noocaas loo sameyay iyo, hadii lagu dabaqi karo, loo qoray, kana mid ah:

A. celcelinta loogu talogalay xassilinta daawada;

B. qalabka la adeegsado ama taageerada makaanikada loo isticmaalo in laga helo xorriyada balaaran xagga dhaqaaqa baddalkii ay ahaan lahayd suurtogal iyadoo aan la isticmaalin qalabka noocaas ama taageerada makaanikadal ama

C. suumanka ammanka baabuurka marka loo isticmaalo sida loogu talogalay inta uu ardayga saaran yahay baabuur socdo.

**Waalid** waxaa loola jeedaa:

A. waalidka laxmiga ama korsada;

B. ilaaliye guud ahaan loo fasaxay in uu ahaado waalidka cunugga, ama loo fasaxay in uu go'aano u gaaro cunugga (balse in uusan u gaarin Gobolka haddii cunugga uu ku sugan yahay mas'uuliyadda Gobolka);

C. qof u shaqeeyo sida waalidka laxmiga ama kordada (kana mid ah waalidka awoowaha, adeerka, ama qaraabo kale) uu cunugga la nool yahay, ama qof oo sharci ahaan mas'uul ka ah maslaxadda cunugga;

D. waalidka loo magacaabay in uu ilmaha koriyo sida waafaqsan A.C. 3301-51-05(E); ama

E. qof kasta lagu tilmaamo sharci ama ammar ka soo baxay maxkamadda in uu yahay waalidka cunugga una leeyahay in uu gaaro go'aanada waxbarashada isaga/iyada oo mattaleysa cunugga.

**Wehlinta qofka** waxaa loola jeedaa taabashada ku meel gaarka ama qabashada, iyadoo aan xoog, gacanta, kala goyska gacanta, garabka, ama dusha loo adeegsanin in lagu hoggaamiyo cunugga qalqalay in uu socod ku tago meel ammaan ah.

**Celcelinta jirka** waxaa loola jeedaa isticmaalka jirka taasoo dhaqaaq u diidda ama yareysa awoodda ardayga u leeyahay in uu si madax banaan u dhaqaajiyo gacmaha, lugaha, jirka, ama madaxa ardayga. Celceliska jirka kama mid aha xariirka jirka loo fulliyo ujeedooyinka soo socdo ama la midka ah si:

A. joojinta dagaalka;

B. hubka laga daffo ardayga haysto;

C. xassilan ama daggan;

D. ku kaalmeeyo ardayga in uu dhamaystiro hawsha/jawaabta haddii ardayga uusan ka hortagin xariirka; ama

E. si looga hortago khatarta dhaw ee dhaawaca ardayga isku gaysto ama dadka kale u geysto

**Wax ka qabashada iyo Taageerooyinka Hab-dhaqanka Wanaagsan ("PBIS", Positive Behavior Intervention and Supports)** macnaheeduwaa qaab-dhismeed hab-dhaqan oo heerar badan leh, dugsi oo dhan ah oo la sameeyay loona hirgeliyay ujeeddada lagu horumarinayo natiijooyinka tacliinta iyo bulshada, iyo kordhinta waxbarashada dhammaan ardayda. PBIS waxa ku jira qaab go'aan-qaadasho oo haga xulashada, is-dhexgalka, iyo hirgelinta tacliin ku salaysan caddaynta iyo dhaqamada hab-dhaqanka si loo horumariyo natiijooyinka tacliinta iyo hab-dhaqanka dhammaan ardayda. PBIS waxaa hoos yimaada xiilado wanaagsan oo ku dhisan siistemka ku kooban qofka si loo xoojiyo dabeecadaha la rabo, la yareeyo soo noqnoqoshada dabecaadaha ka hortagga, kaddibna ardayda la baro dabeecadaha ku habboon.

**Kooxda Hoggaanka PBIS** macneheedu waa kooxda loo xilsaaray heer degmo iyo heer dhisme oo qorsheeya, tababara oo kormeera fulinta PBIS eelaga sameeyo degmada iyo dhismayaasha. Kooxaha Hoggaanka PBIS waxa ku jiri kara, laakiin aan ku xaddidnayn, maamulayaasha dugsiga, wakiilada macalimiinta ee heer fasal iyo mid barnaamij, shaqaalaha awood u leh inay bixiyaan khibradda hab-dhaqan, iyo wakiilada kale ee ay aqoonsadeen degmada ama dugsiga sida darawalada baska, shaqaalaha adeegga cuntada, shaqaalaha ilma haynta, iyo xirfadlayaal.

**U nugul celcelinta** waxaa loola jeedaa celcelinta jirka ama celcelinta makaanikada marka wijiga ardayga uu hoos u sii jeedo muddo dheer.

**Xayiraadda** waxaa loola jeedaa ardayga lagu go'doomiyo qol, meel xeran, ama boos oo ardayga laga hor istaago in uu ka tago lana adeegsado celcelinta jirka ama albaab xeran ama waxyaabo kale oo ku dadban. Kama mid aha waqtiga fogeynta (timeout).

**Ardaygu** waxa loola jeedaa shakhsi ka diiwaangashan degmada.

**Shaqaalaha Ardayga** waxaa loola jeedaa macalimiinta, agaasimeyaasha, la talliyeyaasha, shaqaalaha bulshada, sarakiisha ilaha dugsiga, kaaliyeyaasha macalinka, takhatiirta cilmu nafsiga, wadeyaasha baska, bixiyeeshaha adeegga la xariira, shaqaalaha kaalkalinta ama shaqaalaha kale Dagmada ee toos ula xariira ardayda.

**Fadhiisinta (Timeout)** waxaa loola jeedaa faragelinta dabeecadda oo ardayga, muddo gaaban oo cayiman, laga bixiyo fasalka, gudaha qolka fasalka ama meel aan la xerin, ujeedanaha tahay xakameynta qofka iyo kantaroolka dabeecadiisa ama dabeecadeeda. Marka la fadhiisiyo, ardayga ama aha in jir ahaan la celceliyo ama laga horistaago in uu ka tago meesha oo lagu dadbo shay.

**WAX KA QABASHADA HAB-DHAQANKA WANAAGSAN IYO QAAB DHISMEEDKA TAAGEERADA**

Degmadu waxay ku hirgelin doontaa PBIS nidaam-ballaaran si waafaqsan R.C. 3319.46 iyo A.C. 3301-35-15. Qaab dhismeedka degmada ee PBIS waxay ku lug leedahay nidaam xog oo ka wada dhexeeya dugsiga oo dhan oo awood u siinaya la socodka horumarka tacliinta, dhacdooyinka hab-dhaqanka, imaanshaha, iyo tilmaamayaasha kale ee muhiimka ah fasalada dhan. Maamulka waxaa lagu dhiirigelinayaa inuu isticmaalo go'aan qaadashada lagu salaynayo xogta si uu u doorto, ula socdo, una qiimeeyo natiijooyinka, dhaqamada, iyo nidaamyada. Qaab dhismeedka PBIS waxa kale oo ku lug leh maalgelinta dugsiga oo dhan ee manhajka caddaynta ku salaysan iyo xeelado wax barasho oo wax ku ool ah, oo ku habboon baahiyaha ardayda, iyo xogta lagu taageerayo waxbaridda tacliimeed ee macallimiinta. Dhaqamada

caddaynta ku salaysan ee ay weheliyaan taageerooyin kala duwan ayaa la isticmaali doonaa. Qaab dhismeedka PBIS ee degmada ayaa diirada saari doona hagaajinta cimilada iyo dhaqanka shaqaalaha ee ku saabsan doorka anshaxa marka la joogo fasalka, iyadoo la adeegsanayo wada xiriirid wanaagsan oo firfircooni iyo aqoonsiga shaqaalaha. Ugu dambayntii, dhaqamada fasalka waa in lagu xidhaa oo la jaanqaadaa nidaamka dugsiga oo dhan si markaa la socodka horumarka ay ugu dhacdo daacadnimo iyo natiijooyinka la filaayay. Qaab dhismeedka PBIS wuxuu ku dadaali doonaa inuu suurtageliyo dhaqamada saxda ah ee waara.

Iyada oo qayb ka ah hirgelinta qaab dhismeedka PBIS, degmadu waxay siin doontaa arday Shaqaale leh horumar xirfadeed oo munaasib ah, si cad uga qayb qaata wax barista filashada dhaqanka dugsiga oo dhan, adeegsado nidaamyo joogto ah oo qirasho iyo sixid dhaqan, abuuro jawi waxbarid oo loogu talagalay in lagu baabi'iyo waxyaabaha kiciya hab-dhaqanka, iyo horumariya ka qaybgalka qoyska iyo bulshada.

Nidaamka ama habka ka-hortagga PBIS ayaa lagu dabaqi doonaa dhamaan ardayda iyo shaqaalaha, iyo dhamaan xaaladaha lagu jiro. Waxa ku jiri doona:

A. shaqaalaha dugsiga ee loo tababaray in ay aqoonsadaan xaaladaha sida meesha, daruufaha, yey la joogeen, iyo sababta laga yaabo in lala kulmo dabeecad aan habbooneyn;

B. qiimeynta dabeecadda uu ku shaqeeyo qofka:

   1. fiirinta xogta jirta;

   2. wareysiyada lala yeesho waalidiinta, xubnaha qoyska, iyo ardayda; iyo

   3. fiirinta qorshooyinka faragelinta dabeecadda jirta ee la soo dhaafay.

C. horumarinta iyo fullinta Faragelinta Dabeecadda Wanaagsan iyo Taageerada iyo tababarka dabeecadda ku habboon, sida:

   1. baddalaadda qodobada deegaanka ee kiciya dabeecadda aan habbooneyn;

   2. taageerada gaarista dabeecadda ku habboon; iyo

   3. isticmaalka farsamooyinka hoos u dhigidda si loo yareey halista dabeecadda dagaalka ee suurtogalka ah.

**HORUMARINTA XIRFADEED EE HIRGELINTA PBIS**

Si loogu guulaysto hirgelinta nidaamka PBIS ee ku salaysan degmada oo dhan, Guddigu waa in uu bixiyaa ama shaqaalaha ardaygu waa in uu helo horumar xirfadeed sida soo socota:

A. horumarinta xirfaddu waxay dhici doontaa ugu yaraan saddexdii (3) sanaba mar;

B. horumarinta xirfadeed waa in ay bixiyaan dugsiga ama Degmada PBIS Kooxda Hogaaminta ama Dawlad, Gobol, ama Isha qaran ee ku haboon iyadoo lala kaashanayo dugsiga ama Kooxda Hogaaminta PBIS ee Degmada;

C. kooxda Hoggaanka PBIS ee tababaran ayaa bixin doona horumarinta xirfadeed si waafaqsan qorshaha tababarka PBIS ee degmadu samaysay, kaas oo Kormeeraha Guud ama Wakiilku uu samayn doono;

D. kormeeraha guud ama Wakiilku waa inuu haystaa diiwaanada muujinaya dhamaystirka horumarka xirfadeed; iyo

E. horumarinta xirfadeed waxaa ka mid noqon doona mawduucyada soo socda:

1. dulmarka PBIS;

2. habka loo baro hab-dhaqanka fiican;

3. xog ururin;

4. u hirgelinta PBIS si daacadnimo leh;

5. nidaamyada jawaab celinta joogtada ah ee ardayda si loo qiro hab-dhaqanka ku habboon iyo sixitaanka khaladaadka hab-dhaqanka; iyo

6. joogteynta dhishibiliinka iyo gudbinta dhishibiliinka.

F. tababarka ayaa si ku habboon loogu beddeli doonaa dhagaystayaasha loogu talagala.

Kormeeraha guud ama Wakiilku waxa loo xilsaaray diyaarinta qaab dhismeedka tababarka joogtada ah si ay u bixiyaan tababar joogto ah iyo hirgelinta daacadnimada leh.

**GO'DOOMINTA**

Waxaa la isticmaali karaa xayiraadda marka dabeecadda ardayga ay halis degdeg ah ku tahay waxyeelada soo gaara ardayga ama dadka kale ama aysan jirin faragelin kale oo ammaan iyo hawsha qabata oo heli karaa. Kala soocida waxa loo isticmaali karaa oo kaliya dariiqa u dambeeya si ardayga loo siiyo fursad uu dib ugu soo ceshado xakamaynta falalkaardayga. Xayiraadda waa in loo adeegsado hab ammaan ah oo koriimo ahaan habboon, xagga waqtiga ugu yar ee loo baahan yahay si loo badbaadiyo ardayga iyo/ama dadka kale in aysan soo gaarin waxyeelo, iyo haddii kale sida waafaqsan Siyaasaddaan iyo siyaasadda modelka ee Waaxda Waxbarashada Ohio (Ohio Department of Education) ("ODE").

Gooni-u-saarida waa in ay fuliyaan oo kaliya Shaqaale Arday oo loo tababaray ilaalinta daryeelka, fayoobid, sharafta iyo badbaadada ardayga, oo ay ku jiraan kuwa loo tababaray inay ka ogaadaan calaamadaha xanuunka jireed ama dhimirka ee u baahan ka saarid iyo/ama gargaar caafimaad oo degdeg ah. Shaqaalaha ardaygu waa in uu diiwaangeliyaan indha-indheyntooda ardayga inta lagu jiro gooni u saarista.

**Sharuudaha dheeraadka ee loo isticmaalo xayiraadda:**

Haddii Shaqaalaha Ardayga isticmaalaan xayiraadda, waa in ay:

A. si joogto ah ula socdaan ardayga ku jiyo xayiraadda si ay u ogadaan haddii ay jirto dhibaato xagga jirka ama madaxa iyo raadiyaan kaalmo caafimaad degdeg ah haddii ay jirto arrin;

B. isticmaalaan xiiladaha hadalka iyo farsamooyinka ku saleysan cilmi baarista oo lagu yareeyo qalalaasaha laguna kaalmeeyo ardayga in uu la soo dhakhso ula soo noqdo kantaroolka sida suurtogalka ah;

C. xayiraadda oo laga saaro cunugga marka halista waxyeelada jirka ee la gaarsiiyo ardayga iyo/ama dadka kale ay dhamaatay.

D. la qiimeeyo ardayga si loo ogaado haddii uu jiro dhaawac ama dhibaato ka soo gaartay nafsiga kaddib marka loo adeegsado celcelinta jirka, iyo in la kormeero ardayga hadba

sida loogu baahan yahay lana raaco dhacdada;

E. fulli wareysiga dhamaan shaqaalaha ku lugta leh si loo qiimeeyo waxa shiday dhacdada, jawaabta shaqaalaha ka bixiyeen, iyo hababka wax looga qabto baahida dabeecadda ardayga; iyo;

F. dhamaystir dhamaan warbixinta loo baahan yahay kaddibna qor waxa ay ku arkeen ardayga.

G. in la hubiyo badbaadada ardayda kale lana ilaaliyo sharafta iyo ixtiraamka ardayga ku lug leh;

H. isku darida isticmaalka gooni u soocida iyo wax ka qabadyo kale oo aan ahayn kuwo jireed (kuwaas oo had iyo jeer la doorbido) kuwaas oo hoos u dhigi doona baahida gooni u saarista mustaqbalka;

I. haddi mar uun shaqaaluhu qiimeeyaan in wax ka qabashadu ku filnayn ilaalinta badbaadada dhammaan dadka ku lugta leh, la xidhiidh shaqaalaha gurmadka;

J. isticmaalka gooni u saarista inta ugu yar ee waqtiga loo baahan yahay.

**Sharuudaha qolka ama meesha loo adeegsado xayiraadda;**

Qolka ama meesha loo adeegsado go'doominta waa in ay leedahay boos ku filan, iftiin, dabayl, aragti fiican si loogu ogolaado shaqaalaha ardaydu inay kormeeraan ardayga

Qolka ama goobta loo isticmaalo xayiraada waa in aan la qufulin ama ardayga laga hor istaagin in uu ka baxo goobta haddii shaqaalaha la naafeeyo ama ka tago goobta.

**Dhaqanka kale dheeraadka ah ee la mamnuucay:**

Lama isticmaali karo xayiraad:

A. si loo dhowr wanaagga shaqaalah;

B. sida wax baddala brograamka waxbarashada;

C. sida nooc ka mida dishibiliinka ama ciqaabta;

D. sida wax lagu baddalo habab kale oo xayiraad yar si ardayga loogu taageero in uu dib u soo ceshto kantaroolka;

E. sida wax lagu baddalo shaqaalaha aan ku filneyn;

F. sida wax lagu baddalo faragelinta dabeecadda wnaagsan iyo taageerada iyo maaraynta dhibaatooyinka, ama

G. sida hab lagu jujuubo, looga aar gutto, ama hab halis geliya ardayga.

Waa mamnuuc go'doominta caruurta aan da' ahaan gaarin dugsiga, marka laga reebo in cunugga da' ahaan gaarin dugsiga laga reebi karo asxaabtiisa ama asxaabteeda fasalka, ha ahaato gudaha fasalka ama meel ammaan ah, la iftiimiyay, ama si fiican ugu socoto hawada, muddo gaaban iyo ku habboon da'da iyo koriimada cunugga, haddii cunugga uu mar kasta ku sugan yahay meel uu ka arki karo ama ka maqli karo xubin ka tirsan shaqaalaha dugsiga.

**CELCELINTA JIRKA**

Wajiga dhulka u dhigida, oo ay ku jirto xannibaad kasta oo xannibaysa marin-haweedka ardayga, ama xannibaad kasta oo saameeya habka isgaadhsiinta aasaasiga ah ee ardayga, waa mamnuuc. Shaqaalaha Ardaydu waxay u isticmaali karaan xakamaynat jireed kaliya inay tahay xalka ugu dambeeyo iyo si waafaqsan siyaasadan iyo shuruudaha A.C. 3301-35-15.

Celcelinta jirka waxaa la adeegsan karaa oo keliya marka dabeecadda ardayga halis geliso in ay waxyeelo gaarsiiso ardayga ama dadka kale kaddibna aysan suurtogelin faragelin hab kale oo ammaan ah. Celcelinta jirka waa in loo fulliyo hab ku habboon da'da iyo koriimada, aan xerto awoodda ardayga u leeyahay in uu neefsado, aan faragelinin awoodda ardayga u leeyahay in uu isgaarsiin ku sameeyo luqada aasaasiga ardayga ama habka isgaarsiinta, iyo haddii kale sida u hoggaansan Siyaasaddaan iyo siyaasadda modelka ODE.

Keliya Shaqaalaha Ardayga loo tababaray farsamooyinka xakamaynta badbaadada leh ayaa fulin kara xakamaynta jireed, marka laga reebo xaaladaha degdega ah ee naadirka ah iyo kuwa aan laga fursan karin marka shaqaale tababaran aan isla markiiba la heli karin. Shaqaalaha Ardayga waa in loo tababaraa ilaalinta daryeelka, fayoobida, sharafta, iyo badbaadada ardayga.

**Sharuudaha dheeraadka ee loo isticmaalo celcelinta jirka:**

Haddii Shaqaalaha Ardayga isticmaalaan celcelinta jirka, waa in ay:

A. si joogto ah u kormeeraan ardayga si ay u ogaadaan haddii ay jiraan waxyaabo tilmaama dhibaatada jirka ama madaxa kaddibna raadso kaalmo caafimaad degdeg ah haddii ay jirto arrin;

B. isticmaalaan xiiladaha wada xiriirka iyo farsamooyinka ku saleysan cilmi baarista oo lagu yareeyo qalalaasaha laguna kaalmeeyo ardayga in uu la soo dhakhso ula soo noqdo kantaroolka sida suurtogalka ah;

C. isla markiiba ardayga laga saaro celcelinta jirka marka halista degdegga in waxyeelo soo gaarto jirka ardayga iyo/ama dadka ay dhamaato;

D. la qiimeeyo ardayga si loo ogaado haddii uu jiro dhaawac ama dhibaato ka soo gaartay nafsiga kaddib marka loo adeegsado celcelinta jirka, iyo in la kormeero ardayga hadba sida loogu baahan yahay lana raaco dhacdada;

E. fulli wareysiga dhamaan shaqaalaha ku lugta leh si loo qiimeeyo waxa shiday dhacdada, jawaabta shaqaalaha ka bixiyeen, iyo hababka wax looga qabto baahida dabeecadda ardayga; iyo

F. dhamaystir dhamaan warbixinta loo baahan yahay kaddibna qor waxa ay ku arkeen ardayga;

G. u dhaqangeli hab ku habboon da'da iyo kala duwanaanta cabbirka jidhka;

H. hubi in badbaadada ardayda kale ilaalina sharafta iyo ixtiraamka ardayga ku hawlan;

I. ku darida isticmaalka wax ka qabadyo kale oo aan ahayn kuwo jireed (kuwaas oo had iyo jeer la doorbido) kuwaas oo hoos u dhigi doona baahida wax ka qabashada jireed ee mustaqbalka;

J. isticmaal qadarka ugu yar xoogga lagama maarmaanka u ah wakhtiga ugu yar ee loo baahan yahay;

K. haddi mar uun shaqaaluhu qiimeeyaan in wax ka qabashadu ku filnayn ilaalinta badbaadada dhammaan dadka ku lugta leh, la xidhiidh shaqaalaha gurmadka.

Celcelinta jirka looma isticmaali karo sida ciqaab ama dishibiliin, ama in lagu baddalo habab kale oo xayiraad yar si ardayga loogu taageero in uu dib u soo ceshto kantaroolka.

**Dhaqanka la Mamnuucay**

Waa la mamnuucay dhaqanka soo socoto ee hoos yimaada dhamaan daruufaha, kana mid ah xaaladaha ammaanka degdegga:

A. wajiga dhulka u dhigida;

B. nooc kasta oo ka mid ah xakamaynta jireed ee ku lug leh si ula kac, og, ama si taxadar la'aan ah u isticmaalka farsamo kasta oo:

1. ardayga oo la nabo dhulka kaddibna jilbaha laga saaro xabadka, madaxa iyo/ama qoorta;

2. adeegsata barta cadaadiska, u hoggaansanaanta xanuunka, ama farsamooyinka soo laabista xubnaha laabmo;

3. oo haddii kale ku lug leh farsamooyinka loo isticmaalo si aan loo baahnayn sababa xanuunka;

C. oo ah ciqaabta jirka sida lagu qeexay R.C. 3319.41;

D. khatar gelinta cunugga sida ku sifeysan R.C. 2919.22;

E. u diidida baahiyaha aasaasiga ah;

F. ka soocayso ama ka xakameynaya ardayda da'da dugsiga barbaarinta si xad gudub ku ah A.C. 3301-37-10(D) iyo A.C. 3301-35-15

G. xakamayn qalab loo isticmaalo;

H. xakamayn kiimiko loo isticmaalo;

I. faragelinta dabeecadda xun; iyo

J. ku xirida qol ama meel.

**LA XARIIR HIRGELINTA SHARCIGA IYO/AMA SHAQAALAHA KA JAWAABO DEGDEGGA**

Sida waafaqsan Qorshaha Maamulka Degdegga Guddiga (Board’s Emergency Management Plan) (fiiri Siyaasadda 8400), shaqaalaha Dagmada waxay la xariiri doonaan hirgelinta sharciga iyo/ama shaqaalaha jawaabta degdegga ku habboon haddii mar un ay ogaadaan in faragelinta (ha ahaato celcelinta jirka ama xayiraad) aysan ku filneen si loo xajiyo ammaanka dhamaan inta ku lugta leh.

**DHACDOOYIN BADAN OO XAKAMEYN IYO/AMA GOONI U SOOCID - SAMAYNTA QIIMEYN HAB-DHAQAN SHAQAYNAYSA IYO SAMAYNTA QORSHE WAX KA QABAD HAB-DHAQAN**

Ka dib dhacdadii saddexaad ee ardayga ee xannibaadda jirka ama gooni u saarista sannad dugsiyeedka, shirku waa inuu dhacaa toban (10) maalmood gudahooda dhacdada saddexaad sida soo socota:

A. Ardayga la ogaaday inuu u qalmo adeegyada waxbarashada gaarka ah ama haysta qorshaha 504, barnaamijka waxbarashada gaarka ah ee ardayga ama kooxda 504 waa inay la kulmaan si ay u tixgeliyaan baahida loo qabo samaynta ama horumarinta FBA ama BIP, ama wax ka bedelka FBA ama BIP ee hadda jira.

B. Dhammaan ardayda kale (ie, ardayda aan lagu sifeynin Baaragaraafka kore), koox, oo ka kooban waalidka ardayga, maamulaha ama wakiilka, macalinka ardayga, xubin ka mid ah shaqaalaha ku lug leh dhacdada (haddii aysan ahayn macalinka ama maamulka mar hore lagu casuumay), iyo xubnaha kale ee shaqaalaha ku haboon waa in ay kulmaan si ay uga hadlaan baahida loo qabo in la qabto ama dib u eegis lagu sameeyo FBA iyo/ama la sameeyo BIP.

C. Ma jiraan wax qaybtan ah oo loola jeedo in looga hortago dhamaystirka FBA ama BIP ee arday kasta oo laga yaabo inuu ka faa'iidaysto tallaabooyinkan, laakiin leh wax ka yar saddex (3) dhacdo oo xannibaad ama gooni u saaris ah.

D. Ma jiraan wax qaybtan ah oo loola jeedo in looga hor istaago degmadu inay samayso wax qiimayn ah ama waajibaadyo kale oo ay shaqaaluhu dareemaan inay ku haboon yihiin marka loo eego Sharciga Hagaajinta Waxbarashada Shakhsiyaadka Naafada ah.

**TABABARKA IYO HORUMARINTA XIRFADEED EE LOO ISTICMAALO MAAREYNTA DHIBAATOOYINKA IYO FARSAMOOYINKA DEJINTA QOFKA**

Degmadu waa inay bixisaa tababaro iyo horumarin xirfadeed oo loogu talagalay isticmaalka maaraynta dhibaatooyinka iyo farsamooyinka dejinta qofka oo ay ku jiraan isticmaalka xakamaynta iyo gooni u saarista. Gaar ahaan, degmadu waa inay sannad walba u tababartaa tiro shaqaale ah oo ku habboon dhismo kasta si ay u helaan caddaynta maaraynta dhibaatooyinka iyo farsamooyinka dejinta qofka, iyo sidoo kale isticmaalka badbaadada leh ee xakamaynta jireed iyo gooni u saarista. Ugu yaraan, tababarku wuxuu dabooli doonaa mawduucyada soo socda:

A. tallaabooyin firfircoon oo looga hortagayo isticmaalka gooni u saarida ama xakamaynta;

B. maaraynta dhibaatooyinka;

C. dukumeentiyada iyo isgaarsiin ku saabsan xakamaynta ama gooni u saarista oo leh dhinacyada ku habboon;

D. isticmaalka badbaadada leh ee xakamaynta iyo gooni u saarista;

E. barista iyo tixgalinta da'da iyo kala duwanaanta cabbirka jidhka;

F. Tilmaamaha la socodka calaamadaha murugada inta lagu jiro iyo ka dib koontaroolka jirka; iyo

G. u sheegida dhaqamada iyo hab-raacyada.

Tababarku wuxuu u dhici doonaa fool-ka-fool wuxuuna u ogolaanayaa waayo-aragnimo la ekaan karo oo la samaynayo lana helayo xakamaynta jireed si ay ka qaybgalayaashu u muujiyaan aqoonta ay u qabaan mawduucyada kor lagu tilmaamay.

Kormeeraha guud ama Wakiilku waxa loo xilsaaray in uu hayo dukumeenti qoran ama elektaroonig ah oo khuseeya tababarka la bixiyay oo ay ku jiraan kuwa soo socda:

A. magaca, jagada, iyo shaqada dugsiga ee qof kasta oo dhammaystay tababarka;

B. magaca, jagada, iyo aqoonsiga qof kasta oo bixiyay tababarka;

C. waqtiga tabobarku uu dhammaaday; iyo

D. hab-maamuuska, farsamada, iyo agabka lagu soo daray tababarka.

Iyada oo qayb ka ah tababarka loo baahan yahay, Shaqaalaha Ardayga waa in loo tababaraa si ay u qabtaan hawlaha soo socda:

A. aqoonso xaaladaha sida: meesha, shuruudohee, cidda iyo sababta ay u dhici karto dhaqan aan habboonayn; iyo

B. isticmaal qiimeynta ka hortagga kana mid ah ugu yaraan kuwan so socda:

1 dib u eegista xogta la hayo;

2. talooyinka laga helo waalidiinta, xubnaha qoyska, iyo ardayda; iyo

3. fiirinta qorshooyinka faragelinta dabeecadda jirta ee la soo dhaafay.

Dadka shaqeeyo keliya ee loo tababaray sida waafaqsa Siyaasaddaan xagga isticmaalka ku habboon celcelinta iyo go'doominta ayaa isticmaali kara farsamooyinkaas.

**KORMEERKA IYO HABABKA ASHTAKADA**

Maamulaha ama Wakiilku wuxuu kormeeri doonaa fullinta A.C. 3301-35-15 iyo siyaasadan, oo sannad walba lagu sameeyo dib u eegis A.C. 3301-35-15 iyo siyaasaddan la xiriirta isticmaalka PBIS, xakameyn jireed, iyo gooni-u-saarida. Intaa waxaa dheer, maamulku wuxuu sannad walba ogaysiin doonaa waalidiinta siyaasadda degmada iyo nidaamyada la xidhiidha shuruudaha PBIS, xakamaynta jireed, iyo gooni-u-saarista, oo ay ku jiraan habka cabashada ee soo socota.

Waalidka cunugga ku qoran dugsiga Dagmada wuxuu ashtako qoran u gudbin karaa Maamulaha ama Wakiilku arrinta ku saabsan dhacdo la xariirta celcelin ama xayiraad. Maamulaha ama Wakiilku wuxuu baari doonaa ashtako kasta oo qoran kaddibna wuxuu jawaab qoran ka diyaarin doonaa ashtakada waalidka muddo soddon (30) maalin gudahooda laga bilaabo marka uu helo ashtakada. Maamulaha ama Wakiilku wuxuu samayn doonaa dadaal macquul ah si uu ula yeesho waalidka kulan dabagal ah oo fool-ka-fool ah.

Waalidku waxa kale oo uu cabasho u gudbin karaa sharci fulinta deegaanka, waaxda shaqada iyo qoyska ee degmada, ama xafiiska taageerada ardayda isku dhafan ee gudaha Waaxda Waxbarashada Ohio. Hab-raacyada iyo wakhtiga loogu xareynayo cabashada Waaxda Waxbarashada Ohio waxay ku qeexan yihiin A.C. 3301-35-15(L).

Waalidka cunugga itaalka darran (sida ku sifeysan Ohio Revised Code 3323.01) wuxuu ashtako u gudbin karaa Waaxda Waxbarashada Ohio (Ohio Department of Education), Xafiiska Caruurta Mucjisada (Office of Exceptional Children), sida waafaqsan hababka ashtakada la heli karo sida hoos timaado Xeerka Maamulka Ohio (Ohio Administrative Code) Qeybta 3301-51-05(K)(4)-(6).

**SHURUUDA KA DIB MARKAY DHACDO GOONI U SAARIS AMA XAKAMEYN JIREED**

Celcelin kasta oo la isticmaalo ama reebid waxay ahaan doontaa:

A. isla markiiba loo sheegay maamulka dhismaha;
B. isla markiiba loo sheegay waalidka; iyo

C. la geliyay warbixin qoran.
D. lagu diiwaangeliyay warbixin qoraal ah (eeg Foomka Sheegida Qaabka Xakamaynta iyo Gooni u saarista ee Waaxda Waxbarashada Ohio).

Waalidka ama ilaaliyaha ardayga waxaa la siin doonaa koobiga warbixinta qoran muddo labaatan iyo afar (24) saac laga bilaabo isticmaalka celcelinta ama xayiraadda. Dagmada waxay hayn doontaa warbixinta qoran oo ay ku jiraan koobiga warbixinta qoran waxaa lagu hayn doonaa faylka ardayga.

Dhamaan warqadaha qoran ee la xariira isticmaalka celcelinta ama xayiraadda waa diiwaanada waxbarashada sida waafaqsan Sharciga Asturnaanta Xaqa Waxbarashada Qoyska (Family Educational Right to Privacy Act) ("FERPA"), iyo shaqaalaha Dagmada waxaa laga mamnuucay in ay macluumaadka la aqoonsan ee qofka siiyaan qof aan ahayn waalidka, sida waafaqsan sharuudaha FERPA.

Maamulaha ama Wakiilku wuxuu soo saari doonaa hab oo lagu soo aruuriyo xogta ku saabsan isticmaalka celcelinta iyo go'doominta.

Maamulku waa inuu dejiyaa qorshe taageero oo loogu talagalay macallimiinta beddelka ah haddii ay u baahan yihiin caawinta PBIS ama maaraynta dhibaatooyinka iyo dejinta qofka (ay ku jirto xakamaynta iyo gooni u saarista).

Maamulaha ama Wakiilku wuxuu macluumaadka ku saabsan isticmaalka Degmada celcelinta iyo xayiraadda sannadka u gudbin doonaa Waaxda Waxbarashada Ohio qaabka iyo qaabka ay wasaaraddu u qortay sida wakaaladdaas codsato iyo waxay diiwaanada Dagmada ee ku saabsan PBIS, celcelinta iyo xayiraadda u diyaarin shaqalaha Waaxda Waxbarashada Ohio haddii ay codsadaan.

*Laga soo qaatay Waaxda Waxbarashada Ohio ee Faragelinta Dabeecadda Wanaagsan iyo Taageerada (Positive Behavior Intervention and Supports), iyo Celcelinta iyo Xayiraadda (Restraint and Seclusion) ee Siyaasadaha iyo Hababka Modelka, la soo qaatay Julaay 2021.

**© Neola 2021**

# ADEEGYADA KHAASKA

**Ardayda Barata Ingiriisiga (EL, English Learners)**
Adeegyada Bartaha Ingiriisiga waxaa bixiya TESOL-macalimiinta iyo aqoonyaanada EL ee la siiyo ardayga xaqa u yeesha adeegyada.  Habka brograamka EL waxaa ka mid ah:

- *Luqadda aasaasiga/guriga ee ardayga ma aha Ingiriisi.
- Ardayga wuxuu keenaa in ka yar aqoonta hal maado ama ka badan aqoonta Ingiriisiga (akhriska, qorista, dhageysiga, hadalka, iyo fahamka) xagga imtixanaadka aqoonta luqadda Ingiriisiga gudaha dagmada.
- Ardayga da'diisu kama badna 21 sanno, wuxuuna ku qoran yahay dagadmada.
- Ardayga waxaa ku adag hadalka, akhriska, qorista, ama fahamka Ingiriisiga waxaana dhici karto in uusan awoodin in uu si ku filan u shaqeeyo gudaha fasalka ama marka la soo qaado imtixanaadka gobolka in, taageeo la'aan, uu la kulmo heerarka waxqabadka gobolka.
- Luqadda uu u dhashay/luqadda looga hadlo guriga ardayga ma Ingiriisi, haddii uu ku dhashay Mareykanka ama hadii uu ku dhashay waddan kale.
- Qoraalada iyo habka uu ku socdo fasalka EL waxaa lagu habeyay in lala kulmo baahida arday kasta.   Ardayda waxay ka gudbaan aqoonta Ingiriisiga "Emerging" iyaga oo ka gudba "Horay u Socda" ilaa "Aqoonta" bacdamaa la helo xirfadaha aasaasiga iyo aqoonta Ingiriisiga.

**Adeegga Hibada Waxbarashada**
Ohio, erayga "hibbada" waxaa loola jeedaa ardayda wax qabadkooda ama muujiya karti ay wax ku qabtaan heerar sare marka la barbar dhigo ardayda kale ee la da'da ah, waayoaragnimada, ama jawiga ee lagu tilmaamo in ay raacaan hababka soo socdo iyo sharuudaha ku qoran Xeerka La Baddalay Ohio (Ohio Revised Code) 3324.

Waaxda hibbada waxbarashada waxay ballan qaaday in ay aqoonsato iyo in ay la kullanto baahida ay qabaan ardayda hibbada leh. Horumarinta fursadaha brograamka K-12 in ay fulliyaan ujeedadaan, waxaa la taageeraa fursado kala duwan lana siiyaa xaalado wax looga qabto awoodda kala duwan iyo baahida ardayda hibbada leh.

Dagmada waxay hubsaa fursadda sinaanta dhamaan ardayda dagmada ee loo aqoonsado in ay leeyahiin hibbo si loo tixgeliyo in ay ka qeybgalaan adeegyada dagmada. Adeeg kasta oo la xariira brograamka wuxuu leeyahay hab oo loo baahan yahay in ardayda tilmaaman ay la kulmaan.

**Adeegga Caafimaadka Dugsiga-Baaritaanada**
Adeegyada caafimaadka waxaa bixiya kalkaalinta dugsiga ee shatiyaysan. Adeegyada waxaa ka mid ah adeegga caafimaadka dugsiga guud iyo midka degdegga ilaa dhamaan dugsiyada ku yaal dagmada. Adeegyadooda waxaa ka mid ah baarista hore ee maqalka/aragga Pre-K, xanaanada, darajooyinka 1-aad, 3-aad, 5-aad, 7-aad (aragga kaliya), 9-aad iyo 11aad, ardayda cusub ee ku soo biirto dagmada, iyo sidoo kale baarista maqalka ardayda khatarta ugu jira soo-gaadhista qaylada (tusaale. baandeyda heesaha). Ardayda haysata qiimeynta qodobada-badan waxaa kaloo laga rabaa in la baaro aragtidooda iyo maqalkooda ka hor inta aan la tijaabinin. Waxaa dhici karto in macalinka ardayga uu ardayga ku wareejiyo kalkaalinta si loo baaro. Waalidka/Ilaaliyaha wuxuu weydiisan karaa baaritaan marka uu la xariiro dugsiga cunugga. Waalidiinta/Ilaaliyeyaasha waxaa lagu ogeysiin doonaa foomka tixraacinta haddii ay jirto la-tallin in ardayga la siiyo qiimeynta aqoonta haddii uu ku dhaco mid ka mid ah baaritaanadaan.

**La-tallinta iyo Taakuleynta Caafimaadka Madaxa**
La-talliyaha brograamka dugsiga iyo adeegyada taageerada caafimaadka madaxa waxay qeyb midaysan ka yahiin dhismaha manhajka Dugsiyada Magaalada Westerville. Waxay u joogaan in ay shakhsiyaadka ku kaalmeyaan in ay manaafacaadka suurtogalka ah ee ugu weyn ka helaan waayaha waxbarashada. Prograamyada iyo adeegyada xagga hawlaha hoggaaminta ku saleysan fasalka, la-tallinta kooxda, la-tallinta qofka iyo qorsheynta, kullamada waalidka, la-tallinta shiddada iyo tixraacinta, iyo bixinta la-tallin iyo adeegyada iskuduwidda ee lka siiyo shaqaalaha dugsiga, waalidiinta/ilaaliyeyaasha iyo wakaaladaha bulshada waxaa la siiyaa dhamaan ardada qabta koriimada aqoonta, shaqada, iyo qofka-bulshada. Waxaa intaa dheer, sharciga Ohio wuxuu ka codsanayaa degmooyinka dugsiyada inay ardayda fasalka 9-aad ilaa 12-aad siiyaan lambarka telefoonka ee 988 Suicide and Crisis Lifeline (Khadka Lifeline ee Xaaladaha Is-dilka iyo Xasaradaha). Khadkan wuxuu u furan yahay 24/7 dadka reer Ohio oo dhan si ay ugu wacaan ama u qoraan fariin "988", si ay ula xiriiraan khabiir tababaran oo caawimo iyo taageero siin doona xilliga ay ku jiraan xaalad deg-deg ah oo ay wajahayaan caafimaad-maskaxiyan ah.

**Kaalmada Faragelinta**
Kooxda Kaalmada Faragelinta (IAT, Intervention Assistance Team) ee ku sugan dhismo kasta waxay la shaqeysaa waalidiinta/ilaaliyeyaasha in ay wax ka qabtaan arrimaha ardayga, soo saaraan qorshaha faragelinta, iyo kormeraan horumarka socda. Tixraacinta IAT waxay la bilaaban kartaa waalidka/ilaaliyaha, ardayga, ama xubin kasta oo ka tirsan shaqaalaha dugsiga oo la shaqeeyo cunugga. Xubnaha IAT waxay isku baddalaan dhismaha, balse caadi ahaan waxaa ka mid ah maamulaha dhismaha, macalimiinta, la-talliyeyaasha dugsiga, takhasuseyaasha, iyo inta badan takhatiirta cilmu nafsiga: IAT waxay ka hadashaa waxbarashada iyo sidoo kale caafimaadka, caatifadda-bulshada iyo arrimaha dabeecadda.

**Waxbarashada Ardayda Itaalka Darran**
Dugsiyada Magaalada Westerville waxaa laga rabaa in ay aqoonsadaan dhamaan ardayda itaalka

darran, ee jira 3 -22 sanno, oo daggan dagmada.  Ardayda aan weli gaarin dugsiga iyo ardayda gaartay da'da dugsiga ee qaba itaal darri waa in la siiyo FAPE, Waxbarashada Dadweynaha Ku Habboon ee Lacag La'aanta ah (Free Appropriate Public Education), sida ay go'aamiyaan Kooxda Brograamka Waxbarashada ku Kooban Qofka (Individualized Education Program Team). Ardayda waxaa la siiyaa adeegyada fasalka caadiga iyo adeegyada dugsiga caadiga ilaa heerka ugu sareeyo ee ku habboon.

"Ardayga itaalka darran" waxaa loola jeedaa ardayga ay qiimeyeen koox dishibiliin badan, oo loo arko in ay u baahan yahiin waxbarasho khaas ah iyo adeegyada la xariira taasoo ka dhallata mid ka mid ah xaaladaha itaal darrida soo socdo:  Autisimka, Itaal Darrida Garashada, Dhagoole-Cammoole, Dhagoole, Dhibaatada Caatifadda, Naafonimada Maqalka, Itaal Darrida Badan, Naafonimada Lafaha, Naafonimada Caafimaadka Kale, Itaal Darrida Waxbarashada, Naafonimada Hadalka ama Luqadda, Dhaawaca Xanuunka Madaxa, ama Naafonimada Aragga.  Kooxda qiimeynta qodobada-badan waxaa ka mid ah shaqaalaha dugsiga iyo waalidiinta/ilaaliyeyaasha labadaba. Haddii aad la socotid cunug laga yaabo in loo aqoonsado in uu yahay "arday itaal darran," fadlan soo wac Xafiiska Waxbarashada Khaaska (Office of Special Education), telefoonka (614)797-5700.

# HESHIISKA IN ARDAYGA U ADEEGSADO TIKNOOLOJIYADDA SI BADBAADO AH OO LA OGGOL YAHAY

Si aad u hesho oo aad u isticmaasho Macluumaadka Degmada iyo Agaka Tignoolojiyada (sida lagu qeexay Xeer-hoosaadka 0100) (wadar ahaan, "Agabyada IT"), oo ay ku jiraan akoonka iimaylka dugsigu u qoondeeyay iyo/ama intarneetka dugsiga, ardayda da'doodu ka yar tahay siddeed iyo toban (18) waa inay helaan ogolaansho ka helaan waalidka/masuulka. Ardayda siddeed iyo toban (18) jiraha ah iyo ka weyn ayaa iskood u oggolaan karo.

**Isticmaalka agabka IT-ga degmada waa mudnaan, ee ma’aha xuquuq. Ilaha IT-ga ee Guddiga Waxbarashada, oo ay ku jiraan shabakadeeda kumbuyuutarka, isku xirka intarneetka, iyo barnaamijyada/adeegyada waxbarashada onlaynka ah, ayaa loo bixiyaa ujeeddooyin waxbarasho oo keliya. Isticmaalka aan la oggolayn iyo si aan habboonayn u isticmaalidda waxaa ka dhalan doono luminta mudnaantan iyo/ama tallaabo kale oo anshaxeed ah. Ardeyda saxiixday heshiiskan waxay xaqiijinayaan inaysan u isticmaali doonin agabka IT-ga degmada arrimo sharci-darro ah, anshax-darro ah, ama handadaad ah ama inay ka galaan onlaynka waxyaabo loo qaadan karo fool-xumo, qaawanaan, ama aan carruurta ku habboonayn.**

Guddigu ayaa hirgeliyay tillaabooyinka ilaalinta tiknoolojiyada ee ka hortagaya (tusaale, xannibaadda/shaandhaynta) gelitaanka internetka ee muuqaalada ah bandhigyada/sawirrada/qalabka fisqiga ah, ka kooban sawirrada qaawan ee carruurta, ama dhibaato u leh carruurta yaryar. Guddigu waxa kale oo uu la socdaa dhaqdhaqaaqa onlaynka ah ee ardayda si ay u xaddidaan gelitaanka filimada xunxun ee carruurta iyo waxyaalaha kale ee fisqiga ah, aan la jeclaysan, aan habboonayn, iyo/ama dhibaatada u leh carruurta yaryar. Si kastaba ha ahaatee, waalidiinta/masuulka waxaa lagula talinayaa in isticmaalayaasha la go'aamiyay ay awood u yeelan karaan inay helaan macluumaadka, isgaarsiinta, iyo/ama adeegyada intarneetka ee guddiga uusan oogu fasaxin ujeedooyin waxbarasho iyo/ama in iyaga iyo/ama waalidiintooda/mas'uuliyiinta helaan wax aan habboonayn, gaf ah, aan la jeclaysan ama muran leh. Ardeyda adeegsata agabka IT-ga degmada ayaa iskood masuul uga ah oo loo qabsan doonaa, si madani iyo dambiilenimo labadaba, isticmaalka aan la ogolayn ama aan habboonayn ee agabkaas.

Guddigu waxay xaq u leeyihiin wakhti kasta, inay galaan, kormeeraan, dib-u-eegaan, oo ay baaraan diiwaanka, faylasha, iyo/ama farriimaha ay helaan, lagu hayo, ama la diro iyada oo la isticmaalayo agabka IT-ga Degmada. Farimaha la xiriira ama lagu taageerayo dhaqdhaqaaqyada sharci darrada ah

waxaa loo sheegi doonaa mas'uuliyiinta ku habboon. Isticmaalayaasha shakhsiyeed waa inaysan filan rajo qarsoodida ee la xiriirta isticmaalkooda agabka IT-ga Degmada.

**Waalidka/Masuulka**

Anigoo ah waalidka/masuulka ardaygan, waxaan akhriyay Siyaasadda iyo Tilmaamaha Maamulka 7540.03 u adeegsiga ardayga ee tiknoolojiyadda si badbaado ah oo la oggol yahay, oo waan kala hadlay ilmahayga. Waxaan fahamsanahay in gelitaanka intarneetka ee ardayga loogu talagalay ujeeddooyin waxbarasho iyo in Guddigu uu qaaday taxaddarrada jiro si loo xaddido iyo/ama loo xakameeyo ka gelitaanka ardayga ee internetka waxyaabaha fisqiga ah, aan la jeclasyan, aan habboonayn, iyo/ama dhibtaato u geysan karo carruurta yaryar. Si kastaba ha ahaatee, waxaan garowsanahay in aanay suurtogal ahayn in Guddigu xaddido gelitaanka dhammaan waxyaabaha aan la jeclaysan iyo/ama muranka dhaliyo ee laga yaabo in laga helo internetka. Anigu uma qabsan doono guddiga (ama mid ka mid ah xubnaheeda, saraakiisheeda, shaqaalahooda, ama maamulayaashooda) mas'uuliyadda macluumaadka laga yaabo in ilmahaygu la kulmo inta uu ku jiro internetka.
Intaa waxaa dheer, waxaan aqbalayaa mas'uuliyadda kala hadlidda ilmahayga qiyamyada (sida, qiyamka qoyska) ee aan rabo inay dhowraan marka ay isticmaalayaan intarneetka, oo ay ku jiraan sida ay u dooranayaan, wadaagayaan, iyo sahaminta macluumaadka iyo ilaha intarneetka. Waxaan sidoo kale fahamsanahay in shakhsiyaadka iyo qoysaska ay masuul ka noqon karaan xadgudubyada Siyaasadda iyo Xeerarka.

Haddii ilmahaygu, iyadoo qayb ka ah shaqada fasalka, uu naqshadeeyo iyo/ama dhiso websaydh, bog intarneet, ama app-ka/adeeg lagu martigaliyo saafaryada ay Guddidu leedahay ama xiriir la leh degmada, waxaan oggolahay in Guddigu uu xaq u yeelan doono inuu haysto xuquuqaha lahaanshaha ee websaydhka, bogga websaydhka, bogga intarneetka, ama app-ka/adeegga taas oo la macna ah in Guddidu u yeelan doonto ruqsad abadi ah oo ay ku isticmaalaan websaydhka, bogga websaydhka, ama app-ka/adeegga iyada oo aan wax lacag-celin ah ama lacag-bixin aynan ka helin aniga ama ilmahayga.

Intaa waxaa dheer, ardayda siddeed iyo toban (18) sano jirka ah ama ka weyn waxay aqbaleen waxyaabaha soo socda:

Waan akhriyay oo ogolaaday inaan u hoggaansamo Xeerka iyo Tilmaamaha Maamulka 7540.03 - In Ardayga u Adeegsado Tiknoolojiyadda Si Badbaado Leh Oo La Oggol Yahay. Waxaan fahamsanahay in ku xad-gudub kasta oo shuruudaha iyo xeerarka lagu dejiyay Siyaasadda iyo Tilmaamaha ay keeni karto tallaabo anshaxeed iyo/ama u gudbin sharci fulinta. Ka Isticmaale illaha IT-ga degmada ahaan, waxaan aqbalay inaan u adeegsado xiriirka intarneedka iyo agabka IT-ga si habboon, anigoo ixtiraamaya dhammaan sharciyada khuseeya, xaddidaadaha, iyo tilmaamaha.

Haddii, iyadoo qayb ka mid ah layliga fasalka, aan naqshadeeyo oo/ama horumariyo websaydh, bogga internetka, ama app-ka/adeeg lagu martigaliyo saafaryada ay guddidu leedahay ama xiriir la leh degmada, waxaan oggolahay in guddigu uu xaq u yeelan doono inuu haysto xuquuqaha lahaanshaha websaydka, bogga internetka, ama app-ka/adeegga sida guddigu waa inuu lahaadaa shatiga joogtada ah si uu u isticmaalo degelka, bogga internetka, ama app-ka/adeegga iyada oo aan lacag-celin ah ama lacag-bixin ah la igu siin.

**Macallimiinta iyo maamulayaasha dhismaha ayaa mas'uul ka ah go'aaminta waxa aan la ogolayn ama isticmaalka aan habboonayn. Maamuluhu waxa uu u diidi karaa, ka joojin karaa, ama ka hakin karaa gelitaanka iyo isticmaalka khayraadka IT-ga degmada shakhsiyaadka ku xad-gudba Siyaasadda Guddiga ee In Ardayga u Adeegsado Tiknoolojiyadda Si Badbaado Ah Oo La Oggol Yahay iyo Tilmaamaha la xidhiidha, oo uu qaado tallaabo kale oo anshaxeed sida ku habboon iyada oo la raacayo Xeerka Hab-dhaqanka ee Ardayga.**

6/9/2023

© NEOLA 2023

# DUGSIYADA MAGAALADA WESTERVILLE SIYAASADAHA DUGSIGA SARE IYO HABABKA IYO BARNAAMIJYADA Ogolaashada Guddiga

## Imaashada

**Maqnaashada - Waxa la sameeyo**
Marka ardayga ka maqan yahay dugsiga, waalidiinta/ilaaliyeyaasha waa in ay ogeysiyaan dugsiga sababta dhallisay maqnaashada.

1. Waalidka/Ilaaliyaha waa in ay ogeysiiyaan dugsiga sida ugu dhakhsiyaha badan ee suurtogalka ah si ay u soo sheegaan maqnaashada ardayga. Sida ugu fiican, ogeysiiska maqnaashada wuxuu dhici doontaa ka hor inta uusan bilaabanin waqtiga tababarka bilowdo maalinta. Haddii tani la sameeyo, looma baahna xasuusin marka ardayga ku soo noqdo dugsiga.

2. Haddii waalidka/ilaaliyaha uusan ogeysiinin dugsiga in ardayga (ardayda) maqnaan doonaan, xafiiska wuxuu ogeysiin doonaa waalidiinta/ilaaliyeyaasha ardayda ee magacooda ka muuqdo liiska kuwa maqan waqtiga sida uu rabo sharciga Ohio. Haddii la xaqiijiyo maqnaashada kaddibna soo ogolaado waalidka/ilaaliyaha maalinta maqnaashada mana jiri doono qoraal loo baahan yahay marka ardayga ku soo noqdo dugsiga.

3. Haddii waalidka/ilaaliyaha uusan ogeysiinin dugsiga maalinta ardayga (ardayda) gafeen dugsiga, iyo hadii dugsiga uusan helin xaqiijin ku saabsan ka maqnaashada waalidka/ilaaliyaha maalinta maqnaashada, ardayga waa in uu guriga ka keeno warqad qoran, uu soo saxiixay waalidka ama ilaaliyaha, sida habboon loogu qoray taariikhda, oo sheegta sababta maqnaashada.

**Ballamada**
Waa yar tahay in ardayga la siiyo ballan caafimaad ama ballanak ilkaha saacadaha dugsiga. Haddii ay dhacdo in ballanka noocaas uu noqdo lagama maarmaan, waa in la isticmaalo habka soo socdo ama ardaygaas waxaa loo aqoonsan doonaan in aan la fasixin:

Ogeysiiska ballanka uu qabto waalidka/ilaaliyaha goor hore sida suurtogalka ah maalinta ballanka ku habboon yahay. Ogeysiiska waalidka/ilaaliyaha waa in ay tilmaamaan sababta iyo waqtiga ballanka, iyo sidoo kale waqtiga la filaayo soo noqoshada haddii ardayga uu ku soo noqon doono dugsiga maalintaas.

Ardayga wuxuu iska xaadiri doonaa xafiiska imaashada maalinta ballanka si uu u qaato baaska bixidda (sign-out pass), kaasoo u ogolaan doono ardayga in uu ka tago fasalka waqtiga ku habboon.

Ka hor inta uusan ka bixin dhismaha, ardayga waa in uu soo marro xafiiska imaashada si uu u saxiixo bixidda.

Kaddib marka uu soo noqdo, ardayga waa in uu xafiiska imaashada keeno xaqiijin ku saabsan ballankiisa/ballankeeda kana soo qaato takhtarka, takhtarka ilkaha, iwm. kaddibna saxiixo imaashadiisa.

**Ka noqoshada xariirka**

Waxaa loo baahan yahay ruqsadda waalidka/ilaaliyaha si ardayga uu kaga noqdo dugsiga, marka laga reebo ardayda jirta toban iyo sideed sanno. Waalidka/Ilaaliyaha waa in uu ardayda u soo raaco Xafiiska Hanuuninta (Guidance Office) si uu u bilaabo hababka ka noqoshada. Kaddib marka la soo celiyo buugaagta ardayga, macalin kasta wuxuu saxiixi doonaa foomka ka noqoshada, taasoo ardayga siin doonto darajada ka noqoshada. Kaddib marka la dhamaystiro, foomka waa in lagu soo celiyo Xafiiska Hoggaaminta (Guidance Office) si loo dhamaystiro habka ka noqoshada. In aan la raacin hababka waxay dhallin kartaa in dib u dhac ku yimaado shahaadada rasmiga.

**Ardayda Qaangaartay - Toban iyo Sideed Jir balse ka Yar Labaatan-iyo-Labo Sanno**

Sharciyada Waxbarashada Qasabka ah ee Ohio (Ohio Compulsory Education) uma baahna in ardayda jirta 18-21 sanno tagaan dugsiga. Hase ahatee, ardayda qaangaartay, kuwa aan weli ka qalin jebinin dugsiga sare oo weli la daggan waalidiintooda/ilaaliyeyaashooda ku sugan Dagmada Dugsiga Magaalada Westerville waxay xaq u leeyahiin in ay tagaan dugsiga iyagoo aan bixinin kharashka waxbarashada ilaa ay ka gaaraan 21. Ardayga qaangaaray waxaa lagu sifeyaa arday kasta oo jira 18 sanno ama ka badan.

Xoogaa wareer ayaa dhashay waqti hore taasoo ku saabsan "Xuquuqda iyo Mas'uuliyadda" saaran ardayga qaangaarka. Si loo caddeeyo qaar ka mid ah arrimahaan, wararka soo socdo ayaa lagu dabaqi doonaa dhamaan ardayda marka ay gaaraan 18 sanno.

1. Waxaa la filan doonaa in dhamaan daabacaadda ardayga in ay u hoggaansamaan sharciyada wargeyska mas'uulka ah.

2. Ardayga qaangaaray wuxuu fasixi karaa ka maqnaashada dugsiga marka uu waco Xafiiska Imaashada (Attendance Office) maalinta maqnaashada ama uu keeno qoraal maalinta uu soo noqdo. Sababta maqnaashada waa in ay waafaqsan tahay sharciyada lagu dabaqo dhamaan ardayda. Haddii, sida ay la tahay madaxda dugsiga garato, ardayga qaangaaray uu si xad dhaaf ah u maqan yahay, maamulka wuxuu codsan karaa in xaqiijin dheeraad ah lagu sameeyo maqnaashada.

3. Ardayga qaangaaray wuxuu xaq u leeyahay in uu iska xaadiriyo Xafiiska Imaashada (Attendance Office) marka uu soo daaho ama in uu saxiixo bixidda marka uu waqti hore kana haysanin ogolaasho waalidka/ilaaliyaha. Hase ahatee, waxaa muhiim ah in la xasuusto, in sababta loo saxiixo gudaha iyo dibadda loo qaato in ay tahay waxa la fasixi karo sida waafaqsan sharciyada imaashada ee lagu dabaqo dhamaan ardayda. Haddii raali gelinta tahay mid laga soo jeedin karo su'aal, ardayga waxaa lagu wareejin doonaa kaaliyaha agaasimaha.

4. Foomka waxaa loo diri doonaa ardayga. Hase ahatee, ardayga qaangaaray wuxuu xaq u leeyahay in uu qoraal ahaan codsado in isaga/iyada loo soo gudbiyo wararka dugsiga. Isgaarsiinta noocaas waxaa ka mid noqon kara kaararka darajada, warbixinta horumarka ku meel gaarka, iyo warbixinta dishibiliinka (sida ogeysiiska ka-joojinta). Kaddib marka la helo codsigaan, sarkaalka dugsiga wuxuu ogeysiin doonaa waalidiinta in isgaarsiinta dheeraadka loo diri doono ardayga keliya. Waxaa dhici karto in aan la xormeynin codsiga ardayga qaangaaray in uu joojiyo isgaarsiinta uu la leeyahay waalida/ilaaliyaha haddii sharciyada canshuurta dakhliga federaalka ama sharciyada kale federaalka ee xakuma ardayda baaahiyaha gaarka qaba ay u baahan yahiin iyo/ama ogoladaan xariirka lala leeyahay waalidiinta/ilaaliyayaasha ardayda qaangaaray.

5. Dhamaan ogolaashada, iska dhaafidda, iwm. ee badan laga rabo waalidiinta ama ilaaliyeyaasha ardayda yaryar lana xariira asbaab gaar ah sida safarada dibadda, foomka Ruqsadda

Caafimaadka Degdegga (Emergency Medical Authorization), ruqsadaha dibadda xerada, iyo codsiga baddalaadda jadwalka, waxaa saxiixi karo ardayga qaangaaray.

Liiska kore ma aha mid ay ku dhamaystiran yihiin dhamaan xuquuqda iyo mas'uuliyadda saaran ardayda qaangaartay. Su'aalaha qaar ee ku saabsan meelahaan ama kuwa kale aan ku jirin waa in loo jeediyo maamulaha iyo eegidda AG 5780 iyada oo uu la socdo Foomka 5780 F1.

**Hababka Diiwaan Gelinta Ardayda Qaangaartay**

1. Dhamaan kuwa jira ugu yaraan toban iyo sideed sanno balse ka yar labaatan iyo labo sanno ee daggan meel ka fog waalidiintooda, naftooda ku masaruufa shaqadooda aan qaadanin dibloomada dugsiga sare waxay xaq u leeyahiin in ay tagaan dugsi lacag la'aan ah oo ku yaal dagmada ay daggan yahiin, haddii waalidiintooda/ilaaliyeyaashooda daggan yahiin dagmada ama haddii kale.

2. Diiwaangelinta ka hor, ardayga wuxuu siin doonaa Xafiiska Hawlaha Ardayga, Ammaanka iyo Isgaarsiinta oraah la saxiixay oo laga soo qaaday shirkadda uu ka shaqeeyo taasoo muujisa aqoonsiga shirkadda, nooca shaqada, muddada shaqada, iyo isku celceliska dakhliga soo gal bil kasta, ama warqado kale oo lagu qanco xagga shaqada iyo dakhliga.

3. Si loo arko in ardayga uu masaruufo naftiisa xagga imaashada dugsiga, dakhliga soo gala ardayga bil kasta waa in uu ku filan yahay in uu bixiyo kharashka hooyga, raashinka, daryeelka caafimaadka, danabka, dharka, waajibaadka deynta, iyo baahida kale ee aasaasiga ah. Jiifka lacag la'aanta, cuntada ama deeqda la siiyo ardayga laguma darri doono xisaabinta dakhliga.

4. Diiwaan Gelinta ka hor, ardayga wuxuu Xafiiska Hawlaha, Ammanka iyo Isgaarsiinta Ardayga (Office of Studen Activities, Safety ana Communication) siin doonaa koobiga kirada ama heshiiska kirada, ama caddeyn ku filan meesha uu daggan yahay iyo bixinta kirada.

**Heerka Fasalka**

Heerka fasalka xagga sharafta qalin jebinta waxaa go'aan ka gaari doono nidaamka iskudarka GPA marka la isticmaalo darajooyin miisaaman kaddib marka la dhamaystiro samastarka todobaad (7aad). Mar jiro arday xaq u yeelan doono sharafta qalin jebinta, sida Valedictorian, iwm. haddii isaga ama iyada lagu qoray afar (4) samastar isku xiga ka hor samastarka ugu dambeeyo oo loo isticmaalo soo saarka sharafta noocaas.

**Sii Jeedinta**

Dugsiyada Magaalada Westerville iyo Waaxda Boliiska Westerville (WPD) waxay ka wada shaqeyaan hirgelinta Brograamka Ka Sii Jeedinta (Diversion Program) uu qofka iskiisa uga qeybgalo. Brograamkaan wuxuu u furan yahay ardayda dhallinta, ee hoos yimaada DPD, waxay la xariiraan gaf hoos yimaada awoodda Maxkamadda Dhallinta. Tusaalooyinka waxaa ka mid ah balse kuma eka: Dhamaan dhinacyada ku lugta leh waa in ay waafaqaan qodobada soo socda ee ka tirsan heshiiska Sii Jeedinta (Diversion):

A. Shirka lala galo maamulaha dugsiga, Sarkaalka Ilaha Dugsiga (School Resource Officer), ka-qeybgalaha iyo waalidka/ilaaliyaha iyo kuwa kale ee loo arko in ay ku habboon tahay.
B. U hoggaansan Heshiiska Brograamka Sii Jeedinta Dhallin Yarka
C. In aan loo hoggaansamin qodobada Heshiiska Brograamka waxay dhallin doontaa in la soo gudbiyo eedeynta asalka ee loo haysto dhallin yarka.

**Qaaraanka-Maaliyadda**

Dhamaan mashaariicda qaaraanka maaliyadda waa in uu soo ogolaado agaasimaha ama qofka uu isaga/iyada magacaawdo.

**Siistemka Darajo Bixinta**

Macluumaadka ku saabsan xisaabinta iyo helitaanka isku celceliska buundada darajada (grade point averages) waxaa laga heli karaa Dugsiga Sare Tilmaanta Qorsheynta Waxbarashada. Hoggaamintaa

waxaa laga heli karaa la-talliyaha dugsigaada, ama bogga internetka Dugsiyada Magaalada Westerville: www.westerville.k12.oh.us (*Riix Waalidiinta/Ilaaliyeyaasha; kaddibna Hoggaaminta Qorsheynta Aqoonta).

Guddiga Waxbarashada (Board of Education) wuxuu aaminsan yahay in siistemka darajo bixinta leysku haleyn karo lagana isticmaalo dugsiga oo idil yahay lagama maarmaan si loo siiyo ilaaliyo iswaafajinta warbixinta qiimeynta waxqabadka ardayga iyo si macluumaadka waxqabadka ee ku saabsan ardayda loo gaarsiiyo ardayda naftooda iyo waalidiinta ama ilaaliyeyaasha ardayda. Guddiga wuxuu ogolaan doonaa siistemka darajo bixinta dugsiyada. Maamulaha wuxuu soo saari doonaa habab gaar ah oo la xariira maamulka lagu fulliyo siyaasaddaan. Hababkaan waxaa la fiirin doonaa waqti ka waqti si loo hubiyo in dhaqanka darajo bixinta ay ahaato mid waafaqsan isbaddalada ku dhaca barashada koorsooyinka dagmada.

Iskucelceliska dhibicda darajada saddaxda bil (quarter grade-point averages) waxaa laga heli karaa PowerSchool, siistemka macluumaadka ardayga internetka, meesha ka hooseyso qeybta Darajooyinka iyo Imaashada (Grades & Attendance).

Haddii ay qabyo ka soo baxaan kaarka warbixinta (report card) inta uu socdo sannad dugsiyeedka, waa in loo sheego Xafiiska Hoggaaminta (Guidance Office).

Hababka qiimeynta ardayga waa isbaddalaan, macalin ilaa macalin. Bilowga koorsada, ardayda waxay filan karaan in macalinka qeybiyo oraah darajo bixin oo qoran oo soo qorta waxa fasalka filaayo iyo siyaasadaha darajo bixinta. Macalimiinta qaar waxay waalidka iyo ardayga weydiin doonaan in ay saxiixaan oraahda, aqoonsi ahaan.

Tan ku saabsan macluumaadka gudbinta heerka Darajada, Sharuudaha Qalin Jebinta, Fursadaha Dibloomada, Brograamyada Aqoonta iyo Koorsooyinka la Bixiyo waxay tixraacaan Tilmaanta Qorsheynta Aqoonta Dugsiga Sare (High School Academic Planning Guide).

**Qalin Jebinta, Habeenka Waayeelka Fakarka/Shahaada Baccalaureate**

Ka qeybgalka qalin jebinta iyo Habeenka Fakarka (Evening of Reflection) waa wax ay iska dhaafi karaan ardayga sannadka ugu dambeeyo. Ardayda sannadka ugu dambeeyo waxaa laga codsanaa in ay saxiixaan ballan haddii ay ka qeygeli doonaan ama aysan ka qeybgeli doonin leyliga Qalin Jebinta. Waa la ogeysiin doonaa waalidiinta/ilaaliyeyaasha haddii wiilkooda/gabartooda doorato in aysan ka qeybgelin. Tagidda ku celcelinta qalin jebinta waa WAAJIB. Ardayda sannadka ugu dambeeyo waxaa fasixi karo agaasimaha ama qofka mattalo oo keliya.

Ardayda sannad ugu dambeeyo dugsiga sare waxay dooran karaan hal bandhige ay ku abaal mariyaan dibloomadooda marka la gaaro Bilaabidda (Commencement). Ardayda Xanuunsan Waxay Soo Noqon Doonaan Haddii:

- Xubin ka tirsan shaqaalaha Dugsiyada Magaalada Westerville (oo mushaar ka qaato Guddiga Waxbarashada), waqti hore ama iminka, oo saamayn la taaban karo ku yeesha nolosha ardayga. Ardayda dugsiga sare loogama baahna in ay soo bandhigaan diblooma.
- Macalin shahaado haysta, la-talliyaha tilmaanta, ama maamulaha u shaqeeyo Dugsiyada Farsamada Delaware/Columbus.
- Xubnaha Guddiga Agaasimeyaasha (Board of Directors).

**La Talliyeyaasha Dugsiga**

La-Talliyeyaasha waxay diyaar u yahiin in ay la kulmaan ardayda iyo waalidiinta ama ilaaliyeyaasha mar kasta oo loo baahdo. La talliyeyaasha waxay bilaabi doonaan in ay la xariiraan ardayda iyagoo ku soo bandhiga gudaha fasalka, shirarka kooxda yar, safarada dibadda, iyo shirarka qofka. Xariirkaan waxaa la bilaabaa dhowr jeer sanooyinka uu ardayga ku jiro dugsiga sare. La-talliyeyaasha, iyo sidoo kale xubnaha kale shaqaalaha, waa in loo garto in ay fahmaan iyo u roon yahiin ilaha sida qofka ula qabsado, tilmaamaha shaqada iyo la-tallinta aqoonta.

Ardayda waxay bilaabi karaan in ay la xariiraan la-talliyehooda iyagoo ballan ka qabsada Xarunta Hoggaaminta (Guidance Center). Xogeynta ku sugan xafiiska la-tallinta dugsiga waxay ku faraxsanaan

doontaa in ay ballan ka qabato la-talliyaha ardayga:

A. Si loo soo saaro, lana kaashado kaalmada iyo dhiirigelinta la-talliyaha, qaar ka mid ah ujeedooyinkiisa/ujeedooyinkeeda, iyo si loo sameeyo qorshooyin dhab ah oo lagu gaaro ujeedooyinkaan inta uu socdo dugsiga sare iyo kaddib;
B. Si looga hadlo dugsiga ama dhibatooyinka qofka;
C. Si loo helo kaalmo xagga "sida wanaagsa ee wax loo barto";
D. Si loo sahmiyo awoodiisa/awoodeeda iyo maslaxadda;
E. Si loo ogaado adeegyada bulshada ay heli karaan ardayda xagga waxbarashada, dhibatooyinka caatifadda, arrimaha qoyska, macluumaadka mukhadaraadka, dhibatooyinka caafimaadka, iwm.;
F. Si loo helo kaalmo xagga qorsheynta waxbarashada dugsiga sare kaddib.;
G. Si looga jawaabo su'aalaha ku saabsan adeegyada hoggaaminta, shahaadada kulliyadda, iwm.

Haddii ay soo baxdo arrin degdeg ah, la-talliyeyaasha waxay iskudayi doonaan in ay isla markiiba arkaan ardayda.

**Shirarka Waalidka/Mas'uulka-Macalinka**
Waalidiinta/masuuliyiinta waxaa lagu dhiirigelinayaa inay qaban-qaabiyaan shirar ay la yeeshaan macalimiinta si ay u arkaan horumarka waxbarasho ee ardaygooda oo ay u helaan fursad ay kula kulmaan macalimiinta ardayda. Wakhtiga shirarka waxa lagu qabanqaabin karaa adiga oo dugsiga waca oo ballan samaysta. Shirarka waxaa waalidiinta/mas'uuliyiinta loo qabtaa deyrta iyo jiilaalka.

**Ruqsadda Lagu Marro Hallka (Hall Passes)**
Ardayga ayaa mas'uul ka ah in uu ruqsad (pass) ka codsado macalinka, la-talliyaha, ama maamulaha kaddibna loo isticmaalo hallasha waqtiga fasalka.

**Aqoonsiga/Aqoonsiga Ardayga**
Sida waafaqsan sharciga gobolka, qof kasta oo ku sugan xerada dugsiga waxaa laga dalban karaa in uu muujiyo aqoonsi marka madaxda dugsiga ay sidaas ka dalbato. Ardayda waxaa laga rabaa in ay wattaan Kaararka Aqoonsiga Sawirka Dugsiga Westerville (Westerville School Picture Identification Cards).

**Ogeysiisyada Wararka loo Jeediyo Dadweynaha**
Ogeysiisyada waxaa la akhrin doonaa maalin dugsiyeed kasta iyo waxaa la soo gelin doonaa bogga internetka dugsiga.

**Isbaddalada Jadwalka**
Dhamaan ardayda waxaa si xooggaan loogu dhiirigelinaa in ay soo saaraan jadwalkooda asalka. Daruufaha aan caadiga ahayn awgeed, marmar waxaa loo baahan yahay in wax la baddalo. Dhamaan codsiyada baddalaadda jadwalka waxaa loo diraa Guddiga Fiirinta Baddalaadda Jadwalka (Schedule Change Review Committee). Foomamka Codsiga Baddalaadda Jadwalka (Schedule Change Request Forms) waxaa laga heli karaa xafiiska la-talliyaha dugsiga. Habka looga noqdo koorsooyinka: Fadlan tixraac Tilmaanta Sharaxaadda Koorsada Dugsiga Sare (High School Course Description Guide). Ardayga ka baxa koorso sannad-dugsiyeed dhan socota ka hor dhammaadka muddada qiimeynta koowaad waxaa laga yaabaa in lagu siiyo darajada U (Aan Ku Filnayn) koorsadaas, iyadoo go'aankaasi uu ku xirnaan doono maamulaha dugsiga. Marka muddada qiimeynta koowaad ay dhammaato ka dib, ardayga waxaa laga yaabaa in lagu siiyo darajada ugu dambeysa ee F (Ku Dhacay) ama U (Aan Ku Filnayn) koorsadaas. Ardayga ka baxa koorso simistarka ama iska dhaafay koorso kadib maalinta 10-aad ee dugsigu socdo waxaa laga yaabaa in lagu siiyo darajada ugu dambeysa ee U (Aan Ku Filnayn)) koorsadaas, iyadoo go'aankaasi uu ku xirnaan doono maamulaha dugsiga. Marka muddada qiimeynta koowaad ay dhammaato ka dib, ardayga waxaa laga yaabaa in lagu siiyo darajada ugu dambeysa ee F (Ku Dhacay) ama U (Aan Ku Filnayn) koorsadaas. Codsiyada lagu doonayo in jadwalka waxbarashada lagu beddelo ee la soo gudbiyo wakhti ka baxsan muddada rasmiga ah ee loo cayimay waxaa dib u eegi doona kooxda maamulka iyo la-taliyayaasha dugsiga. Codsiyada beddelka jadwalka waa in qoraal ahaan loogu gudbiyaa la-taliyaha dugsiga ee ardayga loo xilsaaray. La-taliyahaasi wuxuu la shaqayn doonaa macallimiinta ay arrintu khusayso, ka dibna wuxuu la xiriiri doonaa ardayga si uu ugu gudbiyo go'aanka la

gaaray iyo sababaha loo cuskaday. Intaa waxaa dheer, iyadoo ay ka caawinayaan la-taliyayaasha dugsiga iyo macallimiintu, ardayda u baahan inay ka wareegaan koorsooyinka heerka sare ah (Honors ama Advanced Placement) una wareegaan koorsooyin caadi ah ayaa sidaas samayn kara inta lagu jiro simistarka koowaad.
Taxadirka: Ka bixidda koorsada waxay dhallin kartaa darajada dhicidda. Sida ku cad Xeerka Board 5200, ardayga ku jira darajooyinka 9 ilaa 12 waxa loo tixgalin doonaa arday u dhigma wakhti buuxa waase haddii ardaygu ka diiwaan gashan yahay ugu yaraan shan (5) cutub/cashar oo wax barid ah, sida uu qeexay sharciga Gobolka, sanad dugsiyeed kastaba.

**Imtixanaadka Samastarka**

Imtixaanda ayaa laga yaabaa in la qaado dhamaadka simistar kasta. Waa waayo waxbarasho muhiim ah, waana in ay dhamaan ardayda u qaadato si culus. Waxa ku jiro imtixaanka waxay ku xeran tahay waaxda iyo macalimiinta qaar.

**Khidmadaha Ardayga**

Khidmadaha guud, khidmadaha tababarka, khidmadaha jimicsiga waxaa la dajiyaa sannad kasta. Darajooyinka dhabta aha waxaa la gelin doonaa diiwaanka kaddib marka si buuxdo loo geliyo khidmadahaas iyo/ama dallacaaddaas. Haddii khidmadaha ama dallacaadda aan si buuxsan loo bixinin inta uu socdo sannad dugsiyeedka la galay kharashka khidmadaha ama dallacaadda, dhicid ayaa ka dhallan karta marka laga reebto darajooyinka, buundada, iyo ka-qeybgalka leyliga qalin jebinta. Haddii ay dhacdo in talaabado kore aysan dhallinin in la soo aruuriyo khidmadda, Guddiga wuxuu u fasaxay Qasnajiga in uu qaado talaabo sharci oo ku habboon ama talaabo kale oo looga soo aruuriyo.

**Hoollasha Waxbarashada**

Hoollasha waxbarashada waxaa loo habeyaa si wax loogu akhristo oo kaliya. Ardayda waa in ay yimaadaan hoolka waxbarashada si ay wax ugu akhristaan. Ilaaliyaha hoolka wax lagu barto ayaa qeybin doono kuraasta. Ma jiro arday loo ogolaan doono hoolka waxbarashada ruqsad la'aan/baas la'aan. Ardayda waa in ay raacaan hababka maktabka si ruqsad looga siiyo hoolka wax lagu barto si ay u isticmaalaan maktabka.

**Dugsiga Kuleylaha**

Brograamyada Dugsiga Kuleylaha Westerville (Westerville Summer School) waxay ardayda siiyaan fursad ay ku shaqeystaan buundo marka ay qaataan koorsada buuxda ee Carnegie Unit, taasoo ardayda siisa fursad ay horay u sii shaqeystaan, ku celiyaan koorsada lagu dhaco, dib u cusboneysiiyaan una hagaajiyaan xirfadaha barashada xisaabta, fanka luqadda Ingiriisiga, darasaadka bulshada, caafimaadka iyo aqoonta jimicsiga iyo daruusta la xusho.

**Kormeerka Saacadaha uusan Tababarka Jirin**

Arday kasta oo ka qeybgala hawsha dugsiga taasoo la qabto saacadaha aan daruusta la qaadanin waa in uu hoos yimaado kormeerka xubin ka tirsan shaqaalaha.

**Qaadidda Imtixaanka**

Ka Dhaafidda Imtixaanka Ugu Dambeeyo Ardayda Sannadka ugu Dambeeyo

Si ardayga uu xaq u yeesho ka-dhaafidda imtixaanka kama dambayska sannadka ugu dambeeyo, ardayda waa in ay la kulmaan sharciga soo socdo:

1. Ardayga waa in uu shaqeysto buundo ku filan si uu noqdo arday ku jiro sannadka ugu dambeeyo.

2. Ardayga waxaa laga filaa in uu la kulmo heerka dabeecadda

3. Ardayga waa in uu shaqeysto 80% ama isku celcelis ka fiican koorsada imtixaanka ugu dambeeyo laga dhaafi doono.
   Koorsooyinka Samastarka - isugeynta boqolkiiba 2 rubac
   Koorsooyinka Sannadka - isu keenidda booqolkiiba muddo 4 rubac, kana mid ah bartamaha termka.

Waaxda Hoggaaminta (Guidance Department) waxay isku habeysaa imtixanaadka gelitaanka kulliyadda uu soo diyaariyay Guddiga Imtixaanka Gelitaanka Kulliyadda (CEEB, College Entrance Examination Board) iyo Brograamka Imtixaanka Kulliyadda Mareykanka (ACT, American College Testing Program). Guddiga Kulliyadda (CB, College Board) waa urur ka kooban ku dhawaad 2500 kulliyado, dugsiyo, siistemyada dugsiga, iyo ururada waxbarashada ee ku fidsan, balse ku badan Gobolada Bartamada Atlantiga (Middle Atlantic States) iyo gobolada New England.  CEEB waxay bixisaa Imtixaanka Kartida Waxbarashada Hore (PSAT, Preliminary Scholastic Aptitude Test)/Imtixaanka Deeqda Waxbarashada Qaranka (NMSQT, National Merit Scholarship Qualifying Test) (PSAT/NMSQT), Imtixaanka Kartida Waxbarashada (SAT, Scholastic Aptitude Test) and Imtixanaadka Horumarka laga Gaaray (Achievement Tests) toban iyo shan maado.  PSAT waxaa loo adeegsadaa sida tayo bixiyaha Brograamka Deeqda Waxbarashada Qaranka (National Merit Scholarship Program).  PSAT, kaasoo la siiyo fasalada hoose (Juniors) bisha Oktobar, waa imtixaan socdo labo saac oo ka kooban xirfadaha afka iyo xisaabta iyo dhab ahaan wuxuu la mid yahay SAT.  SAT waa imtixaan socda saddax-saac oo cabbira xirfadaha hadalka, xisaabta iyo qoraalka Ingiriisiga caadiga, lana qaato buundooyin u dhexeeyo 200 ilaa 800 maado kasta.

Brograamka Imtixaanka Kulliyadda Mareykanka (ACT, American College Testing Program) waa wakaalad qaada imtixaanaadka oo gaar loo leeyahay taasoo la xariirta kulliyado iyo noocyo kala duwan balse badanaa ku badan Bartamaha Galbeedka (Middle West).  Aasaasiyan ACT waa imtixaan laga qaado sannadaha bilowga (Juniors) iyo sannadka ugu dambeeyo (Seniors), waxaana la qaadaa waqtiyo kala duwan sannadka.  ACT waa imtixaan socdo saddax saac oo cabbira awoodda ardayga u leeyahay isticmaalka Ingiriisiga, xisaabta, daraasaadka bulshada, iyo sayniska dabiiciga.  Baaxadda buundooyinka waa 1 ilaa 36 xagga ACT Macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan SAT iyo ACT iyo sidoo kale foomamka arjiga waxaa laga heli karaa Xafiiska Hanuuninta (Guidance Office).  Madaxa ku haay in loo baahan yahay in arjiyada ay soo gaaraan wakaaladaha CB iyo ACT hal bil ka hor taariikhda imtixaanka la ballamiyay.  Macluumaadka taariikhda qaadidda imtixaanka waxaa laga heli karaa wargeysyada dugsiga iyo bogagga internetka dugsiga. Kood nambarka Dugsiga Sare Bartamaha Westerville (Westerville Central High School) waa 365431, kood nambarka Dugsiga Sare Waqooyiga Westerville (Westerville North High School) waa 365432 iyo kood nambarka Dugsiga Sare Koofut Westerville (Westerville South High School) waa 365430.

Gobolka Ohio wuxuu baddalay sharuudaha qalin jebinta laga bilaabo Fasalka 2023 iyo kaddib. Waxaa jira saddex qeyb oo ah qalin jebinta: inaad kasbato buundooyinka loo baahan yahay, muujisaa aqoon oo aad muujiso u diyaarsanaan. Qeybta buundada waxay u baahan tahay in dhamaan ardayga ay ku guuleystaan dhamaystirka ugu yaraan 20 saacadaha dugsiga sare ee maadooyinka qaar. Qeybta aqoonta iyo u diyaarsanaanta waxay ardayda siisaa dhowr siyaabo oo ay ku qaadan karaan dibloomada dugsiga sare.

- Muujinta Aqoonta: Ardaydu waxay aqoonta ku muujin doonaan Imtixaanada Gobolka Ohio (OST's) ee Farshaxanka Luuqadda Ingiriisiga 2 iyo Aljebra 1 ama iyada oo loo marayo muujin kale, oo ay ku jirto College Credit Plus, waxqabadyada diirada saaraya shaqada, buundooyinkooda ACT ama SAT, ama diiwaan gelinta milatariga.
- Muujinta U Diyaargarsanaanta: Ardaydu waxay muujin doonaan u-diyaarsanaanta tubtooda dugsiga sare kadib iyagoo helaya laba shaabadood oo shahaado ah taasoo u oggolaanaysa inay muujiyaan aqoon tacliineed iyo farsamo aasaasi ah oo muhiim ah, xirfado mihnadeed, iyo xirfado hoggaamin iyo lafo-gurid.

# SIYAASADDA DUGSIYADA MAGAALADA WESTERVILLE KOODKA ASLUUBTA ARDAYDA KA QEYBGASHA HAWLAHA KA BAXSAN MANHAJKA

## Ogolaashada Guddiga

**Falsafo**
Guddiga Waxbarashada Dugsiga Dagmada Magaalada Westerville wuxuu aqoonsan yahay isticmaalka iyo sida xun ay ardayda u isticmaalaan kiimikada tahay dhibaato culus. Cilmi baarista waxay muujisay in isticmaalka mukhadaraadka iyo qamrada ay waxyeelo xun ku leedahay caafimaadka madaxa, jirka iyo caatifadda ardayda. Cilmi baarista waxay kaloo muujisay in tubaakada loo barto iyo in ay waxyeelo gaarsiiso caafimaadka jirka ardayda. Sidaas darteed, Guddiga wuxuu aaminsan yahay in sharciyada qamrada, tubaakada, ama mukhadaraadka kale loo soo saaro dhamaan ka-qeybgaleyaasha ka baxsan manhajka inta ay ku qoran yahiin sida ardayda ku jirta Dugsiga Westerville. Kaddib, Guddiga Waxbarashada (Board of Education) waxay filleysaa in ardayda isticmaalaan garasho wanaagsan iyo in aysan tagin meelaha ay asxaabta ku haystaan qamrada iyo mukhadaraadka kale.

Ujeedada brograamka ka baxsan manhajka waxay tahay in ka-qeybgale kasta la siiyo fursad uu ku dhixo madaxa, niyadda, jirka, iyo caatifadda. Ardayga ka qeybgala hawlaha ka baxsan manhajka waxaa laga filaa in uu u dhaqmo/dhaqanto si muujisa waddaniyad fiican oo sharaf u keenta isaga/iyada, qoyska qofka, dugsiga ardayga iyo bulshada ardayga, gudaha fasalka, ha ku sugnaado ama ha ka maqnaado heerka waxqabadka ama qeybta jimicsiga, sida xubin ka tirsan naadiga dugsiga, inta uu socdo xilliga ama inta dibadda laga yahay.

Si loo hubsado in brograamka bixin karo fursadahaan, waxaa loo baahan yahay in qofka uu ilaa heer ilaaliyo dishibiliinka. Dishibiliinka qofka waxaa la socda u hoggaansamida sharciyada iyo xeerarka ku saabsan dabeecadda qofka iyo sharciyada kaalmeeya maamulka bulshada xadaarada leh. Xeerarkan asaasiga ah iyo tilmaamahani waxay khuseeyaan ardayda toddobada maalmood ee toddobaadka, 24-ka saac ee maalintii, iyo 365-ka maalmood ee sannadka, taas oo loola jeedo in ardayda ay saaran tahay mas'uuliyad sannadka oo dhan (Xeerka Guddiga Dugsiga 5610.05). Ka qeybgaleyaasha manhajka ka baxsan manhajka ardayga ee ka qeybgala falalka aan waafaqsaneyn falsafaddaan waxay lumin doonaan axsaanka ay ku mattalaan dugsigooda. Ka qeybgalka hawlaha ka baxsan manhajka ma aha xaq uu qofka leeyahay, balse waa axsaan. Intaas waxaa dheer, dhamaan ardayda ka qeybgasha hawlaha ka baxsan manhajka, waa in ay la kulmaan sharciyada soo socdo inta uu socdo sannad dugsiyeedka iyo dibedda sanad dugsiyeedka. In aan loo hoggaansamin sharciyada waxay carqalad gelin karaan hamiga shaqada ka baxsan manhajka oo idil ee ardayga.

Siyaasaddaan waxay la xariirtaa Xeerka Asluubta Ardayga ee juira uu Guddiga qaatay.

**Oggolaashada Munaasabadaha Dugsiga**
Shirka Maaliyadda Ohio (Ohio Capital Conference) waxay dajisay kharashka gelitaanka munaasabadaha jimicsiga sannad dugsiyeed kasta. Khidmadaha gelitaanka masraxiyadda ama hawlaha kale dugsiga waxaa qorsheyaa naadiga ama ururka ay quseyso. Waxaa la dhiiri gelinaa iskuduwidda ka dhexeyso dhamaan Dugsiyada Dhexe iyo Dugsiyada Sare.

**Xaq u Yeelashada Ka Baxsan Manhajka**
Fursadda lagu matalo Dugsiyada Magaalada Westerville waxqabad kasta oo ka baxsan manhajka waa mudnaan. Go'aanka kama dambaysta ah ee u-qalmitaanka waxa iska leh dugsiga iyo/ama Ururka Ciyaaraha fudud ee Dugsiga Sare ee Ohio. Go'aanka oggolaanshaha ka qaybqaadashada waxaa iska leh dugsiga iyo tababaraha/la taliyaha hawl kasta. Arday kasta waa lagu soo dhawaynayaa in uu isku dayo waxqabad ka baxsan manhajka haddii adayga uu buuxiyo shuruudahan soo socda. Ardaydu waa inay:

1. Xaq u leeyahiin sida hoos timaado sharciyada iyo xeerka Ururka Jimicsiga Dugsiga Sare Ohio (Ohio High School Athletic Association), marka ay suurtogal tahay;
2. Marka loo baahdo, waa in ay keenaan Foomka Baaritaanka Jirka Ka Hor Inta Aysan Ka Qeybgelin ee Ururka Jimicsiga Dugsiga Sare Ohio (Ohio High School Athletic Association Pre-Participation Physical Examination Form) oo iminka shaqeeyo kuna soo darraan saxiixa waalidka, saxiixa ardayga, iyo saxiixa takhtarka iyo taariikhda baaritaankii ugu dambeyay, iyo macluumaadka loo baahan yahay ee la xariira liiska xaq u yeelashada;
3. Soo gudbiyaan warqadaha xogta oo dhamaystiran, ceymiska iyo foomamka degdegga; gaaraan ugu yaraan isku celceliska buundada darajada (GPA, grade point average) ee 1.75

rubac sanno kasta muddada darajo bixinta aqoonta ee ka horeyso ka-qeybgalka hawsha iyo qaadashada isla'eg ee shan (5) buundo; ardayga hawlaha cusub ma qabaan GPA yar balse (sida waafaqsan OHSAA) waa in ku gudbo ugu yaraan shan (5) maado sagaalka todobaad 4aad ee darajada 8aad.

4. U hoggaansamaan Xeerka Asluubta Ardayga Dagmada (District's Code of Student Conduct), Xeerkaan Asluubta Ardayda Ka Qeybgasha Hawlaha ka Baxsan Manhajka (Code of Conduct for Students Participating in Extracurricular Activities) iyo Siyaasadaha iyo Hababka Tubaakada/Mukhadaraadka/Qamrada (Tobacco/Drug/Alcohol Policies and Procedures);
5. Waa in uu tago dugsiga ugu yaraan 50% jadwalka maalinta tartanka/munaasabadda marka munaasabadda ku soo aado maalin dugsiyeed;
6. U hoggaansamaan sharuudaha xaq u yeelashada Ururka Jimicsiga Dugsiga Sare Ohio (Ohio High School Athletic Association.

Tilmaamaha Xaq u Yeelashada Ka Baxsan Manhajka aan Caadiga Ahayn

Ardayda ku qoran koorsooyinka aan caadiga ahayn kana mid ah balse ku ekeen: koorsada internetka si loo soo ceshto buundada ama dadajinta buundada, iyo fursadaha la ogolaaday ee Dabacsanaanta Buundada (Credit Flex), waa in ay la kulmaan dhamaan sharuudaha xaq u yeelashada Dugsiyada Magaalada Westerville iyo Ururka Jimicsiga Dugsiga Sare Ohio (Ohio High School Athletic Association).

1. Ardayga ma isticmaali karo qorshaha "Baarista" shaqada koorsada si loo hubiyo ka-qeybgalka waxa manhajka ka baxsan.
2. Haddii la qabto bilowga iyo taariikhda dhamaadka oo waafaqsan muddada darajo bixinta Guddiga u qabtay koorsooyinka aan horay loo qaadanin ka hor inta ardayga uusan bilaabin shaqada koorsada mooye, koorsada aan horay loo qaadanin waxaa lagu miisaami doonaa "1" si loo ogaado la mid ahaashada loo baahan yahay xagga xaq u yeelashada manhajka.  Koorsada aan horay loo soo qaadanin ee loo qabtay taariikhda dhamaadka waxay adeegsan doontaa Tilmaamaha OHSAA xagga Xaq u Yeelashada Jimicsiga (OHSAA Guidelines for Student Athletic Eligibility) si loo ogaado xaq u yeelashada.
3. Ka hor inta aan la bilaabin koorsada aan horay loo qaadanin, kormeeraha waxyaabaha aan jimicsiga ahayn ee ka baxsan manhajka/agaasimaha hawlaha jimicsiga wuxuu dajin doonaa horumar ku habboon oo loo baahan yahay in la cabbiro dhamaadka Guddiga muddada darajo bixinta si loo ogaado xaq u yeelashada.  Dhamaan qorshooyinka waa in ay ogolaashada kama dambayska ka helaan kormeeraha hawlaha ka baxan manhajka aan jimicsiga lahayn ama agaasimaha jimicsiga/hawlaha.
4. Haddii ardayga dhamaystiro koorsada aan horay loo qaadanin ka hor inta aan la gaarin muddada darajo bixinta, iyadoo aan la fiirinin taariikhda dhamaadka la qabtay (haddii lagu dabaqi karo), ardayga ma tirin karo koorsada si loo ogaado xaq u yeelashada muddada darajo bixinta kaddib marka la dhamaystiro koorsada.

**Khidmadaha/Sharciyada**

Ardayda waa in ay u hoggaansamaan "Xeerkaan Asluubta ee loogu talogalay Ardayda ka Qeybgasha Hawlaha Ka Baxsan Manhajka."  Hawl kasta, madaxa tababarka/la-talliyaha waxaa u dagsan sharciyo qoran.  Koobiyada sharciyadaan waxaa loo qeybin doonaa arday kasta. Ardayga iyo waalidiinta/ilaaliyeyaasha waxay saxiixi doonaan foomka si ay u aqoonsadaan la-socoshada sharciyada iyo ciqaabta jebintooda.  Dhamaan ardayda loo doorto kooxaha/naadiyada dugsiga sare waxaa laga rabaa khidmadda Bixi-si-aad-uga-Qeybgashid (PTP, Pay-To-Participate). Khidmadda PTP waa in la bixiyo tartanka caadiga kowaad ee la ballamiyay xilliga kowaad. Ardayda waxaa laga saari doonaa kooxda/naadiga/hawsha marka aysan bixinin lacagta.

**Abaal Marinta Warqadaha**

Si laguugu abaal marriyo warqadda kooxda isboortiga ee mattasha Dugsiyada Magaalada Westerville (Westerville City Schools), qaataha waa in uu ugu yaraan la kulmo dhamaan Ururka Jimicsiga Dugsiyada Sare ee Ohio (Ohio High School Athletic Association) iyo heerarka ogolaashada Dugsiyada Magaalada Westerville.

Fududeyn khaas ah ayaa loo samayn doonaa jimicsiga ku lugta leh brograamka Westerville Special Olympics.

**Kadeedka**
Mar kasta, waa mamnuuc nooc kasta hawlaha kadeedka. Ma jiro arday loo ogol yahay in uu qorsheeyo, dhiiri geliyo, ama ka-qeybgalo kadeed. Kadeedka waxaa lagu sifeyaa fullinta fal ama jujuubka loo geysto qof kale, sida dhibanaha, si loo fulliyo ficil kasta oo laga bilaabo fasalka, kooxda ama urur oo sabab u ah ama abuura halis la taaban karo in ay waxyeelo gaarsiiso madaxa ama jirka qof kale. Ruqsadda, ogolaashada, ama qaadashada halista uu qaato qofka loo geysto kadeedka ma yareyn doonto waxyaabaha laga reebay. Fiiri buugyaraha dugsiga (Xeerka Asluubta Ardayga Dagmada, Qodobka 19) (District Code of Student Conduct, Item 19) si aad u heshi macluumaad dheraad ah.

**Luminta Axsaanka Hawsha Ka Baxsan Manhajka**
"Luminta Axsaanka Hawsha Ka Baxsan Manhajka" waxaa loola jeedaa ka reebidda qaar ama dhamaan hawlaha ka baxsan manhajka uu ardayga ka qeybgalo ama xaq u leeyahay in uu ka qeybgalo. Ka saariddaan waxay caadi ahaan quseysaa dhaqamada, ku celcelinta, safarada dibadda, tartanka iyo dhamaan hawlaha kale ee la xariira hawsha ka baxsan manhajka (ama hawlaha) ku lugta leh.

Luminta axsaanka hawsha ka baxsan manhajka waxay si toos ah ula socotaa dhamaan maalmaha ka-joojinta ama ka saaridda. Kaddib, luminta axsaanka hawsha ka baxsan darajada waxaa dhici karto in laga qaado talaabo dishibiliin gaar ah haddii ardayga laga joojiyo ama laga saaro iyo haddii kale. (Fiiri Qeybta II, hoos)

Ardayda ku sugan waxbarashada sannadka kowaad ee dugsiga sare WCS ama dugsiga dhexe ee laga joojiyay in ay ka qeybgalaan, taasoo ugu wacan jebinta koodka, waxay qaadan doonaan ka-joojintooda hawsha iminka u socoto/xigta. Dhamaan ardayda kale ee la laga joojiyay in ay ka qeybgalaan, taasoo ugu wacan jebinta xeerka, looma ogolaan doono in ay ka-joojinta ku qaataan hawsha ka baxsan manhajka marka kowaad.

**Qaaraanka-Maaliyadda**
Dhamaan mashaariicda qaaraanka maaliyadda waa in uu soo ogolaado agaasimaha ama qofka uu isaga/iyada magacaawdo.

**Mukhadaraadka, Qamrada, iyo Isticmaalka Tubaakada**

**Qeybta I – Sifeynta**

Dhanka Siyaasaddaan, qodobadaan waxaa lagu sifeyaa sida soo socoto:

1. Qamrada - Qamrada kulul, fiino, beer ama maado kale oo laga helo waxyaabaha lagu saqraamo.

2. Brograamka Kaalmada - Waxaa dhici karto in ardayga laga dalbado in uu sameeyo mid ama ka badan kuwa soo socdo:

   A. In uu shirka faragelinta la galo kooxda kaalmeynt ardayga. Waxaa si xooggan loogu dhiirigelinaa in uu waalidka ama ilaaliyaha ka soo qeybgalo:
   B. Raaco tallooyinka uu soo jeediyo takhtarkaada ilkaha.
   C. Dhamaystiro qiimeynta la xariirta dhibatooyinka kiimikada ee suurtogalka ah ee laga qaato wakaalad la soo ogolaaday;
   D. Dhamaystiro brograamka daweynta uu ku talliyaya qiimeyaha;

3. Hawlaha Ka Baxsan Manhajka - Waxyaabaha la raaco ee dibadda ka aha fasalka, ama aan la xariirin fasal gaar ah, halkaas ay ardayda ka helaan xoriyadda xullashada iyo ka qeybgalka, lana soconin darajo ama saacadaha aqoonta.

4. Mukhadaraadka - Walax kasta oo jawiga wax ka beddeleysa, oo ay ku jiraan, laakiin aan ku

xaddidnayn, mukhadaraadka sharci darrada ah, marijuana, walxaha la nuugo, steroids-ka wax laga beddeley (iyada oo aan la haysan warqad dhaqtar ah oo sax ah) Siyaasadda AG5530A, dawooyinka sharciga ah iyo daawooyinka miisaska laga soo gato ee la isticmaalo ama la haysto ama loo qaybiyo si aan la oggolayn, iyo walxaha feega ah (kuwa-u eg).

5. Kiimikada Baddasha Caatifadda (Mood-Altering Chemicals) - Waxaa ka mid ah, iyadoo aan la soo koobin, maan dooriyaha, niyad jebinta, kiciyeyaasha, mirqaanka, mukhadaraadka beenta, marijuanaha, iyo dawooyinka la qoro, haddii aan ruqsad iyo qoraal laga haysanin takhtar shatti haysta laguna haynin weelka asalka, loona baahan yahay in weelkaas uu sheego magaca ardayga iyo tilmaamaha isticmaalka ku habboon.

6. Waalidka/Ilaaliyaha - "Waalidka" waxaa loola jeedaa waalidka ardayga ka qeybgalaha, haddii ammar ka soo baxay maxkamadda ama heshiis laga gaaray sharciga uusan soo koobin xuquuqda waalidiinta; ilaaliyaha; ama haayaha sharciga.

7. Ka Joojinta Joogtada - Inta ka hartay nolosha aqoonta ardayga xagga hawlaha ka baxsan manhajka.

8. Racfaanka - Ardayga wuxuu soo codsan karaa in uu dib u soo galo hawsha ka baxsan manhajka marka uu ogeysiis qoran u soo gudbiyo agaasimaha dhismaha ama qofka uu isaga/iyada magacaawdo. Ogeysiiska waxaa ka mid ah jebinta, hawsha iyo sababta lagama maarmaanka oo loo tixgeliyo.

9. Haysashada - Qamrada, tubaakada, maadada la kantaroolo (sida ay ku sifeysay Qeybta Xeerka la Baddalay Ohio 3719.01), ama qalabka mukhadaraadka ee laga helo korka ama jirka ardayga, ama gudaha hantidiisa/hantideeda (tusaale ahaan: koodka, boorsahda dhabarka, baabuurka, lokarka, lokarka la qeybsado (iwm.).

10. Sanno Dugsiyeedka - Sanno dugsiyeedka waxaa lagu sifeyaa sida maalinta kowaad rasmiga dugsiga/xilliga ilaa laga gaaro maalinta rasmiga ugu dambeyso dugsiga/xilliga sida waafaqsan Guddiga Waxbarashada Westerville.

11. Dhererka Xilliga - Xilliyada jimicsiga waxaa lagu sifeyaa Horaanta Qaboobaha (Fall), Qaboobaha (Winter), iyo Horaanta Kuleylaha (Spring). Xilliyada hawsha ka baxsan manhajka waxaa sifeeya samastar kasta.

12. Is-Xaadirinta - U tagidda agaasimaha, maamulaha jimicsiga/hawlaha iyo/ama madaxa tababarka/la-talliyaha hawsha dugsiga, ma aha in loo adeegsado hab leysaga ilaaliyo ciqaabta jebinta xeerka. Jebinta Xeerka ee horay loo soo sheegay ama jebinta aan weli go'aan laga gaarin ma noqon doonaa wax uu "qofka naftiisa soo sheego." Ardayda is-xaadirin karaan oo keliya hal mar inta ay ku sugan yahiin hawsha dugsiga (fiiri Qeybta II, Sharciyada, Qodobka #1, hoos). Maalin dugsiyeedka xigto, dhacdada kaddib, qofka waa in uu isa soo xaadiriyo. Ma aha in ardayga uu is xaadirin karo haddii faragelinta boliiska ay dhacday.

    A. Ardayga wuxuu kaalmo ka raadsan karaa brograam uu dugsiga ogolaado xagga dhibatooyinka mukhadaraadka/qamradca. Maamulaha ama qofka loo magacaabo wuxuu dajin doonaa habka loo baahan yahay oo looga hortago brograamyada mukhadaraadka/qamrada.
    B. Is-xaadirinta waxaa la raacin doonaa jebinta kowaad. Lama qiimeyn doono yareynta xilliga ama hawsha haddii ardayga waafaqo in uu raaco habka kaalmada ardayga.
    C. Tixraacinta waalidka/ilaaliyaha ama tixraacinta saxiixbka waxaa loo qaadan doonaa sida qofka naftiisa xaadiriya.
    D. Haddii ardayga ku guuldareysto in uu dhamaystiro kaalmada iyo daweynta, ciqaabta waxaa loo hirgelin doonaa si buuxdo.
    E. Qofka naftiisa soo xaadiriyo waxaa qiimeyn doono kaddibna ogolaan doono maamulaha. Ogolaashada waxay ku saleysnaan doontaa taariikhdii la soo dhaafay ee ka-qeybgaleyaasha

iyo diiwaanka dishibiliinka.

13. Ku xadgudubka Maadada - Isticmaalka mukhadaraadka ama qamrada taaoo jebisa sharciga federaalka, godbolka iyo deegaanka ama taasoo jebisa siyaasadda dugsiga.

14. Tartamada – Tartamada waxaa loola jeedaa dhammaan ciyaaraha iyo loollannada xilli-ciyaareedka caadiga ah iyo kuwa ka dambeeya xilli-ciyaareedka, sida ciyaaro, kulammo, isreeb-reeb, iyo tartamo kale oo la mid ah. Tani kuma jiraan ciyaaraha tababarka ah (scrimmages), tababarrada, ciyaaraha bandhigga (exhibition games), iyo waxyaabaha kale ee la midka ah ee aan lagu darin diiwaanka rasmiga ah ee xilli-ciyaareedka ama tartamada ka dambeeya xilli-ciyaareedka.

**<u>Qeybta II - Hababka Dishibiliinka</u>**

<u>Jebinta Sharciyada</u>

1. Marka ardayga jebiyo ama la tuhunsan yahay in uu jebiyo sharciga, waxaa taas la ogeysiin doonaa agaasimadha (qofka loo magacaabo).

2. Waxaa dhici karto in agaasimaha/qofka loo magacaabay, maamulaha jimicsiga/hawlaha, tababaraha ama la-talliyaha hawsha ee mas'uulka ka ah kormeerka hawshaas, uu ardayga si ku meel gaar ah looga saaro hawshaas.

3. Waxaa kulmi doono kooxda baaritaanka oo ka kooban kana yareen tababaraha iyo agaasimaha ama qofka uu magacaabo ama shaqaalaha kale ee loo arko in ay ku habboon yahiin, si ay u baaraan jebinta. Haddii guddiga fiirinta la tahay, sida ku saleysan shardiga hoose, in loo baahan yahay in la qaado talaabo dhaafsiisan ka-saaridda ku meelgaarka, agaasimaha ama qofka mattala wuxuu ogeysiin doonaa ardayga iyo waalidka/ilaaliyaha jebinta la geystay iyo ciqaabta suurtogalka ah.

4. Waxaa ardayga lala geli doonaa dhageysi aan rasmi ahayn.

5. Jebinta waxaa laga gaari doonaa go'aan taasoo ku saleysan caddeyn macno leh iyo/ama caddeyn munaasab ah. Xagga qiimeynta caddeynta, agaasimaha ama qofka isaga/iyada magacaabo iyo/ama guddiga fiirinta waxay qaadi karaan talaabo macquul ah sida, balse kuma eka, kuwa soo socdo:

   A. Baarista jebinta la soo sheegay ka hor inta aan la qabanin dhageysiga;
   B. Xaqiijinta caddeynta loo baahan yahay si loo dhageysto;
   C. Abuurista diiwaanka ilaha caddeynta ama xaqiijinta caddeynta:
   D. La tashiga shaqaale kale oo ka tirsan Dugsiga Dagmada Magaalada Westerville.

6. Agaasimaha dhismaha/qofka loo magacaabo wuxuu ogeysiin doonaa ardayga iyo waalidiinta/ilaaliyaha go'aanka la gaaray.

7. Racfaanka laga qaato racfaanka waxaa loo gudbin doonaa Maamulaha ama qofka loo magacaabo.

8. Inta uu socdo racfaanka, ardayga wuxuu ku celcelin karaa balse kama qeybgeli karo hawl rasmi ah inta la sugaayo natiijada ka soo baxdo dhageysiga uu fulliyo Maamulaha ama qofka loo magacaabo. Go'aanka Maamulaha Dugsiyadaha (Superintendent of Schools) wuxuu ahaan doonaa kama dambeys.

9. Ciqaabta waxaa lagu dabaqi doonaa dhamaan hawlaha ka baxsan manhajka muddada ciqaabta.

**<u>Qeybta III - Sharciyada iyo Ciqaabta la Socoto</u>**

Ka qeybgaleyaasha waxaa lagula tallinaa buugyaraha ardayga/galka dhamaan sharciyada ka hor inta aysan ka soo qeybgelin si arday kasta go'aan ku gaaro suurtogalka ka qeybgalkiisa/keeda.

Si loo helo ballan qaadka ardayda ka qeybgasha, tabbare/ka qeybgale kasta wuxuu sharaxi doonaa Xeerkaan Asluubta Hawlaha Ka Baxsan Manhajka (Extracurricular Activities Code of Conduct) ka hor inta aan la bilaabin tartarnka kowaad/munaasabo.

| | |
|---|---|
| SHARCIGA I. | Lama ogola in la isticmaalo, lagu xadgudbo, la iibsado, ama la haysto mukhadaraad ama qamro. |
| SHARCIGA II. | Lama ogola in la gudbiyo, leyskudayo in la gudbiyo ama la iibiyo mukhadaraadka ama qamrada. |
| SHARCIGA III. | Lama ogola isticmaalka, iibsashada, haysashada ama gudbinta tubaakada qaab kasta ha ahaato. |

Waxaa dhici karto in ardayda laga dhaafo isticmaalka mukhadaraadka Sharciga 1 haddii waalidiinta/ilaaliyeyaasha soo bandigaan oraah qoran oo sheegta in diidamadooda ku saleysan tahay caqiiadada diinta, asbaabta daweynta, ama ugu wacan tahay itaal darri. Dhamaan ka dhaafidda waa in uu soo ogolaado Maamulaha ama qofka uu magacaabo.

1. Dhamaan ciqaabta la xariirta sharciyada kore waxaa leysugu geyn doonaa ilaa maalinta rasmi ahaan ugu dambeyso dugsiga, gudaha mid kasta oo ka mid ah saddaxda (3) muddo soo socdo nolosha aqoonta:

    A. Darajooyinka K ilaa 5;
    B. Darajooyinka 6 ilaa 8:
    C. Darajooyinka 9 ilaa 12.

2. Ma aha in ciqaabta loo fulliyo iyagoo wada socda.

**<u>Qeybta IV – Ciqaabta</u>**

**SHARCIGA I. LAMA OGOLA IN LA ISTICMAALO, LAGU XADGUDUBO, LA IIBSADO, AMA LA HAYSTO MUKHADARAAD AMA QAMRO.**

<u>Jebinta Kowaad</u>

1. Ardayga jebiya waxaa laga mamnuuci doonaa in uu ka qeybgalo hawlaha ka baxsan manhajka muddo hal (1) sanno dugsiyeed laga bilaabo taariikhda jebinta.

2. Haddii ardayga jebiya waafaqsan yahay in uu raaco brograamka kaalmada mukhadaraadka/qamrada ama uu tago brograamka qiimeynta mukhadaraadka/qamrada uu dugsiga ogolaaday iyo brograamka daweynta uusan maalgelinin Dugsiga Dagmada Magaalada Westerville, waa laga dhimi doonaa ciqaabta ilaa boqolkiiba qonton (20% tartanka ugu badan ee la ogol yahay sida ay ku sifeysay OSHAA) lagana soo qaaday hawsha ka baxsan manhajka ee iminka socoto ama xigtaama xilliga. Tusaale ahaan, haddii jebinta dhacdo todobaadka ugu dambeeyo xilliga ama hawsha, ciqaabta waxay sii socon doontaa inta xilliga jiro iyo wuxuu u gudbi doonaa xilliga xiga ama hawsha. Ardayga wuxuu ka qeybgeli doonaa balse kama tartami doono/ma la shaqeyn doono kooxda ama gorubka inta uu ku sugan yahay xaaladda ka-joojinta. Agaasimaha ama qofka loo magacaabay wuxuu go'aan ka gaari doonaa ogolaashada ama diidmada qorshaha ardayga la xariira brograamka kaalmada.

3. Haddii ardayga waafaqo in uu raaco brograamka kaalmada mukhadaraadka/qamrada,

isaga/iyada waa in ay agaasimaha ama maamulaha jimicsiga/hawlaha ama qofka loo magacaabay u soo gudbiyaan caddeyn ku saabsan:

A. In lagu guuleystay ka-qeybgalka sida waafaqsan go'aanka uu gaaray agaasimaha ama qofka mattala/agaasimaha jimicsiga/hawlaha, ee brograamka kaalmada mukhadaraadka/qamrada ama ka-qeybgalka dayactirka mukhadaraadka/qamrada uu dugsiga ogolaaday ama brograamka la-tallinta;
B. Ballan qaad socda in aan la isticmaalin mukhadaraad/qamro.

4. Haddii qofka naftiisa yimaado feestada, ciqaabta aqoonsiga iyo/ama abaal marrinta waa laga dhaafi doonaa haddii ardayga uu tagay ama samayay qorshe uu ku tago brograamka kaalmada.

5. Ardayga ku sugan xaalad uu jebiy looma ogolaan doono in uu qabto boosas hoggaamin hawsha iminka socoto ama hawl ka baxsan manhajka ama xilli sida uu go'aamoyo agaasimaha. Isaga/iyada looma ogola in ay tagto feestada/xafladda abaal marrinta. Ka qeybgalaha lama siin karo abaal marrin, warqado, ama aqoonsi la xariira ka qeybgalkiisa/keeda xilliga socdo ama xilliga xiga, haddii uusan iminka ka qeybgelin hawsha ka baxsan manhajka.

Jebinta Labaad

1. Ardayga jebiya Sharciga 1 mar labaad ama marka leysu geeyo mar labaad waxaa laga mamnuuci doonaa in uu ka qeybgalo hawlaha ka baxsan manhajka muddo hal (1) sanno kalendarka laga bilaabo taariikhda uu jebiyo.

2. Haddii ardayga waafaqsan yahay in uu raaco brograamka kaalmada mukhadaraadka/qamrada ama tago brograamka qiimeynta iyo ka-daweynta mukhadaraadka/qamrada uu dugsiga ogolaado aysan Dugsiga Dagmada Magaalada Westerville maal gelinin, ciqaabta waxaa boqolkiiba qonton (50% tartanka ugu badan ee la ogol yahay sida ay ku sifeysay OHSAA) hawsha ka baxsan manhajka ama xilliga iminka socota ama ku xigta. Muddada ciqaabta kaddib, ardayga wuxuu codsi u gudbin karaa agaasimaha si loo qabto dhageysi si loogu soo noqdo ka-qeybgalka. Ardayga kama qeybgeli doono mana la safri doono farqada ama kooxda inta ay socoto ka-joojinta.

3. Ardayga waa in uu la kulmo guddiga fiirinta iyo xubin (xubnaha) ka socdo kooxda kaalmada ardayga, caddeyn ka bixiyo:

A. In lagu guuleystay dhamaystirka (ama ka-qeybgalka sii socda) dayactirka mukhadaraadka/qamrada uu dugsiga ogolaaday;
B. Ballan qaad socda in aan la isticmaalin mukhadaraad/qamro.

4. Guddiga fiirinta wuxuu ku tallin doonaa ogolaaadhada ama diidmada codsiga, kana mid ah sharuudo dheeraad ah (sida ka-qeybgalka taageerada asxaabta ama daawo kale oo la ogolaaday iyo wakaaladda daryeelka kaddib qamrada ama brograamka la-tallinta).

5. Ardayga jebiya looma ogolaan doono in uu qabto boosaska hoggaaminta muddo hal sanno. Isaga/iyada looma ogolaanin in ay tagaan feestada/xafladda abaal marrinta, mana la ogola in ardayda la siiyo abaal marrin, warqado ama aqoonsi la xariira aqoonsigiisa/aqoonsigeeda xilliga iminka socda ama xilliga xiga haddii uusan iminka ka qeybgelin hawl ka baxsan manhajka.

Jebinta Saddaxaad

1. Maamulaha ama qofka loo magacaabo wuxuu hirgelin karaa ka-joojin joogto ah oo la xariira ka-qeybgalka hawlaha ka baxsan manhajka inta ka hartay hawsha waxbarashada ardayga. Go'aanka Maamulaha iyo/ama qofka uu magacaabay waa kama dambays.

**SHARCIGA II. LAMA OGOLA IN LA GUDBIYO, LEYSKUDAYO IN LA GUDBIYO AMA LA IIBIYO**

**MUKHADARAAD AMA QAMRO.**

Jebinta Kowaad

1. Ardayga jebiya waxaa laga mamnuuci doonaa in uu ka qeybgalo dhamaan hawlaha ka baxsan manhajka muddo hal (1) sanno kalendar laga bilaabo taariikhda jebinta.

2. Haddii ardayga jebiya waafaqsan yahay in uu raaco brograamka kaalmada mukhadaraadka/ qamrada ama uu tago brograamka qiimeynta mukhadaraadka/qamrada uu dugsiga ogolaaday iyo brograamka daweynta uusan maalgelinin Dugsiga Dagmada Magaalada Westerville, waa laga dhimi doonaa ciqaabta ilaa boqolkiiba qonton (50% tartanka ugu badan ee la ogol yahay sida ay ku sifeysay OSHAA) lagana soo qaaday hawsha ka baxsan manhajka ee iminka socoto ama xigtaama xilliga. Muddada ciqaabta kaddib, ardayga wuxuu codsi u gudbin karaa agaasimaha ama qofka uu magacaabo iyo agaasimaha jimicsiga/hawlaha, si loo qabto dhageysi si loogu soo noqdo ka-qeybgalka. Ardayga kama qeybgeli doono mana la safri doono farqada ama kooxda inta ay socoto ka-joojinta.

3. Ardayga waa in uu la kulmo guddiga fiirinta iyo xubin (xubnaha) ka tirsan kooxda kaalmada, kana bixiyo caddeyn ku saabsan:

   A. adhamaystir lagu guuleysto (ama si joogto ah looga qeybgalo) dayactiridda mukhadaraadka uu dugsiga ogolaaday ama brograamka la-tallinta;
   B. ballanqaad socda in aan la isticmaali doonin mukhadaraadka.

4. Guddiga fiirinta wuxuu ku tallin doonaa ogolaashada ama diidmada codsiga, kana mid ah sharuudo dheeraad ah (sida ka-qeybgalka taageerada asxaabta ama mukhadaraad kale oo la ogolaado iyo wakaaladda daryeelka kaddib qamarada ama brograamka la-tallinta).

5. Haddii qofka naftiisa yimaado waa laga dhaafi doonaa ciqaabta feestada, iyo ciqaabta abaal marrinta haddii ardayga uu tagay ama samayay qorshe uu ku tago brograamka kaalmada.

6. Ardayga jebiya looma ogolaan doono in uu qabto boosaska hoggaaminta muddo hal sanno. Isaga/iyada looma ogolaan doonto in ay tagto feestada/xafladda abaal marrinta, ardaygana ma heli doono abaal marrin, warqado, ama aqoonsi la xariira ka soo qeybgalkiisa/qeybgalkeeda hawsha ka baxsan manhajka.

Jebinta Labaad

1. Maamulaha ama qofka loo magacaabay wuxuu hirgelin karaa in uu si joogto ah uga joojiyo ka-qeybgalka hawlaha ka baxsan manhajka inta ka hartay nolosha waxbarashada ardayga. Go'aanka Maamulaha iyo/ama qofka uu magacaabay waa kama dambays.

**SHARCIGA III. LAMA OGOLA ISTICMAALKA, IIBSASHADA, HAYSASHADA TUBAAKADA QAAB KASTA HA AHAATO.**

Jebinta Kowaad

1. Ardayga jebiya waxaa laga mamnuuci doonaa in uu ka qeybgalo hawlaha ka baxsan manhajka ilaa boqolkiiba labaatan (20% tartanka ugu badan ee la ogol yahay sida ku sifeysan OSHAA) ee dhamaan munaasabadaha laga bilaabo taariikhda jebinta.

2. Ciqaabta waxaa loo dhigi doonaa gadaal haddii:

   A. Ardayga raali ku noqdo in uu ka qeybgalo brograamka aqoonta tubaakada uu soo ogolaaday agaasimaha dugsiga ama qofka isaga/iyada mattasha. Diidmada ama in lagu guuldareysto

lana dhamaysanin brograamka waxay dhallin doontaa in lagu fulliyo ciqaabta oo buuxdo. Ardayga wuxuu ka qeybgeli karaa, wuxuu u tartami doonaa/wax la qaban doonaa kooxda ama gurubka inta ay socoto ka-jaajinta.

Jebinta Labaad

1. Ciqaabta waxay ahaan doontaa boqolkiiba afartan (40% xisaabta ugu badan ee la ogolaan karo sida ay ku sifeysay OHSAA) mamnuuca ka-qeybgalka, la dhimay ilaa boqolkiiba labaatan (20% xisaabta ugu badan ee la ogolaan karo sida ay ku sifeysay OHSAA) haddii ardayga uu raaco sharuudaha yareynta ee kor ku qoran. Ardayga wuu ka qeybgeli karaa iyo wuu safri karaa, balse lama tartami karo ama wax lama qaban karo kooxda ama gurubka inta ay socoto ka-joojinta.

Jebinta saddaxaad ama ka badan

1. Maamulaha ama qofka mattalo wuxuu ardayga ka mamnuuci karaa in uu ka qeybgalo boqolkiiba qonton (50% xisaabta ugu badan tartanka la ogolaan karo sida ay ku sifeysay OHSAA) ee hawsha ka baxsan manhajka ee iminka socota ama ku xigta. Muddada ciqaabta, ardayga wuxuu ku dhaqmi karaa/ka qeybgeli karaa iyo wuxuu safar la geli karaa koox ama dad inta ay socoto ka-joojinta.

**Xeerka Asluubta ee ka Baxsan Manhajka Sharciyada iyo Jadwalka Ciqaabta**

| | JEBINTA 1AAD | JEBINTA 1AAD IYO AP | JEBINTA 2AAD | JEBINTA 2AAD IYO AP | JEBINTA 3AAD |
|---|---|---|---|---|---|
| SHARCIGA I<br><br>Lama ogola isticmaalka, ku xadgudubka ama gadashada mukhadaraadka ama qamrada. | RC<br><br>1 Sanno (12 bil) oo laga joojiyo dhamaan hawlaha ka baxsan manhajka. | P<br><br>Yareynta 20% (tartanka ugu badan ee la ogol yahay sida ay ku sifeysay OHSAA) ee xilliga iminka jira ama soo socda. | RC<br><br>1 Sanno (12 bil) oo laga joojiyo dhamaan hawlaha ka baxsan manhajka. | P<br><br>Yareynta 50% (tartanka ugu badan ee la ogol yahay sida ku sifeysan OSHA) ee xilliga iminka jira ama soo socda. | RC<br><br>Ka-joojinta suurtogalka ah inta ka hartay nolosha waxbarashada. |
| SHARCIGA II<br><br>Lama ogola gudbinta, gudbinta leyskudayo ama iibinta mukhadaraadka ama qamrada. | RC<br><br>1 Sanno (12 bil) oo laga joojiyo dhamaan hawlaha ka baxsan manhajka. | P<br><br>Yareynta 50% (tartanka ugu badan ee la ogol yahay sida ku sifeysan OSHA) ee xilliga iminka jira ama soo socda. | RC<br><br>Ka-joojinta suurtogalka ah inta ka hartay nolosha waxbarashada. | | |
| SHARCIGA III<br><br>Lama ogola isticmaalka, haysashada ama gudbinta tubaakada qaab kasta. | RC<br><br>20% (tartanka ugu badan ee la ogol yahay sida ku sifeysan OSHA) oo laga yareeyo xilliga iminka jira oo ka baxsan dhamaan hawlaha manhajka. | P<br><br>Yareynta xilliga gadaal loo dhigay. | RC<br><br>40% (tartanka ugu badan ee la ogol yahay sida ay ku sifeysay OSHAA) yareynta xilliga. | P<br><br>20% (tartanka ugu badan ee la ogol yahay sida ku sifeysan OSHA) yareynta xilliga. | RC<br><br>Yareynta 50% (tartanka ugu badan ee la ogol yahay sida ku sifeysan OSHA) ee xilliga iminka jira ama soo socda. |

RC = Waxaa Xisaaba Guddiga Fiirinta    P = Waxaa Xisaaba Agaasimaha
AP = Brograamka Kaalmada

Ardayga jebiya looma ogolaan doono in uu qabto boos hoggaamin muddo hal sanno.  Waxaa dhici

karto in isaga/iyada aan loo ogolaanin in ay tagaan feestada/xafladda abaal marrinta, mana la ogola in ardayda la siiyo abaal marrin haddii aysan iminka ka qeybgelin haw ka baxsan manhajka.